جماعة الصادعون بالحق

FASALKA 3AAD

# Shuruux

## معالم في الطريق

e

## Dhalashada Mujtamaca Muslimka ah iyo Astaamihiisa Gaarka ah

Sh. Mustafa Kaamil Muxammad

Kitaabkan waxaa iska leh Jamaacada Al-Saadicuun Bil-Xaq

Xuquuqda daabicidda iyo fidinta waxay u dhowrantahay jamaacada

Waa la faafin karaa qoraalka, iyada oo xigasho la samaynayo,
waxbana aan laga baddalaynin

# Tusmada Cutubka


Hordhac ........ 1

Midnimada Risaalooyinka ........ 1

Taariikhda aadanaha iyo Khatarta  Kibirka ........ 3

Dacwadu waa mid cad oo sahlan ........ 5

Xaqa oo lagu sugnaando ........ 8

Muuqaallada Shirkiga ee Xilligan ........ 9

Ujeedada Dacwadu waa u isudhiibidda Allaah ........ 10

Isku dheellitirnaanta Nolosha Aadanaha ........ 13

Baahida loo qabo Bulsho Muslim ah ........ 16

Jaahiliyaddu ma aha aragti kaliya ........ 17

“Laa Ilaaha Illallaahu” waxay kacdoon ku tahay baadilka ........ 20

Maxay Rusushu u yimaadeen? ........ 22

Nuxurka Jaahilyadda ........ 24

Manhajka Allaah ayaa isku miisaama Nolosha Insaanka ........ 24

Macnaha “Jaahilyadda” ee Qur'aanka ........ 27

Tiirarka Jaahiliyadda ........ 37

Tilmaamaha Mujtamaca Jaahiliga ah ........ 38

Dawnimada dhismaha Mujtamaca Muslimka ........ 43

Jaahilyaddu baadil bay ku dhisan tahay? ........ 43

Hardanka ka dhexeeya Xaqa iyo Baadilka ........ 44

Saldhigga Islaamku waa Laa Ilaaha Illallaahu ........ 47

Sidee buu Manhajka Anbiyadu u qaadaadhigay Qadiyaddaan? ........ 48

Rumeynta Allaah waa arrin Fidri ah ........ 54

Daliilka Sharciga ah ee kalinimada Ilaahnimada ........ 57

Maxay Culumadu ka yiraahdeen "Xukunka Allaah”? ........ 65

Macanaha ereyga "Xukun" ........ 69

Xeerarka casrigan ee khilaafsan Sharciga Allaah ........ 81

Mugdiga la galiyey Gaalnimada qofkii ka taga Xukunka Allaah ........ 82

Goormuusan gaaloobayn qofkii ka taga Xukunka Allaah? ........ 91

Dadka iyo ka tagista xukunka Allaah ........ 95

Buunbuunita Xukunka aanu Allaah soo dajinin ........ 96

Maxaa nala gudboon si loo hirgaliyo Xukunka Allaah ........ 97

Arrimo Muhiim ah oo khuseeya dhalashada Bulshada Muslimka ah ........ 100

Af-ka-nuslim iyo ku milanka jaahiliyadda ........ 101
Xaqiiqada mujtamacaadka maanta ........ 103
Cudurdaar ma noqon Jaahilnimadu? ........ 105
Shuruudda Laa Ilaaha Illallaahu ........ 117
Qawaaciddii la soo sheegay iyo Waaqaca Maanta ........ 123
Gabababo: sidee mujtamac muslim ah mar labaad arlada looga hirgalin karaa? ........ 124

# Dhalashadda Mujtamaca Muslimka ah iyo Astaamihiisa Gaarka ah

نشأة المجتمع المسلم وخصائصه

## Hordhac

Waxaannu cutubkaan uga hadlaynaa "**Dhalashda mujtamaca muslimka ah iyo astamihiisa gaarka ah**". Hubaashiina waa mawduuc cusub, oo ay ka dhex muuqanayso caqiiddadu, waxaana sidoo kale ka dhex muuqanaya qaabka uu Qur'aanku ku sameeyo mujtamac dad ah oo qaadanaya caqiiddadaan, kaddibna ku mashquulaya lana falgalaya. Falgalkaas iyo isla-jaanqaadkaas baa xaqiijinaya sare-u-kicidda dadka, sida uu Allaah SWT la doonay inay sare uga kacaan qurunka, dacda iyo hooseynta jaahiliyadda, oo ay gaaraan fiidda ugu sarreysa oo uu Allaah la doonayo, si ay u xaqiiqowdo arrimo badan oo dib laga sheegi doono.

Marka aynu ka hadlayno"Dhalashda mujtamac muslimka ah iyo astamihiisa gaarka ah" waxaan dareemaynaa in aan hor taagannahay bilowgii taariikhda aadanaha. Sidee bay ku bilaabatay? Sidee bay ugu suura gashay inuu xaqiijiyo hadafka Allaah uu insaanka u abuuray?

Taariikhda aadanaha waxay markii ugu horraysay ku bilaabatay bilow sax ah, xilligaasoo Allaah SWT uu abuuray Aadam iyo Xaawo si ay u noqdaan unuggii ugu horreeyey ee bulshada bani'aadamka.

Sida aan ka ogaannay bandhigga Qur'aanka sida Allaah SWT ugu kallifay Aadam iyo Xaawo ugu horrayntiiba inay sameeyaan jamaaco muslim ah, wuxuuna ugu yeeray inay raacaan manhajka Allaah, wuxuu ugu caddeeyey tijaabadii koowaad ee jannada sidii ay ku garan lahaayeen meelaha ay ku fiican yihiin iyo meelaha ay ku liitaan, iyo sidii ay ku ogaan lahaayeen cadowga gaadaya, naftooda haku jiro ama bannaanka haka joogo sida Ibliis oo kale. Wuxuu kaloo noo sheegay inay Aadam iyo Xaawo ka barteen casharkaas xaqaa'iq badan oo aan sheegi doonno.

Dhab ahaantii cutubkaan wuxuu na dul joojinayaa taariikhda bilowgeeda oo ah markii ugu horraysay ee loo xilsaaray Aadam inuu hoggaamiyo hayaanka ama geeddisocodka bani'aadamka, ama loogu yeeray inuu noqdo "aabaha aadanaha", kaas oo ay ubadkiisu sii wadayaan gadaashii si ay u gutaan xilkaan inta ay dunida joogaan.

### Midnimada Risaalooyinka

Ustaad Sayid wuxuu yiri:

**(Dacwadii Islaamka ee nabi Muxamed SCW la yimid waxay ahayd qaybtii u dambeysay silsiladdii dheereyd ee dacawada islaamka taas oo ay hoggaanka u hayeen Rusushii wanaagsaneyd… Dacwadaan inta ay taariikhdu soo taxnayd waxay lahayd hal ujeeddo oo ah in la baro dadka Ilaahooda iyo Rabbigooda xaqa ah)**

Dacwadii u dambaysay ee nabi Muxamad SCW uu la yimid waxay ahayd qaybtii ugu dambaysay ee geeddi socodkii dheeraa ee nolosha dacwada islaamka, taasina waxay nugu

bixinaysaa inaan ka hadalno taariikhda bani'aadamka iyo in ugu horraynba loo abuuray inuu khaliif (wakiil) arlada ka noqdo

Arrintaasu waxay burinaysaa waxa loo yaqaan "taariikhda is barbardhigga diimaha", waxay kaloo burinaysaa taariikhda ay ka sheegaan bilowgii bani’aadamka, in markii uu bilaabanayey bani’aadam uusan ahayn, iyo inuusan gaar ka ahayn khalqiga intiisa kale.Waxay sheegaan inuu horumar sameeyay noole ahaan, caqli iyo aragti ahaan, iyo garashadiisa diimeed ilaa heer uu soo gaaray inuu suuraysto hal Ilaah oo uu qaatay fikradda towxiidka. Hadalkaas waxaa oranaaya culimada isu-barbardhigga diimaha iyo falaasifada reer galbeedka iyo dadka baadiyaysan ee daba rucleeya ee ka tirsan dunida islaamka.

Hadalkaasi waa baadil, sababtoo ah Allaah SWT ee abuuray bani’aadamka ayaa go'aamiyay ka hor intaanu abuurin inuu kaalin wayn ka qaadan doono arlada, kaalintaasuna ay gaar ku tahay isaga oo khalqi kale aanan lagu kallifin, sidaas bayna ku billaabatay silsiladda dheer ee anbiyada nabi Aadam CS, waxayna ku dhammaatay nabi Muxammed SCW, dhammaan waxay u yimaadeen inay xaqiijiyaan hal ujeeddo, hal caqiiddo iyo hal manhaj, si loo xaqiijiyo muraadka Allaah SWT ee uu ka lahaa abuurka bani’aadamka.

Sida suuradda Al-Baqara ku timid, ka dib markii uu Qur’aanku soo bandhigay noocyada dadka: Mu'miniinta, gaalada iyo munaafiqiinta, wuxuu Allaah noo bayaamiyay in dadka loogu yeerayo cibaadadiisa si ay Allaah uga cabsadaan, wuxuuna ku gallad sheegtay abuuritaankooda iyo inuu kownkan oo idil u diyaariyay si iyaga loogu adeego, kaddibna wuxuu ku xujeeyey xaqaan iyo Qur’aankaan oo kale inay la yimaadaan, wuuna ka quusiyay inay awood u yeeshaan inay sameeyaan arrintaas:

﴿ فَإِنْ لَمْ تَفْعَلُوا وَلَنْ تَفْعَلُوا فَاتَّقُوا النَّارَ الَّتِي وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ ﴾ [البقرة: ٢٤]

“Haddaydan falin mana falaysaane ka dhowrsada naar lagu shido dadka iyo dhagaxa”
(Al-Baqra: 24)

Haddaba qaddiyaddu bilowgiiba waxay ahayd mid aad u cad, intaa kaddib wuxuu Qur’aanku ka hadlay Aadam CS iyo abuuristiisii, si uu u sugo in seddexdaas nooc iyo xaqiiqooyinka uu horay uga soo hadlay ay gogol dhig u ahaayeen ka hadalka nabi Aadam howshiisa iyo howsha bani’aadamka gabi ahaantiisa.

﴿ وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَائِكَةِ إِنِّي جَاعِلٌ فِي الْأَرْضِ خَلِيفَةً قَالُوا أَتَجْعَلُ فِيهَا مَنْ يُفْسِدُ فِيهَا وَيَسْفِكُ الدِّمَاءَ وَنَحْنُ نُسَبِّحُ بِحَمْدِكَ وَنُقَدِّسُ لَكَ ...... إلى قوله: فَإِمَّا يَأْتِيَنَّكُمْ مِنِّي هُدًى فَمَنْ تَبِعَ هُدَايَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ۞ وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴾ [البقرة: ٣٠-٣٩]

“Xus markuu Rabbigaa ku yiri Malaa’ikta waxaan u yeeli dhulka khaliif ooyna yiraaahdeen ma waxaad yeeli cid fasahaadisa kuna daadisa dhiig annagoo ku nazahayna mahaddaada darteed), ilaa dhamaadka aayadaha ku eg (Haddii uu hanuun idinka yimaaddo xagayga ruuxii raaca hanuunka cabsi korkiisa ma ahaato iyo murug midna kuwa gaaloobay ee beeniyey aayadahannaga kuwaas waa ahlu naar dhexdeedana way ku waari” (Al-Baqara: 30-39)

Howsha Aadam lagu kallifay waa arladainuu khaliif ka noqdo, waa jago sare, malaa'iktuna macneheeda ma aysan fahmin ugu horrayntii, xataa haddii ay fahmeen oo khatartiisa garteen uma aysan arkin in sinjiga bani’aadamka ee dhiigga ku daadinaya arlada fasahaadinaya uu u qalmo karaamayntaas. Laakin Allaah SWT si kooban oo cad buu ugu jawaabay

﴿ إِنِّي أَعْلَمُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ۞ وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ﴾ [البقرة: ٣٠-٣١]

"Waxan ogahay waxa aydan ogeyn*Allaah wuxuu baray Aadam magacyada dhamaan" (Al-Baqra: 30-31)

Cilmigaan weeye cilmiga uu Allaah SWT ka doonayo Aadam iyo tarankiisu inay yeeshaan, waa cilmiga awoodda u siinaya inay u qumaan khilaafada arlada, malaa'igtu uma diyaarsana arrinkaan, sidaa darteed lama siinin cilmiga khilaafada u diyaarinaya, laakin Aadam iyo ubadkiisa bay ahayd inay bartaan, sidaa darteedna Allaah SWT ayaa baray:

﴿ وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ﴾ [البقرة: ٣١]

"Allaah wuxuu baray Aadam magacyada dhammaan" (Baqara: 31)

Allaah SWT ayaa Aadam baray magacyada dhammaantood. Sida culimada tafsiirku sheegaan wuxuu baray wax kasta oo uu u baahnaa marka uu dhulka u daadago. Haddaba arrinku ma aha – sida jaahiliyadda iyo culumada isu barbardhiga diimaha ay sheegeen – in bani'aadamku luqad uusan aqoon ee uu tilmaan faraha ku wada hadli jiray, waa baadil waxaasi. Waxay sunnada nabigu noo sheegtay in Aadam markii lagu afuufay ruuxda, wixii ugu horreeyay ee uu sameeyay ay ahayd inuu hindhiso, kaddib Rabbigiisa ayaa ku beeray inuu yiraahdo (Alxamdu lillaah), markaas buu Rabbigiisa yiri (Yarxamukallaah)[1]

## Taariikhda aadanaha iyo Khatarta Kibirka

Haddaba insaanku wuxuu ahaa mid gaar ah ugu horrayntiiba. Waxaan kaloon aragnay in Allaah SWT uu u bayaamiyay Aadam inuu leeyahay cadow Ibliis la yiraahdo, cadowgaasina inuu diiday sujuuddii oo uu kibray, iyo in faldambiyeedkii ugu horreeyay ee dhaca bilowga nolosha dadka ee Allaah uu inoo sheegay uu ahaa in Allaah lagu kibro. Maxaa yeelay Ibliis wuxuu ku kacay macsiyaddii ugu horreysayoo aadanaha la tuso, wuxuu dambigaas galay iyadoo ay jiraan wax kasta oo ku bixinaya, uguna yeeraya inuu Allaah wayneeyo, isu dhiibo, garto iyo inuucaabudo, hase yeeshee wuu kibray. Ibliis wuxuu cilmi iyo cibaado ka joogay heer uu malaa'igta tartan kula galay, Allaah ayuu toos ulakhidhaabi jiray, wuuna ogaa in Allaah uu ku kallifay oo ku amray inuu Aadam u sujuudo.

Cilmigaas, cibaadadaas iyo maqaamkaas iyadoo ay jiraan, baa waxaa jiray kibir ku jira ibliis naftiisa, kibirkaasna arrimahaas oo idil way celin waayeen, kuwaasoo la rabay inay baqdin ku abuuraan markuu ogaado inuu Allaah la khidhaabayo iyo inuu Allaah yahay midka amray, malaa'igtu inay wada sujuudeen, iyo muraadka Allaah SWT uu sidan yahay. Isagoo og arrimahaas oo idil, kama aysan hor joogsan inuu xadkiisa dhaafo, kibro, amarka Allaah ku caasiyo, isla markaana dood la soo istaago isagoo leh:

﴿ أَنَا خَيْرٌ مِنْهُ خَلَقْتَنِي مِنْ نَارٍ وَخَلَقْتَهُ مِنْ طِينٍ ﴾ [الأعراف: ١٢]

"Anaa ka khayr roon waxaad iga abuurtay dab isagana waxaad ka abuurtay dhoobo" (Al-Acraaf: 12)

kaddibna markii uu ku adkaystay sujuud la'aantiisa ayuu Allaah ka baryey inuu u kaadiyo, wuxuuna wacad ku maray in uu dhuminayo Aadam ubadkiis

١-الحديث أخرجه البيهقي في شعب الإيمان ، وصححه ابن حبان من حديث أبي هريرة رضي الله عنه

﴿ فَبِعِزَّتِكَ لَأُغْوِيَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴾ [ص: ٨٢]

"Waxaan ku dhaartay sharaftaadee waan baadiyeen dhamaantood" (Saad: 82)

Waxaa aad u muhiim ah inaan fahamno taariikhda bani'aadamka bilowgeedii hore, kaasoo ahaa Allaah oo lagu kibray, si aan u fahamnno in kibirku yahay cudurka uga halistabadan ee aadanaha ku dhaca arladan guudkeeda, kaasoo ah nafta oo qofka la weynaata. Shaki kuma jiro arrintaas wax joojinaya inaysan jirin, cilmi iyo cibaado iyo wax kale toonna joojin mayso. Marka ay qofka naftiisu la weynaato, marka ay u hanqal taagto waxa ay doonayso, waxaana uga sii daraya xasadka, xanaaqa iyo uur-ku-taallada, markaas bay madax adeyg Allaah kala hor tagaysaa. Arrintaasina waa midda aan had iyo goor ku aragno dadka kibra, kuwa qallooca, iyo kuwa xaqa ku maldaha baadilka iyagoo dantooda iyo naftooda u adeegaya.

Sidaa darteed baa darsigaan loo sameeyay iyo qaabkaan loo kala hormarsiiyay qallooca dadka, waa kala-horrayn dabiici ah oo Allaah SWT dadka u soo bandhigay ugu horrayntiiba, ka hor inta aanan Aadam howl loo dirin iyo ka hor inta uusan arlada u soo dagin. Waxaa loo bandhigay sida Ibliis u kibray, sida uu u khiyaanay amaanada, iyo sida uu Aadam u waswaasiyay si uu ugu rido macsiyada, wuuna ku guulaystay markii uu kadiyay oo laba dhinac uu ka soo galay,

﴿ هَلْ أَدُلُّكَ عَلَى شَجَرَةِ الْخُلْدِ وَمُلْكٍ لَا يَبْلَى ﴾ [طه: ١٢٠]

"Ma ku tusaa (Aadanoow) geedka waaridda iyo boqortooyo aan duugoobaynin" (Dhaha: 120).

Waa labada shay ay naftu jeceshahay oo ah: nolol jacaylka, iyo madaxnimo, labadaasu waa shahwo aad u ballaaran oo mar kasta qofka la kulmaya, shaydaankuna uu dadka ku waswaasiyo had iyo goor.

Wuxuu Allaah SWT u caddeeyay Aadam iyo xaaskiisa iyo ubadkooda inuu cadow u yahay Ibliis, waligiisna cadow u ahaan doono, Allaah wuxuu u bayaamiyay arrimahaas oo idil si aan u ogaanno sida ay risaaladu ku bilaabatey iyo sida rususha dhammaan ay u yimaadeen inay dadka uga digaan cadowgaan, iyo inay dadka baraan sidii ay ugu hoggaansami lahaayeen Rabbigood. Wuxuu ku soo gabagabeeyay inuu Aadam u sheegay inuu arlada u dagayo, xilli go'anna uu ku leeyahay arlada, raaxo iyo degaan ilaa xilli, haddii uu gafana albaabka towbada iyo soo laabashada inuu furanyahay, wuuna ka towbad aqbalay markii uu baray sida loo towbad keeno, kaddibna risaaladii buu ku kallifay, risaaladaasina waxay noqotay mid la fahmayo kaddib markii la ogaaday dabeecadda Aadam, dabeecadda cadowga, dabeecadda arlada loo dajiyay iyo dabeecadda macsiyada iyo qaababkeeda.

﴿ فَإِمَّا يَأْتِيَنَّكُمْ مِنِّي هُدًى فَمَنْ تَبِعَ هُدَايَ فَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ ۞ وَالَّذِينَ كَفَرُوا وَكَذَّبُوا بِآيَاتِنَا أُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُونَ ﴾ [البقرة: ٣٨-٣٩]

"Haddii uu hanuun idinka yimaaddo xagayga ruuxii raaca hanuunka cabsi korkiisa ma ahaato iyo murug midna kuwa gaaloobay ee beeniyey aayadaheenna kuwaas waa ahlu naar dhexdeedana way ku waari" (Al Baqara: 38-39)

Sidoo kale waxaa ku soo arooray Suurada Dhaha

﴿ فَمَنِ اتَّبَعَ هُدَايَ فَلَا يَضِلُّ وَلَا يَشْقَى ۞ وَمَنْ أَعْرَضَ عَنْ ذِكْرِي فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنْكًا ﴾ [طه: ١٢٣-١٢٤]

"Ruuxii raaca hanuunkayga ma dhumo mana dhurdarsado. Ruuxii ka jeedsada xuskayga waxaa u sugnaaday nolol ciriiri ah" (Dhaha: 123-124)

Bilowgaan wuxuu ahaa lagama maarmaan inaan is dul taagno bilowgii taariikhda bani'aadamka, si aan u garanno waxa ay tahay bulshada uu Allaah doonayo, iyo waxa ay tahay qaddiyadda ay bulshadaasi u taagantahay inay gudato.

Marka uu ustad Sayid leeyahay **(Dacwada Islaamka ee Nabi Muxamed SCW uu waday waa qaybtii ugu dambeysay ee silsiladdii dacwadii dheereyd ee islaamka)**

Wuxuu hadalkaas ka doonayaa inuu nagu xiro isla markiiba qaybtii koowaad, oo aynaan illaawin annagoo ka hadlaynna qaybtii u dambaysay inaysan ahayn qayb go'an ama madax bannaan, mana ahan qayb xiriirka u jartay qaybihii ka horreeyay, laakin hayaanku wuu isku daba xiranyahay, xiriir baa ka wada dhexeeya, qaybtan u dambaysana waxay ka dhalatay qaybtii koowaad iyo qaybihii ka dambeeyay dhammaan.

## Dacwadu waa mid cad oo sahlan

**(Ujeeddada dacwadu waxay waligeed ahayd: in dadka la baro Allaahooda waaxidka ah iyo Rabbigooda xaqa ah, loona addoomiyo Rabbigood kaliya, iyo in rabbinimada loo diido addoomada.)**

Qaddiyaddan ay anbiyadu dhammaan la yimaadeen – sida uu leeyahay ustaad Sayid – waa xaq, waxay dhammaan beegsanayeen hal arrin oo qura, in dadka loo addoomiyo Rabbigooda xaqa ah. Waa qaddiyad fudud, oo xaddidan, taas baana keenaysa weyninkeeda; iyadoo sidaa u wayn oo u ballaaran, bay misana tahay qaddiyad fudud, oo marag ma doonto ah, oo fidrada waafaqsan.

Taasi waa xaqiiqo, in anbiyadu dhammaan u yimaadeen inay sugaan xaqiiqadaan sahlan ee isla markaana cad. Dadka waxaa mar kasta duufsan jiray shayaadiin oo xaqiiqada intay mugdi ka galiyaan indhahana tiri jiray, markaas bay qaddiyaddu adayg ku noqonaysaa nufuusta dadkaas.Qaddiyaddan waxaa dadka ku adkeynayey waxa ay shayaadiintu galinayaan fahmaka iyo quluubta dadka taas oo ay ugu qurxinayaa baadilka caqiiddooyinka iyo afkaarta aan daliil looga hayn xagga Allaah darteed

Caqiiddooyinkaan baadilka ah, iyadoo baadilku uu aad u cadyahay, baa haddana shaydaanku fulin jiray dhaartiisii ahayd inuu baadiyeen doono dadka oo idil.

﴿ ثُمَّ لَآتِيَنَّهُمْ مِنْ بَيْنِ أَيْدِيهِمْ وَمِنْ خَلْفِهِمْ وَعَنْ أَيْمَانِهِمْ وَعَنْ شَمَائِلِهِمْ وَلَا تَجِدُ أَكْثَرَهُمْ شَاكِرِينَ ﴾ [الأعراف: ١٧]

"Waxaan kaga imaanayaa hortooda, gadaashooda, midigta iyo bidixda mana helaysid badankooda in ahaadaan kuwa shukriya" (Al Araaf: 17)

Qaddiyaddu waa fududdahay,waxaa jira Rabbi iyo addoon, abuure (khaaliq) iyo la-abuure (makhluuq).Waa qaddiyad hadal badan aanan u baahnayn, sidaas darteed, rususha CS waxay u soo bandhigeen qaddiyaddan si fudud oo deggan, wayna ku celceliyeen isla bandhiggaas, waxay ku adkaysteen hal qaddiyad, iyagoo adeegsanaya hal oraah oo soo noqnoqonaysa, waxay dhammaan la yimaadeen hal qaddiyo

﴿ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ ﴾ [الأعراف: ٥٩]

"Allaah caabuda ma lihidiin ilaah aan asaga ahayn" (Al-Acraaf: 59).

Waxay u yimaadeen inay dadka baraan qaddiyadda towxiidka, Rabbinimada iyo Ilaahnimada iyo dadka oo Allaah kaligii loo addoomiyo, mana aha inaysan dadku ogayn Allaah, sida uu ustaad Sayid yiri:

**(Dadku – xilliyo yar yar iyo dad yar oo kooban mooyee – ma aysan inkirsanayn ilaahnimada iyo jiritaanka Allaah, ee waxa ay gafi jireen garashada xaqiiqada Rabbigooda dhabta ah, ama ilaahyo kale ayay la wadaajin jireen: ha ahaato rumayn ama cibaado u samayn; ama ha ahaato xukun iyo raacitaan. Labaduba waa shirki looga baxayo diinta Allaah, diintaasoo dadku ay ka baran jireen rususha, kaddibna markii waqtigu ku fugaado ayey tartiib tartiib uga siiban jireen, jaahiliyaddii laga soo saarayna u noqon jireen, oo dib shirkigii u billaabi jireen, ha ahaato caqiiddo ama cibaadaysi ahaan, ama ha ahaato xukunka iyo raacitaanka, ama labadaba ha ahaato).**

Waa middan qaddiyaddu, waa inaan fahamno oo yaqiininno inay tahay qaddiyo aanan u baahnayn daliil fara badan, ama cilmi badan oo dheeraad ah, rusushu waxay u yimaadeen inay dadka si sahlan ula hadlaan, sidaas darteedna diintani waa mid yasiran.

Yasirnaanta diintan waxay ka mid tahay saldhigyada caqiiddada islaamka, iyo aasaaska dacwada iyo gaarsiinta. Qaybo badan oo ducaadda ka mid ah baa waxay dadka dareensiinayaan inay qaddiyadda diintan tahay mid adag ama culus in la fahmo, ama inay tahay qaddiyad ay fahmi karaan dad yar iyo kuwa takhasus leh kaliya, taasi waa jidgooyo dariiqa Allaah la is hor taago, sababtoo ah waxay ka soo hor jeeddaa muraadka Allaah SWT, waxay ka soo horjeeddaa hadalka Allaah ee kitaabkiisa xakiimka ah ee baadilku uusan horay iyo gadaal midna uga imaan karin.

Allaah SWT dadkoo idil buu ku kallifay xaqiiqadaan, mar haddii dadkoo idil lagu kallifay oo aanan la kala soocinna,waxaa cad inay xaqiiqadaani heerarka dadkoo dhan la hadlayso. Dadka lagu kallifay xaqiiqadaan waxaa kaliyoo lagu shardiyay inay noqdaan kuwa caqli leh oo qaangaar ah, macneheedu waxay tahay inaan la shardin heer gaar ah oo cilmi iyo aqoon laga gaaro, karti iyo nasab lama shardin, sidoo kalena khibrad iyo ruug caddaanimona lama shardin.

Waxaa haddaba dadka lagu kallifay laga doonayaa oo kaliya waa inay caqli iyo qaangaar ahaadaan, caqliguna waa midka asaasiga ah ee la tacaamulaya waxyaabaha lagama maarmaanka caqliga ku ah, ee looma jeedo caqliga falsafadda ku dhisan iyo midka ku talaxtagay, waxaa weeye awoodda caqliga ah ee garan karta arrimaha lagama maarmaanka ah, laguna fahmo arrimaha ugu sahlan, sida inuusan qofku laba meelood hal mar wada joogi karin.

Arrimahaas waxaa fahmi kara qofkii gaaray da'da qaangaarka, wuxuu u garanayaa si yaqiin ah oo aanan u baahnayn takhasus ama daliil bannaanka looga keeno. Sidaa darteed, Qur'aanku wuxuu suurad dhan oo suuradihiisa ka mid ah aad ugu xoojiyay inuu Qur'aanku fudayd yahay, nabi kastoo laga sheekeeyo wuxuu ku soo celceliyaa aayaddaan

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

"Waan fududeynay Qur'aanka xusuus darteed ee ma jirtaa cid waansamaysa" (Al-Qamar: 17)

Xaqiiqadan haddii aysan ducaaddu rumayn ugu horraynba naftooda ayay ku adkaynayaan arrinka, kaddibna dadkii bay ku adkaynayaan. Qaabka gaarsiinta waa inuu ahaado qaab sahlan, si uusan isbaraanbar uga dhicin xaqiiqada Allaah uu doonayo iyo dabeecadda kitaabkiisa oo dhinac ah iyo qaabka gaarsiinta ay adeegsanayaan ducaaddu. Waa inay

arrimahoo idil hal si isula jaanqaadaan, mana dhacayso inay qaddiyadda iyo qaabka loo bandhigayaba sahal iyo fudayd noqdaan mooyee, iyo daliilkeedu noqdo mid fudud oo fidrada waafaqsan. Sidaas waxaan ku noqonaynnaa kuwa Allaah xaqa ka gaarsiiyay, oo kaalmaystay dhammaan asbaabaha Allaah uu ku beeray fidrada, caqliga iyo waaqica insaanka.

Waa in aan rumaynaa fudaydka iyo yassirnaanta gaarsiinta iyo fudaydka xaqiiqada dadka lagu waajahayo. Sidaa awgeed, markii ay dadku la madaxbannaanaadeen fekerkooda, manhajkooda iyo qaabkooda si ay u ogaadaan xaqiiqooyinka jiritaanka waxay soo saareen waxa loo yaqaan falsafad, waxayna noqonaysaa qaddiyad ad-adag oo ay dad gaar ah kaliya fahmayaan, iyaga laftooda aysan mararka qaar fahmayn, sidaas ayey falaasifadiiiyo kuwii wax ka qaatayna ku lumeen.

Markii ay muslimiintu ku dheceen haadaantii falaasifadu qodeen, markii ay kiciyeen qaddiyado caqli ah oo fahamkoodu adag yahay, waxay muslimiintusi niyad-sami u dooneen inay raddiyaan iyagoo adeegsanaya isla manhajkooda iyo jaangooyadooda, waxay abuureen wax loogu yeeray (Cilmul kalaam ama cilmiga hadalka). Wuxuu ahaa cilmigaasu waqti lumis iyo faham darro, bal wuxuu ahaa midcaqiiddada iyo diinta luminaya. Sidaa darteed bay salafka saalixa diidi jireen cilmul kalaamka, bidco ayayna ku tilmaamijireen dadka cilmigaan wada iyo kuwa diinta qaabkan ku soo bandhigayaba. Imaamu Shaafici – Allaah ha u naxariistee – wuxuu oran jiray: waxaan ku xukumi lahaa Ahlul kalaamka in la garaaco[2], xaafadahana lagu soo wareejiyo, oo kaddibna la yiraahdo: waa abaalka qofka kitaabka iyo sunnada ka taga oo qaata falsafadda.

Ardaygiisii Muzani baa yiri: waxaan akhrin jiray Cilmul-kalaamka ka hor inta aanu Imaamu Shaafici noo iman, markii uu yimid baan u tagay oo aan waydiiyay masalo ku saabsan kalaamka, wuxuu igu yiri: halka aad joogtid ma taqaan? wuxuu yiri: waxaan iri Haa, waxaan joogaa masjidka jaamaca ee Fusdaad. Wuxuu igu yiri: mayee waxaad joogtaa "Taaraan", Taaraan waa meel ku taalla badda cas oo dooni ay adagtahay inay ka badbaaddo. Wuxuu yiri: kaddib buu i waydiiyay masalo fiqi ah, kolkaas baan ka jawaabay, erey buu ku dhex tuuray oo markaa iga fasahaadiyay jawaabtaydii, jawaab kale ayaan dhiibay, ka dib buu erey kale soo tuuray oo iga fasahaadiyay jawaabtaydii, markaas buu kolkaan wax ku jawaababa iga kala daadiyaa. Ka dib buu igu yiri: fiqigaan oo kitaabka iyo sunnada ku jira ayaa hadalka dadku sidaa u fasahaadinayaaye, maxaad u malaynaysaa kalaamka Allaah ku saabsan oo in la khaldaa ay gaalnimo tahay? Markaas baan iska laabay cilmul kalaamka oo aan fiqiga u jeestay.

Diintaan hal si un baa lagu garan karaa, waana sida uu Allaah SWT u soo bandhigay diintiisa, uguna caddeeyay kitaabkiisa kariimka, rasuulkiisana uu dadka ugu yeeray. Waa qaab sahlan oo fudud oo dadka kula hadlaysa caqligooda iyo dareenkooda iyo khibraddooda iyo fidradooda, iyo wixii lagu beeray fidradaas oo xaqiiqooyin marag-madoonto ah iyo daruurooyin caqliga ah

Waxaa jira wax la yiraahdo daruurooyin caqli ah (waxaan laga maarmin). Qofku uma baahna caddayn inaad tahay qof jira marba haddii aad la hadlayso oo aad leedahay waa I kan waan jiraa, kuma oran karo ii caddee inaad jirtid. Laakin falsafaddu waxay ku leedahay ii caddee inaad jirtid, mar haddii qofku kaa maqanyahayna waxay ku leedahay caddee inuu maqanyahay, waa intaasoo uu joogaaye.

---

٢سير أعلام النبلاء . ج8. ص245.

Haddaba, caqliga bani'aadamka oo sidaa loogu ciyaaro wuxuu keenayaa awoodda caqli inay ka firirto, taas oo aanan loo keenin in lagu ciyaaro ama loo adeegsado ciyaar ama baadi, ee waxaa loo keenay in loo adeegsado cilmi. Sidaa awgeedna waxaa lagu beeray cilmiga daruuriga ah ee aanan u baahnayn daliil. Haddii cadceedda oo goor barqa ah cirka ka muuqata lagu yiraahdo caddee inay cadceeddu jirto waad yaabaysaa, kana jawaabi maysid, sababtoo ah waxaad is leedahay qofkaasi wuu kuugu ciyaarayaa, ama wuu kuugu jeesjeesayaa, ama waa indhoole oo wax ma arko. Qofkaasoo kalena looma caddayn karo xaqiiqo, hore waxaa lagu yiri (gabay):

( وَلَيْسَ يَصِحُّ فِي الأَذْهَانِ شَيْءٌ   إِذَا احْتَاجَ النَّهَارُ إِلَى دَلِيلِ)

(Maanka (maskaxda) waxba ma galaan mar Haddii dharaartu ay daliil u baahato)

Sidoo kalena qaddiyaddan uma baahna daliil, qaddiyadda ah inay diintu tahay mid fudud, iyo in caqiiddadu ay fidrada waafaqsantahay, iyo in dariiqada lagu bandhigayocaqiiddada ay tahay inay noqoto mid fudud si ay dadka u gaarto, annagana aan uga run sheegno sheegashadeenna inaan Allaah risaaladiisa dadka gaarsiinaynno, ee aynaan nafteenna iyo caqligeenna iyo hawadeenna wax ku gaarsiinayn. Waxaan rabnaa inaan kalaamka Allaah, muraadkiisa iyo risaaladiisa gaarsiinno. Waa inaan ku dhagnaa manhajka Allaah ee soo bandhigista, gaarsiinta, gudashada, iyo qaabka, waana inaan rumaynaa inay sidan tahay sida kaliya ee qaddiyaddaan lagu soo bandhigi karo.

## Xaqa oo lagu sugnaando

Arrinkan dhammaantiis waxaa laga dheehday qaddiyaddan oo ah in taariikhda dadka iyo risaalduba ay ku billaabatay Aadam, kuna soo dhammaatay nabi Muxammad SCW, iyaga iyo intii u dhexeysana dhammaan hal qaab oo fudud bay u soo bandhigayeen qaddiyadda, waxayna la hadlaayeen fidrada iyo dareenka iyo daruurooyinka caqliga ah. Sidaa darteed, adeyg kuma jirto soo bandhigista qaddiyadda islaamka. Waxa dadka islaamka ka hor taagan ma aha jahliga, mana aha fahamka oo aan la awoodin, mana aha cilmi la'aan ee waxa dadka hortaagan had iyo goor waa iyaga oo xaqa ka jeesanaya, oo dhabarka u jeedinaya, dhagahana ka awdanaya ama gacmaha saaraya dadka ducaadda afkooda, si aysan u maqlin xaqa. Ma aha in qaddiyaddu ay murugsan tahay, mana aha inay adagtahay. Fudaydka qaddiyadda iyo sahlanaanteeda waxaa ka dhalanaya in dagaalka u dhexeeya ducaadda iyo kuwa loo yeerayo ama jaahiliyadda uusan ahayn sidii loo caddayn lahaa in diintan xaqtahay, ee qaddiyaddu waa sidii loogu sugnaan lahaa xaqa iyada oo laga hor imaanayo canaadka jaahiliyada.

Haddaba, xaqa oo lagu sugnaado kaliya marka la waajahayo jaahiliyada ayaa ah dacwada dhabta ah ee islaamka. Haddii marka ducaadda loo soo daadajiyo doodo iyo wada hadallo qaabka jaahiliyadda u dhacaya, waxay isla waqtigaas noqonayaan kuwa guuldarraystay, oo ka bayray saldhiggii ay ahayd inay ka duulaan, oo markaa toodii ka tagay oo aaday saldhigga cadowga si ay ugula hadlaan, taasina waa bilowga guuldarrada iyo dhammaadkii hawsha ducaadda isla markaas. Qofka muslimka ah waa inuu saldhiggiisa ku ekaadaa oo dadka ugu yeeraa, oo ku adkaystaa inuusan iyaga u tagin,

﴿ فَمَنْ شَاءَ فَلْيُؤْمِنْ وَمَنْ شَاءَ فَلْيَكْفُرْ ﴾ [الكهف: ٢٩]

"Ciddii doonta ha rumeyso ciddii doontana ha gaalowdo" (Al Kahf: 29).

Laakin inaad ka tanaasusho manhajkaaga, dariiqaaga, iyo sida ay wax kuugu kala horreeyaan, waxaasi waa shaydaan waswaaskiis si uu kaaga weeciyo waddada saxan, haddii aad ka

yeeshana waxaa fududaanaysa in markaa kaddib laguu jiido haadaamaha baadida middii la doono

Waxaan rabnaa inaan adkayno inay dadku yaqaanaan, waligoodna yaqaaneen, Rabbigooda iyo khaaliqooda, oo ay yaqaanaan inaysan iyagu is abuurin, isna samaynin. Waa qaddiyad la isku wada waafaqsanyahay, xataakuwa maaddiyiinta ee oranaaya "Ilaah ma jiro, noloshuna waa maaddo", waxay dhab ahaantiicaqiiddada toosan ku beddelayaan mid baadil ah, waxay leeyihiin maadada ayaa wax abuurtay, maaddaduna bilow ma leh, dhammaadna ma leh, iyadaa wax abuurta xadna ma leh awooddeeda abuuris, dhammaanna waa sifooyinkii Allaah. Waxay Ilaaha u diidayaan inuu yahay mid nool, oo wax maqla, waxna arkaya, awood xoog badanna leh, si ay markaa arlada u fasaadiyaan, wax taklifa ahna isaga fogeeyaan, ama wax ay u haystaan inuu ku culusyahay, ama ka hor imaanayo hawadooda iyo shahawaadkooda.

Dhab ahaantii waa inay dadku isku waafaqsanyihiin inay yihiin kuwa la abuuray, laakin qaddiyaddan kalama baxayaan wixii ay ahayd inay ka qaataan.

Markii ay rususha dadka ku yiraahdaan: u soo laabta Allaah, oo siiya cibaadada iyo hoggaansanka iyo madax raaricinta uu xaqa u leeyahay, waa muhimmad cad oo fudud. Waa howsha bani'aadamka dhammaantiis laga doonayo inta uu arlada joogo, inuu ogaado inuu Rabbi leeyahay, Rabbigaasna uu suldaanka leeyahay, suldaankaasna uu yahay mid muuqaal gaar ah leh iyo xaqiiqooyin gaar ahna ka dhex muuqdaan. Haddii dadku ay ka leexdaan aqoonta Rabbigooda, iyo aqoonta sifooyinkiisa ama magacyadiisa ama xuquuqdiisa ama sharcigiisa ama qiyamkiisa, waxaa imaanaya anbiyada si ay dadka dib ugu soo celiyaan Allaah, haddaba qaddiyaddu waa mid fudud oo culays lahayn.

Sida uu Sayidku yiri **(…dadku waxa ay gafi jireen garashada xaqiiqada Rabbigooda dhabta ah, ama ilaahyo kale ayay la wadaajin jireen: ha ahaato rumayn ama cibaado u samayn; ama ha ahaato xukun iyo raacitaan).**

Arrimahaas waa hal xaqiiqo oo dhinacyo badan ku timid, dhinac waa ka bixataanka addoonnimada bani'aadamku ay u yihiin Allaaha xaqa ah, ha ahaato dhanka caqiiddada, oo markaa ay cid kale la wadaajiyaan ama Ilaahyo badan ay samaystaan, ama ay sifooyinkiisa iyo magacyada ay la wadaajiyaan, ama qaababka cibaadada ay la wadaajiyaan, ama waxyaabihii ay xuquuqda Allaah keensanaysay laga waayo.

## Muuqaallada Shirkiga ee Xilligan

Waxa la iska rabo(caqiiddada) waa la yaqaan, waana Allaah SWT oo la aqoodo, maqaamka Ilaahnimada iyo sifaadkiisa iyo magacyadiisa, iyo in la rumeeyo xaqaa'iqda arrimaha ku heeran bani'aadamka, xaqiiqada kownka, xaqiiqada nolosha, iyo xaqiiqada insaankaba. Dhammaan waa arrimo caqiiddo ah oo laga doonayo aadanuhu inuu garto oo aqoodo.

Cibaadadu waa dhammaan shaqooyinka iyo howlaha uu addoonku ugu dhowaado Allaah SWT, si raalli ahaansho uu uga helo, caradiisana uga fogaado.

Raacitaanka iyo maamulka (xaakimiyada) waa qaddiyadda toosnaanta xagga dhaqanka, bulshada iyo nolosha aadanaha,iyadoo Allaah kaliya la siinayo xaqa maarayntanolosha, iyo xaqa go'aaminta arrin kasta oo nolosha dadka ku aaddan.

Dadku haddaba, waxay Allaah ugu shariik yeelaan dhankacaqiiddada, ama dhanka cibaadooyinka, ama dhanka raacidda iyo xaakimiyada.

Waxay u muuqan kartaa in raacitaan iyo xaakimiyo ay kala duwanyihiin, oo inta ay dadku go'aansadaan mabda'a xaakimiyada bay misana xaakimiyada ku raaci karaan hawadooda, sheekhyadooda iyo bidcooyinkooda iyo qalloocooda. Taasi waxay dhacdaa marka ay dadku sharci dagsadaan ama ay diinta Allaah ku soo kordhiyaan wax uusan Allaah oranin.Haddaba faraqa u dhexeeya arrimahaan waa mid ka hoos bixi kara dadka.

## Ujeedada Dacwadu waa u isudhiibidda Allaah

**(Taasi waa dabeecadda ay lahayd dacwada Allaah guud ahaan taariikhda bani'aadamka. Hadafkeedu waa "islaam" waa isdhiibid ay addoomadu isu dhiibaan Rabbigooda, iyo in laga saaro addoomo inay caabudaan si Allaah kaligii ay u caabudaan, iyada oo laga saarayo suldaanka ay addoomada kale ku leeyihiin xukun iyo sharci ahaan, iyo qiyam iyo dhaqan ahaan, si ay u galaan xukunka iyo shareecada Allaah kaligii dhammaan arrimaha nolosha.)**

Waxaan marar badan ka hadalnaa in dacwada Allaah amaba diintaan ay doonayso in addoomada loo hoggaamiyo Rabbigooda, waana arrin xaq ah. Balse waxaan rabaa inaan aragtida ku jeediyo qaabka loo fahmayo qaddiyaddaan. Sidee aadanahu u fahmaa in naftiisa Allaah u dhiibo? Siduu u dhadhansadaa xaqiiqadaas? Waxaa dhici karta inaan taabannay qayb ka mid ah qaddiyaddaan markii aan ka hadalnay jiilkii hore(asxaabtii), iyo sidii ay u dhadhansadeen islaamka, iyo sidii ay Allaah SWT ula noolaadeen, iyo sidii ay ula dhaqmeen Allaahaas ay barteen baadi ka dib.

Shaki kuma jiro in qaabka ay saxaabadu u fahmeen xaqiiqadan, sidii ay u dhadhansadeen, iyo sidii ay dabeetana xaqiiqadan ula dhaqmeen, shaki kuma jiro inay ka dhex muuqatay qaab nololeedkoodii, dareenkoodii, qiyamtoodii iyo dhaqamadoodii dhinac kasta oo nolosha ka mid ah. Qaddiyaddan waa midda aan rabno inay dadku fahmaan marka aan leenahay: ujeeddadu waa addoomada oo loo hoggaamiyo Rabbigood, ujeeddadu ma aha in laga baxo cibaadada dawaaqiidda (kuwa xadkoodii dhaafay) ama la diido xukunka dawaaqiidda oo keliya.

Qaddiyaddu intaas way ka guda weyn tahay; waa iyadoo la is waydiiyo sidee ula dhaqmaa Allaah? See u bartaa? See u qaddariyaa? See u fahmaa masaafada u dhexeysa addoonka iyo Allaah SWT inta ay la egtahay? Gunteedu waa qaddiyad dareen iyo mashaacir, ee ma aha qaddiyad caqli kaliya ah, laakin bilowgeedu waa inay caqli noqotaa, si loo xaddido masaafada u dhaxaysa addoonka iyo Allaah, masaafada u dhexeysa makhluuqa iyo khaaliqa, iyo masaafada u dhexeysa sifooyinka makhluuqa iyo sifooyinka khaaliqa.

Qaddiyaddan waa inaan muddo dheer is dul taagnaa.Waxaan u baahannahay inaan is dul taagno oo ka fekerno: waa maxay macnaha makhluuq baan ahay? Waa maxay macnaha Allaah waa khaaliq? Waa maxay macnaha inaan ahay insaan la abuuray oo isagoon jirin la sameeyay, oo ay jirtay maalin maalmaha ka mid ah uusan wax jira ahayn. Sidoo kale, waa maxay macnaha Allaah inuu yahay khaaliqa abidkiis soo jiray, abidkiisna jiri doona, iskiisna u taagan, kuna dhacaynin nuqsaan, dhammaad, geeri, illow ama jahli. Arrimahaas oo idli, waa inaan is hor taagnaa in badan dhabnimada inta ay isu jiraan sifooyinka khaaliqa iyo makhluuqa, iyo xaqiiqada uluuhiyada iyo xaqiiqada addoonimada, iyo maqaamka Allaah SWT iyo maqaamka addoomada makhluuqiinta ah.

Qaddiyaddan waxay bilow asaasi ah u tahay gelitaanka iimaanka dhabta ah, iyo xerada iimaanka nool ee ifaaya. Dadka qaddiyadda u qaadanaya inay tahay xisaab ama falsafad, 'mar haddaan jiro waxaa jirta cid jiritaankayga ka dambaysay', oo ay qaddiyaddu halkaas ku dhamaato, xiriirka igala dhexeeya khaaliqaasna uu ku dhammaado qaabkaas qallalan ee khafiifka ah ee aanan dareen dhaqaajinaynin, wax xuquuq ah ama aragti ah aysan ka

dhalanaynin. Dadka sidaas u qaadanaya qaddiyadda waxay ka lumeen irridkii saxda ahaa ee xaqiiqada gaarsiinayay.

Waxaa aad muhiim u ah inaan ogaanno in dacwada Allaah ee ay anbiyadu la yimaadeen haddafkeedu uusan ahayn in dadka la baro inay leeyihiin khaaliq iyo inay yihiin kuwa la abuuray. Taasi waa qaddiyad fidri ah oo waaqici ah, waxayba ka mid tahay daruurooyinka caqliyeed ee insaanka. Qofka caqliga leh kama qarsoomi karto arrintaas, mana awoodi karo inuu dhabarka u jeediyo, mar haddii uu yahay qof jira waa lagama maarmaan inuu jiro cid ahaysiisay, bani'aadamkuna waligiis ma sheegan inuu isaga is abuuray, haddii uu sidaas sheegan lahaa waxaa laga dalban lahaa inuu noloshiisa mid ka wanaagsan keeno.

Laakin ma jiro qof naga mid ah illaa wuxuu dareemayaa inay nuqsaan ku jirto, mana awoodo inuu buuxiyo nuqsaantaas ama beddelo, kii gaabnaan lagu abuuray inuu dheeraado ayuu rabaa mana awoodo, kii foolxumo lagu abuuray qurux buu doonayaa mana awoodo, kii cillad ku dhashay inuu ka fayoobaado ayuu rabaa mana awoodo, haddii uu isagu ahaan lahaa mid naftiisa abuuray wuu awoodi lahaa. Taasi waa oraah asalkeedu falsafad yahay oo baadil ah oo ka hor imaanaysa caqliga, sababtoo ah wax awoodi kara ma jiro inuu is abuuro, si uu isu abuurana waa inuu isagu jiro ka hor inta uusan is abuurin, waa sheeko Roomaankii hore ah oo aysan ahayn in la isku howlo, waa hadal ka suurooba qof waalan ama ciyaaraya, ama waqtiga luminaya, ama shaydaan uu ku ciyaaray oo markaa shaydaanka ajiibaya.

Qaddiyadda marag ma doontada ah ee uu garanayo caqliga deggan ee bani'aadamka ah ee naftiisa ixtiraamaya waa inuusan isagu is ahaysiinin, haddaba waa inuu jiritaankiisa keenay khaaliq ka awood sarreeya isaga. Haddii uu marka eego waxa ku hareeraysan iyo waxyaabaha isugu aaddan ee noloshiisa u fududaynaya wuu garanayaa arrinkaas, sababtoo ah insaanku iskii uma taagna, iskumana filna, haddii uu isu arki lahaa mid isku filan qaddiyaddu intaas way ka adkaan lahayd.

Xaqiiqda geerida iyo nolosha ayaa ku filan inay caddayso inuu yahay mid la abuuray isaga oon jirin, walow haddii uu yahay mid iskii u taagan oo isku filan oo goonni isu maamuli kara oo tiirarka nolosha ay ku idil yihiin. Laakin Allaah SWT wuu uga naxariistay bani'aadamka arrintaas si uusan ugu dhicin baadi iyo kibir, oo markaa isugu malaynin inuu isagu is abuuray oo uu goonni isu taagi karo, wuxuu ka dhigay mid wax kasta u baahan, hawo, iftiin, cunid iyo cabbidba u baahan, si uu had iyo goor u dareemo inuusan is abuuri karin, naftiisana u diyaarin karin noloshan iyo waxa ay ka koobantahay ee asaasiyaad iyo dhamaystirba, taasina waxay keenaysaa inuu dareemo yaraantiisa iyo baahidiisa, iyo inuu dareemo faqiirnimo;

﴿ يَا أَيُّهَا النَّاسُ أَنْتُمُ الْفُقَرَاءُ إِلَى اللَّهِ وَاللَّهُ هُوَ الْغَنِيُّ الْحَمِيدُ ﴾ [فاطر: ١٥]

"Dadow awaxaa tihiin kuwa Allaah u baahan. Allaahna waa kii qani ah lana mahadiyo"
(faatir: 15)

Waxaa misna taasi ku xigta tabardarrada asalka bani'aadamka, iyo tabardarrada kobciddiisa; ha ahaato markii hore ee dhoobada laga samaynayay, ama marka dambe ee biyahaliita laga sameeyay. Labada abuurba uma saamaxayaan insaanka inuu kadsoomo ama kibro ama naftiisu la waynaato, isagoo ah miskiin liita oo daciif ah, ka bilowda dhibic liidata, kuna dhamaanaya bakhti uraya. Qofka sidaas ah xageebuu kibir uga imaanayaa? Xageebuu isla weynin uga imaanayaa? Waa wixii uu Ibliis isku dayay markii nabi Aadam uu kadinayay.

Waxaa lagama marmaan ah in qaddiyaddaan aad u caddahay, oo ah in makhluuqa ay tahay inuu barto khaaliqiisa. Waa qaddiyadda ay u yimaadeen anbiyadu inay dadka baraan. Waxay u

yimaadeen inay dadka ku yiraahdaan: Rabbigiin u soo noqda, siiya xaqa addoonnimada uu idinku leeyahay khaaliqiinna aad qirsantihiin, isla markaana aad rumaysantihiin oo aad nicmooyinkiisa ku dhex nooshihiin, kaasoo idin abuuray idinka oon jirin. Allaah oo khaaliqiinna ah xaq buu idinku leeyahay. Waa middaas muhimmada anbiyada, waana isla iyada muhimmadda ducaadda. Haddaba, qaddiyaddu ma aha daliillo laururiyo iyo falsafad iyo dood ay doodayaan dad aqoonyahanno ah.

Qaddiyaddan waa mid sahal ah:

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

"Waan fududeynay Qur'aanka xusuus dartiid ee ma jirtaa cid waansamaysa" (Al-Qamar: 17).

Sidoo kale Allaah SWT wuxuu ku yiri dadka

﴿ أَمْ خُلِقُوا مِنْ غَيْرِ شَيْءٍ أَمْ هُمُ الْخَالِقُونَ ۞ أَمْ خَلَقُوا السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ بَلْ لَا يُوقِنُونَ ۞ أَمْ عِنْدَهُمْ خَزَائِنُ رَبِّكَ أَمْ هُمُ الْمُصَيْطِرُونَ ۞ أَمْ لَهُمْ سُلَّمٌ يَسْتَمِعُونَ فِيهِ فَلْيَأْتِ مُسْتَمِعُهُمْ بِسُلْطَانٍ مُبِينٍ ۞ أَمْ لَهُ الْبَنَاتُ وَلَكُمُ الْبَنُونَ ﴾ [الطور: ٣٥-٣٩]

"Mise waxaa la abuuray abuure la'aan mise iyagaa abuuray naftooda. Mise iyagaa samaawaadka iyo dhulka abuuray iska dhaafee wax yaqiinin maayaan. Mise agtooda ayaa khayraadka Allaah yaallaa mise iyagaa xisaabin dadka. Mise waxay leeyihiin sallaan (jaranjaro) ay wax ku dhegaystaan, ha la yimaado kooda wax dhegaystay xujo cad. Mise Allaah ayaa gabdho u sugnaaday idinkana wiilal" (Adhoor: 35-39)

Sidoo kale wuxuu Allaah yiri

وَأَنَّهُ هُوَ أَضْحَكَ وَأَبْكَى ۞ وَأَنَّهُ هُوَ أَمَاتَ وَأَحْيَا ۞ وَأَنَّهُ خَلَقَ الزَّوْجَيْنِ الذَّكَرَ وَالْأُنْثَى ۞ مِنْ نُطْفَةٍ إِذَا تُمْنَى ۞ وَأَنَّ عَلَيْهِ النَّشْأَةَ الْأُخْرَى ۞ وَأَنَّهُ هُوَ أَغْنَى وَأَقْنَى ﴾ [النجم: ٤٣-٤٨]

"Allaah waa kan wax ka qosliya kana oohiya. Isagaana wax dila waxna nooleeya. Isagaana abuuray labada nooc ee lab iyo dheddig, kana ahaysiiyey dhibic la daadiyo, isagaa ahaysiiya soo celinta labaad, Isagaana hodmiya isagaana wax faqiiriya" (Al-Najm: 48)

Side u qososhaa? Waa maxay qosol? arrintaani markuu insaanku dul istaago waxaa laga yaabaa inuu caqli wareero, maxaa yeelay ma awoodo inuu fahmo macnaha qosolka, oo waa maxay qofku inuu qosluu karaa? Qosolkuse muxuu cabbiraa si uu qofku u fahmo inuu faraxsan yahay? Allaah kaliya ayaa ah kan wax ka qosliya, kana oohiya! Siduu kaaga qosliyo ayuu kaaga oohiyaa… sidee u qosolnaa? sidee u ooynaa? Allaah oo kaliya ayaa sidaa samayn kara.

Qaddiyado toos ah weeye oo qofka aanan waxna qorin, waxna akhrin uu fahmi karo, qofka cilmiga badanna uu garan karo, waa arrimo cad cad oo aan feker badan u baahnayn, caqli badan iyo falsafadna aan u baahnayn, waxay u baahantahay kaliya in caqliga caadiga ah laga shaqaysiiyo oo ay markaa qaddiyaddu caddaato. Nafteenna annagu waxba kuma lihin, waxaa waajib ah inaan noqonno waxa uu Allaah naga doonayo, inaan Allaah u soo noqonno. Hawsha anbiyada waxay ahayd inay dadka soo wada galiyaan xerada Allaah, addoomadana ay u soo celiyaan Rabbigooda, khaaliqooda, oo ay ka bixiyaan caabudidda addoomada una bixiyaan caabudidda Allaah kaligii.

Waxaan leenahay: ereyga "addoomada in laga bixiyo caabudidda addoomada loona bixiyo caabudidda Allaah kaligii" ma ahan qaddiyad siyaasadeed. Kuma koobna in shareeco iyo

nidaam laga soo saaro oo kuwa kale la hoos keeno, ama maamul laga saaro oo mamul kale u taliyo. Balse waa in dadku ka baxaan awood u talisa u baxaan awood kale. Haddaba u hoggaansanka awooddan waa inay ku dheehnaato jacayl iyo qaddarin, waana in si dheeri ah loo bartaa maqaamkeeda wayn. Taasna waxaa lagu heli karaa in si qotodheer loogu fekero masaafada u dhexeysa khaaliqa iyo makhluuqa, dadka iyo Allaah SWT.

Shaki kuma jiro ahmiyadda ay leedahay inaan fahamno gunta dacwada Allaah iyo suldaankiisa dadka loogu yeerayo. Marka uu Allaah SWT dadka ka dalbado inay ka baxaan suldaanka addoomada, shareecadooda, dhaqankooda,fekerkooda iyo qiyamkooda, oo ay Allaah suldaankiisa iyo xukunkiisa soo galaan.Waa inaan u fahamno qaddiyaddaas inaysan ahayn muuqaallo iyo nidaamyo iyo sharciyo laga guuraayo oo kaliya, laakin qaddiyaddu intaas ka hor iyo kaddibba waa in la dareemo in insaanku ku yimid ereyga ahow (kun) ee uu Allaah SWT doonay. Haddaba, isaga iyo jirtaankiisa oo idil, iyo awoodihiisa iyo kartidiisa dhammaan, iyo wax kasta ee uu Allaah u sakhiray waa siismo iyo nimco Allaah uga timid.

Dareenkan waa inuu ka hor maraa barashada xaqa Allaah leeyahay iyo sharciyadiisa. Qofku mu'min dhab ah ma noqonaayo jeer uu ugu horreyn Allaah barto, intaas kaddibna uu xuquuqda Allaah barto oo dareemo yaraantiisa marka la hordhigo weynaanta Allaah, haddii uu sidaas dareemo si habboon buu Allaah wax uga qaadanayaa, una madax raaricinayaa Ilaahnimadisana isaga oo isdullaynaya. Isdullayntaasi waxay tusaysaa inuusan qofna awood u lahayn inuu istaago la’aanta kaalmada Allaah iyo amarkiisa. Mana jiro kownka wax dhaqaaqi kara ama istaagi kara Allaah amarkii mooyee. Isudulleynta Allaah sidaas baa laga wadaa, ee dullinimo ma ahan madax-raaricin iyo hoggaansanaan oo keli ah. Dadkuba aakhiro iyagoo dulleysan bay imanayaan, sababtoo ah waxay garteen dhabnimada Ilaahnimada iyo waynankeeda maalintaas, maxaa yeelay waxay ogaanayaan xaqiiqadii oo dhamaystiran.

Waxaa nalaga rabaa intaan dunida joogno inaan sare ugu kacno fahamka heerkaas ah si buuxdana Allaah aan isugu dulleeyno, isudulleyntaas oo inaga saaraya suldaanka addoomada illeen xaq naguma lehee, oo noo saaraya suldaanka, xukunka iyo shareecada Allaah. Taasina waa arrin bilowgaba dareen ah. Annaga nooma habboona in Islaamka dadka ugu soo gudbinno si falsafad ahama inuu yahay baahi bulshadeed ama inuu yahay nidaam iyo sharciyo kaliya.

Waa in aan ugu horreyn u soo sheegnaa inay addoomo Allaah yihiin, macnaha addoonimo idilkeed, yaraan idilkeed, dulleysan yihiin dullinnimo dhammanteed, faqiirnimo halkii ugu dambaysay yihiin. Haddii qofku uu islaamka irridkan ka soo galo, arrimaha dhimman aad bay u fududaanayaan, haddiise uu ka soo galo illinka doodda ama wada noolaanshaha ama miisaanka takaaliifta iyo faa'idadeeda laga helaayo ama inuu islaamku sacaado u gaarsiinayo dadka. Dhammaan arrimahaas dadka kuma islaamayaan, kuma dareemayaan dhadhanka islaamka.

## Isku dheellitirnaanta Nolosha Aadanaha

**(Islaamka oo ah diinta nabi Muxammad SCW uu la yimid, nabiyadii horena ay la yimaadeen, ayaa u yimid inuu dadka dib ugu celiyo xukunka Allaah, si ay ula mid noqdaan uunkan wayn ee ay dadku ku dhex noolyihiin. Awoodda maamulaysa noloshooda waa inay noqotaa isla awoodda maamulaysa jiritaankooda, si ayan iyagu ula gaar noqon maamul iyo xukun iyo qaab dhaqan ka duwan midka kala hagaya uunka gebi ahaantiisa, oo xataa maamula noloshooda qaybta aysan ikhtiyaarka ku lahayn).**

Tani waa qaddiyad kale oo ah in insaanku aanu ahayn makhluuqa kaliya ee la abuuray, balse kownkan waxaan naqaan iyo waxa aanaan aqoonba Allaah ayaa abuuray

﴿ وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴾ [النحل: ٨]

"Wuxuu (Allaah) abuuraawax aydin aqoon" (Al-Naxla: 8)

Kownka gebi ahaan wuxuu u hoggaansan yahay Allaah SWT,

﴿ وَإِنْ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا يُسَبِّحُ بِحَمْدِهِ وَلَكِنْ لَا تَفْقَهُونَ تَسْبِيحَهُمْ ﴾ [الإسراء: ٤٤]

"Shay ma jiro illaa wuxuu ku tasbiixsanayaa mahaddiisa (Allaah), laakiinse ma fahmeysaan tasbiixdooda" (Al-Isra: 44).

Dadku haddaba waa inay noqdaan kuwa caqli leh, oo jooga heerka garashada ee Allaah uu bani'aadamka gaar uga dhigay, isagoo ah makhluuqaadka midka ugu caqliga badan, ahna sayidka makhluuqaadka. Haddaba, haddii makhluuqaadku dhammaan ay Allaah u hoggaansanyihiin, muxuu bani'aadamku uga fallaagoobayaa hoggaansankaas? Muxuuse uga baxayaa qaanuunkan?

Waa in ay dadku ogaadaan mar haddii ay kuwa la abuuray yihiin iyaga iyo kownkan oo idil, uma bannaana inay ka fallaagoobaan asalka guud, oo ah in kownkan uu yahay mid Allaah addoon u ah, dadkuna ay tahay in addoomo Allaah u noqdaan sida kownkan oo kale, si dhammaan la isula jaanqaado mar qura. Allaah uma abuurin khalqiga (dadka) si ay ugu gadoodaan ama u fallaagoobaan ama ugu kibraan ee in ay Ilaahnimadiisa ugu hoggaansamaan buu u abuuray. Taasina waa macnaha maamulka dhammeystiran ee aanan ku habboonayn Allaah SWT mooyee. Addoomadu ma aha haddaba inay la gooni noqdaan manhaj iyo maamul ka duwan midka kownka maamulaya, iyo sidoo kale maamulaya noloshooda qaybta aysan doorashada ku lahayn.

Qofka bani'aadamka wadnihiisu wuu garaacmayaa, mana uu joojin karo, qaab gaar ah iyo tiro go'an buu u garaacmayaa, waxaasoo idil Allaah kaliya ayaa gacanta ku haya. Xubin kastana Allaah ayay u sakhirantahay oo u hoggaansantahay. Bani'aadamku laba dhinac buu ka koobanyahay: dhinac u hoggaansan xukunka qadarta oo uusan waxba ka beddelikarin, wuxuu kala mid yahay wax kasta ee jira (noole iyo ma-noole) oo dhammaan Allaah u hoggaansan; dhinaca kalena waa dhanka doorashada ee Allaah uu goonni uga yeelay bani'aadamka, uuna ku karaameeyay markii uu masuul uga dhigay waxa uu sameeyo, awoodna u siiyay kala garasho iyo doorasho, iyo inuu diido ama yeelo, dhammaan waa karaamayn ee ma ahan hoos u dhigidda qiimihiisa, mana ahan ku saarid masuuliyad uusan ka bixi karin, Allaah markii uu insaanka u abuuray howshaan, wuxuu ugu abuuray inuu awood u leeyahay darteed.

Insaanka kownkaan dhex jooga waa inuu yaqaan meesha uu mudan yahay, awoodihiisa iyo kartidiisa. Wuxuu leeyahay dhinac uu kala mid yahay makhluuqaadka oo idil, oo Allaah u hoggaansan, uusan ka bixi karin noloshiisa iyo geeridiisa, xanuunkiisa iyo saboolnimadiisa, muuqaalkiisa iyo midabkiisa midna, dhamaantood waa qadar aanan laga bixi karin. Dhinac kale, waa dhinaca Allaah ku karaameeyay oo ah inuu doorasho sameeyo, inuu doorto Allaah SWT isaga oo jecel oo waynaynaya isuna dullaynaya, si uu halkaa uga helo abaal marinta wayn ee Allaah SWT u sameeyay addoomihiisa muuminiinta ah. Sayidka oo arrintaas fidriga ah ka hadlaya wuxuu yiri:

**(Dadka waxaa xakuma xeerar fidri ah oo xagga Allaah ka ahaaday, oo maamula koritaankooda, caafimaadkooda iyo waliba noloshooda iyo geeridooda, waxaa ay sidoo kale ku xakumanyihiin xeerar maamulaya noloshooda mujtamac ahaan, iyo caaqibada uga**

**imanaysa falalka ay ikhtiyaarkooda kula imanayaan, mana awoodaan inay beddelaan sunnada Allaah ee xeerarka maamulaya uunka.)**

Dhaqdhaqaaqan doorashada ku dhisan laftiisu wuxuu u hoggaansanyahay sunnada Allaah ee sugan, wixii ay doortaanba waxay ugu dambayn u noqonayaan qaanuunka Allaah ee xukumaya waxa ka dhalanaya doorashadiisa. Qofkii doorta inuu meel sare iska soo tuuro, sunnada Allaah ayaa xaddidaysa meesha uu ku dambaynayo, isagu ma go'aamin karo inuu soo dhoco oo uusan dhimanin, taasi waa sunno Allaah. Haddii uu cuntada iska daayo ama inta uu u baahanyahay ka badan cuno, wuxuu ku xukumanyahay qaanuunka Allaah, haddaba doorashadiisu ugu dambayntii waxay ku dhammaanaysaa xukunka Allaah qaddaro.

Haddaba, waa inay dadku Islaamka ula soo laabtaan qaybta ay ikhtiyaarka u leeyihiin noloshooda, oo shareecada Allaah ay ka dhigtaan midda maamusha qayb kasta oo ka mid ah noloshooda, si ay isu waafaqaan qaybta ikhtiyaarka ay u leeyihiin iyo qaybta fidrada ee noloshooda, oo ay markaa is waafajiyaan jiritaankooda gebi ahaan iyo jiritaanka uunka.

Dhab ahaan, tani waxay aad ugu bixinaysaa qofka inuu raaco diinta Allaah SWT; sababtoo ah haddii uu raaco diinta Allaah noloshiisa ayaa isla jaanqaadaysa. Waxaa suura gal ahayn inuu Allaah ku raaco noloshiisa dhinaca uusan u madax banaaneyn, una hoggaansanaado qawaaniinta kownka iyo sunanta, misana noloshiisa doorashada ah cid kale inuu ku raaco. Taasi waa arrin ku bixinaysa qofka, caddayna u ah lama huraanka inuu Allaah isu dhiibo kaligiisna caabudo. Xataa haddii aanan loogu yeerin arrinkan waxay ahayd inuu is waydiiyo: Rabbiyow maxaan ka yeelaa dhaqaaqayga aan xorta u ahay? Anigu-halkan-waxaa ku qalbi samahay noloshayda qaybta aanan u talin illeen adigaa i hoggaaminayee, maxaan ku sameeyaa nolosheyda dhanka aan u madax bannaanahay? Maxaad hagid la'aan iiga tageysa? Sidaas bay mudneyd dadku inay is waydiiyaan.

Allaah SWT wuu karaameeyay dadka, wuxuu u soo diray rusul, kutub buu u soo dajiyay, wuxuu ku beeray inay Allaah u hiloobaan oo ay raadiyaan, si ay addoomo ugu noqdaan, labadooda dhinacna isu waafajiyaan, sidaas la'aanteedna jiritaanka bani'aadamka ku noqon maayo jiritaan midaysan oo is dhamaystiraya.

Haddii la kala sooco labada dhinac ee midka doonistiisa ku salaysan iyo midka uusan u madax banaaneyn, oo midba uu Ilaah goonni ah hoggaamiyo, waxaa dhacaya fasahaad iyo isku dhac. Waana waxa ku dhaca dadka marka ay ka baxaan diinta Allaah oo ay isu dhiibaan Ilaahyo kale, Allaahna wuxuu faray sidaas si ka duwan:

﴿ وَقَالَ اللَّهُ لَا تَتَّخِذُوا إِلَهَيْنِ اثْنَيْنِ إِنَّمَا هُوَ إِلَهٌ وَاحِدٌ فَإِيَّايَ فَارْهَبُونِ ﴾ [النحل: ٥١]

"Allaah wuxuu yiri: ha samaysanina laba Ilaah, Isagu waa hal ilaah oo kaliya, aniga uun iga cabsida" (Annaxl: 51)

Isku habayntaasi waa mid iska cad, towxiidkuna waa mid aan caad saarneyn, waxay ahayd inay dadku u cararaan iyaga oo aanan loogu yeerin, sababtoo ah taas baa naftooda u keenaysa dheellitirnaan, isdhamaystir, dagganaansho iyo isku dhac la'aan labada dhinac.

Allaah SWT wuxuu ku leeyahay kitaabkiisa kariimka ah:

﴿ ضَرَبَ اللَّهُ مَثَلًا رَجُلًا فِيهِ شُرَكَاءُ مُتَشَاكِسُونَ وَرَجُلًا سَلَمًا لِرَجُلٍ هَلْ يَسْتَوِيَانِ مَثَلًا ﴾ [الزمر: ٢٩]

"Allaah wuxuu ka yeelay maahmaah, Ninay dad is khilaafsan wadaagaan iyo nin u hoggaansan hal nin matal ahaan ma siman yihiin" (Zumar: 29)

Ma sinnaanayaan, mar haddii qofku hal Ilaah uu addoon u yahay wuxuu helayaa amarro is waafaqsan oo aanan iska hor imaanayn, sababtoo ah hal Ilaah ma bixinayo laba amar oo iska soo horjeedda mar qura. Laakin haddii laba Ilaah iyo ka badan ay jiraan, waxaa dhacaya isburin, kan wuxuu la rabaa faraxsanaan, midkan kalena hoog iyo ba', kani wuxuu la doonayaa hanti kaasina saboolnimo ayuu la doonayaa.

﴿ لَوْ كَانَ فِيهِمَا آلِهَةٌ إِلَّا اللَّهُ لَفَسَدَتَا فَسُبْحَانَ اللَّهِ رَبِّ الْعَرْشِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴾ [الأنبياء : ٢٢]

"Haddii samada iyo dhulka ay ilaahyo aan Allaah aheyn jiri lahaayeen way fasahaadi lahaayeen labaduba, Allaaha carshiga Rabbigiisa ahayaa ka hufan waxay ay sifaynayaan" (Al-Anbiyaa: 22)

Waxaa hubaal ah in isu dheelli tirnaantaasiay tahay mid fidri ah oo qof kasta inuu raadiyo ay tahay waajib.

## Baahida loo qabo Bulsho Muslim ah

**(Hayeeshee, jaahiliyadda ku dhisan dadku inay is xukumaan, oo laga goonni noqdo jiritaanka uunka, la iskana horkeeno dhinaca fidriga iyo dhinaca ikhtiyaarka ee nolosha dadka; jaahiliyadaas waa midda uu is-hor taagay rasuul walba oo nabi Muxammad SCW ugu dambeeyay isaga oo islaamka ugu yeeraya)**

Rasuulkii Allaah muxuu jaahiliyaddii ku waajahay? Wuxuu ku waajahay in Islaamka loogu yeero, si uu uga saaro fallaaganimada, ugana saaro in cid aan Allaah ahayn loo xukun tago; sababtoo ah taasi waxay u gacan gelinaysaa Ilaahyo fara badan. Rasuulku wuxuu doonayaa inuu ka saaro dadka kana badbaadiyo iska hor imaashada abuurkisa(fidradiisa) iyo ikhtiyarkiisa. Nabi kasta wuxuu qaabilay jaahiliyaddan, waligeedna sidaas bay ahayd markasta oo ay dadku ka bayraan diinta Allaah oo ay Ilaahyo iska soo horjeeda addoomo u noqdaan, waxaa lama huraan noqon jirtay in rasuul uu yimaado si uu u yiraahdo: mar labaad u soo noqda Allihiinna halka ah si aad ugu nimcaysataan nolol dheellitiran,deggan oo towxiid ku dhisan, si ay ugu liibaanaan adduun iyo aakhiro.

Rasuul kasta wuxuu isla hortaagay jaahiliyada dacwo islaamka oo kaliya, sidaas buuna nabi Muxammed SCW isugu taagay jaahiliyad dhan inuu islaamka ugu yeero. **(Jaahiliyaddaasi ma ahayn mid ku dhisan "aragti" mutuxan, balse mararka qaar maba lahaymba aragti gebi ahaamba).** Waxayse mar walba ka dhex muuqanaysay isu-imaatin dhaqdhaqaaq leh, kaasoo ah mujtamac, u hoggaansan hoggaanka bulshadu leedahay, iyo dhammaan aragtiyada, qiyamka, ujeeddooyinka, mashaacirta, hiddaha iyo dhaqanka bulshada.

Waxa ay ka duuli jireen hawadooda, sidaa daraadeed maalin kasta isbeddello bay ku sameen jireen noloshooda. Waxay jaahiliyaddu ahayd nolol iyo waaqac jira oo dhaqdhaqaaq leh, dad iyo mujtamac ka kooban, oo hoggaan leh, ayaga oo ka dambeeya caqiiddo, afkaar, qiyam,dareemo iyo caado iyo dhaqamo ay lahaayeen.

**(Kuwaasoo uu ka dhexeeyo falgal, is-dhamaystir, is-waafaqsanaan, hiillo iyo is-taakulayn dhab ah, kuwaasoo mar qura wada dhaqaaqaya – ha ogaadeen ama yeysan ogaane – inay jiritaankooda ilaaliyaan, iska difaacaan oo ka takhallusaan arrimaha khatarta ku ah, ee si uun u handadaya jiritaankooda iyo qaab dhismeedka bulshadooda.)**

Hadalkaas oo idil wuxuu gogoldhig u yahay lagama maarmaannimada inuu samaysmo mujtamac muslim ah, bulshadaas muslimka ahna uma dhismayso inay ku baaqdo aragti qayaxan, ee waxaa lagama maarmaan ah si ay u samaysanto inay noqoto mujtamac leh xubno isku xiran, lehna tiirarka mujtamac ku taagan yahay si ay u waajahdo bulshada jaahiliyadda.Jaahiliyaddu maalinna ma ahayn fikrado meel iska yaalla, ee waxay ahayd waaqac nool, waxay ahayd mujtamac ka kooban xubno, xubnahaasna ay isku xirayso cilaaqaad iyo aragtiyo, falsafad iyo ujeedooyin,xuquuq iyo waajibaad, iyo qawaaniin noloshooda nidaaminaysa. Waxay lahaayeen danohooda iyo ujeeddooyinkooda ay ku mintidaan difaaceeda, si fududna meel cidla ah ugama tegi jirin, ee waxay u taagnaayeen inay ka difaacaan khatar kasta oo handadaysa jiritaankooda, ogaal iyo ogaal li'iba.

Bulshada caynkaas ah lagalama hortagi karo aragti qayaxan sida dad badan qabaan, taas oo ah inaan qorno ama allifno kaliya kutub lagu caddaynayo islaamka. Sidaasi sax ma aha suurtagalna kama aha waaqaca nolosha, sababtoo ah aragti qayaxan iyo falsafad ma aha waxa ina hor yaalla, waxaan waajahaynaa waaqac dhammaystiran oo ay ku idil yihiin wax kastoo ummadi ku jiri karto, difaacanaya jiritaankiisa, una heellan ka hortagga khataraha kusoo fool leh. Bulshadaas isu dhiibi mayso awood kale oo hortaagan mooyee,sida mujtamac jira oo leh xubno is-haysta,wadaagana aragtiyo, fikrado,dano iyo xiriirro, isuna bahaysanaya iska caabinta khataraha ku soo foolleh.

Waxaa halkan ka cad in samaysanka mujtamac muslim ah ay jawaab u tahay dacwada anbiyada,dabeecadda abuurista Allaah ee dadka, iyo iswaafajinta labada dhinac ee uu ka kooban yahay aadanaha (khiyaarka iyo khiyaar la'aanta) si ay u waajahaan mujtamacyada jaahiliga ah ee aan weligood aragti mutaxan ahayn balse ahaa mujtamac jirta oo ay u dhan tahay tiirarka ay ku taagan tahay iyo wax kasta oo kaabaya jiritaankeeda.

## Jaahiliyaddu ma aha aragti kaliya

Jaahiliyaddu waligeed aragti qayaxan ma noqon, mana noqon doonto. Jaahiliyaddu waa colka ka soo horjeeda islaamka, waa waaqaca mar kasta diiddan islaamka. Jaahiliyaddu markasta waxay leedahay waaqac nool, iyo dad u dhaqaaqaya habaynta noloshooda iyo daryeelka hal-abuurkooda sidoo kalena isku taxallujinaya inay xaqiijiyaan ujeeddooyinkooda ku dhisan qiyam iyo aragtiyo gaar ah, waxayna ka muuqata dhaqankooda. Waxay noloshooda ku habeeyeen gaaridda ujeedooyinkaas ay rumeeyeen ama ay doonayaan inay ku dhaqmaan. Haddaba, waxay aad ugu dadaalayaan inay iska difaacaan wixii jiritaankooda khatar ku ah.

Midowga Jaahiliyadda ee leh xubno jira suuragal maaha in islaamku kala hortago fikrad mutaxan, waayo qofna kama adkaan karo cadowgiisa isagoon la xoog ahayn ama ka xoog badanayn.

Jaahiliyaddu waa waqaac jira, ha lahaado falsafad ama yuusan lahaan, waxaa xukuma qawaanin iyo qiyam nidaamiya qaybaha bulshadaas, sababtoo ah xuquuqda iyo waajibaadka nidaam la'aantiis ma istaagaan. Haddaba jaahiliyaddu waa inay nidaam leedahay, hawaba ha ku dhisnaadee, hawaduna waa asaas ka mid ah asaasyada jaahiliyad kasta, waana in nidaamku u habeysan yahay qaab sugan oo macquul ah ilaaliyana dadka xuquuqdooda iyo hiigsiyadooda.

Islaamku waa in sidaas ku qaabilaa jaahiliyadda uu doonayo inuu beddelo ama burburiyo, waa inuu kala hor yimaadaa waaqac nool oo ka xoog badan waaqaceeda. Waxaa uu Sayidku si cad uga yiri arrintaas

**(Marba haddii jaahiliyadu aysan ahayn "aragti" mutuxan oo qura, ee ay ka dhex muuqanayso isu-imaatin bulsheed sidaan soo aragnay, haddaba, isku dayga in la suuliyo jaahiliyaddaas, dadkana mar kale Allaah loo celiyo, ma aha -waxbana tari mayso- inuu isku-daygaasi ka soo dhex muuqto "aragti" mutuxan. Markaasi noqon maayo mid u babac dhigi kara jaahiliyaddda dhidibbadu u aasanyihiin ee mujtamac dhaqaaqaya ka soo muuqata, iskaba daa inuu ka sare maree, sida laga doonayo mar haddii la rabo in la suuliyo jiritaan dhisan, oo lagu beddelo mid gebi ahaamba ka duwan, oo dhinac walba ku khilaafsan, dabeecaddiisa iyo manhajkiisa, usuushiisa iyo furuucdiisa intaba. Waxaase lama huraan ah in isku-daygaani cusub ka dhex muuqdo dhaqdhaqaaq mujtamac isutagtay, oo aragti iyo nidaam ahaan, iyo xiriir hoosaadka intaba uga xoog badan bulshada jaahiliga ee taagan.)**

Shaki kuma jiro in iskudaygaasi yahay mid aad u culus, waayo fikrad kasta oo cusub waa caadi in laga takooro,lagalana colloobo bulshada ay ka soo dhex baxday, sal iyo baarba la diido ujeeddooyinkeeda.

Jiritaanka iyo horumarinta fikradda noocaas bulshadaas dhexdeeda waa arrin fog suurtagalnimadeeda, balse dadka dacwada islaamka wada waxaa laga doonayaa arrinkaas inay u istaagaan. Aadanuhu way sameeyaan taas oo kale markii fikrad ay rumeeysan yihiin doonayaan inay meel laga neceb yahay ku dhexfaafiyaan, wax badan bay huraan, way is habeeyaan, fikraddii bay dadka gaarsiiyaan. Haddii ay guulaystaan waxay gaaraan inay fikraddooda adkaato, wixii jirayna ay meesha ka saaraan.

Arrinkaasi taariikhda marar badan buu dhacay. Tusaale dhow waxaa u ah shuuciyadda markii ay ka dhalatay Ruushka. Ruushku ma ahayn waddan laga filanaayey in ay ka hirgasho shuuciyaddu; sababtoo ah Markis baa horay saadaaliyey in shuuciyaddu ay ka dhalan karto mujtamac warshadeed, maadaama ay aslan ahaan fikraddu shuuciyaddu ku dhisnayd loollan u dhexeeya xoogsatada iyo maalqabeenka, Ruushkuna wuxuu ahaa boqortooyo(Qaysariya), bulshaduna waxay ahayd beeraley ku dhisan qaab dhulgoosi ah, sidaa darteed ma ahayn Ruushku goobta ugu habboon inay shuuciyaddu ka ambaqaaddo.

Laakin waxaa dhacday inay awoodi waayeen inay shuuciyad ka hirgaliyaan dalka Ingiriiska, waxay isku dayeen inay Ruushka ka hirgaliyaan. Si taasi ay u dhacdana, waxay bixiyeen dadaal laba jibbaaran, wax badanna way u hureen. Qofkii akhriya sheekada "Hooyada" ee Maksiim Joorji uu qoray wuxuu ogaanayaa waxa ay hureen iyo sida ay u hureen shuuciyiintu, rag, dumar, caruurba, yar iyo waynba. Qofkii aqriya buuggaas aad buu ula yaabayaa heerka adkaysiga iyo ku ad-adaygga iyo naf huridda si ay u taagaan nidaamkaas baadilka ah ee bani'aadamka in badan rafaadiyeyilaa uu ciidda afka gashaday.

Haddaba waa khasab in loollan iyo dagaal uu dhex maro fikradda cusub iyo waaqaca jira ee ay fikraddaasi rabto inay dumiso oo xididdada u siibto.

Haddaba taasi hadday tahay sunno joogto u ah fikrad kasta oo cusub ee ka dhex dhalata mujtamac col la ah, Islaamku fekerkiisa waa mid aad uga duwan, ugana fog waaqaca iyo fekerka jaahiliyadda,ayna ku adag tahay in ay aqbasho; sababtoo ah afkaarta dadka ee jaahiliga ah si kasta lid ha isugu ahaadeen, waxaa ka dhexeeya wax badan oo ay wadaagaan, waxaaba la oran karaa dhab ahaan wax is beddel ah oo nolosha dadka ku soo kordhaya ma jiro in yar mooyee. Qofka shuuciga ah iyo midka raasamaaliga ah labaduba way ka dhar la'yihiin qiyam iyo akhlaaq haba yaraatee, waxay raacayaan shahwaadkooda, xaq ma oogayaan, kumana dadaalayaan. Haddaba qofka raasamaaliga ah shakhsi ahaan wax wayn ma khasaarayo, laakin

isbeddelku wuxuu ka jiri karaa heerka nolosha maaddiga ah, qaabka xorriyadda iyo xorriyatul qowlka iwm.

Dhab ahaan qofka lagama rabo inuu si qota dheer isu beddelo marka uu ka soo wareegayo raasamaaliyadda iyo dhaqan xumadeeda, maxaa yeelay shuuciyadduba dhaqan xumo iyo shahwad-raac baa uastaanah, waxayba ku baaqaysaa, sharciyeyneysaa oo fududeyneysaa dhaqan xumo dheeri ah. Shuuciyaddu akhlaaqda bay jirdaha u siibaysaa, waxa ay rumaysantahay in jinsiga iyo cunnada iyo cabiddu ay yihiin baahi noole(bayoolaji) oo caadi ah oo ay dadkoo dhan inay wadaagaan ay tahay, waxaynu ogsoonnahay in shuuciyaddu heerkeeda ugu fiican u aragto in caruurta yihiin wax soo saar dabiici ah, yacnii inay yihiin ciyaalka dowladda, iyo in xiriirka labada jinsi uu yahay mid xor ah, haddii ilmo dhashaanna dowladda ayaa laga rabaa inay hoy siiso, sababtoo ah dowladda ayaa looga fadhiyaa in dadka oo idil ay hoy siiso.

Haddaba qofka raasamaaliga ah wax badan ma waayayo naf ahaantiisa haddii uu noqdo shuuci, marka laga soo tago muqaalladaa hodannimada iyo xorriyadda hadalka ee ay dadku iska jecel yihiin, taas oo ah arrin ku abuuranaadanaha si uu u dareemo karaamad iyo xorriyad iyo in uu fekerkiisa ka hadli karo. Farqigu waa intaas oo kaliya, mana aha farqi wayn sida uu u waynyahay farqiga dhacaya markii raasamaaligu ama shuucigu ama jaahiligu qaabkuu doonayo ha noqdeen u soo guuro Islaamnino. Markaasi wuxuu u baahan yahay inuu qayb kasta oo jiritaankiisa ah beddelo. Unug kasta oo noloshiisa ka mid ah waxaan la hurayn inuu qaato qaab aad uga geddisan wixii uu qofku samayn jiray xilligii uu jaahiliga ahaa.

Haddii ay fikradda jaahiliga ee cusubi la kulmayso dagaal iyo loollan jaahiliyadda dhexdeeda ah, maxaad ka filaysaa in ay la kulmayso fikradda islaamka ee dadka beddelaysa hoggaan ahaan, akhlaaq ahaan, aragti ahaan, waaqac ahaan, sal iyo baarna ku kala duwan, xataa haddii ay qaybaha qaar isu ekaadaan waa wax un isku soo aaday, asal, dhadhan iyo qaab-fulintaba aan is lahayn

Arrinku waa sidaas, mar walboo ay xarakada dib u soo noolaynta islaamka isku daydo inay islaamka taagto, diintana ay faafiso, waxaan la hurayn inay jaahiliyadda waajahdo, ma aha fikrad oo kaliya ama aragti qayaxan, ee waa inay ku waajahdo xubno is-haysta oo karti u leh burburinta iyo dhidibbo u siibidda bulshada jaahiliga ah. Taasi lama heli karo inay xarakada islaamiga ah ka xoog badato bulshada jaahiliga ah mooyaane. Sababtoo ah haddii ficilkeeda mid le'eg lagala horyimaado – iska daa mid ka yare – waxaa imaanaysa in hal meel la joogsado oo dhanna loo dhaqaaqin, sidaa darteed muqaawamadu waa inay ka xoog badataa awoodda horay u jirtay si ay uga adkaato, qofka raba inuu wax beddelo waa inuu awood iyo saamaynba badnaadaa.

Waxaan ognahay in dagaallada taariikhda ugu waawayn ee majaraha taariikhda beddelay, wuxuu isbeddelku imaan jiray markii cidda guusha heshay ay la timid hub cusub oo ka awood badan hubka cadowgeeda, sidaas bayna dagaalka ugu guulaysatay. Haddaba hubka noociisa baa ka mudan tirada ragga dagaallamaya iyo tabaha cadowga. Sidoo kale, xarakada Islaamku waa in falcelinteedu ka xoog badnaataa tan cadowgeeda, si ay awood ugu qasabto inay jaahiliyada dib u gurato ugu dambeyntiina is dhiibto oo meesha ka baxdo.

Xaqiiqadaas waa inay caddaataa, oo uu qofka muslimka ah ka dheregsan yahay in aysan suurta gal ahayn inuu Muslim sii ahaan karin isaga oon lahayn awood waaqaca beddesha. Taasna waa qodob muhiim ah.

Waxaa iyana muhiim ah in aan garanno aragtida in badan oo ducaadda Islaamka ka mid ah oo ah: inaysan bannaanayn in jaahiliyadda awood lagu maquuniyo ama dagaal lala galo, sababtoo ah ma haysanno awood looga hortago, ee waa in xikmad iyo waano wanaagsan loogu yeeraa si wanaagsan loola doodaa meeshaasna aan ku ekaanno. waxaa muhim ah inaan ogaanno taasi inay tahay aragti marxaladeed, ee aanay ahayn aragti kama dambays ah. Dacwada ku dhisan xikmadda,waanada iyo dood wanaagga waa marxalad muhiim ah oo ay xarakda Islaamku xilli xilliyada ka mid ah ay marayso, laakin isma ag taagto xilligaas, ee waa inay uga gudubtaa isku dayga xoog ku burburinta jaahiliyada,xoogguu doono ha noqdee. Laakin waa inaan ogaanno – sida aynu ku sheegi doonno cutubka Jihaadka – goorma ayey noqonaysaa awooddaasi in la adeegsado?

Laakin waxaan sax ahayn dadka xarakada islaamka iyo dacwada islaamka u fakara inay ku ekeystaan inay jaahiliyadda ugu yeeraan islaamka qaab feker oo qayaxan, ama sida ay culumada casriga qaarkood ku andacoodaan in aysan jirin wax baahi ah oo keensanaya Jihaad, iyo sabab loogu kala qaybiyo dunida daar gaalo iyo daar islaam, waayo idaacadaha, internetka, telefishanada iyo baraha xiriirka bulshada ayaa imminka u taagan gaarsiinta dacwada qof kasta, dowladuhuna awood uma leh inay dadka u diidaan maqalka islaamka, Jihaadkuna waxaa loo jideeyay dadka in xaqiiqada la gaarsiiyo, marka haddii codka islaamka dadkoo dhan uu gaarayo jihaadku daruuro ma aha!!

Jihaadka waxaa loo jideeyay inuu suuliyo caqabadaha dadka ka hortaagan maqalka dacwada xaqa, iyo – kaba sii muhimsane – in la suuliyo dawaaqiidda oo arlada laga xoreeyo caabudidda Allaah qayrkii, sababtoo ah waa arlada Allaah iyo boqortooyada Allaah, dadka mu'miniinta ahna waa ciidanka Allaah ee doonaya inay arlada boqorkooda xoreeyaan, waana arrin ku habboon inay xoreeyaan si uu kaligii uga taliyo.

Qolyaha sheeganaya in uusan jihaad jirin waa dad jaahiliin ah, ama dhagar qabayaal ah, ama labadaba ah. Hadalkaas ay oranayaan idilkiis wuxuu ka soo jeedaa niyad jab ay ka qaadeen dacaayadda cadowga Islaamka ee oranaysa: islaamku waa diin dagaal oo ku fiday seef iyo xoog, casrigaanna waa casrigii dimoqraadiyadda iyo wada hadalka. Halka dhab ahaantii waaqaca dooddu ka duwan yahay sidaas, markii ay doonaan way dagaallamaan, xoog xad dhaaf ahna adeegsadaan, dhagnajalaq uma siiyaan, mana oggolaanayaan aslan inay jirto falcelin, iskumana kallifaan inay cudurdaartaan ama micneeyaan waxa ay ku kacayaan.

Wixii ka dhacay Bosniya iyo Hersogavina, Kosovo, Afganistan, Ciraaq, Masar iyo Suuriya… iyo meelo kale waa xoogsheegasho iyo amar ku taaglayn. Waana mid afjigeysa ummadaha kale.

## “Laa Ilaaha Illallaahu” waxay kacdoon ku tahay baadilka

Dacwo kaligeed oo ka maran awood iyo itaal wax qiimo ah ma leh; sababtoo ah sifadaas cidna guul kuma gaarto. Haddaba dadka sidaas dacwo ka dhigtay waxay islaamka iyo muslimiintaba u gacan galinayaan cadowgooda, waxayna doonayaan inay meesha ka saaraan amarrada Allaah SWT go'aamiyay, uuna jideeyay.

**(Saldhigga aragti ama fikrad ee islaamku ku taaganyahay, tan iyo intii bani’aadamku jiray, waa: saldhigga “Shahaadada "Laa ilaahaIllallaah", oo ah in Allaah SWT loo keli yeelo Ilaahnimada, Rabbinimada, suldaanka iyo xukunka, waana in ay siwaafi ah uga muuqataa qofka caqiidadiisa, cibaadadiisa, iyo sharciga uukudhaqmo. Haddii aanan shahaadadaas si dhamaystiran looga helin, oo qofka si dhab ah noloshiisa uga muuqanaysa, ma noqonayso mid lehjiritaan sharci ah, qofkuna ma noqonayo muslim).**

Qoraallada Sayidka AUN dhammaan waxaan ku arkaynnaa ruuxdaas uu gaarka la yahay, ruuxda qofka xaqa wata ee qaddiyaddiisa rumaysan ee sharafta ka dareemaya, dadkana aanan ka sugaynin inay raalli ka noqdaan ama ay ku waafaqaan. Isagu wuxuu doonayaa inay xaqiiqada ku hanuunaan, inay sare ugu soo kacaan, laakin diyaar uma aha inuu iyada kula gorgortamo ama raalli ahaansho ka sugo, mana kala jecla inay ku jeesjeesaan ama ay u caroodaan. Waa erayo uu ku yiri Sayidku kalsooni iyo dhiirranaan isagoo og in erayadaasi uga xanuun badan yihiin jaahiliyadda iyo kuwa islaam sheegadka ah rasaas feeraha looga dhuftay.

**(Haddii aanan shahaadada sidaas dhamaystiran lagu helin, oo qofka si dhab ah noloshiisa uga muuqanaysa, ma noqonayso mid leh jiritaan sharci ah, qofkuna ma noqonayo muslim)**

Waxaa hubaal ah inuu ogaa in erey kasta oo ka mid ah ereyadaan jaahiliyadda uu siinayo daw buuxa inay ka takhallusaan qofka ereyadan qoraya, sababtoo ah macnaha ereyada ma aha kacdoon iyo inqilaab oo kaliyee, waa mid ka daran, waa mid duminaysa aasaaska ay ku taagantahay bulshada jaahiliga ah ee joogta xilliga uu qoray kitaabkan, ha ahaato bulshada jaahiliga ah ee reer galbeedka, ama shuuciyiinta ama sanam-caabudka, ama mujtamacyada afka ka oranaaya "Laa ilaaha Illallaah" iyaga oon macneheeda iyo waxa ay keensanayso moog.

Sida uu ku tilmaamay Ustaad Mawduudi kutubtiisa mid ka mid ah: haddii qofka addimaya shan goor maalin kasta oo oranaaya "Ash-hadu Allaa Ilaaha Illallaah" uu macneheeda aqoon lahaa, dadka ka daba dhahaayana ay macneheeda garan lahaayeen, jaahiliyaddu hal maalinna ma dayseen, sababtoo ah aadaankaas waa iyadoo dhowr jeer maalin kasta minaarad dusheed looga dhawaaqayo oo lagu celcelinayo kacdoon ka dhan ah suldaanka iyo boqortooyada iyo maamullada jira. Haddii ay jaahiliyaddu ogaan lahayd in dadka kalmaddaas ku dhawaaqaya ay uga danleeyihiin ku baaqid kacdoon, gadood, inqilaab iyo isbeddel, marnaba kama oggolaateen kan addimaya iyo kuwa ku celcelinaya kalmaddaas. Laakin jaahiliyaddu waxay ogtahay in ay ciyaarayaan oo hadaaqayaan, iyo inaysan aqoomba waxa ay oranayaan, sidaa darteed way ka oggoshahay inay kun jeer maalintii ay dhahaan, iskaba dhaaf shan jeer.

Macnahaasi waa inuu maskaxdeenna iyo qalbiyadeenna aad ugu caddaadaa, in Muslimku uu yahay askariga Allaah SWT ee arladan, uuna u yimid inuu baadilka xididdo siibo, fasahaadka suuliyo, fisqiga iyo qooqa joojiyo, arladana waxaasoo idil ka daahiriyo, qaab kastana u adeegsado, erey, fal, hub iyo xoogba. Taasi la'aanteedana ma noqonayo askari daacad ah. Taasi la'aanteeda awood uma yeelanayo inuu diinta Allaah oogo, ama Ilaahnimada Allaah arlada ka xaqiijiyo ama towxiid uu waaqaca nolosha ka taago.

Marka uu arrintaas sugayo Sayidku, waxaan fahmaynaa in macnaha ereyadan (Uluuhiya, rubuubiya, qawaama, Suldaan, Xaakimiyo) uusan ka wadin kaliya macnahooda siyaasiga ah. Dadka qaar baa sheeganaya inay Sayidku iyo Mawduudi ay ka hadleen Islaamka Siyaasiga ah, ayna ka aamuseen cibaadada iyo Allaah u dhowaanshihiisa. Ereyada Sayid Qudub aad bay u cadcadyihiin, inuu (shahaadada Laa ilaaha Illallaah) ula jeeday sidii ay anbiyadu ula jeedeen, oo ahayd in Allaah SWT kaligii loo keli yeelo Ilaahnimada, Rabbinimada, talada (Qawaamada), saldanada iyo xukunka. Waa hadal cad oo qofka dadka ugu doqonsan ama ugu cadowsan uusan ka fahmi karin wax ka duwan sida Sayidku uga dan lahaa. Haddii dadku ay beddelaan ama marin habaabiyaan waa dhaqan lagu yaqaan qolo kasta oo fikrad colaadisa si dhab ahna u fahamsan fikradda ay colaadinayso.

Sayidku wuxuu oranayaa isagoo sharxaya waxa ay tahay in la qiro Shahaadada:

**(In Allaah loo keli yeelocaqiiddada damiirka ku jirta)**: haddaba waa caqiiddo ee ma aha afka uun wax laga yiraahdo, mana aha erey qofku ku dhawaaqo si uu u soo galo xayndaabka Islaamka ee waa in ay ahaato ictiqaad damiirka qofka ku jira.

**(iyadoo loo keli yeelo cibaadooyinka shacaa'irta ah)**: cibaadooyinku iyo shacaa'irtu waa qayb asaasi ah oo diintan iyo shahaadadaba ka mid ah, addoonkuna muslinnimadiisa dhammaystir noqon mayso isaga oon la iman shacaa'irtaas uu Allaah jideeyay, ha ahaadeen kuwa waajibka ah ama kuwa sunna ahba.

**(iyadoo loo keli yeelo shareecada nolosha maamulaysa)**: dadka fekerkan doonaya inay halleeyaan ma helayaan qiil ay cuskadaan.

**(Arrintaa saldhigga u ahcaqiiddada in la sugo waxaa macneheedu yahay in nolosha dadka gebi ahaan Allaah ay u noqoto, oo aysan iyagu iskood u go'aansan arrin ka mid ah ama dhinac ka mid ah noloshooda, balse ay lama huraan tahay inay xukunka Allaah u noqdaan si ay u raacaan, kaasoo ah wixii rasuulku farayay, taasuna waxay ka muuqanaysaa qaybta labaad ee Ashahaadada ee tiirka koowaad ee islaamka: "in laga markhaati koco in Muxammad SCW uu yahay rasuulka Allaah".)**

Tani waa dhammaystir lagama maarmaan ah, sababtoo ah Islaamku ma aha keliya Allaah oo kaligii la rumeeyo loona keli yeelo saldanada, ee waxaa sidoo kale lagama maarmaan ah in rususha Allaah dhammaantood la rumeeyo, iyo nabi Muxammad SCW oo rususha lagu khatimay, iyo in la qiro in rasuul kasta – uu ugu horreeyo rasuulkeenna – uu u yimid inuu dadka gaarsiiyo wixii loo waxyooday, dadkana laga rabo inay raacaan rasuulkaan.Rasuul kasta wuxuu u yimid inuu ku yiraahdo qowmkiisa

﴿ فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ ﴾ [آل عمران: ٥٠]

"Allaah ka cabsada oo i adeeca" (Ala-Cimraan: 50).

Oraahdaas waxaa ku celceliyey rasuul kasta sida ku cad suuradda Shucaraa' iyo sida Suuradda Al-Nisaa ku timid

﴿ وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ رَسُولٍ إِلَّا لِيُطَاعَ بِإِذْنِ اللَّهِ ﴾ [النساء: ٦٤]

"Rasuul ma aanaan dirin in laguadeeco idinka Allaah mooyee" (Al Nisa: 64)

## Maxay Rusushu u yimaadeen?

Balse aragtida aan caga badan ku taagneyn ee oranaysa in rususha ujeeddadooda ay tahay inay wax gaarsiiyaan, oo ay ereygooda tuurtaan ka dibna sii socdaan, inay Islaamka oogaanna aanan looga fadhin, waa aragti dhalanteed ku dhisan oo dadka lagu marin habaabinayo. Maba dhicin in rasuul ay risaaladiisa caynkaas noqotay, ee rasuulkasta wuxuu u yimid inuu wax gaarsiiyo, kaddibna ku adkaysto in qowmkiisu ay is beddelaan, qowmkiisana hortaagnaado ilaa uu Allaah qaddiyaddaan ku kala xukmiyo isaga iyo qowmkiisa. Haddaba, Shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" hadday tahay tiirka koowaad ee Islaamka qaybtiisa koowaad, qaybteeda labaadna: "Wa Anna Muxammadan Rasuulullaah", waxay xaddideysaa in RasuulkaSCW uu yahay halka wax laga qaadanayo, wuxuuna Allaah yiri:

﴿ وَمَا آتَاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا ﴾ [الحشر: ٧]

"Wuxuu rasuulku idiin la yimaado qaata, wuxuu idin ka reebona ka hara" (Al-Xashr: 7)

﴿ مَنْ يُطِعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ ﴾ [النساء: ٨٠]

"Ciddii rasuulka adeeca Allaah ayey adeecday" (Al-Nisaa: 80)

Qaddiyaddu waa in sidaas ay isu haysataa, si loo helo muuqaalkeeda oo cad oonaan mugdi ku jirin, una baahnayn in caddaymo badan la soo aruuriyo. Haddii aannu isla qirnay – caqli ahaan – inay lagama maarmaan tahay in kownkaanu uu yeesho sayid iyo khaaliq iyo boqor maamula oo xifdiya, waxaa ka ratibmaya in khaaliqaasi noqdo midka xukuma oo gacanta ku haya.

Waxaa maslaxadda dadku ku jirtaa, u habboonna qofka Allaah in uu waydiisto SWT waxa uu ka yeelayo noloshiisa qaybta xorriyadda loo siiyey mar haddii Allaah uu habeeyay qaybta noloshiisa uusan ikhtiyaar u lahayn. Waa dalabka dabiiciga ah ee caqligalka ah haddiiba uu rabo qofku inuu helo nolol dheellitiran oo israacsan.

Laakin haddii arrintaas caksigeedu uu dhaco, oo nolosha qaybta uusan ikhtiyaarka u lahayn uu Ilaah maamulo, qaybta kalana Ilaah kale maamulo, qofku wuxuu u kala go'ayaa sidii qof laba awoodood kala jiidanayso. Taasna waa arin fidri ah oo caqligal ah.

Taas waxaa raaca in bani'aadamka oo idil ay isku waafaqeen – iyaga oon kulmin – in ummad kasta ay tahay inuu u taliyo hal hoggaamiye, haddii labo ay isla hoggaamiso waxaa lumaya dagganaanshaheeda, amnigeeda iyo waliba danaheeda.

Haddaba haddii ay dadku isku waafaqeen, in hal awood oo kaliya xaq u yeelato maaraynta,habaynta, hagaajinta, ciqaabta iyo amarka, haddii taasi ay daruuri u tahay maslaxadda dadka heer kastoo ay joogaan, waxaan la hureyn in kownkaan wayn uu yeesho hal Ilaah oo maamula. Haddii dad ay sheegtaan in Ilaahyo kale ay jiraan ama ay samaystaan shariikyo kale, ugu horrayn naftooda ayay khaldayaan, waxayna khilaafayaan waaqac ay ku nool yihiin dhabtiina ay ku dhaqmaan.

Laakin markii ay shayaadiin dadka u qurxiyaan awoodda in la wadaago khayr lama doonayaan, dhab ahaan waligood ma oran Ilaahyada dhammaan waa isku heer.

Diimaha qalloocan idilkood waxay aaminsanaayeen inuu jiro Ilaah wayn oo waxkasta gooya, iyo shariikyo ay sheeganayaan inay caawinayaan Ilaahaas wayn, ama isaga ay uga dambeeyaan hadba meeshii uu u diro. Carabtu ka hor intii uusan nabi Muxammad SCW imaanin ka sokow shirkigoodii caddaa iyo asnaamtii faraha badnayd iyo Ilaahyadii badnayd waxay oran jireen marka ay xajinayaan: Ku ajiibnay Ilaahow shariik ma lihid, shariik adigu aad leedahay oo aad u taliso mooyee.

Taasi xaqiiqo cad oo ka muuqata diimaha dhammaan kuwii hore iyo kuwii dambeeyayba. Sida ay sheegaan dadka yaqaan "cilmiga diimaha isbarbardhiggooda", waxaa mar kasta jiray Ilaah sare oo ka korreeya dadka oo ay u hoggaansan yihiin mar kasta. Haddaba, fikradda jiritaanka Ilaah sare waa mid soojireen ah, waana xaqiiqo taariikhi ah oo ka muuqatay qabaa'ilka cawaanka iyo kuwa kaleba, laakin waxay Allaah la wadaajin jireen Ilaahyo kale sida Qur'aanku sheegay:

﴿ مَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرِّبُونَا إِلَى اللَّهِ زُلْفَى ﴾ [الزمر: ٣]

"Uma caabudeyno in ay Allaah noo dhaweynayaan mooyee" (Al-Zumar: 3).

Ma aysan siin jirin aslanba ilaahyadaa xaqa Ilaahnima dhammaystiran, Allaahna lama simi jirin Ilaahyada kale. Xataa caqiidnada "Mathnawiya" ee Furuska waxay lahaayeen laba Ilaah: Ilaahay

sharta iyo Ilaaha khayrka, ama Ilaaha mugdiga iyo Ilaaha iftiinka. Ilaaha khayrka ayaana xoog badnaa oo ay dadkuna jeclaayeen, waana midka ay difaacaan oo ay guushiisa rajeeyaan, wayna necbaayeen midka sharta.

Dadka had iyo goor fidradooda waxay tusisaa hal Ilaah oo ay jeclaadaan, sababtoo ah dhab ahaan maba aaminsana Ilaahnimo mid oo dhab ah mooyee. Xaqiiqadan oranaysa in suldaanka iyo xukunka dhammaantood Allaah uu leeyahay waa qaddiyad cad oo caqligal ah, Islaamku iyo dhammaan rususha waxay u yimaadeen inay xaqiiqadaas sugaan, si dadku ay u helaan daliil xagga Allaah ka yimid oo ay u noqdaan, iimaankooduna u xoogeysto.

**(Taasi waa saldhigga feker ee uu islaamku ku taaganyahay, waxa ayna abuuraysaa manhaj dhamaystiran oo nolosha oo idil lagu dhaqayo, qofka muslimka ahi ku qaabilayo dhinacyada kala geddisan ee nolosha gaar ahaaneed iyo midda wadar ahaaneed ee ka jirta daarta islaamka iyo dibaddeedaba, iyo xiriirrada uu qofka muslimka ahi la leeyahay bulshada muslimka ah, iyo xiriirka bulshada muslimka ahi la leedahay mujtamacyada kale.)**

Arrintaasi saldhig waxay u noqonaysaa – sida aan ku sheegi doonno cutub soo socda – manhaj nololeed oo dhammaystiran, kaasoo nolosha dadka dhinacyadeeda oo idil taabanaya, qayb ka mid ahna aanan u oggolaanaynin inuu saldhiggaas ka hoos baxo amarkiisa iyo taladiisa. Nolosha dadka ee arlada dhammaanteed waa inay ka dhalataa oo ku taagnaataa saldhigga "Laa ilaaha Illallaah".Wax kasta oo aan cuskaneyn saldhiggaas waa baadil sharci ahaan, xaqna uma laha inuu jiro aslanba, noocu doono ha ahaado ama dhib iyo dheef wuxuu rabo ha lahaado. Islaamku waxba kama soo qaadayo ugu horraymba maadaama uu san si sax ku imaanin, xaqna u lahayn in uu jiro.

Saldhigga fikraddu waxay ku dhisan tahay hadafka ah in dadku addoomo u noqdaan Rabbigood qiraanna ilaahnimadiisa dhulkan uu ilaaha ka yahay.

## Nuxurka Jaahilyadda

Ka hor inta aanan u gudbin waxa ka dhalanaya qaaciddadaas ee ah nolol, qiyam, hiddo iyo dhaqan, waa in xoogaa isdultaagnaa macnaha jaahiliyadda iyo islaamka, iyo waxa loola jeedo ereyada jaahilyad iyo "Laa ilaaha Illallaah".

### Manhajka Allaah ayaa isku miisaama Nolosha Insaanka

Ugu horrayn waxaan caddaynaynaa – annaga oo hubna – in nolosha bani'aadamka ee arlada ay tahay qaab laba laba ah.Qofku waa mid nool ama waa mayd, waa mid buka ama caafimaad qaba, waa mid dhuroobay ama mid dhurdarraystay, waa muslim ama jaahili. Taasi waa qaabka lammaanaha ah ee lagu abuuray bani'aadamka, dabcigiisuba waa mid laba laba ah, kheyr ama shar. Dabeecaddaas lammanaha ah waxay si joogto ah uga muuqata oogadiisa iyo guntiisa hooseba. Markasta doorasho ayuu samaynayaa, had iyo goorna wuxuu taaganyahay waddo kalabeyr ah (isgoys), wuxuu ku khasbanyahay inuu doorto labadaas waddo middood, arrintaasi waa dabeecad bani'aadamku leeyahay.

Bani'aadamku sidii horeyba loogu abuuray waa ruux iyo cantoob dhoobo ah. Wuxuu ka kooban yahay laba dhinac; dhinac maaddi ah iyo dhinac macnawi ah. Insaanku wuxuu u sare mari karaa heerka Malaa'ikta, bal wuu ka sare mari karaa qudhooda, wuxuuna u daadagi karaa heerka xoolaha, bal wuu ka sii hoos mari karaa. Lammaanayntaas waa nolosha bani'aadamka wax ku beeran, si qofku u noolaadana waa inuu isku daraa (maaddi iyo macnawi) labadaas dhinac isagoo iftiinsanaya nuurka Allaah iyo wixii uu u dooray.

Allaah SWT wuxuu ogyahay in bani’aadamku marka uu qaabkaas lammaanaha ah ku nool yahay in uu ku jiro xaalad labada dhinac lookala jiidanayo... Laakin Allihii SWT ee abuuray insaanka wuxuu ogyahay inuu jiro dhabbo saddexaad, oo ah in qofku awoodo in labadaas awoodood iyo labadaas janjeer uu isu keeno oo ka dhigo kuwa is dhamaystiraya, ee aanu dagaal ka dhaxaynin. Markii uu dhoco isdhamaystirkaasina wuxuu gaarayaa heerka uu ugu xoogga badan yahay oo ugu muuqaalka fiican yahay.

Islaamku wuxuu u yimid inuu ka dhabeeyo dheellitirnaantaasadag oo aan lagu sheegin taariikhda bani'aadamka cid ku guulaysata. Taariikhda bani'aadanku idilkeed waxay noo sheegaysaa in madaahibta aadanaha ay marwalba labada dhinac midkood ay qofka u riixayeen; inay ka dhigaan mid maaddi ah oo sida xoolihii shahwaad kaliya daba jooga oo cirka aanan kor u eegaynin; ama mid go’doon ah oo nolosha adduunyada dhan iskaga fogaada, oo god ama geed hoostii iskaga cibaadaysta oo dhinacyada ruuxiga dhaqan galiya, oo qaab ruuxi ah uun u noolaada.

Lamaanayntan ku abuuran bani’aadamka waxay ugu kaalmaynaysaa inuu fahmo arlada iyo kownkaba halka uu ka joogo, isagu ma ahan hal-dhinacle ama mid hal dabeecad uun xambaarsan, sidaa daraadeed uma habboona inuu iskala mid dhigo makhluuqaadka intooda kale ee halka dabeecad leh, haddii uu sidaa yeelo wuxuu ka leexanayaa dariiqiisii, mana xaqiijinayo ujeeddadii loo abuuray.

Allaah wuu awoodaa – hadduu doono – inuu bani’aadamka u abuuro hal dabeecad sida Malaa'ikta iyo xayawaankaba, ama qaabkuu doonaba ha noqoto, laakin Allaah wuxuu bani’aadamka u doortay arrin kale, wuxuu u doortay laba dabeecad inuu yeesho, middaas bayna masuuliyadda bani’aadamku ku taagantahay, oo ay ka imaanaysaa karaamadiisa adduun iyo aakhiraba.

Rususha howshoodu waxay ahayd inay waaqaca nolosha ku xaqiijiyaan is-waafaqsanaan iyo isu-dheellitirnaan labadan dhinac, iyo inay xaqiijiyaan is-dhamaystir, iyo inay baabi'iyaan loollankan iyo dagaalkan joogtada ah ee ka dhexeeya bani’aadamka labadiisa dhinac ama labadiisa dabeecadood. Qaddiyadda in addoomada loo hoggaamiyo hal Rabbi macneheedu ma ahan inay shareecadiisa qaataan oo diintiisa soo galaan oo keli ah.

Arrinku intaa waa ka waynyahay, wuu ka muhiimsan yahay, wuu ka gude-waynyahay in diinta la sheegto ama lagu abtirsado, arrinku intaas wuu ka waynyahay sababtoo ah waa diinta Allaah. Allaah mar hadduu isaga abuuray dadka uu u doortay dariiq, dariiqaasu wuxuu tixgalinayaa ajiibayaana dhammaan baahiyaha bani’aadamkan. Ujeedooyinka diinta iyo howsha rusushabawaxaa ka mid ah inay noo keenaan qaab nololeed sugaya isu dheellitirankaas u muuqda marka ugu horraysa inay iska hor imaanayaan.

Waxaannu ka helaynaa dhaqanka anbiyadu inaysan iska hor imaanaynin, gaar ahaan siirada nabigeenna SCW, kaasoo awood u yeeshay inuu kulmiyo labada arrimood sida ugu quruxda badan oo ugu wanaagsan. Rasuulku SCW wuxuu tusaale nool u ahaa isu-dheellitirnaantan iyo isku-sar go'naantan

﴿ لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ ﴾ [الأحزاب: ٢١]

“Waxaa idinku sugan Rasuulka Allaah ku dayasho wanaagsan” (Al-Axzaab: 21).

Wuxuu awood u yeeshay rasuulku SCW inuu noloshiisa nooga sameeyo tusaalaha buuxa ee qofka dhamaystiran ee aanan dayicin hawl ka mid ah hawlahiisa iyo rabitaankiisa. Sida uu u

ahaa qofka dadka ugu cibaadada badan, buu misna adduunyada si buuxda oo macaansi iyo dhadhansi leh wax uga qaadanayay. Isagoo rasuulku SCW la dagaallamaya shaqa la'aanta iyo si-xun-udharagga iyo qaababka xunxun ee ka jira jaahiliyadda, waxaan arkaynnaa inuu ahaa qof dhadhansanaya quruxda, jecelna, kuna farxaya nicmada, ulana dhaqmaya quruxda nolosha sida ugu bilicsan,kuna cabbiraya ereyada ugu macaan.

Rasuulkan kariimka ah SCW Allaah ayaa ka dhigay mid lagu daydo. Looga dayan maayo Ikhlaaskiisa iyo aqoontiisa diinta Allaah iyo towxiidkiisa kaliya, waxaa kale oo looga dayanayaa awoodiisasida qurxoon oouu iskugu dhafay labada dhinac: dhinaca ruuxiga ah iyo dhinaca maaddiga ah.

Marka aan ka hadlayno dabeecadda lammaan ee bani’aadamka waa inaan ka dhex raadinnaa tiirarka nolosha aadanaha oo idil.

﴿ فَأَلْهَمَهَا فُجُورَهَا وَتَقْوَاهَا ۞ قَدْ أَفْلَحَ مَنْ زَكَّاهَا ۞ وَقَدْ خَابَ مَنْ دَسَّاهَا ﴾ [الشمس: ٨-١٠]

“Ku ilhaamiyey xumaanteeda iyo Alle ka cabsigeed, waxaa liibaanay ruuxii naftiisa daahiriya waxaana khasaaray ruuxii naftiisa duuga” (Al Shams: 8-10).

Sidoo kale, Allaah wuxuu yiri:

﴿ وَهَدَيْنَاهُ النَّجْدَيْنِ ﴾ [البلد: ١٠]

“miyaana u caddeynin labada jid (khayrka iyo sharta” (Al Balad: 10).

Siduu Allaah ku yiri suuradda Al-tagaabun:

﴿ هُوَ الَّذِي خَلَقَكُمْ فَمِنْكُمْ كَافِرٌ وَمِنْكُمْ مُؤْمِنٌ ﴾ [التغابن: ٢]

“Allaah waa kii idin abuuray waxaa idinka mid ah mid gaaloobay waxaa kaloo idinka mid ah mid rumeeyey” (Al-tgaabun: 2)

Siduu ku yiri Suuratul Insaan:

﴿ إِنَّا هَدَيْنَاهُ السَّبِيلَ إِمَّا شَاكِرًا وَإِمَّا كَفُورًا ﴾ [الإنسان: ٣]

“Innagaa dadka tusinay jidka waxayna noqdeen mid shukriya (mahadiya) iyo mid gaalnimo badan” (Al Insaan: 3)

Kuwaasi waa noocyada lammaan ee ka jiracaqiiddada, dhaqanka iyo dariiqa uu dooranayo qofku.

Waxaa sidoo kale hor yaalla dariiq lammaane ah, oo iftiin iyo mugdi leh, islaam iyo jaahiliyo leh, iimaan iyo gaalnimo leh,ayaan iyo hoog leh, sharaf iyo dulli leh. Sidaas bay lammaanaantu ula socotaa qofka bani’aadamka ah goor kasta. Had iyo goor qofku wuxuu taaganyahay isgoys, waxaana laga doonayaa inuu doorasho sameeyo oo uu garto halka uu u socdo, ma dhinac labada dhinac ka mid ah buu aadayaa, misa wuxuu awood u yeelanayaa inuu isu keeno labada dhinac.

Bani’aadamka waxaa hor yaalla noloshiisa laba dariiq; inuu noqdo addoon Allaah oo amarkiisa isu dhiibay, ama inuu Allaah ku gadoodo. Waa inuu labadaas mid doorto.

Markii uu doorto dhinaca xaqana ma ahan inuu waayayo wixii raaxo adduun ahaa ee jaahiliyadda dhexdeeda uu ku haystay, sababtoo ah wax kasta oo nolosha bani'aadamka khayr u ah oo ay jaahiliyaddu samayso, waxaa si ka wanaagsan oo ka dhamaystiran uu uga helyaa islaamka. Sidaa darteed, markuu islaamka doorto wuxuu helayaa labadiisa dhinac oo israacsan oo harsanaya saldanada Allaah, naxariistiisa iyo manhajkiisa.

Bani'aadamka waxaa hor yaalla lamaanahaas, inuu noqdo Muslim ama uu noqdo Gaal, ma jiro dariiq saddexaad oo uu ku socon karo, waa mid mahad-celin badan ama mid ku kufriya, waa mu'min ama gaal, waa mid hanuunsan ama mid baadiyaysan, waa inuu iftiin ku noolyahay ama mugdi ku noolyahay.

Sidaa darteed, waa inaan is dul taagnaa macnaha ereyga Jaahiliyo, iyo sidoo kale macnaha ereyga Islaam ee anbiyadu ay la yimaadeen sida ugu fudud uguna nuxursan oo ay habbon tahay inaan dadka ugu yeerno qaab u soo dhaweynaya in ay si sahal ah ku fahmaan, u raacaan, una jeclaadaan.

## Macnaha “Jaahilyadda” ee Qur'aanka

Ereyga Jaahiliyad waa erey Qur'aanku hal abuuray. Ereyga asal ahaan wuxuu luqadda carabiga ku yahay jahli. Jahli luqadda carabiga marka la eego uma taagna oo keli ah aqoon la'aan ama cilmi la'aan, ee wuxuu kaloo leeyahay macnaha dhibka, cayda iyo ixtiraamdarrada dadka iyo xaqooda oo loo diido, ama guud ahaan in la duudsiiyo xuquuqda dadka. Sida gabyaydu yiri:

ألا لا يجهلن أحد علينا فنجهل فوق جهل الجاهلين

“Yuusan qofna nagu gardarroon … oo aan u dhaaminno gardarro tii ka badan”

Carabta dhexdeeda haddi qof uu caytamo waxaa la yiraahdaa: iska daaya waa jaahile. Umana jeedaan waxaba ma yaqaan, waxay u dan leeyihiin waa qof caadadiisu tahay inuu dadka dhibo oo xumeeyo.

Haddaba, ereyga jaahiliyo waxaa laga keenay Jahli, waxaana ugu horrayntii ereyga adeegsaday Qur'aanka kariimka ah. Sidaa darteed, ereybixin kasta oo cusub oo aan aragno waa inaan ka raadinnaa macnihiisa halkii ugu horrayn ay ka timid.

Tusaale ahaan: ereyga (Dimoqraadiyad) haddaan doonayno inaan fahamno waa inaanan ku gaabsan fasiraadda casrigan la qoray oo kaliya, ee siinaya macnayaal beddelan ama la qurxiyay, ee waa inaan ka baarnaa halkii ay asal ahaan ka timd ee Giriigga oo ahaa kuwii sameeyay ereyga oo noloshooda ku dabaqay. Ereygu haddaba (Democracy) sidaan wada ogsoonnahay waa "xukunka shacabka", taas oo ka jirtay magaalooyin Giriiggu dagganaayeen sida Asbarta iyo Athena, dadka magaalada waxaa la isugu keeni jiray fagaaraha ugu wayn ee magaalada haddii la doonayo in arrin muhim ah noloshooda laga go'aansado, dadkaa loo bandhigi jiray, kaddib waa laga doodi jiray, dabadeedna cod baa loo qaadi jiray, halka loo bato ayaana la meel marin jiray. Waa sidaas macnaha inuu shacabku xukunka ku yeesho, shacabka ayaa ugu dambayn xukunka ridaya.

Haddii dimoqraadiyaddu ay tahay xukunka shacabkaa leh, waxaa micneheedu yahay inuu insaanku noqdo midka xukunka ummadda iska leh, haddii aannu fahamsannahay Islaamka inuu qabo in xukunka uu Allaah kaliya leeyahay, dimoqraadiyadda macnahaas leh ma noqonayso mid Islaamka waafaqi karta, islaamkuna waafaqi karo. Haddii aan u noqonno

macneheedii asalka ahaa waxaa noo sahlanaanaya inaan diidno, sababtoo ah waxay si toos ah u burinaysaa asalkacaqiiddada Islaamka, ee ah xukunka inuu Allaah leeyahay.

Dadka u ololaynaya dimoqraadiyadda haatan waxay isku dayayaan inay dadka marin habaabiyaan oo yiraahdaan dimoqaraadiyaddu waa "caddaalad, sinnaan, wada-tashi, xorriyatul qowl, iyo naqdiga xorta ah, iyo inuu qofku xor u noqdo wuxuu doonayo inuu yiraahdo", waxay dadka kala hadlayaan baahidooda, dadkuna waxay ku soo hoos gubteen in badan maamul kalitalisnimo, markaas bay dimoqraadiyadda u timid u arkayaan inay ka badbaadinayso kalitalisnimada.

Kalitalisnimo iyo dimoqraaddiyad labaduba insaanka ayay awoodda xukunka iyo sayidnimada siinayaan, hayeeshee waa laba qaab oo kala duwan. Islaamku wuxuu u arkaa in sayid uu yahay Allaah oo kaliya, dadkuna addoomo ay u yihiin Allaah kaliya, waa aragti ka duwan labadaas qaab, dimoqraaddi ama kalitalis ama qaab kastoo kale. Laakin marka ay dimoqraaddiyad dadka ugu yeerayaan, ma oranayaan in xukunka iyo sharci dejintaba Allaah qayrkii la siinayo, waaqac ahaan loogu dhaqmayo, haddana dadka waxay ka soo galayaan dhinaca u qurxinta

﴿ أَفَمَنْ زُيِّنَ لَهُ سُوءُ عَمَلِهِ فَرَآهُ حَسَنًا ﴾ [فاطر: ٨]

“Ruuxase loo qurxiyey camalkiisa xun oo u arkay inuu fiican yahay (ma la midbaa kaan saas falin” (Faadhir: 8)

Shaydaanka muhimaddiisu waa inuu dadka u qurxiyo howlohooda. Marka aan erayga dimoqraaddiyad ka fahamno halkii uu ka yimid waxaan awood u yeelanaynaa inaan garanno, kaddibna ay toos uga dhacdo indhaheenna.

Sidaa darteed, erey-bixin kasta waa in asalkeedii loo noqdo si ay u fududaato in la fahmo oo xukun la saaro sidii aan ku aragnay ereyga "dimoqraaddiyad".

Sidoo kale ereyga "Jaahiliyad", waa erey-bixin Qur’aanku sameeyay, haddii aan doonaynno inaan macnihiisa ogaanno waa inaan Qur’aanka u noqonnaa oo waydiinnaa macnihiisa. Dadku haatan waxay u yaqaanaan jaahiliyad inay la macne tahay "dib u dhac", ama "aqoon la'aan" ama xilliyadii hore ee qarniyaalkii mugdiga ahaa. Haddii jaahiliyad ay sidaas tahay, xilligan hadda la joogo ma jirto wax jaahiliyad ah, sababtoo ah horumar baa jira, dib u dhac waa laga yimid, cilmiga la gaarayna waligeed horay looma gaarin, misana taariikh ahaan waxaan ku jirnaa xilliyadii iftiinka ee casriga ahaa. Haddaba, ereyga "Jaahiliyad" wuxuu noqonayaa wax aan la qaadan karin, waxaana laga dareemayaa dib u noqosho iyo dibu u dhac iyo jahligoo dib loogu noqday, sidee bay jaahiliyad u dhici kartaa casriga iftiinka iyo tiknoolojiga, casriga dimoqraadiyadda iyo xorriyadaha?

Ku macnaynta jaahiliyadda sidaas waa khalad, kuwa oranaya imminka ayay dunida ka jirtaana waa daallimiin, waana dib-usocod bani’aadanka cadow u ah. Cay iyo been abuur ayay samaynayaan, waayo jaahiliyad kama jirto arlada oo idil, waxayna leeyihiin: dib u socod ma nihin, jaahiliinna ma nihin, waxaan ku noolnahay xilli iftiimaya, baraarug uu arlada ifiyey oo caddaalad iyo wax-istar iyo xorriyadna ka hirgaliyey.

Markii sidaas loo soo bandhigo jaahiliyadda waa la diidayaa, saxna noqon mayso dadka haatan nool in lagu sifeeyo. Laakin hadallada ay sheegeen iyo fasiraadda ay abuurteen xaq ma aha. Way weeciyeen macneheeda si ay xaqiiqada u qariyaan dadkuna u garawsanin qaraarka iyo foolxumada ay ku hoos noolyihiin, oo ay markaa ugu yeerin jaahiliyad sidii Allaah uu umadihii hore ugu sifeeyay oo kale.

Allaah SWT wuxuu u sameeyay jaahiliyadda macne cad. Haddii aan Qur'aanka u noqonnana waxaan arkaynaa in ereyga 'Jaahiliyad ' lagu xusay afar meelood. Meel kastana waxaa lagu muujiyay macne ka mid ah macnayaalkeeda iyo astaan ka mid ah astaameheeda, haddii aan isku darno afarta astaan waxaa noo soo baxaaya xaqiiqada dhabta ah ee jaahiliyadda, iyadoon qofna dheeh ka saarneyn.

**Macnaha koowaad** ee Qu'aanka lagaga xusay jaahiliyad waa: suuradda Aala Cimraan, wuxuu Allaah leeyahay:

﴿ يَظُنُّونَ بِاللَّهِ غَيْرَ الْحَقِّ ظَنَّ الْجَاهِلِيَّةِ ﴾ [آل عمران: ١٥٤]

"Waxayna Allaah u maleeyeen male jaahiliyadeed" (Ala-Cimraan: 154).

Male "Danni" haddii Qur'aanka lagu sheego waxaa badanaa laga wadaa Yaqiin (ee ma aha shaki iyo laba labayn). Waxay malaynayaa haddaba waxaa laga wadaa waxay aaminsanyihiin, waxaa ku soo aroortay suuratul kahfi

﴿ فَظَنُّوا أَنَّهُمْ مُوَاقِعُوهَا ﴾ [الكهف: ٥٣]

"waxayna yaqiinsadeen in ay ku dhici (naarta)" (Al-Kahf: 53)

Yacnii waxay yaqiinsadeen inay ku hooban doonaan. Ereyga "Danni" ama Malayn in badan buu ugu soo arooray aayadaha Qur'aanka isagoo macnahiisu yaqiin yahay, marka laga reebo haddii uu la socdo wax caddaynaya inaysan sidaas ahayn, sida suuratu Yoonis iyo Suuratu Najmi

﴿ إِنْ يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنَّ الظَّنَّ لَا يُغْنِي مِنَ الْحَقِّ شَيْئًا ﴾ [النجم: ٢٨]

"Wax cilmi uma lahan ee waxay raaci uun male, malana xaqa wax kama taro" (Al-Najm: 28)

Marka intaa laga soo tago, badi adeegsiga ereyga "malayn" waxay ku timaaddaa yaqiin.

Ereyga "malaynayaan" halkan macneheedu waa "aaminsanyihiin". Waxay Allaah ka malaynayaan wax aanan xaq ahayn, macnihii waxa ay Allaah ka aaminsanyihiin wax aanan xaq ahayn. Waxaa halkaan lagu sugay oo lagu xukumay in waxa ay jaahiliyaddu aaminsanyihiin uu khilaafsanyahay xaqa. Ictiqaadkaas Allaah uu ku sifeeyay xaq inuusan ahayn waa malaha jaahiliyadda. Aayadda koowaad waxay sheegtay in jaahiliyadu ay leedahay ictiqaad, falsafad, fikrad iyo aragti, dhammantoodna aan xaq ahayn. Taasi waa astaanta koowaad, inay Allaah ka malaynayaan xaq wax aanan ahayn, sidaay jaahiliyaddu malayso.

Waxaa hubaal ah in marka aan isa soo hordhigno taariikhda afkaarta dadyowga baadiyaysan kana fog Nabiyada jidkooda, waxaan arkaynaa inay baadi wada ahaayeen, ictiqaad xaq aan ahayn qabeen iyo male jaahiliyeed.

Haddaan hal tusaale ka soo qaadanno taariikhda fekerka insaanka baadiyaysan, waxaan arkaynnaa in caqligii ugu waynaa – sida ay ugu yeeraan – awood uma yeelan inuu ku garto xaqiiqada caqligiisa isagoon waxyigii anbiyada loo soo dejyay waxba ka qaadan. "Arosto", (Aristotal) ninka ay ilaa hadda ugu yeeraan macallinkii koowaad, reer Yurubna ay ka qaateen in badan oo ka mid ah afkaartooda, oo ay gaarsiiyeen booska macallinka koowaad ee insaanka, ama caqligii ugu waynaa ee ay aadanuhu soo saareen. Ninkaasi marka uu ka hadlayo Allaah SWT, waxaan arkaynaa inuu sheegayo wax uu u bixiyay " jiritaanka waajibka ah", waa macnaha falaasafaddu Allaah u taqaan, ama sababtii koowaad ee jiritaanka keentay, taasu waa waajib inay jirto, waana mid qadiim ah (jiri jirtay) oo waligeedna jiri doonta, iskeedna u taagan.

Wuxuu qirayaa inuu jiro mid jiritaankiisu waajib yahay oo ku sifaysan dhamaystirnaan buuxda, taasi waa xaq, laakin wuxuu oranayaa in dhammahaasi uusan abuurin kownka. Haddaba sidee buu ku yimid kownkan haddaan la abuurin? Wuxuu leeyahay kownkan waxaa ifka u soo saaray hilow uu u qabo dhammaha weyn (Allaah). Haddana wuxuu leeyahay kownkani waa qadiim oo waa mid hore jiri jiray. Waa feker isburinaaya, mar haddii la yiraahdo waa la helay oo kowkani hilow uu dhammaha buuxa ama hilow uu Allaah u qabo ayuu ku yimid, taasi micnaheedu waa hore uma jirine haddaa wax jira laga dhigay sidee ku noqon karaa isla markaas qaddiim (mid hore u jiri jiray)??!, haddaba Arosto wuxuu leeyahay waxaa jira laba qadiim, midka jiritaankiisu waajibka yahay(Allaah) iyo kowonka, sidee bay u jiri karaan laba qadiim, kownkii gadaal ka yimidna loo oran karaa waa qadiim?

Ilaaha ama jiritaankiisu midka uu waajibka yahay (waa siduu arosto u dhigaye) kama garanayo kownkan wax guud mooyee. Wuxuu garanayaa in kown jiro laakiin ma yaqaan wax uu ka kooban yahay, wuxuu ogyahay inuu jiro makhluuq la yiraahdo insaan hase yeeshee qof qof uma yaqaan, halkaasi waxaa lagu waayayaa sifo ka mid ah sifooyinka Allaah ee ahayd sifada cilmiga. Caqliyada kii ugu waynaa ee Yurub ay soo saarto oo ay ammaanta iyo hadalhaynta ka badiyeen wakaas dhex jibaaxaya wareer oo la imaanaya wax is burinaaya.

Waxaa Aristo ka dambeeyay "Afluutiin", waa faylasuufkii Iskandariya, Iskandariyana waxay ahayd madrasadii labaad ee saamaynta ugu weyn ku reebtay fekerka Insaanka, waxaan oran karnaa falsafado badan, suufinimada iyo shiicinimadaba madrasadaasay ka yimideen, madrsadaasi waa halka ay ka dhalatay fikradda sare kaca ama kormeernimada (istishraaf) ee ay caanka ku ahayd madrsada Iskandariya.

Afluutiin wuxuu u yimid inuu aad u sii nasoho midka jiritaankiisu waajibka yahay. Wuxuu yiri: "Midka jiritaankiisu waajibka yahay" wuxuu ku sifaysan yahay kaamilnimo buuxda, wuu ka duwanyahay waxyaabaha soo darriyay ee dib ka yimid, wuxuu ka duwanyahay jireyaasha kale oo dhan. Sidaa darteed ma bannaana in lagu sifeeyo cilmi, sababtoo ah jireyaasha kalaa cilmi leh, lagumana sifayn karo wax lagu sifeeyay kuwaas, midka jiritaankiisu waajibka yahay isma oga laf-ahaantiisa. Arosto (markuu lahaa Ilaahu wax guud buu ogyahay) wuxuu oranaayay in sababta uusan isugu mashquulinayn arrimaha yaryarka ah inay ka timid kaamilnimadiisa darteed, ma aha inuu ku mashquulo waxa ugu fadliga badan mooyee, isaga uun baa isku mashquulsan maadaama uu kaligii kaamil yahay, kuma mashquulsana waxyaabaha naaquska ah ee ka soo haray. Sidaa darteedna wax war iyo wacaal uma hayo jiritaanka intiisa kale ee naaquska ah, sababtoo ah isaga daatadiisa kaamilka ah uun buu ku mashquuli karaa.

Waxaa yimid Afluutiin si uu u sii nasoho Ilaahaas, wuxuu yiri naftiisa xataa war uma hayo, sababtoo ah cilmi iyo war u hayntu waa sifo dadku leeyihiin, lagumana sifayn karo Ilaah wax dadku ku sifoobayo.

﴿ يَظُنُّونَ بِاللَّهِ غَيْرَ الْحَقِّ ظَنَّ الْجَاهِلِيَّةِ ﴾ [آل عمران: ١٥٤]

Waa kaa bashariyada habowsan kuwooda ugu caqli sarreeyay fekerka ay ka haysteen Allaah, waa ictiqaad jaahili ah oo aan xaq ahayn "Waxay Allaah ka aaminsan yihiin waxaan xaq ahayn ee ah malaha jaahiliyadda"

**Macnaha labaad** ee Qur'aanka Jaahiliyad looga xusay waa: suuratul Maa'ida. Wuxuu Allaah leeyahay:

﴿ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴾ [المائدة: ٥٠]

"Ma xukunka jaahiliyada ayey doonayaan, yaa uga fiican Allaah xukunkiisa qoomka wax yaqiinsan (wax rumaysan)" (Al Maa'ida: 50).

Halkan wuxuu Allaah u tiiriyay jaahiliyadda xukun, waayoo sida ay u leeyihiin ictiqaad bay u leeyihiin xukun, dabeecadda mujtamacyada insaanka ayaa ah in aanan xukun iyo nidaam la'aan la noolaan karin. Allaah SWT wuxuu dadka waydiiyay su'aal la yaabid ah: sidaa darteed waxaa jira laba xukun; xukunka jaahiliyadda oo uu ka soo horjeedo xukunka Allaah. Wuxuna Allaah SWT sugayaa oo adkaynyaa inaysan habboonayn in dadku ay oggolaadaan ama raalli ka noqdaan xukunka jaahiliyadda.

Aayaddani waxay faallo iyo faahfaahin u tahay markii uu Allaah SWT saddex jeer ku celceliyay in ciddii sharciga Allaah SWT wax ku xakumi waydaa ay bannaanka ka tahay diintiisa:

﴿ إِنَّا أَنْزَلْنَا التَّوْرَاةَ فِيهَا هُدًى وَنُورٌ يَحْكُمُ بِهَا النَّبِيُّونَ الَّذِينَ أَسْلَمُوا لِلَّذِينَ هَادُوا وَالرَّبَّانِيُّونَ وَالْأَحْبَارُ بِمَا اسْتُحْفِظُوا مِنْ كِتَابِ اللَّهِ وَكَانُوا عَلَيْهِ شُهَدَاءَ فَلَا تَخْشَوُا النَّاسَ وَاخْشَوْنِ وَلَا تَشْتَرُوا بِآيَاتِي ثَمَنًا قَلِيلًا وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ۞وَكَتَبْنَا عَلَيْهِمْ فِيهَا أَنَّ النَّفْسَ بِالنَّفْسِ وَالْعَيْنَ بِالْعَيْنِ وَالْأَنْفَ بِالْأَنْفِ وَالْأُذُنَ بِالْأُذُنِ وَالسِّنَّ بِالسِّنِّ وَالْجُرُوحَ قِصَاصٌ فَمَنْ تَصَدَّقَ بِهِ فَهُوَ كَفَّارَةٌ لَهُ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ۞وَقَفَّيْنَا عَلَى آثَارِهِمْ بِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَاةِ وَآتَيْنَاهُ الْإِنْجِيلَ فِيهِ هُدًى وَنُورٌ وَمُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيْهِ مِنَ التَّوْرَاةِ وَهُدًى وَمَوْعِظَةً لِلْمُتَّقِينَ ۞وَلْيَحْكُمْ أَهْلُ الْإِنْجِيلِ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فِيهِ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤-٤٧]

"Anagaa soo dejinay Towreed oo dhexdeeda ku sugan yahay hanuun iyo nuur ayna ku xukumayeen nabiyadii u hogaansamay Allaah kuwii yuhuudoobay waxaana xukumi jiray madaxda iyo culimada wixii laga doonay in ay ilaaliyaan oo kitaabka Allaah ah, waxay ku ahaayeen markhaati ee ha ka cabsan dadka ee iga cabso aniga, hana ku gadanin aayaadkayga lacag yar, ciddaanan wax ku xukumin wuxuu soo dejiyey Allaah kuwaasi waa gaalo.Waxaan ku waajib yeelay korkooda nafta in nafta loo qasaaso, ishana il, sankana san, dhegtana dheg, iliggna ilig, dhawaacyadana waa la isu qisaasi, ciddii iska sadaqaysata (saamaxda) waxay u noqon kafaaro (dambi dhaaf), ciddaanse wax ku xukumin wixii Allaah soo dejiyey kuwaasi waa daalimiin.Waxaan raacsiinay raadkoodi Ciise ibn Maryama isagoo rumaynaya wixii hortiisa ah ee Towreed ah, waxaana siinay Injiil oo hanuun iyo nuur ku sugan yahay una rumaynaya wixii ka horeeyey ee Towreed ah hanuun iyo wanaagna u ah kuwa Allaah ka cabsada.Ha xukumeen Injiil ahalkiisuwuxuu ku soo dejiyey Allaah dhexdiisa, ciddaanan ku xukumin wixii Allaah soo dejiyey waa kuwo faasiqiin ah" (Al Maa'idda 44-47)

Intaa kaddib ayuu Allaah daba dhigay xukunkaan ah:

﴿ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ ﴾ [المائدة: ٥٠]

"Ma xukunka jaahiliyadda ayey doonayaan" (Al-maaida: 50)

Haddaba waxaa jira xukun baadil ah oo jaahiliyaddu ay leedahay – sida aayaddu sheegayso – sida ay u leedahay ictiqaad baadil ah sidii ay aayaddii hore sheegtay. Waxaana jira ictiqaad xaq ah iyo xukun xaq ah oo Allaah uu amray, nabiyaduna dadka ay ugu yeereen.

**Macnaha saddexaad** ee Qur’aanka jaahiliyad looga xusay waa: suuratul Axzaab, wuxuu Allaah leeyahay:

﴿ وَلَا تَبَرَّجْنَ تَبَرُّجَ الْجَاهِلِيَّةِ الْأُولَى ﴾ [الأحزاب: ٣٣]

“Hana muujinina sida ismuujintii jaahiliyadii hore” (Al-Axzaab: 33).

Halkan waxaa jaahiliyadda lagu sifeeyay inay tahay nidaam bulsheed oo qaawan aadna u hooseeya. Qaawanaantu waa muuqaal si daran usoo baxaaya una muuqanaaya. Wuxuu Allaah meel kale ku leeyahay

﴿ وَلَوْ كُنْتُمْ فِي بُرُوجٍ مُشَيَّدَةٍ ﴾ [النساء: ٧٨]

“Walow aad ahaataanba daaro muuq dheer oo la adkeeyey dhexdood” (Al-Nisaa: 78)

Macnuhu waa meel kore oo dadka u muuqata. Haddaba astaamaha jaahiliyadda waxaa ka mid ah qaawanaantuna, waxayna ka soo horjeeddaafidrada. Waa karaamadii Allaah SWT uu dadka karaameeyay iyo fidradii oo laga fogaado.

Marka la xuso ereyga "qaawanaan" waxaa haddiiba maanka ku soo degdegaya qof haween ah oo fidnadeeda la soo banbaxday si ragga ay u fidnayso oo ay dabinkeeda ku soo dhacaan. Haddaba waxaa dumarka muuminiinta ah laga reebay inay sidii dumarkii jaahiliyadda oo kale isu qaawiyaan, macnahaasina dumarka gaar ahaan uguma koobna. Qaawanaantu haddaan macneheeda qaadanno ee ah fidrada oo laga baxo, waxaan arkaynnaa in dumarku ay fidrada uga baxayaan markii ay cowradooda muujiyaan oo ragga ay u wacdaan oo ay faaxishadu faafto oo ay fidnadooda u adeegsadaan fasahaadinta bulshada.Sidoo kale ninkuna wuu is qaawiyaa, waxayna ka muuqataa socodkiisa siduu isku jajabiyo, ereyo fool xun oo uu ku hadlo, dhaqamo xunxun uu la soo banbaxo, waxaasi dhammaan waa isqaawin, sababtoo ah wuxuu khilaafsanyahay fidrada karaamada Allaah siiyaay.

Sida dumarkuba ay qaawanaanta ku muujiyaan ereyo, socodka, muuqaalka, moodada iyo waxyaabaha la isku qurxiyo, sidoo kale baa ragguna isugu qaawiyaan socodka iyo ereyga iyo dabeecadda. Sidaa darteed, wuxuu rasuulku SCW lacnaday ragga isu ekeysiiya dumarka iyo dumarka isu ekeysiiya ragga. Sababtoo ah islaamku wuxuu aad ugu dadaalaa inuu jinsi kasta ku gaar ahaado astaamihii lagu abuuray si uu u guto howshii loo abuuray. Waxaa ninka laga rabaa inuu nin ahaado, oo ragannimo iyo xoog iyo ad-adkaan iyo caqli iyo goonni isu taag yeesho. Waxaa qoftii dumar ahna laga rabaa jilicsanaan iyo dumarnimo, debecsanaan iyo raacsanaan ninka ay raacsantahay.

Haddii uu dhaco isku-qas, oo ninkiina dumar isu ekeysiiyo debecsanaanteeda iyo jiljileeceedii, oo haweentiina nin isu ekeysiiso adadkaantiisa; waxaa fasahaadaysa fidrada iyo bulshadiiba, waxaa fasahaadaysa sunnada nolosha oo idil oo isku dhex yaacaysa.

Islaamku wuxuu ku dadaalaa in dhinac kasta uu gaar ahaado oo si buuxda saafi u noqdo si uu u guto howshiisa, ninkuna nin noqdo, haweentuna haween noqoto. Jaahiliyaddu waxay doonaysaa fasahaad oo ninka ay naag ka dhigto naagtana nin, oo ay meesha ka saarto wixii farqi ah oo u dhexeeyay, si dadkii iyo bulshawayntiiba u noqdaan waxaan meel loo raaco lahayn. Waxay leeyihiin waxaa jira jinsi seddexaad oo soo bixi raba, jinsi aanan rag iyo dumar midna ahayn.

Haddaba sifooyinka bulshada jaahiliga ah waxaa ka mid ah inay yihiin mujtamac burbursan oo aad u liidata, oo fidradu fasahaadday, sababtoo ah fasaadku wuxuu bani'aadanka u diidayaa toosnaanta, wuxuu is-hortaagayaa xaqa qaadashadiisa, kaddib markii uu u ka dhigo wax nasakhan, oo rag iyo dumar u dhexeeya.

Sida aan ku aragno waddamada reer galbeedka oo haatan laga-roonayaashu (raga isku galmooda] ay noqotay mid muctarif ah oo sharciyaysan, waxaaba la oggolyahay inay is guursadaan dadkaas, waxaaba jira kaniisado gaar u ah isuguurinta ragga dhexdooda iyo dumarka dhexdooda. Waxaan ku arkaynnaa Holland tusaale ahaan in aroosyada caynkaas ah telefishinka laga soo daayo, iyagoo xaflado dhammaystiran dhiganaya, waxayba siinayaan lacagta lagu caawiyo dadka isu guursada sida caadiga ah. Dalka Faransiiskana dowladda ayaa ku guda jirta in dadka sidaan isu qaba canshuur dhaaf loo sameeyo sida dadka caadiga isu qaba. Dadka qaanuunkaas ka soo horjeedana waxay ka eegayaan in dadka is qaba loola dhaqmo sida hal qof oo kale, taasi waxay keenaysaa in dakhligii canshuurta faransiiska ay nusqaanto marka nin iyo nin, naag iyo naag la isu guursado, oo midkood canshuurtiisii dhacdo, taas oo dhalisa khasaare dhaqaale, qaddiyaddu marka waa mid maaddi ahe ma aha mid akhlaaq.

Jaahiliyaddu haddaba waa mujtamac nasakhan oo qaawan, halka uu Islaamku yahay nidaam xishood, xijaab iyo xushmad xambaarsan. Xijaabku ma aha kaliya in la qariyo qofta dumarka ah fidnadeeda iyo cawradeeda oo loo diido inay xirato wax sifaynaya ama laga dhex arkayo. Xijaabku waa nidaam dhammaystiran. Waa nidaam xaddidaya xiriirka ka dhexeeya ragga iyo dumarka. Waxaa soo galaya qaabka isu idan qaadashada, salaanta, nidaamka la dhaqanka dumarka, xuquuqda iyo waajibaadka raga iyo dumarka. Dhammaan intaasu waxay soo galayaan nidaamka xijaabka ee xaddidaya xiriirka ragga iyo dumarka ka dhexeeya. Nidaamkaasi wuxuu ilaalinayaa labnimada ninka, dheddignimada dumarka, kaalinta ninka iyo hoggaamintiisa, dhego nuglaanta dumarka iyo hooyanimadeeda. Wuxuu ilaalinayaa jinsiga ninku inuu lab ahaado, jinsiga dumarkana uu dheddig ahaado, si ay u fusho sunnada Allaah ee jinsiga iyo nooca dadka ay ku tarmaan si nooca dadka uu u sii jiro,iyadoo la ilaalinayo in bani'aadanka ugu raaxaystaan nolosha jawi nadiif ah oo aan isku qasnayn, si looga hortago nasabku inuu isku khaldamo, laysku qabsado dumarka iyo sharafta oo lagu dagaallamo sida jaahiliyadda ka dhacda oo kale.

Bulshada muslimka ah, nidaamka islaamka ee xijaabka wuxuu qofka xaq u siinayaa dhammaan raaxada nolosha, iyadoo saafi ah oo nadiif ah, oo ka maran dhibka iyo qaska ay jaahiliyaddu ku nooshahay. Dhibaatada ay jaahiliyadda kuwooda wax gartaa ay ka cabanayaan – haddiiba ay jirto jaahiliyo wax garata – waxay ka cabanayaan fasahaadka iyo hoogga ay ku noolyihiin, heerka hoose ee yaaqyaaqsiga ah ee ay ku dhaqmayaan, maaha raaxo laga dhergo in hoog laga qaado maahee, ee maalin kasta waxay cusboonaysiinayaan qaababka raaxaysiga, ilaa uu dhexdooda ku faafay guur wadareed iyo xaflado galmo-wadareed ah oo sino lagu sameeyo. Waxaa faafay xaasaska oo la is dhaafsado iyo waxyaabo kale oo fasahaad iyo xad ka bax ah. Waxaasoo idil waa si ay u helaan qaabab raaxaysi oo cusub kaddib markii ay ka daaleen noocyadii qadiimka ahaa. Waxaa xataa ka sii baaba'aya mujtamacyada Yurub inay wax xaaraan ah jiraan, maba la xuma xiriirka ninka iyo gabadhiisa uu dhalay dhexmaraya, iyo wiilka iyo hooyadiis ama walaashiis sidoo kale.

Waxaa waddanka Iswiidhan (Sweden) la oggolaaday nin iyo walaashiis inay is guursadaan, waxayna had iyo goor qaanuundajinta ka hor sameeyaan inay isku waafaqaan oo ay arrintu dhexdooda ku faafto, kaddibna qaanuun ka dhigaan. Waxay ka soo daayaan telefishinka si cad,

oo ay dalbadaan inay mashruuc hirgala noqoto oo qaanuun laga dhigo, oo aysan cidna is hortaagin lana dirirин, waa taas jaahiliyo.

Waxayba arrimahaas foosha xumi ku soo socdaan waddamada islaamka sheegta ee aan ku dhaqmin waaqac ahaan, taasina waxaad ka dhex arkaysaa sheekooyinka ay ugu yeeraan "suugaanta waaqiciga ah" oo aad ugu dhex faaftay golayaasha iyo bogagga internetka.

Haddaba jaahiliyaddu waxay leedahay ictiqaad khaldan oo baadiyaysan, xukun khaldan oo baadiyaysan, iyo sidoo kale nidaam mujtamac oo burbursan aadna u nasakhan, oo ka hor-imaanaya fidrada dadka, una horseedaya bani'aadamka inay kala googo'aan shakhsi ahaan iyo koox ahaanba.

**Macnaha afraad**: Aayadda afraad ee jaahiliyadda ka hadashey waa suuratul Fatxi, Allaah wuxuu leeyahay:

﴿ إِذْ جَعَلَ الَّذِينَ كَفَرُوا فِي قُلُوبِهِمُ الْحَمِيَّةَ حَمِيَّةَ الْجَاهِلِيَّةِ ﴾ [الفتح: ٢٦]

"Markii ay yeeleen kuwii gaaloobayquluubtoodqiiro iyo santaag,qiiro jahiliyadeed"
(Alfatxi: 26)

Halkan waxaa ka muuqda waxa isku xiraya bulshooyinka jaahiliyadda mujtamac ahaan ama qof ahaan. Jaahiliyadda waxaaisku xira ficilo qabiil, cunsuriyad midab, luqad, maslaxado iyo waddan. Intaas ayay isugu yimaadaan, isku kaashaddaan darteedna ugu diriraan. Xiriiradaas dhammaan waxay geyeysiiyaan ban'iaadamka colaad iyo dagaallo, sababtoo ah waxaaba suurtagal ah in casabiyaddu ay gaarto heer ay qoys kasta qoyska ka soo horjeeda uu la diriro, oo ay dadkii u kala googo'aan shakhsiyaad waxba uusan ka dhexeynin, waxayba gaaraysaa ugu dambayntii qof kasta inuu naftiisa ka daafoco dadka kale dhammaantood. Sida uu ku yiri Jaan Bool Sarter sheekadiisii "**cadaabku waa inta kale**", wuxuu arkayaa in dadka kale ay yihiin cadow. Falsafadda Wujuudiyada ee uu ninkani la yimid waxay leedahay inuu qofku noqdo kaligii noole, wuxuu doonayo uu sameeyo, raaxadiisana qaab kasta uu ku xaqiijiyo xataa haddii dadka kale uu laayo. Taasina waa ficillada ugu xun ee jaahiliyaddu gaarto kaddib marka ay kala jartay xiriir kasta oo dadka isu keeni lahaa, qof walbana uu noqdo mid wuxuu doonayo sameeya, uuna eedo caaqibada kalinimadiisa, laga yaabee in uu in yar ku raaxeysto xorriyad buuxda, umana hoggaansamo dadka kale ee cadowga uu u arkayo, waayo waxay ku hor gudban yihiin waxa ay naftiiisu jeceshahay

Yurub waxay kalinimadaas u muujisay siyaabo kala duwan. Qofku markuu ku soo wareego xaafadda Laatiin ee magaalada Paris, wuxuu arkayaa xaafad silloon, ma dareemaysid inaad bani'aadam hortaagan tahay, waxaad ku arkaysaa wax aadan sifayn karin. Waxaad arkaysaa Rag iyo dumar isugu yimid shahwad kaliya, qof kastana sida uu doorbidayo u guto.Waxaad arkaysaa qof qaawan oo lugaynaya, mid madaxa barkiis xiirtay, mid xabadkiisa qarsaday oo inta kale oo qaawan soconaya, mid cabsan oo baAllaaha nalka sidii inuu haween yahay ugu dhaggan. Waa fasahaad, waalli iyo walaahow xaalkoodu.Waxaabad isleedahay waxaad soo gashay xero xoolaad ama dac uraysa.

Waa sidaas xiriirrada jaahiliga ah, waa kuwa dabeecad ahaan wax kala geeya oo aan isu keenin, sababtoo ah waa xiriir asal looga dhigay dhul ama midab ama sinji ama luqad, ama wixii kale ee la isugu yimaado dhulkaan.

Xiriirradani waxay dhalaan tafaraaruq.Waa xiriirro aan ku imaan qofka doorashadiisa balse uu ku khasban yahay. Qofku ma awoodo inuu beddelo meesha uu ku dhashay, midabkiisa, ciidda

uu ku soo koray, iyo waliba lab iyo dheddig midka uu yahay. Xiriiradaasi waa xiriirrada xayawaanka ee ma ahan kuwa bani’aadamka. Xayawaanku waa midka ku xiran meel gaar ah iyo xuduud go'an oo uu ku noolyahay iyo cunno go'an oo uu cunayo, xayawaannada ku nool cirifyada dhulka barafka leh kuma noolaan karaan dhul-baraha, caksigana waa la mid. Dhanka kale, bani’aadamku waa noole ka madax bannaan xanibaadyo badan, waxaa uu Allaah ku mannaystay  dabacsanaan, awoodna uu u siiyay inuu jawiyo kala duwan ku noolaado lana qabsan karo. Haddaba, xiriirradaas xayawaaniga ah in laga dhigo kuwa ay dadku ku abtirsanayaan ayna ku kulmayaan waa jaahilnimo iyo khalad wayn, waana hubaal inay kala tagtagayaan.

Sidaa daraadeed bay casabiyaddu tahay mid aan laga oggolayn islaamka. Rasuulku SCW wuxuu leeyahay:

(ليس منا من دعا إلى عصبية، وليس منا من قاتل على عصبية، وليس منا من مات على عصبية)[3]

"naga mid ma aha qofkii casabiyad u yeera, naga mid ma aha qofkii casabiyad ku dagaallama, naga mid ma aha qofkii ku dhinta casabiyad",

Wuxuuna ansaarta ku yiri markii ay dhexdooda is dirireen, kaddib markii ay yahuuddu ku kaakicisay ficilo iyo caro qabiil lana xasuusiyay wixii gabay laga tiriyay dagaalkii Bucaath, wuxuu yiri:

(ما بال دعوى الجاهلية.. دعوها فإنها منتنة)[4]

"Maxay tahay isu habar wacashadan jaahiliga ah, iska daaya waa qurune"

Waxaa hubaal ah in xiriirka muslimiinta isu keenaya uu yahaycaqiiddada, taasoo bani’aadamka dhammaantiis ku xiraysa hal Ilaah. Kulligood waxay u siman yihiin Allaah hortiisa, waxay ku kala hormarayaan cabsida Allaah oo kaliya. Luqdaha, midabka, dhul iyo isir u dhalasho Islaamka agtiisa qiime kuma laha, kamana dhigayo wax dadka kala geeya ama ay ku kala soocmaan. Caqiiddada Islaamku waa midda dadka Allaah isugu keenta, oo waxa lagu kala fiicnaanayana ka dhigta cabsida Allaah kaliya, carab iyo cajamna farqi ma leh Allaah ka cabsi mooyee, midabka, luqadda, maqaamka, dhaxaltooyada, nasabka iyo kartida midna Islaamku waxba ku dhisimaayo, dadka dhammaantood Allaah hortiisa waa simanyihiin, xuquuqdooduna waa mid, maqaamka mid kasta iyo booskiisa waxaa xaddidaya Allaah ka cabsigiisa.

Maadaama ay caqiidadu tahay wixii bulshada isku xirayay, waxay sidaa ku noqotay qiimaha dadku ku kala sarraynayo, macnahaasi wuxuu keenayaa dadku inay isu yimaadaan oo isku xirnaadaan; markaasina way is jeclaanayaan, is kaalmaysanayaan, isa saamaynayaan, isku xadgudbi maayaan, ismana dulminaayaan. Allaah ka cabsigooda waxaa ka dhalanaya wanaag ay wada helaan, waxaana sidaa ku xaqiiqoobaya noloshii miisaaliga ahayd ee lama gaari karo lays lahaa, ama bulshadii miisaaliga ahayd, ama magaaladii ugu sarraysay ee faadilka ahayd ee ay falaasifadu u raadinayeen, dadkuna hilowga u qabeen.Misaalinimadaa lama xaqiijin karo iyada ooncaqiiddada laga dhigin waxa kaliya ee dadka isu keenaya iyo in lagu kala sarrreeyo ka cabsiga Allaah oo kaliya. Arrintaan ah in caqiiddo laysugu yimaado cabsi Allaahna lagu kala sarreeyo waxaa suurta gelin kara ama is hortaagi kara qofka bani’aadamka ah, dadkoo idil way

[3] رواه أبو داود من حديث جبير بن مطعم -رضي الله عنه

[4] متفق عليه من حديث جابر -رضي الله عنه

beddeli karaan halka ay wax kaqaataan amay raacsan yihiin, wayna beddeli karaan ictiqaadkooda iyo fikradohooda, wayna xakamayn karaan

Laakin dadku ma beddeli karaan midabkooda iyo meesha ay ku dhasheen iyo sinjigooda midna. Waxaan arkaynaa xiriirka uu Allaah dadka isugu keenay inuu yahay xiriir u qalma bani’aadamka ikhtiyaarka leh ee karaamaysan, dariiqiisa iyo maqaamkiisana isagu dooranaya. Halka ay jaahiliyaddu caqabado hor dhigayso isu-imaatinka dadka, bal waxayba dhigaysaa sababihii horseedi lahaa loollanka, xasadka iyo is-nacaybka iyo tafaraaruqa.

Shuuciyaddu waxay isku dayday inay samayso caqiiddo dadka isu keenaysa, oo midab iyo sinji aan dadka ku kala soocaynin,hal caqiiddo kaliya la isugu imaanayo. Hayeesheecaqiiddada shuuciyaddu laf ahaanteeda ayaa ku taagnayd loollanka dabaqadaha, kicinta dareenka xasadka iyo ciilka dadka dhexdooda ah. Sidaa darteed, waxay ahayd caqiiddo sumaysan oo isku dhac keenaysa, qiyamkii iyo akhlaaqdiina burburinaysa. Caqiiddadaanu waxay qabtaa in shuuciga dhabta ah yahay midka aanan wax akhlaaq ah lahayn, sidaasay naxashkeeda ku diyaarsatay sababta burburkeeda iyo geerideedana ku samaysatay.

Hiillada, iyo qiirada jaahiliyadda ee aayaddu ku soo aroortay ama lagu xusay waxay ka hadlaysaa casabiyaddii qurmuunayd iyo midabtakoorka iyo hayb sooca.Qiiradu waxay keenaysaa sabab kasta oo abuuri karta tafaraaruqa, kala go'naanta, loollanka, uur-ku taallada iyo is-nacaybka dadka. Taas oo ugu dambayn ka hor imaanaysa maslaxadda bani'aadanka iyo nabadgalyadiisa arlada.

Waxaa hubaal ah in ilbaxnimada bani'aadanka ay ku taagantahay nabadgalyo iyo caddaalad, haddii jaahiliyaddu nolosheeda ay ku taagantahay dulmi iyo is-nacayb, waxay ilbaxnimada bani’aadanka u keenaysaa burbur iyo baylahnimo.

Markaynuuruurinno dhammaan waxa laga dheehan karaayo ereygan "jaahiliya" meelihii uu Qur’aanka uga soo arooray, ee afartii aayadood ahaa, waxaan arkaynnaa inay cabbirayso ictiqaad kharriban, xukun baadil ah, mujtamac burburay oo qaawan oo xumaan kasta u yeeraysa, iyo mujtamac wadajirkeedu ku qotomo loollan iyo tafaraaruq, bani'aadankana hoog u keenaysa, run ahaantii waa ciriirgii Qur’aanku sheegay

﴿ وَمَنْ أَعْرَضَ عَنْ ذِكْرِي فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنْكًا ﴾ [طه: ١٢٤]

“Ciddii ka jeedsata xuskeyga, wuxuu ku noolaanayaa nolol ciriiri ah” (Taha: 124)

Sifooyinkaas ereyga "Jaahiliya" uu wato iyo xaqiiqooyinka ka burqanaya adeegsiga ereygan iyo macnihiisa, waxaan awoodnaa inaan si cad u qeexno "Jaahiliya" qeexid ka run sheeg badan qeexataannadii ay samaysatay Jaahiliyaddu ee aynu horay usoo aragnay.

Waxaan oran karnaa jaahiliyaddu waa diin kasta ama nidaam kasta ee aan Islaam ahayn. Taasi waa mid ka mid ah qeexataannada, waxay kaloo noqon kartaa: xaaladda uu bani’aadamku ku jiro marka ay ka bayraan manhajka Allaah iyo diintiisa. Ama si kale haddii loo dhigo; xaalad kasta oo ay diidmo qayaxan dadku diidaan ku hanuunsanka hadyiga Allaah, xukunka sharcigiisana ku gacan sayraan.

Dhammaan waa qeexataanno sax ah, qeexataannadan iyo xaqiiqooyinkan aan kala soo baxnay ereybixinta jaahiliyadda sida Qur’aanku u soo arooriyay xiriir dhow ama fog lama leh sida dadku ay u yaqaanaan ereyga.

Jaahiliyaddu ma aha lidka ereygacilmi, bulshadu waxay noqon kartaa mid heerka ugu sarreeya ka joogta horumarka maaddiga ah, cilmi, tiknoolojiyad, farsamo, hal-abuur iyo ka faa'idaaysiga sunnooyinka kownka, isla markaana ay bulshadaasu marayso jaahiliyad halkii ugu darnayd, sidii Caad iyo Thamuud iyo Faraacinnadii, ama sida maanta ay yihiin Maraykanka iyo wixii la mid ah. Haddaba jaahiliyad ma aha dib u dhac maaddi ama cilmi la'aan.

Jaahiliyaddu ma aha marxalad taariikheed oo dadka soo martay, dibna aan u soo noqonayn, ee waa xaalad cudur iyo xanuun dadka hela, haddii calaamadahiisa xilli xilliyada ka mid ah la arko jaahiliyad way joogtaa, ha ahaato xilli hore, xilligan imminka la joogo ama mid iman doona intaba. Cudurku ma leh saman gaar ah, markii calaamadihiisa la arko oo qof uu ku dhoco ayaa qofkaas lagu sheegaa cudurka uu qabo. Sidoo kale weeye bani'aadankuna, haddii ay ka soo muuqdaan calaamadaha jaahiliyadda waxaa la oranayaa xaalad jaahiliyad ayay ku jirtaa. Xilli taariikheed ma ahan ee waa cudur bani'aadanka lagu sifaynayo markii ay ka leexdaan diinta Allaah, diidaanna hanuunka Allaah iyo ku xukumidda wixii uu soo dajiyay.

## Tiirarka Jaahiliyadda

Waxaan ku soo koobi karnaa qodobbada ugu waawayn ee macnaha jaahiliyadda laba qodob:

**Qodobka koowaad**: **Aqoon sax ah oo aan Allaah loolahayn**:

Aqoon sax ah la'aanteed marka aynu leenahay waxaan u dan leennahay in had iyo goor ay jirto aqoon loo leeyahay Allaah SWT, laakin jaahiliyaddu markasta aqoon naaqus ah oo aanan sax ahayn bay haysataa. Ma oranayno Allaah oo aan la aqoon, sababtoo ah Aadanuhu weligii jaahilnimo dhammaystiran Allaah uma qabin. Bani'aadamku had iyo goor Allaah waa ay yaqaanaan, laakin waa aqoon sax aanan ahayn ama naaqus ah. Haddaba qodobka koowaad ee macnaha jaahiliyadda waa aqoon sax aanan aheyn oo laga haysto Allaah SWT.

**Qodobka labaad: sharcigii Allaah soo dajiyay oo aanan la isku xukumin.**

Waxaanu arkaynaa in labadaan qodob midkood uu muuqdo, midna uu qarsoonyahay. Aqoon la'aantu waa mid uur ku-jir ah, ma cadda mana muuqato. Haddaad qof waydiiso: Allaah ma taqaan? Wuxuu ku oranayaa: waan aqaan, waxaad u baahantahay waqti dheer iyo dood farabadan si aad ugu caddayso in aqoontiisa Allaah uu u leeyahy ay tahay mid naaqus ah.

Aqoontu haddaba waa mid gudaha ah oo aanan muuqanayn waqti kasta, halka qodobka labaad ee xukunka wixii Allaah uu soo dajiyay la xiriirana uu yahay mid muuqda, yacnii in shareecada dadku ay tahay shareecada Allaah, iyo inay u xukun tagaan sharciga Allaah ee aysan sharci kale u xukun tagin, ma aha mid qarsoon.

Daliilka aan muuqanin ee qarsoon gudaha ku jira waa aqoonta saxda ahayn, daliilka muuqdana waa ku xukumid la'aanta wixii Allaah uu soo dajiyay. Sidaa darteed xukunka fiqiga ah wuxuu raacayaa midda muuqata ee ma raacayo midda qarsoon.

Haddii uu jiro mujtamac ku xukumaya sharciga Allaah waxaan ahayn, waa mujtamac jaahili ah, haddii uu jiro qof diiddan xukunka Allaah, isaguna waa qof jaahili ah.

Fuqahadu waxay adduunyada u kala qaadeen labo daarood: Daar Islaam iyo Daar Kufri. Waxayna ka eegayeen muuqaaalka Shareecada Allaah oo dadka lagu kala xukumo ama la'aanteed. Bulshada muslimka ahi waa midda ku xukunta wixii Allaah uu soo dajiyay ee diidda xukun kasta oo kale. Xukunka Allaah xaggiisa ka ahaaninna uma tirsana.

Annaga marka aannu wax ka qaadanayno Rasuulka SCW oo aynnu adeecayno Allaah ayaa na faray adeeciddiisa, ee annagu iskeen kuma dooran adeecitaankiisa, haddii layna fari lahaa inaanan adeecin ma aynaan adeecneen, waxbana kama qaadanneen. Laakiin Allaah SWT ayaa na faray inaan rasuulkiisa adeecno, waynu adeecaynaa sunnadiisana waynu qaadanaynaa, waxaan ka dhiganaynnaa asal ka mid ah usuusha aynu shareecada ka helno sababtoo ah Allaah ayaa sidaa ina faray.

﴿ مَنْ يُطِعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ وَمَنْ تَوَلَّى فَمَا أَرْسَلْنَاكَ عَلَيْهِمْ حَفِيظًا ﴾ [النساء: ٨٠]

"Ciddii Rasuulka adeecda wuxuu dhab u adeecay Allaah, kii jeestana kumaanaan dirin mid ilaaliya korkooda" (Al-Nisa: 80)

﴿ وَمَا آتَاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا ﴾ [الحشر: ٧] .

"Wuxuu Rasuulka idiinla yimaado qaata, wuxuu idinka reebana ka reebtooma" (Al-Xashr: 7)

## Tilmaamaha Mujtamaca Jaahiliga ah

Bulshada jaahiliga ah haddaba astaamaheedu waa xaddidan yihiin, waa mujtamac sharciga Allaah aan isku xukumin. Bulshada muslimka ahi waa bulshada sharciga Allaah isku xukunta. Haddaba, arlada waa laba daarood: Daar Islaam iyo Daar dagaal, mid kastana astaameheedu waa cadyihiin. Fuqahadu aad bay ugu ad-adagyihiin qaybtintaas. Fuqahada qaar baa sida Xanafiyiinta waxay qaateen ra'yi ah in nabadgalyadu dal ama daar ay siinayso sifada Daar Islaam, waa ra'yi aanan caga badan ku taagnayn laguna raddiyay. Waxaa suurta gal ah in ra'yigaasi ka dhashay waaqac markaa jiray, oo sida maanta xaaladdu tahay ma ahayn.

Bulshada jaahiliga ah haddaba waa bulshada diidda inay ku hanuunto hadyiga Allaah, wixii uu soo dajiyay inay isku xukumaanna diida.

Waxaan markaan ka hadlaynaa astaamaha bulshada jaahiliga ah ee maxay yihiin astaamahaasi? ama maxay yihiin astaamaha ay wadaagaan dhammaan jaahiliyadaha, kuwii hore iyo kuwa hadda, iyo kuwa iman doona mustaqbalka.

Jaahiliyo oo idil – sidii aan soo sheegnayn – waa mid, waa xaalad cudur oo diidaysa inay ku hanuunto hadyiga Allaah, dajisanaysana nidaam diiddan xukunka Allaah. Dhammaan waxay leeyihiin astaamo ay wadaagaan taariikh ahaan. Haddii astaamahaas la helo waqtigay dooniba ha noqotee, bulshadaas laga helay ama dadkaas waxay noqonayaan jaahiliyo.

**Astaanta koowaad ee jaahiliyadda waa: Allaah oo si sax ah aanan loo rumaynin**

Jaahiliyad dhammaanteed Allaah si sax ah uma rumaysna. Farqi baa u dhexeeya iimaan sax ah la'aantiisa iyo aqoon la'aanta. Waxaa jira mujtamacyo Allaah yaqaanna, laakin si sax ah aanan u rumaysnayn. Waxaa ka mid ah tusaale ahaan, Ahlu-kitaabka, Allaah way yaqaanaan laakin si sax ah uma rumaysna, haddaba aqoon kaligeed qiimo ma laha.

Jaahiliyo dhammaanteed iimaan sax ah ma rumaysna Allaah, inay ku gaaloobaan ama Ilaahyo kale ay la wadaajiyaan mooyee. Iimaan la'aanta, ama shirkigu wuxuu noqon karaa dhanka ictiqaadka, ama cibaadaysiga ama raacitaanka iyo xukunka. Taasi haddaba waa astaanta koowaad ee ay jaahiliyaddu wadaagaan.

**Astaanta labaad**: oo ka dhalanaysaa astaanta koowaad; waa raacitaanka Hawada, dadka jaahiliyiinta ah waxay raacaan hawadooda, hawadu noocay dooni ha noqotee; mid maaddi

kaliya ah ha noqoto, sida jaahiliyaddii Giriigga iyo Roomaanka iyo kuwa reer galbeedka dhammaantood; ama jaahiliyad diini ku dheehantahay ha noqoto, sida jaahiliyadda kaniisadda, middii Faraacinada, ama midda Hindida. Waa jaahiliyooyin diin iyo suufinimo xambaarsan, laakin dhab ahaan hawadooda raacaya marka noloshooda ay qaabaynayaan.

Jaahiliyaddu dhammaan way wadaagaan astaanta hawa raacidda ah; hawadaas ha ahaato mid adduunyo lagu raadinayo, ama mid ay ku raadinayaan xukun iyo madaxtinimo, ama in diimo baadil ah la raaco, kuwaasoo cibaado baadil ah iyo Ilaahyo baadil ah u horseedaya, sida ay sameeyaan Yuhuudda iyo Nasaarada, Faraacinada iyo Hindida, ama jaahiliyad kasta ee diin baadil ah iyadu diin ka dhigata. Waxaasi oo dhan waxay ka dhasheen hawadoo la raaco, diin la iska samaysto oo aragti iyo cibaadooyin loo hindiso markaasna lagu xirmo, iyadoo la aaminsanyahay inay tahay diinta dhabta ah, waxaasina xaq ma aha.

**Astaanta saddexaad**: **Daaquud la caabudo**:

Jaahiliyadi dhammaanteed waxay caabudaan daaquud. Daaquud waa erey carabi ah oo laga keenay ereyga duqyaan, macnihiisuna yahay xadka oo la dhaafo. wuxuu Allaah yiri:

﴿ إِنَّا لَمَّا طَغَى الْمَاءُ حَمَلْنَاكُمْ فِي الْجَارِيَةِ ﴾ [الحاقة: ١١]

"Annagu markay biyuhu xadkoodi dhaafeen, waxaan idinku xambaarnay doonidii dhexdeeda" (Al-Xaaqa: 11)

Carabtu waxay qaabkaan u adeegsataa wixii lagu talax tago; sida daaquud, raxmuut, malakuut, rahabuut; waxay doonayaan inay yiraahdaan wuxuu ku talaxtagay qooq, naxariis, boqornimo, iyo cabsiin (waa siday isugu xigxigeene). Daaquud waa erey caddaynaya qooq lagu talaxtagay, macnaheeda luqad ahaan waa xadka oo la dhaafo, macnaheeda sharciga ahna waa wax kasta oo dadka ka sii jeediya Allaah SWT. Sidoo kale; waa wax kasta oo nolosha dadka u qalqalloociya sida uu doonayo isagu ama danihiisu yihiin, dhammaan waa daaquud. Waxaa kaloo qeexay Sheekh Muxammad Bin Cabdil Wahhaab oo yiri: "Daaquud waa eray kulansanaya; wax kasta oo Allaah sokadii la caabudo, raallina ku noqda cibaadadaas, halloo cibaadaysto ama halla raaco ama halla adeeco Allaah iyo rasuulkii kasokoow, waa Daaquud."

Raalli ahaanta la xusay waxay ku fadhidaa macno weyn, waayo dadku waxay caabudeen Nabi Ciise, Cuzayr, iyo Malaa'ikta iyaga oon raalli ka ahayn, sidaa awgeed daaguut soo gali mayaan

Waxaan arkaynaa in astaantani ay jaahiliyad kasta leedahay, waxaa ay caabudaan ama raacaan oo adeecaan madaxdooda iyo kabiirradooda Allaah oo aanan u idmin, taasina waxay u horseeddaa inay diinta Allaah iyo sharcigiisa ka baxaan, wixii uu xalaasha ka dhigay xaaraantimeeyaan, wixii uu xarrimayna xalaaleeyaan, sidii ka dhacday jaahiliyaadka taariikhda dhammaantood.

Noocyada daaquudka aad bay u badan yihiin, waxaa ugu khatar yar kuwa laga qoray asnaamta iyo dhagaxyada, kuwa nafta ku jira (macnawiga ah) ayaa ka khatarsan kuwa maaddiga ah ee muuqaalka loo yeelay. Casri kasta dawaaqiid buu leeyahay, haddii aynu doonno inaan isha marinno dawaaqiidda xilligan aynu joogno jira, waxaan arkaynaa casrigaan inuu yahay midka ugu daaquud badan, waa casriga ugu badan dawaaqiidda macnawiga ah ee qarsoon, dadkuna way raacayaan iyagoo is mooda inay sax yihiin.

Daaquudka qowmiyadda, daaquudka wadaniyadda, waa daaquud qadiim ah haddana cusub. Dadku waddamadooda ayay aaminsan yihiin oo u diriraan kor u qaadidda sharafta waddankooda gardarro iyo dulimiba ha ku gaareene. Dagaalkaas ay waddanka dartiis u

galayaan waxay ku duudsinayaan xuquuqda dadka, boobayaan dhulkooda, si magaca waddanka kor loogu qaado ayay waddamo kale u gumaysanayaan dadkoodana dullaynayaan; sidii ay oran jireen: Biritaaniya dadkoo dhan bay ka korraysaa, Jarmalku dadkoo dhan buu ka horreeyaa. Waxaas oo idil waa daaquud.

Fanku tusaale ahaan waa daaquud, waana daaquud aad u wayn. Dadka ayaa loo addoomiyaa, noloshooda ayaa loo beddelaa, wixii Allaah uu xarrimay baa la xalaaleeyaa, wixii uu xalaaleeyayna waa la xarrimaa iyadoo fanka la tixgalinayo, waxayba u haystaan in fanku ka dalbanayo arrimo gaar ah, wayna ku raacayaan, xataa haddii ay Allaah ka caraysiinayso. Fanku–sida aynu arkaynno–ha ahaado heeso ama riwaayado ama shaneemo, fanku nooc walba sida badan wuxuu la dirirayaa Allaah, wuxuu xalaaleeyaa wixii Allaah uu xarrimey, wuxuu xarrimaa wuxuu Allaah xalaalayey. Dhammaan waxyaabaha xaaraanta ah ee magaca fanka lagu sameeyo, ee muusiko, dhaqan xumo, qaawanaan, iyo falal laga qajilaba, waxay u yaqaanaan fan, dartii in loo dhintana shahiidnimo ayay u haystaan, waxay oranayaa qofkii ku dhinta isagoo masraxa saaran waa shahiidkii fanka, ama isagoo boos wayn riwaayad ka dheelaya haddii uu dhinto waxay ugu yeerayaan shahiid, waa runtood, sababtoo ah wuxuu markhaati ka kacay inuu fanka Ilaahiisa, Rabbigiisa, iyo sayidkiisa yahay, dhab ahaan waa shahiidka fanka.

Marka jilayaashu ay dadka hortooda ku sameeyaan wax kasta ee Allaah uu reebay, waxay u qaadanayaan wax uu fanku keensanayo oo aanan la khilaafi karin. Mar bay Ummu-Kultuum iyo Maxamed Cabdi Wahaab (laba heesaa oo Masaari ah) ayaa heestii koowaad ee labadooda kulminaysay isla qaadeen, joornaalladu cinwaankii weynaa ay ka qoreen dhacdadaas wuxuu ahaa: Kulanka Ilaahyada Fanka. Waa arrin ay qirsanyihiin, waxay taasi ahayd meeshii ugu sarraysay ee uu gaaray fanka Masar markii ay labadaasi kulmeen, ka dibna dhowr jeer bay kulmeen si ay u xaqiijiyaan waxa dadku ay rabaan. Waxaa lagu arkayay joornaallada iyo waddooyinka marka shaneemada la xayaysiinayo: Ilaahaddii shacabka "midda ay dadku caabudaan", waxay ahayd arrin dabiici ah oo qof diidaya uusan jirin, dhab ahaan jamaahiirtu ama dadku waa ay caabudayeen naagtaas qaawan ee anshaxa xun ee golayaasha ka ciyaarta. Waxa ay ku guulaysteen inay sameeyaan Daaquud dadka noloshooda beddela, loo dhafro daraadood, loo noolyahay daraadood. Daafaha adduunkaa looga imaanayay si ay u dhagaystaan Ummu-kultuum, bil kasta khamiista ugu horraysa kulan ay carab oo idil timaaddo baa dhici jiray, khaliijiyiintu diyaarado ayay ku imaan jireen si ay u qabsadaan kuraasta u dhowdhow Ummu-kultuum, shacabka Masarna habeenkoo idil bay dhagaysan jireen heesaheeda, waxay ahayd habeen muqaddas ah. Sidaa darteed, markii uu joornaalka Observer ee Ingiriiska kasoo baxa cadad ka mid ah ku soo daabacay in Jamaal Cabdi Naasir uu laba tiir cuskan yahay: midi waa Sheekhul Azhar, midka kalena waa Ummu-kultuum, joornaalkaasi been ma sheegin.

Waa hubaal in maalintaas Sheekhul Azharku diinta mageceeda ama Islaamka magiciisa wax ku saxiixayay, si dulmiga iya aabiga Cabdi Naasir uu u meelmariyo, dadkana magaca diinta ayuu ku daroogayn jiray ama ku seexin jiray, sheikh kasta ee Azhar soo mara ama Mufti kasta oo diinta ka iibsada ninka markaas xukumaya meesha uu joogo sidaas ayuu sameeya.

Tiirka labaad ee xukunka Cabdinasir cuskanaa waa midka uu jamaahiirta ama shacab-waynaha ku mashquulin jiray, si ay ugu sakhraamaan Ummu-kultuum iyo codkeeda, codkaasoo dhab ahaan ahaa mid gaar ah oo soo jiidasho badan, Allaah SWT ayaa fidno ka dhigay, si loo kala ogaado inay isaga adeecayaan ama Ummu-Kultuum ay caabudayaan, dadkiina waa ay ku dheceen imtixaankii.

Waa hubaal in daaquudka fanka uu yahay mid aad u wayn, dadkana si xooggan u harqiyay, waxaan arkaynnaa in maalin kasta ay ku guulaysanayaan dhidibbo-u-aasidda fanka iyo sare u qaadidda qooqiisa. Waxaad arkaysaa dhallinyarada iyo dadka oo jilayaasha ka dhiganaya miisaalka noloshooda ay kaga dayanayaan. Dhaqaaq kasta ama labis kasta ama tima-jarasho kasta ee uu sameeyo fannaanku waxay noqonaysaa ilbaxnimo, waxayna ka noqonaysaa "Moodo", ama horumar iyo casri meel kasta ee dunida ka mid ah.

Daaquudka moodada sidoo kale waa mid dadka dullaynaya, dadka moodooyinka sameeya ama hal abuura dhammaantood si buuxday u haystaan dadka. Sanad kasta ama xilli kasta waxay soo saaraan moodooyin cusub, dadkuna ma khilaafi karaan, sababtooah kii khilaafa waa dib-u-socod dambeeya oo faqri ah, oo aanan awood u lahayn inuu waqtiga la jaan qaado. Waxay ku ciyaaraan dadka, mar dharkii bay ciriiri ka dhigayaan marna way waasicinayaan, mar way gaabinayaan marna way dheereynayaan, markastana midda ay keenaan baa u fiican. Haddii aad qoftii dumarka ahayd ku tiraahdo: jirkaaga qari, waxay ku oranaysaa: moodadu sidaas ma aha mana khilaafi karo. Haddii sannad kaddib moodadu ay keento dhar dhaadheer, kuwii gaabnaa baa ceeb noqonaya oo qofna xiran karin, haddaba waxay qaawanaanta iyo labiskaba kaga amar qaadanaysaa ilaahyada moodada, ee dawaaqiidda ah, amarka Allaah ma qaadanayso, Allaah wuxuu leeyahay:

﴿ يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُلْ لِأَزْوَاجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَاءِ الْمُؤْمِنِينَ يُدْنِينَ عَلَيْهِنَّ مِنْ جَلَابِيبِهِنَّ ﴾ [الأحزاب: ٥٩]

“Nabiyow waxaad ku tiraahdaa xaasaskaaga, gabdhahaaga iyo haweenka mu’miniinta: ha ku dadeen korkooda jilbaabyadooda” (Al-Axzaab: 59)

Moodada iyo guryaha lagasoo farsameeyo waxay dadka ku leeyihiin: is qaawiya oo dibadda u baxa, waxay qaadanayaan wixii moodadu tiri. Haddaba waa kee macbuudku? Waa kee cidda la adeecayo? Allaah miyaa misa waa ilaahyadaan kale?

﴿ أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ ﴾ [الشورى: ٢١]

“Ma waxay leeyihiin shuruko u jideeyay diinta -xukunka- wax aanan Allaah idmin” (Ash-Shuuraa: 21)

Haddii aan sii dabagalno dawaaqiidda arlada joogta waxaynu arkaynaa inay aad u fara badanyihiin, dhammaantoodna ay nolosha dadka u beddelaan hadba sidii ay doonayaan. Sidaa darteed, Rasuulku wuxuu leeyahay SCW:

(تعس عبد الدينار وعبد الدرهم وعبد القطيفة وعبد الخميصة)[٥]

"waxaa hoogay addoonka diinaarka, addoonka dirhamka, addoonka katiifadda, iyo addoonka dharka"

Sababtuna waa inuu caabudayo dirham iyo diinaar, iyo lacag iyo dhar, waxayna illowsiinayaan Allaah SWT. Dadka doonaya inay hantidooda badiyaan, har iyo habeen way ordayaan, meel walbay isaga kala gooshayaan, waxaa kaliya oo ay ka fakarayaan sidii ay heshiisyo ganacsi u soo saxiixan lahaayeen oo shaqada u sii badin lahaayeen, wax kale kuma mashquulayaan, waxaad arkaysaa inay ka seexanayaan salaadaha, xaaraanta iskama dhowrayaan haddii ay ka

[٥] رواه البخاري من حديث أبي هريرة -رضي الله عنه-.

hortimaaddo heshiisyada ama shahwooyinkooda, waxa dhabta ah ee ay caabudayaan waa dirhamka iyo diinaarka.

Astaanta ugu dambaysa ee astaamaha jaahiliyadda waa dhex-tiimbashada shahwooyinka. Dhex-tiimbashada shahawaadka waa arrin kale oo ka duwan raacitaanka hawada, hawoo idil shahwo ma wada aha. Waxaan uga golleennahay shahwaadka waa midda farjiga iyo midda caloosha. Labadaas shahwo gaar ahaan waa kuwa ugu badan ee jaahiliyaddu dadka ugu yeerayso, kaddibna kuna harqinayso. Waxaa dhici karta inay jiraan dad hawadooda u raacay si ay xukun ama mansib ama hanti u helaan, waxaa suura gal ah inaysan ku simbiririxanin shahwada farjiga ama caloosha, sababtoo ah shahwada madaxtinimada, jaaha, iyo awoodda waa shahwooyin ad-adag oo xoog badan, badanaa kuma mashquulaan oo isma raaciyaan dhextiimbashadda shahawaadka galmada, cunitaanka iyo cabitaanka.

Hawada oo la raaco wuxuu noqon karaa in dadka loo dajiyo wax uusan Allaah soo dajinin.

Shahawaadka oo lagu dhextiimbado waxaan ula jeednaa in loo dhaadhoco darajada xayawaanka, oo qofku hankiisu ahaado inuu xuduud la'aan dherjiyo shahwaddiisa farjiga iyo caloosha. Dawaaqiiddu waxay u arkaan fidinta iyo dhiirri gelinta shahwaadka inay tahay xayndaabkii ay ku ammaan heli lahaayeen, waayoo waa looga mashquulayaa, shahwaad bay dadka ka dharjinayaan, xorriyad buuxdana loo siinayaan, halka ay xorriyaadka kale oo idil ay u diideen. Waxaa la leeyahay "sidaadrabtaan u fasahaadiya, khamrada u cabba, u dhaqan xumaada, laakin siyaasad iyo dhaqaale haka hadlina, waa arrimo idinka waawayn, maslaxaddiinna annagaa idinka naqaan". Shahawaadka waa loo daynayaa siday doonaan ha ugu marqaameene; waayoo naftaa jecel dadkoo dhan baa u nugul inay si fudud ugu simbiriraxdaan.

Dawaaqiiddu waxay aad ugu tiirsan yihiin in dadku dhexmaquurto shahawaadka si bulshowayntu addoomo ugu ahaato iyo kuwa u dullaysan. Sidaa awgeed aad bay ugu dadaalaan inay shahawaadku iyo faaxishadu faafto si dadka looga hoggaamiyo calooshooda iyo farjiyaalkooda iyo shahawaadkooda.

Markii ay dadku shahawaadka addoomo u noqdaan, waxaa adkaanaysa inay xaq doon isu taagaan ama baadil diidaan. Dawaaqiiddu had iyo goor waxay ku handadayaan: haddii aad na adeeci waydaan waxaan idinka goynaynaa shahawaadka, markaasay degdeg ugu laabanayaan, sida daroogiiste loo diiday maandooriyihii, dawaaqiiddu aad bay ugu dadaalaan inay faaxishadu faafto. Sidaa darteed waxaa ka mid ah astaamaha bulshada muslimka ah inaysan faaxishadu faafin, astaamaha bulshada gaalada ama jaahiliga ahna waxaa ka mid ah inay faafto faaxishadu.

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يُحِبُّونَ أَنْ تَشِيعَ الْفَاحِشَةُ فِي الَّذِينَ آمَنُوا لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ وَاللَّهُ يَعْلَمُ وَأَنْتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴾ [النور: ١٩]

"Kuwa jecel inay faaxishadu ku dhex faafto muu'miniinta waxay leeyihiin cadaab kulul adduun iyi aakhiraba.Allaah ayaa garnaya, idinkuse ma garanaysaan" (Al-Nuur: 19)

Taasina waa astaan ka mid ah astaamaha bulshada jaahiliga ah; inay jecelyihiin inay faaxishadu dadka ku dhex faafto.

Habeennada Ramadaanka ayey aad u bataan barnaamijyada fasahaadinta, markii la afuraba say u billaabato, ilaa heer qofku uu ka baxo dareenka soonka iyo farxadda afurka. Wuxuu qofku afurayaa isagoo daawanaya dumar ciyaaraya, raadkii soonku noloshiisa ku reebi lahaa halkaasuu ku tagayaa, waaba haddiiba uu wax faa'idaystay. Barnaamijta telefishinka, kuwa

shaneemooyinka iyo musalsallada way sii laballaabmayaan ilaa salaadda subax laga gaarayo, ama afar iyo labaatan saac, si dadku ay joogto u dhex-tiimbanaadaan, iyadoo laga baqayo in Ramadaanku uu ku reebo in yar oo Allaah ka cabsi ah, ama u laabasho Allaah, sidaas darteedna quful aad u wayn bay ku dhufanayaan irriddaas.

Kontomeeyadii iyo lixdameeyadii waxaa gaar ahaan bisha Ramadaan ka imaan jiray Yurub kooxo anshax xun oo qaawan, waxaana ku biiri jiray fanaaniinta raqsiga ee degaanka sida kooxda Ridaa iyo kooxda Qaranka, waxaa dhinacyada masaajidka taraawiixda lagu tukanayo looga samayn jiray khaymado waawayn, dadku markey masaajidda ka soo baxaan waxay geli jireen khaymadaha. Waxaa looga golleeyahay si aysan ruuxdooda iyo quluubtooda ugu harin in yar oo nadaafad ama Alla ka cabsi ama khushuuc ah, iyo si aanan loo helin fursad yar oo lagu tadaburo aayadahii iyo Qur'aankii lagu tukanayey, si jawiga iimaanka looga fogaado had iyo goor.

Waxaannu arkaynnaa in jaahiliyaddu iyo dawaaqiidduba ay aad ugu dadaalaan in fuxshigu faafo, dadkuna dhextiimbadaan shahawaad. Sidaa awgeed, markii uu Jamaal Cabdi Naasir doonay inuu dadka ku diro Ikhwaanka sanadkii 1965, wuxuu yiri waxay qorshaynayeen inay dilaan Ummu-kultuum, Maxamed Cabdi Wahaab iyo Cabdilxaliim Xaafid (oo ahaa fanaaniin). Dabcan arrin aad ugu wayn bay ahayd Masaarida, mana ay cafiyeen waligood qof 'xiddigahaas' xumeeya, waxay ku adkeyd sida ay u noolaan karaan haddii ay dhintaan xiddigahaas? Markii uu geeriyooday Cabdilxaliim Xaafid waxaa murugo awgeed is dilay gabdho badan. Wuxuu Jamaal Cabdi Naasir ku tilmaamay fanaankaas "Hanti Qaran" sababtoo ah wuxuu ahaa mid heesahooda kuadkeeya xukunkiisa,kuna faafiya hantiwadaagga

Intaasi waa astaamaha jaahiliyadda: astaanta koowaad: **Allaah oo iimaan sax ah aan la rumeyn**; Astaanta labaad: **raacitaanka hawada**; Astaanta saddexaad: **Daaquudka oo la caabudo**; Ugu dambayn astaanta afaraad: **ku dabaalashadda shahawaadka**. Dhammaan jaahiliyaadkii taariikhda soo maray way wadaagaan afartaan astaamood,midna kama baxsan. Waxaa jira astaamooyin kale oo ay jaahiliyad kasta gaar la tahay oo ay uga duwan tahay kuwa kale, dib baanseuga hadli doonnaa insha Allaah.

## Dawnimada dhismaha Mujtamaca Muslimka

Kaddib markii aan ka soo hadalnay jaahiliyadda iyo waxa la xiriira oo ah qeexiddeeda,tilmaamaheeda iyo waaqaceeda…Waxaan halkaan ug hadleynaa tasawurka Islaamka waayo dhalasha mujtamaca muslimka iyo jiritaankiisa wuxuu xiriir qoto dheer la leeyahay tasawurka Islaamka iyo ka fogaashaha tilmaamaha jaahiliyadda

Marka aynu ka hadlayno dhalashadda bulshada muslimka ah waxaa lagama maarmaan ah inaan ka hadalno dhidibbada asaasiga ah ee ay ku taagantahay bulshadu.

### Jaahilyaddu baadil bay ku dhisan tahay?

Waxaan horay u soo sheegnay in jaahiliyaddan **(Marba haddii jaahiliyadu aysan ahayn "aragti" mutuxan oo qura, ee ay ka dhex muuqanayso isu-imaatin bulsheed sida aanu soo aragnay, haddaba, isku dayga in la suuliyo jaahiliyadaas, dadkana mar kale Allaah loo celiyo, ma aha – waxbana tari mayso – inuu isku-daygaasi ka soo dhex muuqdo "aragti" mutuxan. Markaasi noqon maayo mid u babac dhigi kara jaahiliyadda dhidibbadu u aasanyihiin ee mujtamac dhaqaaqaya ka soo muuqata, iskaba daa inuu ka sare maree. Sida laga doonayo mar haddii la doonayo in la suliyo jiritaan dhisan, oo lagu beddelo mid gebi ahaamba ka duwan, oo dhinac walba ku khilaafsan, dabeecaddiisa iyo manhajkiisa,**

**usuushiisa iyo furuucdiisa intaba. Waxaase lama huraan ah in isku-daygaani cusub ka dhex muuqdo dhaqdhaqaaq mujtamac isu-tagtay, oo aragti iyo nidaam ahaan, iyo xiriir hoosaadka intaba uga xoog badan bulshada jaahiliga ee taagan).**

Jaahiliyadu waa mujtamac xubnaheedu u idil yihiin, kana kooban canaasiirta ay mujtamac ka koobanto, waxaana ka dhexeeya xiriirro iyo hiillo, sidoo kale waxa ay ku mintidaan, ku dadaalaan, kana difaacaan khatar kasta oo ku fool leh, waxay u huraan wax kasta qiimo leh si ay u ilaaliyaan jiritaankeeda.

Haddaba, waxaa ina hor yaalla jiritaan dhab ah, ee ma aha fikrad qayaxan, oo qoraal ama aragti kaliya ku taagan, ee waa isbahaysi maaddi ah oo leh xubno aaminsan fikraddooda, taas oo ay ku dhaggan yihiin, difaacayaan, ku dhaqmayaan akhlaaqdeeda.

Waxaa halkaa inooga cad in islaamku aanu ku kaaftoomi karin inuu noqdo fikrad qayaxan,mar haddii Islaamku u yimid inuu dunida ka suuliyo jaahiliyadda, waana lama huraan inuu u dhismo qaab is-haysta oo xubnihiisu wadaagaan xiriirkacaqiiddada, Allaah kaliya oo addoomo loo noqdo, shareecadiisa kaligeed oo loo xukun tago, shareeco kasta ee kalena la diido, iyo jiritaankaas oo la difaaco. Taasi waa marag ma doonto, umana baahna daliil iyo caddaymo. Haddaba, bulshada islaamka ee ku dhisan Allaah rumayntiisa, ma suurtowdo inuu qaab fikrad qayaxan ahaato, ee waa hubaal in uu ahaado ruux nolol galisa bulshada muslimka ah, kuna dhalisa adkeysi iyo hore u socosho si meesha looga saaro jaahiliyadda.

Hor iyo horraanba, jiritaanka jaahiliyadda iyo waxay ku taagan tahay oo ah fikrado, ictiqaad, dhaqan, akhlaaq, nadaam, xeerar iyo calaaqaadba sharci maaha, xaqna uma laha inay jirto sidaa darteed waa waajib in la baabi'iyo.

Haddaba isku dayga uu mujtamaca muslimku isku dayaayo baabi'inta jaahiliyadda kama imaanin sunnada loollanka iyo hardanka ummadaha ka dhexeeya oo kaliya, bal wuxuu isku daygaasu ku dhisan yahay in mujtamaca muslimka ah iyo dowladdisuba ay masuul ka yihiin sugitaanka Ilaahnimada Allaah uu dhulkaan kaligii ka Ilaah yahay , lana oggolaan karin in Ilaah aan Allaah ahayn uu arladaan ka jiro , sidaa darteed jaahiliyaddu waa inay meesha ka baxdaa,iyo jiritaanka urur mujtamac kasta oo Allaah ilaahyo kale la caabudaya.

Iskudaygu maaha mid ay nagu bixinayso dano shakhsiyeed, mid dhaqaale, iyo mid maaddi ahba.Wuxuu ka tarjumayaa weertii uu ku yiri saxaabigii weynaa Rubciyi bin Caamir Allaah ha ka raalli noqdee Rustum hoggaamiyihii reer Furus : " **Allaah ayaa nasoo saaray si aan uga saarno qofkuu doono caabudidda addoomada una saarno caabudidda Allaah oo kaliya**"… Baabi'inta jiritaanka jaahiliyaddu waa waajib sharci ah waaqacuna keenayo , sababtoo ah jaahiliyaddu Allaah cidaan ahayn bay caabudaysaa, waxayna dadka ugu yeeraysaa saldanada Allaah midan ahayn inay hoos tagaan, dhalanteed xaqiiqada ka fog bay ku nooshahay , oo diiddan tahay Ilaahnimada Allaah, sidaasayna ku weysay sharciyadda jiritaanka

Bulshada muslimka ah haddaba waa mid rabbaani ah, amarka baabi'inta jaahiliyaddana wuxuu uga yimid Allaahii abuuray samada iyo arlada ee maaliggooda ahaa dhankiisa, si xaqu uu kaligii u taliyo, baadilkuna u baaba'o.

## Hardanka ka dhexeeya Xaqa iyo Baadilka

Baabi'inta mujtamaca jaahiliga ah iyo loollankiisuba kuma hirgali karaan fikrado kaliya oo lala yimaado , waxay ku suuroobi kartaa in la helo jiritaan dhammaystiran oo Islaami ah si uu awood ugu yeesho inuu waajaho mujtamaca jaahiliga ah sida ku cad sunnada loollanka iyo

hardanka daka ka dhexeeya ee uu Allaah jideeyay,  dadku way loollamayaan oo hadba dhinac isu jiidanayaan, waxaase lagama maarmaan ah in loollanku xaq ku dhisnaado, dadku u jihaadaan si ay kalimadda Allaah kor u ahaato , loollanka iyo hardanka ka dhexeeyo shaydaanka iyo Insaanka, awliyada Allaaha Raxmaanka ah, iyo awliyada shaydaanka si ay u kala baxaan kuwa runta sheegaya iyo kuwa beenaalayaalka ah

﴿ أَحَسِبَ النَّاسُ أَنْ يُتْرَكُوا أَنْ يَقُولُوا آمَنَّا وَهُمْ لَا يُفْتَنُونَ ﴾ [العنكبوت: ٢]

"Dadku ma waxay maleeyeen in loo daynayo inay yiraahdaan waan rumaynay iyagoo aan la imtixaanaynin" (Al-Cankabuut: 2)

Qaanuunka loollanka waa mid arlada ka jira, waana midda ay diiddantahay jaahiliyaddu, ama si kale haddii loo dhigo, si khaldan bay uga hadashaa. Jaahiliyaddu, Waxay mar walba isku daydaa inay dadka ku marin habaabiso inaan loollan jirin oo ay habboontahay in fikradaha kala duwani is ogolaadaan oo muwaafaqo dhexmarto isna dhegaystaan oo aan midkood midka kale meesha ka saarin ama diidinoo baabi'inin.

Waxaasuna sax ma aha, way jiraan arrimo ayadoo laysku khilaafsan yahay lawada noolaan karo ama lays aqbali karo, hase yeeshee hadduu khilaafku ka jiro xagga usuusha iyo ictiqaadka, qaanuunka xukuma waa loollan iyo hardan iyo inaan lays oggolaanin.

Jaahiliyaddu waa ay diiddantahay islaamka, islaamkuna waa uu diiddanyahay jaahiliyadda, mana suurtoobayso in waligood ay mar qudha wada kulmaan. Qaanuunka loollanka iyo is-riixriixataanku waa mid rabbaani ah, jaahiliyadduna way ogtahay, waxayse isku dayaysaa inay caammada iyo dadka wax magaratada ah ku marin habaabiso in Islaamku uu yahay kaligii kan diiddan ra'yiga kale   ee iyagu aysan cidna ra'yigooda diidaynin amaba tirtiraynin, Taasina waa beenta ay caanka ku tahay, sababtoo ah

﴿ وَلَنْ تَرْضَى عَنْكَ الْيَهُودُ وَلَا النَّصَارَى حَتَّى تَتَّبِعَ مِلَّتَهُمْ ﴾ [البقرة: ١٢٠]

"Kaama raalli noqdaan Yuhuud iyo Nasaara intaad ka raacdo diintooda" (Al-Baqara: 120).

Jaahiliyaddu dhammaanteed – gaalo iyo ahlu kitaabba – sinnaba raalli ugama aha inuu islaamku jiritaan yeesho. Iyaga dhexdooda raalli way iska noqon karaan, way wada noolaan karaan, laakin waxa aysan waligood raalli ka noqonaynin waa inuu islaamku dhexdooda ku noolaado. Arrintaasi waxaa ka hadlay Qur'aanka kariimka ah kolkii uu ka sheekaynayay jaahiliyadda iyo sidii ay u qaabili jireen ambiyadii iyo dadkii rumeeyay, iyagoo oranaya

﴿ لنخرجنكم من أرضنا أو لتعودن في ملتنا ﴾ [الأعراف: ٨٨]

"Dhulkeenna waan idinka saaraynaa ama diinteennaad u soo noqonaysaan" (Al-Acraaf: 88)

Qaanuunka loollanka iyo is-riixriixataanku waa mid dhab ah, mana aha inaan inkirno amase ka xishoonno inaan si bareer ah u caddaynno.Waa lagama maarmaan inaan ogaanno in Allaah SWT uu nagu kallifay inaan suulinno jiritaanka jaahiliyadda, iyo inaanaan aqbalin mid kastoo diidaya Ilaahnimada Allaah. Uma bannaana mu'miniinta muslimiinta ah ee awliyada Raxmaanka ah inay raalli ka noqdaan jiritaanka jaahiliyadda, balse waa inay suuliyaan haddii ay awoodaan, haddii ay kari waayaanna, waxa ugu yar ee ay la iman karaan waa inaysan xulufo la noqonin oo aysan u ictiraafin jiritaan sharci ah, inta uu Allaah ka idmayo suulintiisa.

Qaanuunka loollanka waa qaanuun dhab ah, ma aha muslimiintu inay ka qajilaan, amase ka leexleexdaan sheegitaankiisa; waxaa innaga naloo soo saaray si dadka aan uga saarno addoonnimada addoomada, oo addoomo Allaah uga dhigno, taasina waligeed dhici mayso iyadoo ay jiraan Ilaahyo kale oo dadka addoonsanaya. Ra'yi kaas ka duwan meel kuma leh arlada, waa laba midkood: xaq ama baadil. Arrintaasi waa lagama maarmaan in la fahmo oo maskaxda ay meel fiican ka dagto.

﴿ بَلْ نَقْذِفُ بِالْحَقِّ عَلَى الْبَاطِلِ فَيَدْمَغُهُ فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ وَلَكُمُ الْوَيْلُ مِمَّا تَصِفُونَ ﴾ [الأنبياء: ١٨]

"Xaqaanse ku gannaa Baadilka oo tirtira markaasuu tagaa. Waxaa idiinku sugnaaday halaag waxaad sifayneysaan" (Al Anbiya: 18)

﴿ وَقُلْ جَاءَ الْحَقُّ وَزَهَقَ الْبَاطِلُ إِنَّ الْبَاطِلَ كَانَ زَهُوقًا ﴾ [الإسراء: ٨١]

"Waxaad dhahdaa waxaa yimid xaqii waxaana tirtirmay baadilkii, baadilkiina wuxuu noqday mid la tirtiray" (Al Israa: 81)

Bulshada muslimka ah marka ay suulintan u howl galayso waxay ku suurta galaysaa in dadka loo celiyo Allaah SWT. Celintaasi – sida aan horay u soo sheegnayba –ka ratibmimayso islaamka oo fikrad kaliya ah, sababtoo ah markaasi ma noqonayo mid u babac dhici kara jaahiliyadda, aanan ku taagnayn fikrad kaliya, ee ku dhisan hay'ado, qawaaniin, sharciyo, ciidamo, xoogag iyo jiritaan dhammaystiran. Waa lagama maarmaan in islaamkuna yeesho jiritaan dhammaystiran oo leh kaabayaashiisa oo idil, balse ma aha inuu u dhigmo jaahiliyadda oo kaliyee, waaba inuu ka xoog badnaadaa, si uu awood ugu yeesho inuu ka sare maro.

**(mar haddii ay jaahiliyaddu ayan ahayn mid ku dhisan nadariyad oo kaliya balse ay tahay mujtamac dhaqdhaqaaq lehsidaan hore usoo sheegnay, marka laysku dayaayo in la tuuro oo dadka loo soo celiyo Allaah mar kalesax ma aha mana suurogelayso in iskudaygaasi ku taagnaado nadariyad oo kaliya, markaas oo kale waa iskuday aan u dhigmin wax ka qabadka jaahiliyadda ka dhisan xubno dad ah oo isku xiran oo nool, isku daygaasu waa inuu yeesho awood ka sarreysa nidaamka jira ee taagan si ay ugu suurowdo inuu tuuro oo meeshiisa keeno nidaam kale oo si walba uga duwan dabeecadda kii la beddelay).**

Waxaa intaas raacda in haba yaraatee aysan jirin wax isu-ekaansho ama shaabbahaad oo ka dhaxaysa islaamka iyo jaahiliyadda, hay'adaha islaamka iyo kuwa jaahiliyadda, qiyamka islaamka iyo qiyamka jaahiliyadda, ama dadka muslimiinta iyo dadka jaahiliyiinta ah. Waxaa jira kala duwanaansho buuxda dhexdooda, haddii ay xataa wadaagaan qaab dhismeedka jirka bani'aadamka, waxaa ay ku kala duwanyihiin wax kasta. Waxa ay ku kala duwanyihiin dabeecadooda, manhajkooda, arrimohooda guud ahaan iyo gaar ahaamba.

**(Waa in iskudaygaas cusub ku yimaadaa xubno isku xiran oo ka awood badan jaahiliyadda, dhanka qawaaciddisa nadariga ah iyo xiriirradiisa iyo isku xirnaantiisa)**

Arrin kalaa jirta oo ay tahay in ay jalleecaan kuwa doonaya in ay islaamka mar labaad oogaan oo ay dib u billaabaan howsha.Si loo suuliyo jiritaanka jaahiliyadda waa in isu-taggoodu ka itaal roonyahay isu-tagga jaahiliyadda dhinacyadafekerka.Macnaha inay si cad u fahamsanyihiin waxa ay ku taaganyihiin, oo ay fikraddaasu u cadcaddahay maanka qof kasta oo ka mid ah isutagga islaamka. Waa inaysan noqonin fikraddu mid dahsoon ama maldahan ama kooban, ee waa in askari kasta ee ka mid ah ciidanka islaamka iyo xubin kasta ee ka mid ah isutagga xarakiga ah ee islaamka uu si qota dheer oo baaxad wayn u fahamsanyahay fikradda islaamka, iyo waxyaabaha ay keensanayso, waa inay u caddahay fikradda Ilaahnimada halka

ah iyo addoonnimada buuxda, iyo waxyaabaha cadcad ee ka dhalanaya intaba. Asbaabaha xoogga waxaa ka mid ah in bulshada muslimka ahi ay muhimmaddeeda garanayso, si qof kasta oo iska qayliyaa uusan uga qasin fahamkeeda oo shaki uga galin waxa ay ku taagantahay. Waxaa lagama maarmaan ah in qaaciddada fikriga ah ee isutagga xarakiga ah ee islaamku ay aad ugu caddahay dadka diintan u nool.

Sidaa awgeed, mas'aladani waxay u baahatay saddex iyo toban sano laga hadlo, si dhidibbada loogu aaso tiirarka islaamka, oo ay kooxda rumaysay ee Maka joogta u tarbiyowdo, si macnaha "Islaamka', "Towxiidka", "Shirkiga" iyo qaababka muuqda ama dahsoon ee "shirkiga" ay u fahamto, iyo si ay qaacidada towxiidka khaalis ugu noqoto. Intaa markay heleen dabadeed, ayuu Allaah idmay in qaaciddadaas arlada laga oogo, iyadoo barashadii Allaah ay sideedii u sii socotay.Waxaa dadka la barayay macnahaIlaahnimada halka ah iyo macnaha addoonnimada buuxda, waxaa looga digayay shirkiga, kufriga, nifaaqa, shakiga iyo iskhilaafka. Ujeeddada waxaasoo idil waxay ahayd si kooxda rumaysay iyo ummadda islaamkuba ay isugu tagto saldhig ama qaaciddo fikri ah oo ka xoog badan kana sugan qaaciddada fikriga ah ee jaahiliyaddu ku taagantahay, iyo sidoo kale si ay isugu taagto qaaciddo nidaameed ama maamul oo ka adag amase ka xoog badan isutagga jaahiliga ah

Tani waxay keensanaysa in cilmi, la noolaasho iyo faham loo yeesho dhammaan wasiilooyinka maamul, maarayn, iyo nidaaminta ee jira xilliga markaas ay jamaacadu nooshahay iyo marxaladda ay la jaanqaadayso. Waa lagama maarmaan in muslimiintu ay qaataan dhammaan hababka nidaaminta, maaraynta, taatikada iyo tiknoolojiyadda ka yeelaysa nidaamkooda mid ka xoog badan, ka xeel dheer kana nidaamin badan jaahiliyadda, Waa arrin aad mihiim u ah, kana mid ah asbaabta awoodda.

﴿ وَأَعِدُّوا لَهُمْ مَا اسْتَطَعْتُمْ مِنْ قُوَّةٍ وَمِنْ رِبَاطِ الْخَيْلِ ﴾ [الأنفال: ٦٠]

"U diyaarsada wax kastoo aad awooddaan oo xoog ah iyo fardaha darban" (Al-anfaal: 60)

Waxaa lagama maarmaan ah in la qaato dhammaan asbaabta awoodda keenaysa, si dhab ahaan looga awood roonaado nidaamka jaahiliga ah, fikrad ahaanna inaan ka wacyi sarraynno, iyo sidoo kale cilaaqaad iyo isku xirnaanna aannu kaga awood badinno. Waxaa loo baahan yahay in xiriirradaasi ahaadaan kuwo aad u qoto dheer oo iskukeen tolaaya kuna dhisan is jacayl khaalis ah, is bahaysi saafi ah, daacadnimo iyo naf-isu-hurid. Sidaasuu mujtamaca Islaamigu ku dhismayaa kuna ahaanayaa mid ku xoog badan dhanka afkaartiisa, nadaamkiisa, iyo xiriirradiisa sidoo kale akhlaaqdiisa. Wuxuu ahaanayaa xubno isku xiran oo meel walba uga sarreeya jaahiliyadda.

## Saldhigga Islaamku waa Laa Ilaaha Illallaahu

**(Saldhigga aragti ama fikrad ee islaamku ku taaganyahay, tan iyo intii bani'aadamku jiray, waa: saldhigga "Shahaadada "Laa ilaahaIllallaah", oo ah in Allaah SWT loo keli yeelo Ilaahnimada, Rabbinimada, suldaanka iyo xukunka, waana in ay siwaafi ah uga muuqataa qofka caqiidadiisa, cibaadadiisa, iyo sharciga uu ku dhaqmo. Haddii aanan shahaadada sidaas dhamaystiran looga helin, oo qofka si dhab ah noloshiisa uga muuqanaysa, ma noqonayso mid lehjiritaansharci ah, qofkuna ma noqonayo muslim).**

Haddii aynnu halkan soo gaarnay, waxaynnu soo gaarnay halka ugu khatarsan kitaabkan, waa kolka laga hadlayo "Laa ilaaha Illallaah". Ma aha kaliya halka ugu khatarsan kitaabka, ee waa halka ugu khatarsan jiritaankoo idil, waa arrinta Ilaahnimada Allaaha oo kaliga ah.

Si kasta oo ay tahay weyninka iyo khatarta qaddiyaddan iyo ahmiyaddeeda gaarka ah ee jiritaanka ay ku leedahay, misana waa qaddiyad aad u cad una fudud. Sidaas bayna had iyo goor qaddiyadaha waawayn u yihiin kuwa cad oo marag ma doonto ah, waxaana astaan u ah mar kasta caddaantaas dadka u khuduucayaan oo ayan ka murmi karin xataa haddii ay diidaan inay u hoggaansamaan.

Qaaciddadan fikriga ah ayuu ku taaganaa islaamku taniyo intay soo billaabatay taariikhdii bani'aadamka. Taasi micneheedu waa in laga billaabo sidii nabi Aadam loo abuuray ilaa qofka ugu dambeeya ee arlada ku nool ay tahay inay noloshoodu ku taagnaato qaddiyaddan halka ah, waa isla Qaddiyadda ay anbiyadu dhammaan la yimaadeen, laga soo billaabo Aadam illaa laga soo gaaro Muxammad SCW oo ugu dambeeyay anbiyada. Waa hal qaddiyo, waa hal dacwo, waa hal farriin, oo dadka ugu yeeraysa inay hal Ilaah caabudaan, hal dariiqna qaadaan, kaasoo ah siraadkii Allaah ee toosnaa.

Shahaadada "Laa ilaaha Illallaah", Allaah oo loo keli yeelo Ilaahnimada, Rabbinimada, suldaanka iyo xaakimnimada, ha ahaato damiirka qofka caqiiddo ahaan, ama cibaadaysigiisa ha noqdeen, ama shareecadiisa iyo qawaaniintiisa, waa inay sidaas u baaxad iyo gude waynaato. Haddii aanan sidaas dhamaystiran lagu helinna, ma noqonayso mid jirta oo sharciyad u leh jiritaan, sifaalahaan haddii la waayo qofku muslim siima ahaanayo, si kasta ha u sheegto qaabkastana ha u labisto.

Waa Qaddiyadda aan doonaynno inaan muddo dheer isdul taagno. Muxuu yahay macnaha ka dambeeya in shahaadadan ay tahay qaaciddada fikriga ah ee ay ku taagantahay dacwada islaamka taniyo intii ay taariikhda bani'aadamku soo jirtay.

Macneheeda haddii la soo koobo; Allaah SWT bani'aadamka uma abuurin inay caabudaan oo waxidaan mooyaane, anbiyada iyo rususha dhammaantood wuxuu u soo diray oo kutubtiisa oo idil u soo dajiyay inay ugu yeeraan qaddiyaddan oo kaliya; qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah". Haddaba, qaddiyaddani waa inay heshaa daryeel buuxa, daryeel iyo danayn gaar ah oo aan lala wadaagin, taasina ka hor imaan mayso howlaha kale ee bani'aadamka, himilooyinkiisa iyo baahiyihiisa, sababtoo ah daryeelka iyo danaynta qaddiyaddan la siiyo ayaa quudinaya oo dardar gelinaya howlihiisa kale ee ma burinayo. Ma jirto qaddiyad ayada la mid ah qaddiyaddaan ama is garab taagi karta oo mudan inuu qofku isku mashquuliyo, balse qaddiyad kastoo aadanaha khusaysa waxay farac ka tahay qaddiyaddaan.

Haddaba, marka aynnu leennahay taariikhda Aadanaha iyo noloshiisaba waxay ku taagnayd qaddiyaddan, waxaannu si cad uga dan leennahay inaysan bani'aadamka u bannaanayn inay daneeyaan qaddiyad kale ka hor inta aysan ka dhammaan oo meel ka gaarin qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah". Markii ay bashariyadu gaarto aragti cad oo bisil iyo wacyi damiirka ku sugan oo ku aaddan qaddiyaddan, daboolayana nolosha bani'aadamka oo idil, dhammaan qaddiyaddaha kale way hir galayaan, iyagaana iska xallismaya, sababtoo ah qaddiyadahaasu ka hor imaan maayaan waxy dalbanayso ama keensanayso "Laa ilaaha Illallaah".

## Sidee buu Manhajka Anbiyadu u qaadaadhigay Qadiyaddaan?

Hayeeshee, sidee baa lagu bartaa qaddiyaddan? Waxaa jira laba dariiq oo(ay dadku u maraan fahamka qaddiyaddan) lagu barto qaddiyaddan; midi waa midka keliya ee saxda ah; midka kalena waa jidad fara badan iyo manaahij kala duwan oo dhammaantood aanan horseedayn in la gaaro aragtida saxda ah ee "Laa ilaaha Illallaah".

**Dariiqa koowaad**: dariiqa anbiyada; anbiyada waa rususha Allaah u soo diray bani'aadanka, waa macallimiinta dadka, waa kuwa u yimid inay dadka baraan xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah". Haddaba, ma bannaana in la dhaho waxaa jira manhaj ama dariiq kale oo u soo dhowaan kara manhajka anbiyada. Waxaa lagama maarmaan ah ducaadda islaamka iyo kuwa doonaya xarako islaami ah oo sax ah inaysan qaadin dariiq aanan ahayn dariiqa anbiyada. Waayo ikhtiyaar kama furna howshaas, waa waajib ay keensanayso dabeecadda qaddiyaddan dhinac marka laga eego,caqiiddada ayaana waajib ka dhigaysa dhinaca kale. Dabeecaddacaqiiddada ayaa keenaysa sababtoo ah rususha iyo anbiyada ayaa dadka uga aqoon badan qaddiyaddan, sidaa darteed, qofna uma bannaana marnaba in uu maleeyo inuu anbiyada ka fahmi ogyahay ama ka badiyo qaabka loo gaarsiiyo dadka oo loogu oogo arlada iyo waxyaaba ay keensanayso.

Waa waajib in dadku ugu horrayn anbiyada u qiraan in dariiqooda ay dadka Allaah ugu yeereen oo ay diinta Allaah ku oogeen oo xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah" ay ku xaqiijiyeen uu yahay dariiqa kaliya ee saxda ah, ee aysan qof caqli leh marnaba ku habboonayn inuu maleeyo inuu hindisi karo dariiq kale, ama wax ka beddeli karo – ku darid ama nusqaamin – wixii anbiyadu sameeyeen. Waa arrin ay keenayso dabeecadda mas’alada iyo qaddiyaddaba.

Dhanka ictiqaad ahaanna, rususha Allaah waa rusul la doortay oo Allaah u soo diray si ay kalimaddiisa dadka u gaarsiiyaan. Haddaba, in la khilaafo ama manhajkooda la beddelo waa deeqdii Allaah uu dadka siiyay oo la diiday, waa Allaah SWT oo lagu kufriyay markii uu qof diido inuu raaco tubtii anbiyada iyo rususha, sababtoo ah waa diidmo ku socota ciddii soo dirtay oo howshan u xilsaartay. Dariiqa anbiyada, haddaba, waa dariiq lagu aan hureyn oo ay tahay inay maraan horseedayaasha xarakada islaamka, waana inay ku dhagganaadaan qaab ahaan iyo nuxur ahaamba, hadal ahaan iyo ruux ahaamaba, iyo dhaqan ahaanba. Ma aha inay marnaba labalabeeyaan ama dariiq kale raadiyaan, ama suuraystaan in dariiqa anbiyada uusan dabooli karin dhammaan baahiyaha ducadda xilli kasta iyo meel kastaba. Dariiqa anbiyada ayaa ah dariiqa kaliya ee saxda ah. Dariiqa kale, magaca uu doono ha yeeshee sida dariiqa falaasifada, faalliyeyaasha, kaahinnada, iyo dawaaqiidda, dhammaan waa isku hal,waxayna qaadeen marinka baadida.

﴿ وَأَنَّ هَذَا صِرَاطِي مُسْتَقِيمًا فَاتَّبِعُوهُ وَلَا تَتَّبِعُوا السُّبُلَ فَتَفَرَّقَ بِكُمْ عَنْ سَبِيلِهِ ذَلِكُمْ وَصَّاكُمْ بِهِ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴾ [الأنعام: ١٥٣] .

“Kaasina waa jidkayga toosan ee Raaca, hana Raacina wadiiqaha oo idin la kala tago idinka leexiyo jidka Allaah. Sidaas ayuu Allaah idinkula dardaarmay, waxaa mudan tihiin inaad ka cabsataan” (Al-Ancaam: 153)

Tubta toosan waa dhabbaha Allaah SWT, waa siraadka anbiyada, dariiq kasta ee ka soo haraa waa mid qalloocan ama waddooyin qalloocan, siday doonayaan ha u ekaadeen kuwa ku socda dariiqyadaas. Falsafaddu,kuhaantu, iyo dawaaqiiddu waxay isku dayeen inay qabtaan howsha anbiyada.Waxaa kaloo isku dayeen mid kasta oo ku andacoonaya in uu aadanaha islaaxinaayo, laakin dhammaantood dadkii ayay ka weeciyeen siraadkii toosnaa, way baadiyoobeen dadkiina way baadiyeeyeen, way fogaadeen dadkiina way fogeeyeen.

Haddaba, haddii aan rabno inaan fahamno qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah" waa inaan dhinacna u dhaafin manhajka anbiyada, habka bandhigidda iyo caddeynta qaddiyaddan, sababtoo ah waa manhajka Allaah uu ka doonay anbiyada iyo rususha inay qaadaan si ay addoomadiisa iyo khalqigiisa u gaarsiiyaan wixii uu ka doonayey.

Bilowga qaddiyaddu waa halkan oo ah inaan fahamno, garanno, yaqiinsanno oo in yarna aan laga bayrin manhajka anbiyada ee soo bandhigista iyo fahmidda qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah".

Ka hor inta aanan ka hadlin manhajkan rabbaaniga ah waxaan leenahay – waana qaddiyad asal ah oo daruuri u ah kolka la baarayo qaddiyad islaami ah – waa lagama maarmaan inaan soo koobno dhammaan waxa ku soo arooray kitaabka Allaah, sunnada rasuulkiisa SCW, iyo jiilkii koowaad sidii ay u dhaqan galiyeen qaddiyaddan.Waa inaan soo aruurinno arrimahaasoo idil, ka dibna aan baarno, misna eegno waxa ka dhasha isku daygaas. Waxaa habboon in aan Qur'aanka ugu horrayn wax ka qaadanno, ka dibna u geynno wixii rasuulkeennu SCW yiri isaga oo fasiraya, sababtoo ah taasi waa howshiisa

﴿ لِتُبَيِّنَ لِلنَّاسِ مَا نُزِّلَ إِلَيْهِمْ ﴾ [النحل: ٤٤]

"Inaad u caddeyso dadka wixii loo soo dejiyay" (Al naxl: 44)

Intaa ka dibna aan eegno sidii saxaabadu ay u fahmeen arrinkan iyo sidii ay noloshooda ugu dabbaqeen. Haddii aynaan sidaa yeelin waxaan noqonaynaa kuwa ka gaabiyey qaddiyadda fahamkeeda iyo caddaynteeda, qaaciddadaas asalka ah waa mid muhiim ah oo aan laga maarmin.

**Arrinta labaad**: Qur'aanka waxaa ku soo arooray "Muxkam iyo Mutashaabih", sidoo kale sunnada labadaba waa laga helayaa, haddii lagu qiyaasana dadka hadalkoodu wuu leeyahay muxkam iyo mutashaabih. Qaaciddada halkan waa inuu muxkamku xukumayo mutashaabiha, isla markaana uu noqonayo tix raac iyo meel loogu noqdo wixii loo malayn karo mutashaabih. Dhab ahaanna, isu ekaanshuhu ma aha mid dhab ah, ee waa qaddiyadda oo laga jaahil yahay iyo iyada oon lagu xirin asalkeeda. Hadallada iyo ereyada qaar – ha ahaadeen Qur'aan ama xadiis ama hadalka dadkee – ayaa mar marka qaarka u muuqanaya sidii inay is burinayaa ama isu eg egyihiin. Hase ahaatee, waa kuwa sugan dhab ahaan haddii lagu eego muxkamka, ma jirayo wax mutashaabih ah. Runtii waa lagama maarmaan inaan ogaanno in dhammaan waxa ku yimid Qur'aanka iyo sunnada ee aannu u suuraysanaynno inuu mutashaabih yahay, haddii aan u celinno asalkii iyo aayadihii muxkamka ahaa iyo axaadiistii kala goynaysay waxaan arkaynnaa in aayadaha isu eg eg uu ka suulayo mugdiga oo ay kuwa cad cad noqonayaan, sababtoo ah waxaa la saaray miisaan go'an oo cad.

Marka aannu ka hadlayno manhajka anbiyada waxaan oranaynaa ugu horrayn in: manhajkani uu la hadlaayo bani'aadamka guud ahaantiisa, ee lama hadlaayo qayb ka mid ah qaybihiisa sida ay yeelaan manhajyada kale. Falsafaddu waxa ay la hadlaysaa caqliga bani'aadamka, intiisa kale way iska indha tiraysaa; suufiyada iyo rahbaaniyaddu waxa ay la hadlayaan dareenka qofka, intiisa kale way iska indha tirayaan; qolyaha (falaadka iyo kutiri kuteen wadwada) waxa ay la hadlaan fikradaha iska soo horjeeda ee bani'aadamka, wax goonni ah ma taabtaan. Sidaa darteed, waxaan arkaynnaa qofka wax ka qaata falsafadda ama qolyaha dareenka abbaara ama (falaadka iyo kutiri kuteen wadwada)waa hubaal inuu baadiyoobayo baadi fog. Dhammaan waxa uu bani'aadamku ka dhaxlay falsafadda iyo wixi la mid ah waa sooyaal baadiyaysan oo is burinaya, wuxuu taabanayaa qaybo ka mid ah xaqiiqada si uu u foolxumeeyo ama u kala googooyo, waligiisna uma soo gudbiyo xaqiiqada waaqac is haysta oo is fasiraya oo dheellitiran. Bal waligiis xaqiiqada ma waafaqin amaba ma haleelin, xaqiiqda intay ku dul meeraystaan bay haddana gees uga baxaan oo dayoobaan sida mid diday oo wuxuu doonayay aad uga fogaada

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

"Dhabtii waan fududaynay Qur'aanka xusuusin darteed, ma jiraa mid waansama" (Al-Qamar: 17)

﴿ هَذَا بَصَائِرُ لِلنَّاسِ ﴾ [الجاثية: ٢٠]

"Kaasi (Qur'aanka) waxa uu dadka u yahay aragti xujo ah" (Al Jaathiya: 20)

﴿ قل هذه سبيلي أَدْعُو إِلَى اللَّهِ عَلَى بَصِيرَةٍ أَنَا وَمَنِ اتَّبَعَنِي ﴾ [يوسف: ١٠٨]

"Dheh tan waa waddayda (xaqa ah) waxaana ugu yeeri (dadka) xaga Allaah anoo ku sugan xujo cad aniga iyo inta I raacda" (Yuusuf: 108)

Aragtida xeel dheer waa ku wajahnaanta insaanka guud ahaantiisa, wacyiga insaanka, caadifadihiisa, dareemadiisa iyo wax kasta oo insaanka ka yimaada. Arrimahaasoo idil ayuu la xaalaa manhajka rabbaaniga ah, wuxuu la hadlaa bani'aadamka oo idil, wuxuu la hadlaa caqligiisa, kaasoo ay la socdaan dareemadiisa, caadifaddiisa, khibradihiisa iyo himilooyinkiisa. Sidaa awgeed, caqliyadda(xujo toosnida) Qur'aanka waxay u tustaa insaanka oo idil si uu u baahi tiro, dhammaantiina ku ekeeyo kaah aad u ifaya iyo nuur daggan, qofku markuu ka bogto qowlka rabbaaniga ah – Qur'aanka wuxuu baxayaa isaga oo dareemaya negaasho iyo xasillooni

﴿ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ ﴾ [الرعد: ٢٨]

"Xuska Allaah ayay ku xasishaa qubuubta" (Al-Racad: 28)

iyadoo weliba sahlan oo fudud:

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

Sida aanu horay u sheegnayba, xaqiiqadu mar kastoo ay sii waynaato, waxaa loo soo bandhigaa sida ugu fudud uguna sahlan oo u bayaan iyo caddaan badan. Qorraxdu waa waxa ugu wayn ee uu bani'aadamku arko inta uu ku nool yahay arlada, sidaa darteed waa waxa ugu muuqashada badan intuu arko, dadkoo idil way yaqaanaan qorraxda, qof ifkeeda damin kara ma jiro, qof dabooli kara ma jiro, qofkii ula kac indhihiisa isku qabsada ama madixiisa daboosha mooyaane. Laakin haddii uu qofku si dabiici ah u eego waa hubaal inuu si yaqiin leh u arko qorraxda sida qofkasta ee arlada jooga u arko, waa xaqiiqo wayn oo aad u cad.

Qaddiyadda Ilaahnimadu waa mid aad u cad oo iftiin badan. Qof kasta ayaa dareemaya, qof ka shakiyi karaana ma jiro, sababtoo ah qof kasta wuu ogyahay inuusan isagu isa samaynin, naftiisa keensanin, ma abuurin mana yaqaan waxyaalaha ku hareeraysan siday u habaysan yihiin, mana oga sida isaga loo abuuray, xubnihiisu isugu dubbaridan yihiin oo isu fahamsan yihiin wada shaqaynina uga dhaxayso, bal ma awoodo inuu hakiyo ama joojiyo dhaqdhaqaaqyada gudahiisa ka socda amaba uu faro xubnihiisa inay falaan waxaan Allaah doonin.

Qofku hadduu caqli leeyahay, kuma adka inuu ogaado naftiisa inuusan samaynin, abuurinna,

.. ﴿ أَمْ خُلِقُوا مِنْ غَيْرِ شَيْءٍ أَمْ هُمُ الْخَالِقُونَ ۞ أَمْ خَلَقُوا السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ بَلْ لَا يُوقِنُونَ ﴾ [الطور: ٣٥-٣٦]

"Mise waxaa la abuuray abuure la'aan, mise iyagaa abuuray naftooda, mise iyagaa samaawaadka iyo dhulka abuuray, saas ma ah ee wax ma ayan yaqiinin" (Adh-Dhuur: 35-36)

Qaddiyaddaase aad bay u caddahay, aad bayna ugu dhowdahay qalbiga bani'aadamka, caqligiisa, dareemadiisa, iyo dhammaan xubnahiisa, waaqaddiyad marag ma doonto ah. Markii ay qaddiyaddu sidaa u fududdahayna uma baahna daliil wayn, umana baahna caqliga si dhib badan in looga shaqaysiiyo, ee waxaa ku filan qofku inuu hareerihiisa eego, si fudud uga fekero, wuxuuba is arkayaa isaga oo qanacsan oo rumaysan xaqiiqadaan bannaanka iska taal.

Qofku miyuu is moogaysiin karaa qorraxda?  xaqiiqada Allaahna waa sidaa, qofku ma awoodo inuu iska indha tiro. Dadka gaaloobayna uma gaaloobin inay arki waayeen ama dareemi waayeen xaqiiqadan, ee waa ay ka jeesteen, indhohoodana dabool ka saareen, sidii nabi Nuux Rabbigiisa uu ku yiri markuu xumaha qoomkiisa ka warramaayay:

﴿ وَإِنِّي كُلَّمَا دَعَوْتُهُمْ لِتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوا أَصَابِعَهُمْ فِي آذَانِهِمْ وَاسْتَغْشَوْا ثِيَابَهُمْ وَأَصَرُّوا وَاسْتَكْبَرُوا اسْتِكْبَارًا ﴾ [نوح: ٧]

"Markasta oo aan u yeero si aad ugu dambi dhaafto waxay farahooda yeelaan dhagahooda, maryahoodana way isku dadaan, wayna is weyneeyaan" (Nuux: 7)

Dadkaasi xaqiiqada way arki waayeen sababtoo ah indhohooda ayay dabooleen, dhegohooda ayay awdeen, ee ma aha inaysan wax arkaynin ama wax maqlaynin. Xaqiiqada way yaqaanaan, gudohooda ayay xaqiiqadu gilgilaysaa, misana waxay isku dayayaan inay aamusiiyaan codkaas (codka dacwada) ee welwelka ku haya oo hurdada u diiday, maadaama uu ka hor imaanayo shahwadooda iyo hawadooda iyo shayaadiintooda. Dhab ahaan, xaqiiqada Allaah iyo inuu khaaliq yahay, Maaligga wax kastoo jira yahay, waa xaqiiqo caqliga fayow uusan ka doodi karin, ee waa nafta iyo qalbiga waxa wareeraya, oo jidka ka bayraya

﴿ فَإِنَّهُمْ لَا يُكَذِّبُونَكَ وَلَكِنَّ الظَّالِمِينَ بِآيَاتِ اللَّهِ يَجْحَدُونَ ﴾ [الأنعام: ٣٣]

"Iyagu kuma Beeninayaan laakiin Daalimiintu aayaadka Allaah bay diidayaan"
(Al Ancaam: 33)

﴿ فَإِنَّهَا لَا تَعْمَى الْأَبْصَارُ وَلَكِنْ تَعْمَى الْقُلُوبُ الَّتِي فِي الصُّدُورِ ﴾ [الحج: ٤٦]

"Indhuha kaliya ma dhacaan ee waxaa indha beela quluubta laabta ku jirta" (Al-Xaj: 46)

Qalbiga, oo ah halka uu iimaanku dago, barta wax ajiibta, meesha is dhiibitaanku ka dhaco, qalbigaas ayaa diidmada samaynaya, oo xaqa ka jeesanaya. Sidaa awgeed, manhajka islaamka iyo manhajka Qur'aanka waxay la hadlayaan gunta garashadda iyo xujada cad (Basiirah) Allaah ku abuuray dadka, garashaddasi waxay adeegsanaysa qalbiga sidii Allaah u abuuray, aragga, maqalka, iyo wax kasta oo abuurtiisa ka mid ah, si ay khaaliqeeda ku barato, kolkaasna ma awooddo inay ajiibto mooyee, sababtoo ah waxaa gudeheeda ku jira wax Allaah SWT xasuusinaya:

﴿ وَإِذْ أَخَذَ رَبُّكَ مِنْ بَنِي آدَمَ مِنْ ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَأَشْهَدَهُمْ عَلَى أَنْفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْ قَالُوا بَلَى شَهِدْنَا أَنْ تَقُولُوا يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَذَا غَافِلِينَ ۞أَوْ تَقُولُوا إِنَّمَا أَشْرَكَ آبَاؤُنَا مِنْ قَبْلُ وَكُنَّا ذُرِّيَّةً مِنْ بَعْدِهِمْ أَفَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ الْمُبْطِلُونَ ﴾ [الأعراف: ١٧٢-١٧٣]

"Xusuuso markuu Rabbigaa ka qaaday bani'adamka dhabarkooda ubadkoodii uuna marag uga dhigay naftooda, kuna yiri miyaanan Rabigiina ahayn, ooy dhaheen in aad Rabigeena tahay ayaan marag kacaynaa, in aydnaan dhihin maalinta qiyaame annagu waan hilmaansanayn kan,

ama aydnaan dhihin waxaa wax la wadaajiyey aabayaalkeennii mar hore anaguna waxaan nahay ubad ka dambeeyey oo miyaa no halaagi waxay ay faleen xuma falayaal"
(Al-Acraaf: 172-173)

Cudurdaarradan la aqbali maayo, waana lagu soo celinayaa dadkii la yimaada, maxaa yeelay moogeyaal maaha, jaahiliinna maaha, aabbayaashood inay raacaanna uma bannaanayn, sababtoo ah xaqiiqada way yaqaanaan. Haddaba, qaddiyadda Ilaahnimadu waa mid iska cad,

﴿ أَوَلَمْ يَكْفِ بِرَبِّكَ أَنَّهُ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴾ [فصلت: ٥٣]

"Miyuunan ku fillayn Rabbigaa inuu wax kasta marqaati ka yahay" (Fusilad: 53)

Allaah ayaana markhaati ka ah arrintaas sida aayaddu sheegtay.

Manhajka anbiyadu wuxuu la hadlayaa garashada sugan iyo xujada cad ee ah dareenka iyo wacyiga insaanka, garashadaasuna waxay xaqiiqada ula falgalaysaa si fudud oo toos ah, umana baahna qurxin, adkayn, iyo xardhid midnaba, waxay si fudud ula falgalaysaa xaqiiqada , maxaa yeelay xaqiiqada ayadaaba fudud oo nadiif ah una baahnayn in caqliga aad looga shaqaysiiyo, waa xaqiiqo dhow oo la taaban karo, aad u cad nafta aadanaha ku dhex cad, qofkiise dooni inuu ka jeesto, oo gaaloobo, xaqiiqdaas muuqata ee iska cad ka fogaanaya waa yeelkadiis.

Haddii aan doonayno inaan fahamno ama baranno xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah", waxaa kaliya oo noo furan inaan raacno manhajka anbiyada.

Haddii aannu eegno taariikhda anbiyada iyo qaabka Qur'aanku u soo bandhigay dacwadooda, waxaannu arkaynnaa in xujadoodu isku mid tahay, hadalkoodu isku mid yahay, ereyadoodu isku mid yihiin. Waaba isla ereyadiiba, nabi kasta oo bani'aadamka isa soo hor taaga wuxuu ku dhawaaqayay oo la bannaan istaagayay

﴿ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ ﴾ [الأعراف: ٥٩]

"Allaah caabuda ilaah aan asaga ahayn ma lihidine" (Al-Acraaf: 59)

Wuxuu qiraayay Nabi walba inuu isagu yahay insaan caadi ah oo wax dhib iyo dheef midna u awoodin. Qof kasta oo isa soo hor dhiga Qur'aanka oo idil, gaar ahaan suuradaha Acraaf, Huud iyo Shucaraa', waa suuradaha looga hadlay nabiyadee, wuxuu arkayaa inay hal luqad iyo hal hadal, iyo ereyo aad mooddo inay isla iyagii yihiin adeegsanayeen. Taasi waxa ay calaamad u tahay in xujada anbiyada ay mid kaliya tahay, ereyo fududna adeegsanayeen. (Allaah caabuda ilaah aan asaga ahayn ma lihidine). Anbiyadu waligood uma iman inay dadka u sheegaan inuu Ilaah jiro, ee waxa ay u yimaadeen inay yiraahdaan caabuda Ilaaha aad taqaanaan, oo aad ogtihiin inuu xaq yahay, ee fidradiinnu idiinkugu yeerayso, ee abuuritaankiinnu rumaysanyahay, ee waaqaca aad ku dhex nooshihiin ee arlo iyo samo iyo wax kastoo idinku hareeraysan waxay idin leeyihiin Allaah waa ilaaha xaqa ah, ee u soo laabta Ilaahaas, xaqiisa siiya, baadilkaas aad aaminsan tihiinna ka nasaha.

Anbiyadu uma iman inay dadka u sheegaan inuu Ilaah jiro, ama ay u caddeeyaan dadka inuu khaaliq jiro, taasi waa qaddiyad marag ma doonto ah oo ku beeran fidrada dadka, umana baahna caddayn dibadda ka timaadda ee waxa ay u yimaadeen inay dadka ku yiraahdaan: u soo laabta Allaah.

﴿ مَا لَكُمْ لَا تَرْجُونَ لِلَّهِ وَقَارًا ۞ وَقَدْ خَلَقَكُمْ أَطْوَارًا ﴾ [نوح: ١٣-١٤]

"Maxaad leedihiin ood Allaah uga cabsan weydeen weyneyn darted. Asagoo idin abuuray heerar idinkoo ah" (Nuux: 13-14)

Sidaas bay anbiyadu si aad u fudud dadka ugala hadlayeen qaddiyadda si ay ugu soo celiyaan xerada Allaaha kaligiis ah, si ay ugu caabudaan Allaah sidii uu ka doonayay inay u caabudaan.

Innagu baahi uma qabno falaasifada daldalankooda, umana baahnin ruhbaanta iyo suufiyada isku daygooda iyo talax taggooda, umana baahnin fataal badanayaasha waxay is jeclaysiinayaan.Laakin waxaannu u baahannahay inaan qaadno dariiqa toosan ee fudaydka ah ee xasillan xaqiiqada nagu gaarsiinaya qaabka ugu sahlan oo ugu cad sidii Allaah SWT uu na faray.

﴿ وَأَنَّ هَذَا صِرَاطِي مُسْتَقِيمًا فَاتَّبِعُوهُ وَلَا تَتَّبِعُوا السُّبُلَ فَتَفَرَّقَ بِكُمْ عَنْ سَبِيلِهِ ﴾ [الأنعام: ١٥٣]

"Kaasina waa jidkayga toosan ee raaca, hana raacina wadiiqaha oo idin ka leexiyaan dariiqiisa" (Al Ancaam: 153)

Allaah SWT markuu noo yasiray Qur'aankan:

﴿ وَلَقَدْ يَسَّرْنَا الْقُرْآنَ لِلذِّكْرِ فَهَلْ مِنْ مُدَّكِرٍ ﴾ [القمر: ١٧]

"Waan fududeynay Qur'aanka xusuus darteed, ma jirtaa cid waansamaysa" (Al-Qamar: 17)

## Rumeynta Allaah waa arrin Fidri ah

Qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah" sida aan erey ahaanteeda ka arkayno, waa anfin iyo sugid, Ilaahnimada ayaa Allaah wax kastoo ka soo hara laga anfinayaa, Allaah kaligii ayaana loo sugayaa. "Laa ilaaha Illallaah" waa Ilaahnimada oo Allaah lagu keli yeelo, oo cid kastoo ka soo harta laga xayuubiyo. Waa qaddiyad fudud, fahamkeedu fudud yahay, macneheedu fudud yahay. Maxaa loo keenay "Laa ilaaha Illallaah"? maxaa yeelay qaddiyadda Ilaahnimada waxay ku xiran tahay abuurista kownkaan, maarayntiisa iyo milkiyaddiisa intaba.

Allaah Ilaahnimada inuu mudan yahay waxay ku timid: Ilaah kale ma jiro, midka khaaliqa ah, maaligga ah, wax kasta oo kownka yaalla maamulaya mooyee, isla markaana ah midka wax dhiba, waxna dheefiya, wax bixiya, wax diida, nooleeya oo dila, haddaba ma jiraa cid Allaah sokadii ah oo samayn karta arrimahaasi?

﴿ أَإِلَهٌ مَعَ اللَّهِ بَلْ هُمْ قَوْمٌ يَعْدِلُونَ ﴾ [النمل: ٦٠]

"Ma Ilaah kale ayaa jira Allaah maciisa, balse iyagu waa kuwo xaqa ka leexanaya" (Al-Naml: 60)

Ma jiro Ilaah Allaah lagu laro. Maxaa yeelay xaqiiqooyinkan iyo calaamadahan iyo astaamaha waxaa si gaar ah u leh Allaah SWT, waxaa haddaba dabiici ah inuu kaligii leeyahay suldaanka, boqortooyada, iyo maamulka. Sidaan bayna shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" ku noqotay oraahda ugu runta badan taariikhda bani'aadamka iyo taariikhda kownkaba, sababtoo ah kuma qasmayso umana ekaanayso arrin kale ama xaqiiqo kale. Ilaah wax abuuraya ama wax maaraynaya ama nolol iyo geeri keenaya ma jiro Allaah mooyaane. Dadku markii ay leeyihiin waxaan markhaati ka kacaynnaa inuusan Ilaah jirin Allaah mooyee, waxa ay leeyihiin ereyga ugu runta badan, waxay ka markhaati kacayaan ereyga ugu weynaanta badan.Markhaatikacowaa ogaal iyo yaqiin. Qofka markhaati kacayaa waa inuu yaqiinsanyahay, aadna u yaqaanno waxa uu ka markhaati kacayo iyo waxa uu dadka ugu yeerayo. Qofka

cilmiga iyo yaqiinta lihi wuxuu ka markhaati kacayaa "Laa ilaaha Illallaah", sababtoo ah wuu ogyahay inuusan Ilaahnimadaas mudnayn Allaah mooyee, cid kalena aysan u qalmin isaga mooyee SWT.

﴿ قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ ۞ اللَّهُ الصَّمَدُ ۞ لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ ۞ وَلَمْ يَكُنْ لَهُ كُفُوًا أَحَدٌ﴾

“Waxaad dhahdaa Nabiyoow Allaah waa keli, (wehelna ma leh) waana sayid, Allaah wax ma dhalin, asna lama dhalin, wax la mid ahna ma jiro” (Al Ikhlaas: 1-4)

﴿ لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ وَهُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ ﴾ [الشورى: ١١]

“Wax la mid ah ma jiro, isagu waa kii maqal badan oo arki og” (Al Shuura: 11)

Kelinimadu waa in Allaah uu la keli noqday Ilaahnimada iyo sifooyinkeeda oo dhan, kaamilnimada, quruxda, weyninka iyo haybadda. Haddaba, shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" waxa ay ku dhisantahay cilmi yaqiin leh. Qofkii aanan aqoon macnaha Ilaahnimaduna markhaati kiciisa iyo hadalkiisu waa mid u nugul khalad iyo qallooc. Sidaa darteed, shardiga koowaad ee lagu xaqiijin karo "Laa ilaaha Illallaah" waa cilmiga, sababtoo ah haddii la waayo cilmi ku aaddan Qaddiyadda Ilaahnimada iyo addoonnimada, iyo Rabbi jira iyo makhluuq, oo aysan meelna iskaga ekayn, jiritaan ahaan iyo sifooyin iyo suldaan dhammaan, haddaan cilmigaasu jirin ma xaqiiqoobayso shahaadadan. Sidaa darteed wuxuu Allaah SWT leeyahay:

﴿ فَاعْلَمْ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ﴾ [محمد: ١٩]

“Ogow in aan Allaah mooyaane Ilaah kale (xaq lagu caabudo) jirin” (Muxammad: 19)

Waa shardiga koowaad ee ay shahaadadu ku dhaboobayso, inuu aqoon iyo cilmi u leeyahay qofku, ee uusan dad kaga dayanaynin, ee aqoon iyo cilmi uu u leeyahay ku oranaayo. Cilmigaas waa inuu la jiraa yaqiin, run ka sheegaa, daacad ka ahaado shahaadadaas, jeclaado shahaadadaas, aqbalo wax kasta oo ay keensanayso, bari' uu ka noqdo wax kasta oo ka hor imaanaya shahaadadaas. Waxaa shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" leedahay shuruuddan: cilmiga, yaqiinta, runta, daacadnimada, jacaylka, aqbalaadda iyo ka bari noqoshadda waxa ka soo horjeeda. Waa kuwaa shuruuddeeda, waana inay dhammaantood dhaboobaan. Dadka yaqaanna inuusan Ilaah jirin Allaah mooyee oo keli ah, misna aanan ka run sheegin, yaqiin iyo jacayl iyo aqbalaad u haynin, wixii ka soo horjeeda oo liddi ku ahna inkiraynin, kuwaasi cilmigoodaas wax qiimo ah ma leh.

Qofku markii uu shuruuddaas ku qiro "Laa ilaaha Illallaah", Allaah uga markhaati kaco Ilaahnimadiisa, iyo inuu kali la yahay abuurista, noolaynta, dilidda, dhibidda, dheefsiinta, wax siinta, u diididda, maamulka iyo boqortooyada, waxaa hubaal ah in qofka naftiisa ay ku soo dhacayso waajibnimada in Ilaahaasi uu lahaado dhammaan awoodaha. Iimaanku waa in la rumeeyo in awoodda uu Allaah kaligii leeyahay waana natiijo si dabiici ah uga dhalanaysa fahmidda xaqiiqada Ilaahnimada, qofkuna waligii uma baahanayo caddayn dibadda ah si uu u rumeeyo in cidda sifooyinkaan iyo awoodahaan iyo cilmigaan iyo jiritaankaan iska leh ay tahay in loo madax raariciyo oo loo hoggaansamo. Shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" waxa ay noqonaysaa mid macneheedu dhab ahaantii yahay in suldaan uusan jirin Allaah mooyee, iyo inaysan cid ka mid ah makhluuqaadkiisana suldaanka waligeed la sheeganin.

Qaddiyaddu haddaba marka laga baaro dhanka caqliga qayaxan waa mid marag ma doonto ah, oo caqliga bani’aadamku ku qasban yahay inuu aqbalo, waa haddii uu doonayo inuu xaqiiqada ogaado, umana baahna dadaal dheer iyo mid wayn toonna.

Fidrada bani’aadamka xaqiiqadan ayaa ka burqanaysa feker iyo u qasad la'aan. Haddii qof aad si kadis ah u waydiisid ma rumaysantahay Allaah? Ma oran karo Maya, sababtoo ah waa arrin ku beeran fidradiisa. Laakin haddii uu fekero wuxuu oranayaa: Maya, waan khaldanaa, sababtoo ah wuxuu doonayaa inuu ka horyimaado kana madax taago xaqiiqada, hayeeshee, fidrada si yaqiin leh bay u rumaysantahay xaqiiqada.

Waxaa la wada ogsoonyahay in Allaah oo la rumeeyaa ay tahay arrin caqligu keensanayo xataa haddii uu yahay caqli gaal ah, oo diidaya Allaah rumayntiisa iyo jiritaankiisaba. Shuuciyiinta sheeganaya inay raacsanyihiin 'manhajka cilmiga ah ee maaddiga' waxa loo yaqaanno, way qirayaan inay jirto "xaqiiqo" aanan bilow iyo dhammaad midna lahayn, laakin waxay leeyihiin xaqiiqadaasi waa "Maaddada – walaxda", maaddadu waa midaan bilow iyo dhammaad lahayn, jiritaankeedu mar uu soo bilowday ma leh, mana aha mid dhammaad yeelan doonta, mana aha mid la abuuray. Arrintaas ay sheegayaan waa sifada uu leeyahay Allihii kownkaan ahaysiiyay, ee jiritaanka u yeelay, isaga ayaan lahayn bilow iyo dhammaad, iyo wax la mid ah toonna. Laakin iyagu waxa ay raadinayaan wax aan marnaba suura gal ahayn, xaqiiqduna way u dhowdahay, iyaga inkasta oo ay rumaysan yihiin xaqiiqadaas soo jireenka ah waxay u tiirinayaan maaddada, inay iyadu wax walba abuurtay, awooddeeduna xad aysan lahayn.

Kuwaasi miyaan ahayn sifooyinka Allaah?! Ha yeeshee waxay leeyihiin waa maaddo indha la', dhaga la', af xiran, mayd ah, wax dareen ahna aan lahayn, maaddo sidaa ah ayay u tiirinayaan inay abuurtay makhluuqaadkan nool ee dhaqdhaqaaqaya, wacyigana leh. Waxa ay dadka ka codsanayaan inay wax aanan dhici karin rumeeyaan. Waxaan oranaynaa: bani’aadamku waa hubaal inuu ugu dambaynta xaqiiqadaan caqligalka ah soo taabanayo.Hase ahaatee, waa ay iska indha tirayaan arrimaha dabiiciga ah ay keensanayso, xaqiiqadaan soo jireenka ah waligeedna jiridoonta, ee abuurta wax kasta oo jira, waa hubaal inay ka sarrayso wax kasta oo jira, oo ay gaartay cirifka ugu sarreeya kaamilnimo dhammaystiran amaba sarrayn malaheenna aad uga sarreeya. Markaynu saa leenahay uma baahnin inaan ka amba qaadno "shakiga Diikaart ama shakiga falsafadda” oo weligood shakiga ka amba qaada.

Baahi uma qabno inaan shaki ka bilowno, sababtoo ah yaqiin baannu taagannahay. Mar haddii aan ognahay inaan jiritaan leennahay, kownka nagu hareeraysanna uu jiro, waxaan ka billaabaynaa barta yaqiinta. Shakiga Dikaart iyo shakiga falsafaddu waxa ay bani’aadamka ka dalbanayaan inuu wax walba ka shakiyo, oo naftiisa uu been u sheego, shakigaas ka dibna u tallaabsado dhinaca caddaynta jiritaankiisa, kaddibna uu caddeeyo jiritaanka ciddii jiritaanka samaysay, kaddibna caddaynta jiritaankan inuu yahay mid nusqaan leh, sidaa awgeedna ay lagama maarmaan tahay inuu ka soo hor jeedo jiritaan dhammaystiran oo kaamil ah. Annagu uma baahnin shakiga Diikaart iyo shakiga falsafada midna.

Waxa aannu yaqiinsannahay in kownkani uu yahay mid la abuuray, iyo dhammaan xubnaha uu ka koobanyahay, bani’aadam, xayawaan, dhir, ma noole, cir, dhul iyo xiddigo, waa xaqiiqo dhab ah oo aanan la mala awaali karin. Xaqiiqadani waxa ay si go'an u caddaynaysaa inuu jiro khaaliq abuuray kownkan, khaaliqaasina waa inuu yahay waligii jire abidna jiri doona, iskii u taagan, cidna aanan u baahnayn, cid kastaahina ay isaga u baahantahay, nusqaanna aanan yeelan karin, waligii kaamilka ah, waa arrin marag ma doonto ah oo caqliga, fidrada, iyo waaqacaba uga dhow wax kasta oo kale ee ay male-awaalayaan falaasifada baadiyaysan ee doonaya abuurista inay u tiiriyaan maaddo mayd ah, ama Allaah ku sifeeyaan inuusan naftiisa

mooyee wax kale aqoon u lahayn, Kuwaasi dhammaantood waa ay baadiyoobeen sababtoo ah waxay diideen waxyiga Allaah, waxayna cuskadeen caqligooda iyo hawadooda.

Dhinaca caqliga ku dhisan sidaan soo sheegayba uma baahna caddayn dibadda laga keeno, sababtoo ah waa arrin xaqiiqa ah. Xaqiiqada waynina bani'aadamka iyadaa khasbanaysa, ee isagu ma khasbi karo. Waa sida qorraxdaba ay noogu khasbayso inaan yaqiinsanno. xaqiiqada Ilaahnimaduna waa Sidoo kale– Allaah masaalka sare iska leh – waxa ay dhabnimadeeda, jiritaankeeda, iyo waynankeeda ku kallifaysaa qof kasta inuu garto, ka dib marka uu fahmo dhabnimadiisa inuu yahay qof nool wuu garan inuu yeesho Ilaah iyo khaaliq. Waa qaddiyad muran aanu ka furnayn

Qaddiyadda labaad: waxaa lagu soo koobi karaa in mar haddii Allaah uu yahay wax kastoo jira kii abuuray, maamulaya isla markaana iska leh, waa lagama maarmaan inuu suldaankana isagu yeesho. Waa xaqiiqo marag ma doonto ah, oo ay tahay inay ka dhalato haddii si dhab ah loo qiray sifooyinka Allaah iyo jiritaankiisa. Waxaa ku habboon bani'aadamka haddii aanan wax kutub ah loo soo dajinin laheyn, rusulna aanan loo soo diri laheyn, waxay ahaan lahayd inuu istaago oo qayliyo oo Rabbigii abuuray waydiiyo: Allihiii abuurayow, maxaad iga rabtaa? Allaah SWT wuu u naxariistay bani'aadamka wuuna ka ajiibay qayladaas uu khalqigiisa ka filayo, wuxuu soo diray rusul, wuxuu soo dajiyay kutub, si wixii uu ka doonayay uu ugu sheego iyo wixii loo abuuray, waa qaddiyad fudud. Waxay Rusushu u yimaadeen kutubtuna usoo degtay inay ajiibaan baahida qarsoon ee dadku ay dareemayaan haddii ay hareerohooda eegaan ee kownkan ballaaran ay ka raadiyaan kaalinta ay ku leeyihiin, kaddibna ay khaaliqooda su'aalaan. Rusushu haddaba waxa ay u yimaadeen inay xaqiiqada dadka u sheegaan, inta uusan shaydaan dadka uga hor marin oo xaqiiqada uusan ka fogaynin,

﴿ قَالَ فَبِعِزَّتِكَ لَأُغْوِيَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ﴾ [ص: ٨٢]

"Wuxuu yiri: cisadaadaan ku dhaartaye dhammaan waan baadiyayn" (Saad: 82)

Waxaa hadda lagama maarmaan noqotay in rusul la soo diro, kutubna la soo dajiyo, si dadku aysan Allaah xujo ugu yeelan rususha dabadeed. Rususha iyo kutubta dadka waxa ay u bayaamiyeen xaqiiqadan cad ee fidrada iyo waaqaca la socota, iyo arrimaha marag ma doontada ah, si aysan dadku shaydaan u dhagaysan. Xaqiiqadan marka caqli ahaan loo soo bandhigo, waxa ay shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" noqonaysaa baahi dabiici ah, waaqac ah, ahmiyad daruuri ahna u leh qof kasta oo naftiisa iyo caqligiisa ixtiraamaya, xaqiiqadana la dhaqmaya.

## Daliilka Sharciga ah ee kalinimada Ilaahnimada

Haddii aan u imaanno daliisha sharciga ah waa mid aad u fara badan oo waa Allaah mahaddiiye ay adagtahay in la tira koobo, Qur'aanku gabi ahaamba wuxuu ka hadlayaa xaqiiqadan. Haddii aannu doonno inaan sheegno xaqiiqadaan daliisheeda, waxaannu leennahay aayadaha Qur'aanka oo idil baa xaqiiqadan ka hadlaya, oo daliil dhammaantood u noqon kara. Haddaba uma baahnin hadalka "ahlul kalaamka" iyo daliilka falaasifada iyo culimadaba si aannu u garanno xaqiiqada Ilaahnimada. Qur'aanku bilow ilaa dhammaad waxa uu ka hadlayaa waa qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah". Waxaannu isku dayaynnaa inaan dhowr aayadood isa soo hor dhigno, waa ay badanyihiin, hase ahaatee kuwa ugu cad cad oo ugu ahmiyadda badan baannu eegaynaa.

Soo bandhigi maynno aayadaha ka hadlaya in Allaah uu yahay kii wax abuuray, taasi cid ka doodaysaa ma jirto, kana hadlimayno aayadaha oranaaya waa kii arzaaqda bixinaayey, dhib iyo dheefna lahaa. Wareerka bani’aadamka haystaa imminka wuxuu ka jira diidmada ay Allaah u diideen suldaankii uu ku lahaa naftooda, noloshooda iyo waaqacooda. Dhammaan awoodihiisa kale waa ay u qirsanyihiin, dood kama qabaan inuu isagu wax abuuray, arzaaqaayo, noolaynayo oo dilaayo, bixinaayo oo diidaayo, waxa kaliyoo ay diiddanyihiin oo ay ka hakanayaan waa qaddiyadda suldaanka iyo xukunka inuu Allaah kaligii leeyahay.

Aayadaha ku soo arooray in xukunka Allaah kaligii uu leeyahay aad bay u fara badanyihiin, aad bayna uga muuqdaan kitaabka Allaah SWT.

Ka hor inta aannan Qur’aanka galin waxaan baraarujinayaa in carabi kolkii Qur’aanku ku soo dagay, oo luqaddooda iyo aftahannimadoodii uu ku soo dagay xilli ay meel sare ka gaareen aftahannimada, Qur’aanku wuu la hadlay waa ayna fahmeen wax walba oo uu yiri, gaaladii iyo muslimiintii labaduba waa ay fahmeen wixii Allaah uu ka doonayay.

Imaam Mawduudi Allaah ha u naxariistee ayaa qaddiyaddan uga hadlay buuggiisa "Afarta erey Fure ee Qur’aanka “Musdalaxaad al-arbaca fil Qur’aan", wuxuu caddeeyay in gaaladu kolkii loogu yeeray "Laa ilaaha Illallaah" ay macneheeda ka fahmeen magan galin, badbaadin, jacayl, kalgacayl, hilow, madaxtinimo, is qarin iyo awood.

Qofka carabka ahi kolkii loogu yeero "Laa ilaaha Illallaah", wuxuu garanayay in rasuulkani u yimid inuu u sheego: Allaah SWT kaligii ku kooba jacaylka, hilowga, gargaar dalbashada, magangalyo doonka, isaga kaliya ayaa ah sayid, Rabbi, addoommadu isaga arki mayaan, isaguse wuu arkayaa wax walbana wuu gaarayaa, isaga wax gaarayaana ma ay jiraan. Hadalku wuxuu ahaa mid sahlan, cad oo fudud, sababtoo ah wuxuu ku socday dad heer sare ka gaaray aftahannimada, Qur’aankuna luqaddooda uu ku soo dagay isagoo heerkaas sare ku hadlaaya. Sidaa awgeed, wax dhib ahi kama ay jirin inay fahmaan carabtu waxa laga doonayay. Dhibku wuxuu ka jiray nufuustooda.

﴿ فَإِنَّهُمْ لَا يُكَذِّبُونَكَ وَلَكِنَّ الظَّالِمِينَ بِآيَاتِ اللَّهِ يَجْحَدُونَ ﴾ [الأنعام: ٣٣]

“Dhab ahaan kuma beeninayaan laakiin daalimiinta aayadaha Allaah ayey diidayaan”
(Al-Ancaam: 33)

Dhibka haysta ahlul'kitaabkana ma ahayn inaysan aqoon, sababtoo ah kutubtooda ayaa horay u sii sheegay nabiga khaatimka ah, magiciisa, sifooyinkiisa, astaamihiisa iyo meesha uu ka soo baxayaba waa ay sheegeen. Haddaba, kuwaasi kolkii ay gaalobeen jaahilnimo uma gaaloobin, ee kibir iyo santaag baa u geeyay.

Sheekada Abuu-Jahal iyo Xuyay Bin Akhdab si fiican baa loo yaqaan, labaduba waa ay qireen naf ahaantooda in nabi maxamed uu nabi yahay.

Abuu jahal waxaa u yimid Akhnas Bin Shurayq, waxaa uu waydiiyay: Abul xakamow, maxay kula tahay wixii aad Muxammad ka maqashay? Abuujahal wuxuu ku jawaabay: oo maxaan maqlay? Annaga iyo Banuu Cabdi-Manaaf ayaa sharafta ku tartannay, cunto ayay bixiyeen annana waan bixinnay, dad bay xambaareen annana waan xambaarnay, waxbay ku deeqeen annana waan ku deeqnay, ilaa aan is barbar dhac noqonnay oo laba faras oo tartamaysa noqonnay bay waxay yiraahdeen: waxaa naga soo baxay nabi waxyigu cirka uga imaanayo, goorma ayaannu gaaraynaa middaas? Wallaahi inaanan waligeen rumaynaynin.

وعن أم المؤمنين صَفِيّةَ بِنْتِ حُيَيّ بْنِ أَخْطَبَ -زعيم اليهود- أَنّهَا قَالَتْ: " كُنْتُ أَحَبّ وَلَدِ أَبِي إلَيْهِ وَإِلَى عَمّي أَبِي يَاسِرٍ لَمْ أَلْقَهُمَا قَطّ مَعَ وَلَدٍ لَهُمَا إلا أَخَذَانِي دُونَهُ. فَلَمّا قَدِمَ رَسُولُ اللّهِ -صَلّى اللّهُ عَلَيْهِ وَسَلّمَ- الْمَدِينَةَ، وَنَزَلَ قُبَاءَ، فِي بَنِي عَمْرِو بْنِ عَوْفٍ، غَدَا عَلَيْهِ أَبِي، حُيَيّ بْنُ أَخْطَبَ، وَعَمّي أَبُو يَاسِرِ بْنِ أَخْطَبَ، مُغَلّسَيْنِ. فَلَمْ يَرْجِعَا حَتّى كَانَا مَعَ غُرُوبِ الشّمْسِ. فَأَتَيَا كَالّيْنِ كَسْلَانَيْنِ سَاقِطَيْنِ يَمْشِيَانِ الْهُوَيْنَى. فَهَشِشْتُ إلَيْهِمَا كَمَا كُنْتُ أَصْنَعُ فَوَاَللّهِ مَا الْتَفَتَ إلَيّ وَاحِدٌ مِنْهُمَا، مَعَ مَا بِهِمَا مِنْ الْغَمّ. وَسَمِعْت عَمّي أَبَا يَاسِرٍ وَهُوَ يَقُولُ لِأَبِي حُيَيّ بْنِ أَخْطَبَ: أَهُوَ هُوَ؟ قَالَ: نَعَمْ وَاَللّهِ! قَالَ: أَتَعْرِفُهُ وَتُثْبِتُهُ؟ قَالَ: نَعَمْ! قَالَ: فَمَا فِي نَفْسِك مِنْهُ؟

قَالَ: عَدَاوَتُهُ وَاَللّهِ مَا بَقِيتُ (!!!)"

Waxaa laga wariyay Ummul Mu'miniin Safiya Bintu Xuyay Binu Akhdab Allaah haka raalli noqdee inay tiri: "waxaan ahaa ilmaha aabbahay midka uu ugu jecelyahay isaga iyo adeerkay Abuu Yaasir, waligood ilama aysan kulmin anigoo caruurtooda ku dhex jira illaa aniga ayay i qaadaan. Kolkii uu nabigu SCW yimid Madiino, ee uu ku soo dagay Qubaa', reer Banii Camr Bin Coof, Aaabbahay Xuyay Bin Akhdab iyo adeerkay Abuu Yaasir Bin Akhdab waa ay ku kAllaaheen aroor hore, mana aysan soo noqon jeerey qorraxdu dhacday mooyee. Waxa ay yimaadeen iyagoo daallan oo dhacsaal ah oo aayar u soconaya. Aniga waan ku orday sidii aan yeeli jiray, Wallaahi midkoodna ima soo eegin, walwalkii hayay aawadii. Waxaan maqlay adeer kay Abuu yaasir oo Aabbahay waydiinaya: Ma isagii baa? Wuxuu ku jawaabay: Haa Wallaahi! Wuxuu yiri: ma garanaysaa oo ma kuu cadyahay? Wuxuu ku jawaabay: Haa! Wuxuu yiri: maxaad go'aansatay oo naftaada ku jira? Wuxuu yiri: wallaahi "la collaytankiisa inta aan noolahay!!"

Haddaba, ma jirin waxa kala teedaaya bani’aadamka iyo xaqiiqadan. Xataa Hiraqla boqorkii Ruum waxaa uu yiri isaga oo la hadlaya Abuu Sufyaan: "haddii wixii aad sheegtay ay run yihiin, waxaa dhow inuu qabsado halkan aan taagnahay, haddii aan rajo ka qabo inaan la kulmayana waan isku dhibi lahaa la kulankiisa, haddii aan la joogo waxaan u dhaqi lahaa cagihiisa". Wuuba ku sigtay inuu islaamo, haddii uusan u baqi lahayn boqortooyadiisa inay tagto, boqor Najaashise Allaah ayaa hanuuniyay waana uu rumeeyay.

Xaqiiqadu waa mid cad, caqliga iyo qalbigana dariiq cad oo sahlan bay u maraysaa. Sidaas bayna tahay xilli kasta, fahamkeedu ma aha mid culus. Waxaaba la oran karaa qaddiyadda xilligan aynu ku jirno waaba mid sii cad oo bannaanka taalla, mar kasta oo ay culumadu cilmi siyaadsadaan waxa ay mar kale sii yaqiinsanayaan inaysan suurta gal ahayn Allaah cidaan ahayn waxan inay samayso. Cilmigu maanta bani’aadamka waxa uu ku bixinayaa inay rumeeyaan, caqliga iyo khibraduhuna sidoo kale iimaan bay u horseedayaan. Mana jirin waligeed xilli looga baahi badanyahay iimaan xilligan aynu ku jirno baahida loo qabo oo kale. Ha yeeshee, dadku xaqa iyo diintan waa ay ka jeesanayaan.

Haddii aannu u imaanno Qur’aanka waxaan arkaynaa in aayadaha arrintan ka hadlay aad ay u fara badanyihiin, gaar ahaan –sidaan soo sheegnay – waxaan xoogga saari doonnaa qaddiyadda xukunka iyo awoodda.

1. Waxaa uu Allaah SWT ku leeyahay suuratu Yuunis

﴿ قُلْ أَرَأَيْتُم مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنْ رِزْقٍ فَجَعَلْتُمْ مِنْهُ حَرَامًا وَحَلَالًا قُلْ آللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ أَمْ عَلَى اللَّهِ تَفْتَرُونَ ﴾ [يونس: ٥٩]

“Waxaad dhahdaa ka warama waxa Allaah idiin soo dejiyey oo rizqi ah, ood ka yeesheen qaar ka mid ah xaaraan, qaarna xalaal, waxaad dhehdaa ma Allaah ayaa idiin idmay, mise Allaah ayaad ku been abuuranaysaan” (Yuunus: 59)

Haddii aayaddan oo qura ay Qur'aanka ku jiri lahayd waa ku fillaan lahayd. Allaah SWT wuxuu su'aalayaa su'aal yaab ku jiro oo xaqiiqadan ku saabsan; xaqiiqada inuu isagu riziqa dadka siiyay

﴿ قُلْ أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنْ رِزْقٍ ﴾ [يونس: ٥٩]

Wax kasta oo dadka noloshooda ku jiraana waa riziq Allaah ka yimid, qorraxda iyo ifkeeda iyo kulkeeda laga soo billaabo, dayaxa iyo layrkiisa, cirka iyo waxa ku jira, roobka soo da'aya, dhirta soo baxaysa, dadka iyo xayawaanka, noolaha iyo ma-noolaha, dhammaan waa riziq Allaah, sidoo kale caafimaadka, ubadka, cunnada iyo cabitaanka dhammaan waa riziq Allaah. Su'aal baa la is waydiinayaa

﴿ قُلْ أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ لَكُمْ مِنْ رِزْقٍ ﴾ [يونس: ٥٩]

Ereyga riziq halkan waa mid guud waxaana soo galaya noocyada kala duwan ee riziqa, wax walba oo nolosheenna ku jira waa riziq Allaah, idinkuna hawadiinna ayaad ku qayb qaybiseen,

﴿ فَجَعَلْتُمْ مِنْهُ حَرَامًا وَحَلَالاً قُلْ آللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ ﴾ [يونس: ٥٩]

Mar haddii uusan jirin idan Allaah ka yimid oo xaqaan(xaqa xalaalaynta iyo xarrimidda) siinaya cid aanan isaga ahayn, malag dhow iyo nabi la soo diray midna, iskaba daa qof dadka ka mid ah ama jinni ama cid kale toona, erey kasta oo xaqa xalaalaynta iyo xarrimidda siinaya cid aanan Allaah ahayn waa been abuurasho iyo ku xad gudbid Ilaahnimada Allaah iyo wixii gaarka uu u lahaa iyo xaqiisii xalaalaynta iyo xarrimidda. Taasina micneheedu waa gaalnimo fogaatay oo geed loogu soo gabbado lahayn. Aayaddaani waana aayad cad oo ay dadku har iyo habeen akhrinayaan xaqiiqadan ku sii adkaynaysa.

﴿ قُلْ آللَّهُ أَذِنَ لَكُمْ أَمْ عَلَى اللَّهِ تَفْتَرُونَ ﴾ [يونس: ٥٩]

2. Suuradda Naxli waxaa ku soo arooray:

﴿ وَلَا تَقُولُوا لِمَا تَصِفُ أَلْسِنَتُكُمُ الْكَذِبَ هَذَا حَلَالٌ وَهَذَا حَرَامٌ لِتَفْتَرُوا عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ إِنَّ الَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ لَا يُفْلِحُونَ ﴾ [النحل: ١١]

"Ha dhihina waxa carabyadiinu tilmaamayaan oo been ah; kani waa xalaal, kani waa xaraam, in aad ku been abuurataan Allaah darteed, kuwa ku been abuurta Allaah ma liibaan"
(Al Naxl: 116)

Yacnii waa sifada hadalka ay oranayaan iyada oon gebi ahaamba la isla gaarin dulucdiisa ayaa lagu sifeeyay inuu been cad yahay, maxay tahay beenta aynu sheegnay? Waa middaas qaddiyaddu, inaad xalaal iyo xaaraan sheegtaan ayaa been ah, been cad oo geed aan loogu soo gabban, been abuurasho iyo xad gudub bareer ah, dhiirrasho qayaxan iyo gaalnimo mutuxan weeye… Sidii inaad hal ujeeddo hadalkiinna ka leedihiin, oo ah inaad Allaah ku been abuurataan, been abuurasho ula kac ahina waa gaalnimo cad. Qaddiyaddu haddaba aad bay u caddahay, aayaddan iyo tii ka horraysayba qaddiyadda ayay sii ifinaysaa.

3. Suuradda Shuura waxaa ku jirta:

﴿ وَمَا اخْتَلَفْتُمْ فِيهِ مِنْ شَيْءٍ فَحُكْمُهُ إِلَى اللَّهِ ذَلِكُمُ اللَّهُ رَبِّي عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ ۞ فَاطِرُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ﴾ [الشورى: ١٠-١١]

"Waxaad isku khilaaftaan oo shay ah Allaah ayaa xukunkiisa leh, kaasina waa Allaah; Rabbigay asagaana tala saartaa xagiisa ayaana u noqdaa, isagaa abuuray samooyinka iyo dhulka" (Ash-Shuura: 10-11).

Aayaddani waxa ay si cad u sheegaysaa

﴿ وَ مَا اخْتَلَفْتُمْ فِيهِ مِنْ شَيْءٍ﴾

Ereyga "شَيْءٍ" waa (nakira: aqoon kuma xaddidna) sidii ereyga "riziq" oo kale si ay wax walba u soo hoos galaan, caday lagu cadaydo xataa ha noqdo, mar haddii dadku is khilaafaan, cidda kaliya oo kala xukumin kartaa waa Allaah

﴿ وَمَا اخْتَلَفْتُمْ فِيهِ مِنْ شَيْءٍ فَحُكْمُهُ إِلَى اللَّهِ﴾

Sababtu maxay tahay?

﴿ ذَلِكُمُ اللَّهُ رَبِّي﴾

Sayidkayga, taliyahayga, khaaliqayga, kii aniga i lahaa, wax walba oo jirana maamulahayay.

﴿ ذَلِكُمُ اللَّهُ رَبِّي عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ ۞ فَاطِرُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ﴾

Aayado aad u cad cad waaye, ma bannaana in loo xukun tago ama uu wax xakumo Allaah qayrkii waxay dooni ha noqotee, ha yaraato ama ha waynaato.

4. Isla suuradda Shuuraa, wuxuu Allaah SWT si inkiraad ku jirto u waydiinayaa, si dadku ay u ogaadaan in Allaah qayrkii oo wax laga qaataa ay shirki tahay,

﴿ أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ ﴾ [الشورى: ٢١]

"Mise waxay leeyihiin gaaladu shuraka Allaah (la wadaajiyeen) oo u jideeya diin(xukun) aan Allaah idmin" (Al Shuura: 21)

Ma waxaa jira cid Allaah wax la wadaagta? Allaah miyaa cid kale u idmay inay sharci dajiso?

Allaah uma idmin cid kale inay sharci dajiso. Cid kastoo sharci ka qaadataa Allaah qayrkii waa mushrikiin, waxa ay Allaah u yeeleen shariik, sidaas ayayna ku gaaloobeen. Arrintaasi waxaa sii adkaynaysa aayaddan suuratu Towba

﴿ اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا إِلَهًا وَاحِدًا لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ سُبْحَانَهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ ۞ يُرِيدُونَ أَنْ يُطْفِئُوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَيَأْبَى اللَّهُ إِلَّا أَنْ يُتِمَّ نُورَهُ وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ ﴾ [التوبة: ٣١-٣٢]

"Waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii rabiyaal Ilaahay ka sokoow iyo Ciise ibnu Maryama, waxaanan cibaadada Ilaahay aan ahayna lama farin, Allaah mooyee Ilaah kalena ma jiro, waana ka nasahan yahay waxay la wadaajin. Waxay dooni gaaladu in ay ku damiyaan nuurka Allaah afkooda, Allaahna wuu diidi dhamatystirka nuurkiisa mooyee, haba kahdeen gaaladuye" (At-Towba: 31-32)

Waxaa uu Allaah SWT aayaddan isla simay kuwa wadaaddada iyo culimadooda ka dhigtay Rabbiyaal "macnaheeduna yahay inay sharci u dajin jireen" iyo kuwa Masiixa ka dhigtay Ilaah oo sheegtay inuu Allaah inankiisa yahay, hal buu ka wada dhigay. Nabigu SCW wuxuu noo

fasiray shirkigaas ay ku dheceen Yahuud iyo Nasaaro kolkii uu ku yiri Cadiyi Bin Xaatim RC "Miyaanay xaaraanta idiin xalaalayn, xalaashana idinka xaaraantinimayn, misna aad ku raacdeen, taas ayaa ah cibaadada aad caabuddeen iyaga"

Haddaba, sharci dajinta, xalaalaynta iyo xaaraantinimayntu waa qaddiyad aad ugu cad kitaabka Allaah oo ka mid ah waxyaabaha gaarka uu u leeyahay Allaah, mana u bannaana nabi ama malak ama qof inuu wax xukumo oo Allaah uu la wadaago arrinkaas.

Wuxuu Allaah SWT ku oranayaa suuratu Yuusuf:

﴿ إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ أَمَرَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ ﴾ [يوسف: ٤٠]

“Xukunka Allaah kaligii baa leh, wuxuu amray inaan la caabudin isaga mooyee, taa ayaa ah diinta toosan” (Yuusuf: 40)

Haddii dadku ay xaakin Allaah sokadii samaystaan, mise ay Allaah la wadaajiyaan, ma noqonayaan kuwa Allaah caabuday, mushrikiin bay noqonayaan gaaloobay. Taasina waa diinta qayimka ah, diin kale oo qayim ahina ma jirto.

﴿ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

“hayeeshee dadka badankiis garan maayaan”

Dadku inaanay arrintani aqoon u lahayn xaqiiqada waxba ka beddeli mayso, dadkana waxba u kordhin mayso. Dadka aqoonta aanan u lahayn waa kuwa Allaah aanan u xukuntamin, waa kuwa aanan caabudaynin, diinta Allaahna kuma ay jiraan, ha ogaadeen ama yaanay ogaannine.

5. Suuratu Al-Nuur, qayb weyn oo ka mid ah waxa uu Allaah SWT ku sugayaa qadiyaddan sida aadka ah u cad.

﴿ وَيَقُولُونَ آمَنَّا بِاللَّهِ وَبِالرَّسُولِ وَأَطَعْنَا ثُمَّ يَتَوَلَّى فَرِيقٌ مِنْهُمْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ ۞ وَإِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِنْهُمْ مُعْرِضُونَ ۞ وَإِنْ يَكُنْ لَهُمُ الْحَقُّ يَأْتُوا إِلَيْهِ مُذْعِنِينَ ۞ أَفِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ أَمِ ارْتَابُوا أَمْ يَخَافُونَ أَنْ يَحِيفَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُ بَلْ أُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ۞ إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴾ [النور: ٤٧-٥١]

“Waxay oranayaan (munaafiqiinta) waxaan rumaynay Allaah iyo Rasuulka, waana addeecnay, kaddibna waxaa jeedsada kooxo ka mid ah, kuwaas ma aha mu’miniin. Marka loogu yeero Allaah iyo Rasuulkiisa inuu kala xukumo dhexdooda waxaa soo baxa koox ka mid ah oo jeedsada, hadduu xaqu iyagu u sugnaado way u yimaadaan ayagoo adeecsan, ma qalbigay ka bukaan mise way shakiyeen mise waxay ka cabsanayaan in Allaah ka eexdo iyo Rasuulkiisu, balse kuwaasi waa kuwo daalimiin ah. Mu’minka hadalkiisu marka loogu yeero Allaah iyo Rasuulkiisa in uu kala xukumo dhexdooda waa uun in ay dhahaan waan maqalay waana adeecay, kuwaas uun baa liibaanay” (An-Nuur: 47-51)

Qaddiyaddu waa mid dibadda taalla oo cad, sharaxna uma baahna, dadkan sheeganaya oo oranaaya waxaan rumaynay Allaah iyo Rasuulkiisa, waana adeecnay, haddii sharciga Allaah ay ka jeestaan, oo sharcigiisa mid aanan ahayn ay qaataan, Allaah wuxuu ka anfinayaa iimaanka, sababtoo ah waxaa loogu yeeray xukunka Allaah uma aysan soo degdegin, kolkii xukunka qayrkii loogu yeerayna waa ay aqbaleen wayna ku farxeen.

﴿ وَإِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَحْدَهُ اشْمَأَزَّتْ قُلُوبُ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِالْآخِرَةِ وَإِذَا ذُكِرَ الَّذِينَ مِنْ دُونِهِ إِذَا هُمْ يَسْتَبْشِرُونَ ﴾ [الزمر: ٤٥]

"Marka la xuso Allaah keliya waxaa liidaanyooda qalbiyada kuwaan rumaynin aakhiro, marka la xuso wax Allaah ka soo haray waaba ayagoo bishaaraysanaya" (Al-Zumar: 45)

Sheegashadu haddii ay waaqaca ka duwanaato, waaqaca ayaa xukunka iska leh,

﴿ وَإِنْ يَكُنْ لَهُمُ الْحَقُّ ﴾ [النور: ٤٩]

"Hadduu xaqu iyaga u sugnaado..." (Nuur: 49)

Haddii maslaxad ay ugu jirto xukunka Allaah iyagoo ordaya ayay imanayaan. Waa sidii diintani inay u adeegayso hawada dadka oo kale, haddii ay dani ka gasho way u yeeranayaan, haddii aysan baahi dareeminna ama ay ku dhibtoodaan way iska eryayaan, diinta Allaahna sidaa marna inay noqoto ma aha. Dadka caynkaas ah iyo wixii la midka ah waxaa uu Allaah SWT ka yiri:

﴿ أَفِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ أَمِ ارْتَابُوا أَمْ يَخَافُونَ أَنْ يَحِيفَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُ بَلْ أُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ [النور: ٥٠]

"Ma qalbigay ka bukaan mise way shakiyeen mise waxay ka cabsan in Allaah iyo Rasuulkiisa ka eexdaan, balse kuwaasu waa kuwo daalimiin ah" (Nuur: 50)

Daalimiintan la sheegayaa waa gaalada, sababtoo ah dulmi waxaa ugu daran gaalnimada.

﴿ إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴾ [النور: ٥١]

"Mu'minka hadalkiisu marka loogu yeero Allaah iyo Rasuulkiisa in uu kala xukuma dhexdooda waa uun in ay dhahaan waan maqlay waana adeecay, kuwaasuna waa uun kuwa liibaanay" (Nuur: 51)

sidaas ayaana ah mawqifka kaliya ee saxda ah.

6. Aayadaha suuratul Nisaa' iyo Suuratul Maa'ida ayaan eegaynnaa, waa aayado caan ah oo la wada yaqaanno, waxa uu Allaah ku sugayaa aayadda koowaad:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَطِيعُوا اللَّهَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ وَأُولِي الْأَمْرِ مِنْكُمْ فَإِنْ تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ﴾ [النساء: ٥٩]

"Kuwa rumeeyoow adeeca Allaah oo adeeca Rasuulka iyo kuwa amarka leh oo idinka mid ah, haddaad shay ku doodaan u celiya Allaah iyo Rasuulkiisa haddaad tihiin kuwa rumeeyey Allaah iyo maalinta Aakhiro" (Al-Nisaa': 59)

ilaa laga gaaro dhammaadka kooxdan aayadaha ah ee ku soo dhammaanaya dhaartan rabbaaniga ah,

﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء: ٦٥]

"Maya! Rabbigaa baan ku dhaartaye ma rumaynin ilaa ay kaaga xukuntamaan waxa dhex mara, kaddibna ayan naftooda ka helin dhibsiga waxaad xukuntay oo ay hogaansamaan hogaansanaan" (Al-Nisaa': 65)

Aayadahan dhammaan waxa ay si cad u tusinayaan in adeecitaanka Allaah iyo Rasuulkiisa oo keliya ay leeyihiin, xukunna Allaah iyo Rasuulkii ayuun baa leh, waa haddii dadku ay iimaan sheeganayaan, haddii aysan sidaa yeelin sheegashadoodu waa been

﴿ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ وَيُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَنْ يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴾ [النساء: ٦٠]

"Ka waran kuwa sheeganaya in ay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo waxa lagu dejiyey kuwii kaa horreeyey, oo doonaya inay u xukuntamaan daaquutka iyagoo la faray in ay ku kufriyaan, wuxuuna shaydaanku doonayaa in uu baadiyeeyo baadi fog" (Al Nisa': 60)

Siday doonayaan dadku ha u sheegteen inay doonayaan khayr iyo towfiiq iyo wanaag, sheegashadoodu waa lagu celinayaa, sababtoo ah Allaah kama ay aqoon iyo ogaal badna, isaguna Rasuulkiisa uma uusan soo dirin in lagu adeeco idanka Allaah mooyee. Marka haddii iyagu aysan u xukuntamaynin Allaah iyo Rasuulkiisa, naftooduna aysan ku xasilaynin oo aysan qiraynin in xukunka Allaah uu had iyo goor khayr yahay, mar haddii aysan xukunka Allaah si amaano ah u fulinaynin, dadkaasi ma aha kuwo Allaah rumeeyay.

Dhaar aad u wayn buu ku dhaaranayaa:

﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء: ٦٥]

"Maya! Rabbigaa baan ku dhaartaye ma rumaynin ilaa ay kaaga xukuntamaan waxa dhex mara, kaddibna ayan naftooda ka helin dhibsiga waxaad xukuntay oo ay hogaansamaan hogaansanaan" (Al-Nisaa': 65)

Dhaarta qaabkaan loo dhigay Qur'aanka saddex qaddiyad dartood uun bay ku timid; qaddiyadda xukunka, qaddiyadda soo saaritaanka aakhiro, qaddiyadda risqiga.

Saddexdaa qaddiyadood waa tiirarka ee isnaaka xajiya una diidaysa inuu iisho oo ay shayaadiintu hanato … haddii uu insaanku rumeeyo Allaah inuu yahay kan awoodda iyo xukunka kaligii leh, haddii uu rumeeyo inaan cid aan isaga ahayn wax noolayn waxna dilin sidaa darteedna soo saaridda aakhiro waa xaqiiqo iyaduna. Insaanku wuxuu rumeeyay in risqi siintiisu gacanta Allaah oo kaliya ay ku jirto. Saddexdaasi tiir uu yaqiinsado insaanku ma qalloocanaayo mana lumaayo.

﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ﴾..

Waa dhaar wayn oo xujo aanan cidna u reebayn in lagama maarmaan ay tahay in dadku ay sharciga Allaah uun sharci ka dhigtaan, quluubtooduna aysan wax kahsi ah ka dareemin, iyo inay u fuliyaan oo isugu dhiibaan si buuxda. Macne kale oo aayadda aanan ku soo aroorin oo lagu kordhiyaa waa baadiyayn iyo wareerin, sababtoo ah dadbaa waxa ay malayn karaan in la oran karo "Rabbigaagaan ku dhaartaye ma rumaynayaan iimaan dhamaystiran", taasi macneheedu waa iyaga oo raba inay yiraahdaan: haddii dadku ay sharciga Allaah ka tagaan, shaki ay ka qaadaan, xasillooni aysan ka dareemin, quluubtooduna ay kahato, oo aysan fulinin sinnaba, waxa ay iska sii ahaanayaan mu'miniin, laakin iimaan naaqus ah weeye. Warkaasina ma aha mid waligii caqli ahaan iyo nas ahaanba aayadda la soconaya, haddii Allaah uu doono wuu oran lahaa sidaa, mase oran.

Aayadaha suuratul Maa'ida ayaa soo haray, waa aayado aad u cad cad, oo caddaynaya in Allaah SWT uu ku xakumayo cid walboo wixii uu soo dajiyay aanan ku xukumin inay yihiin kaafiriin, daalimiin, faasiqiin, oo dhammaantood hal macne leh, oo ah gaalnimo iyo xad gudub iyo ka bixid diinta Allaah

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

"Ciddaan wax ku xukumin wuxuu Allaah soo dejiyey, kuwaasi waa gaalo uun"
(Al-Maa'ida: 44)

Xaqiiqadaan waxaa ku hareeraysan dhowr qaddiyadood oo aannu u dib dhiganayno meel soo socota, waxa ayna yihiin Shubuhaadka ay qadiyaddan ku soo arooriyaan kuwa dadka baadiyaynaya iyo culumada xunxun iyo kuwaan wax garan. Waxaa kale oo ka mid ah xaddideyaal dhowr ah: goorma ayaa qofka wixii Allaah uu soo dajiyay aanan ku xukumaynin la gaalaysiinayaa, iyo ka hadlidda ereygii Ibnu Cabbaas laga soo weriyay ee qadiyaddan khuseeya ee ahaa gaalnimadoodu waa "Gaalnimo ka sokaysa gaalnimada weyn", iyo sidoo kale waxaannu kaashanaynaa qayb ka mid ah hadalladii culumadii salafka iyo kuwan xaadirka ahba ee qaddiyaddan ay ka yiraahdeen si ay aad noogu caddaato. Waxaa kale oon caddaynaynaa arrimo aad u yar yar oo dad badan ay ku lumeen, oo ay ka mid yihiin dadka xarakada islaamiga ah ka shaqeeya iyo waliba culumo u banbaxday dacwada Allaah, waxaad arkaysaa iyaga oo ku dhacaya gafaf aad u khatar ah iyaga oo aanan is ogayn. Waxaannu doonaynnaa inaan arrintaas si gaar ah u xusno si qaddiyaddu u sii noqoto mid cad oo xaddidan. Waxaannu ku soo qaadan doonnaa bayaannadaasi qaar ka mid ah tiirarka ay ku taagan tahay qaddiyadda si ay meesha uga baxdo suurtogalnimada in layska indho tiro amaba lays moogeysiiyo qaddiyaddaan bannaan yaalka ah ee iska cad, Allaah baana nooga aqoon badan.

## Maxay Culumadu ka yiraahdeen "Xukunka Allaah"?

Waxaan cutubkaan bilowgiisi uga soo hadalnay qaddiyadda ugu muhiimsan wujuudka oo dhan iyo noloshaa aadanaha waana qaddiyadda Laa Ilaaha illallaah.

Marka aynu ka hadlayno dhismaha mujtamaca muslimka ah waxaa noo muuqanaya inay muhiim tahay inaan wax badan dul istaagno qaaciddooyinka usuuliga ah, kuwa ictiqaadiga ah, dhaqdhaqaaqa, akhlaaqda, iyo nidaamka ah ee uu ku dhismayo mujtamacaasu asaas ahan.

Inkastoo uu dheeraan karo ka hadalka qaaciddooyinkaas ka hor intaanan u gudbin warka ustaad Sayid ka qoray arrintaan, hayeeshee waan laga maarmi karin hadalkaas maxaa yeelay suurtogal ma aha inaan fahamno waxa uu yahay mujtamaca muslimka ah iyo sida uu u dhasho, muxuu u dhalanayaa illaa aan ogaanno qaaciddooyinka aan ka ambaqaadayno iyo kuwa uu ku istaagayo mujtamacaasu.

Sideedaba markaannu dib ugu laabanayno wax walba macnaheedu ma aha inaan wax cusub sheegayno, balse waxaa la filanayaa in arrimahaasu noo sugan yihiin, laakin iminka waxaa qabanayno waa dib u eegid iyo habayn qaddyado firirsanaa, si aan u adkayno u tiirinno arrimo aan wada ognahay. Waxaan Allaah weydiisanaynaa inuu na waafajiyo caddaynta xaqa noona fududeeyo.

Waxaan si sugan u rumaysan nahay in qaddiyadda laa ilaaha illallaah aysan ahayn wax qufulan oo ay adga tahay in la fahmo, waa qaddiyad fidri ah labana ku murmi karin siday u fududdahay darteed. Loollanka dhex yaal xaqa iyo baadilka, awliyada Allaah iyo kuwa

shaydaanka waxaa sababaya madax adaygga iyo isqaadqaadka jaahiliyadda, iyo isku daygeeda inay aasto qaddiyadda laa ilaaha illallaah ee sidaa u sahlan una cad si ay hawadeeda u raacdo.

Sidaa darteed waxaan arkaynaa in anbiyada oo dhan ay u soo bandhigeen qaddiyaddasi si kooban aadna u sahlan, waxay in badan xoogga saarayeen oo adkaynayeen dhaqangelinta iyo isu dhiibidda xaqiiqada. Waxa layska doonayo ma aha in la garto oo kaliya, waa xaqiiqo sideeda u cad sida qorrax barqo joogta, mana arki waayo illaa ninkaan rabin araggeeda mooyee oo iska daboola indhaha.

Qofkii doonaa inuu wax arko qorraxdu si buuxday u muuqataa, xaqiiqada laailaaha illallaahna way kasii caddaan iyo muuqaal weyn tahay qorrax maalin cad joogta.

Waxa ay anbiyadu xoogga sarayeen annagana nalaga rabo ma ahayn sugiddaa laa ilaaha illallaah, maxaa yeelay kalimaddu waa wax cad oo marag madoonto ah, maalinta qiyaamaha dadka lagula xisaabtami doono waadix nimadeeda darteed sida ay aayadda suuratul acraaf u xustay cahdigii iyo ballantii aadanaha Allaah la galay xujadana loogu oogay, loona sheegay inaan laga yeeli doonin inay dhahaan:

﴿ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَذَا غَافِلِينَ ﴾ [الأعراف: ١٧٢]

"Annagu arrintaan qaafil baan ka hayn" (Al-Acraaf: 172)

Qaafil ma ahayn, sida aayaddaanu sheegayso:

﴿ وَإِنْ مِنْ أُمَّةٍ إِلَّا خَلَا فِيهَا نَذِيرٌ ﴾ [فاطر: ٢٤]

"Ummad ma jirto aan loo dirin mid u diga" (Faadir: 24)

Diinta Allaah ma tirtiranto weligeed, waxaa jooga mar walba calaamado ama astaamo si sahalan ugu yeeraya qof walboo xaq doon ah waqti kasta. Waa inaan ogaanna markaan jaahiliyadda wajahayno inaan qaddiyaddenu ahayn wax dhib badan oo mugdi ku jiro, si kastooy isugu dayaan inay wax isku qasaan, ama isku weynaysiiyaan, ama wax u adkeeyaan waa uun wax hawadooda iyo jaahilnimadooda ka dhashay, sidaa darteed nooma habboona in hakad nagalo, amaba aan moodno in kalimadda towxiidku adag tahay oo aan sahal lagu fahmi karin.

Bal haddana aan firino wixii ay ka yiraahdenn culumadii hore iyo kuwa dambe arrinkaan, umana soo qaadanayno inaan rumayn ama yaqiinsi ka doonaayno, Allaah ayaa mahad leh Annagu waan rumaysannahay oo yaqiinsanahay xaqiiqadaan. Hayeeshee waxaannu usoo qaadanay si aannu u ogaanno inaanan kaligeen ahayn cidda hadalkaan sheegaysa, iyo inuu jiro Ijmaac (isku wada raacid) ka dhexeeya culumada salafka iyo khalafka in "Laa ilaaha Illallaah" ay macneheedu yahay Suldaanka Allaah kaliya ayaa leh, taasina waxaa soo galaya arrinta xukunka ee iska cad.

Xaqiiqo ahaan kitaabka "إن الله هو الحكم" (**Allaah uun baa ah Xakamka**) ee uu qoray **Muxamad Shaakir Shariif**, Wuxuu koobay dhinacyada mawduucan weliba si sahlan oo fudud.

Waxaan horraantii hadalkeenna ku soo sheegnay in kolka aannu qadiyaddan ka hadlaynno ay lagama maarmaan tahay inaan manhajka anbiyada ku dhagganaanno, oo aanan ku qasin hadalladii falaasifada iyo ahlul kalaamka iyo dadka hawadooda raaca. Qadiyaddan sida Qur'aanku u sheegay iyo sida rususha Allaah dhammaantood u sheegeen una gaarsiiyeen, waa

arrin ku taagan aragti xeel dheer (basiirah), ee caqli iyo dareen iyo hawo oo keliya kuma taagno. Hadalku wuxuu ku socdaa qofka gebi ahaantiisa, aragtidiisa xeel dheer ee caqliga iyo dareenka ka tarjumaysa, iyo waaqaca uu beni'aadanku ku noolyahay. Kani waa qaabka qura iyo xujada keli ah ee lagu soo bandhigi karo qadiyadda, muuqaalkeeda oo dhammaystiranna sidaa uun baa lagu fahmi karaa. Kitaabkani wuxuu si fudud u soo bandhigayaa qadiyadda, xujada Qur'aanka ayuu adeegsanayaa, ee caqliga iyo waaqucuba ay taageerayaan, iyo qaar ka mid ah hadallada culumada ee aannu doonayno inaanan badinin.

Waxaa kale oo jira arrimo aad xasaasi u ah, dadka iyo ummadaha caalamka ee islaamka ahaan jiray ee loo yeerahayo waa ay ku adkaan kartaa fahamkeeda, qaarkeen bay sidoo kale ku adkaan kartaa, faham ahaan, isku aaddinteeda iyo sheegiddeedaba. Waa qaddiyado aan ugu yeeri karno "shubuhaad, ama is-dabamarin" oo ay xaqaan cadowgiisu ku doonayaan inay ka faa'idaystaan amase ku wareeriyaan kuwa "Laa ilaaha Illallaah" fahankeeda curdanka ah ee saxda ah ee fudud ee ambiyadu la yimaadeen dadka ugu yeeraya. Waannu jalleeci doonnaa arrimahaasi, gaar ahaan qoraaga buugga oo meelo aad xasaasi u ah taabtay oo arrinta sii caddaynaya, isla markaana ka sifaynaysa jah-wareer iyo dahsoonaan wixii meesha ku jiray.

Waxa aannu isa soo hor dhignay aayado dhowr ah oo ka hadlaya qaddiyadda sharci dajinta, xalaalaynta iyo xaaraantinimaynta inay tahay arrin Allaah uu gaar u leeyahay, cid la wadaagtaana aysan jirin, waana hubaal in aayadihii aynu soo qaadannay ay yihiin in yar oo ka mid ah aayadaha badan ee Qur'aanka ku soo arooray.

Waxaa jira aayado kale oo badan oo aannu u sheegaynno cilmi kororsi, sida:

﴿ وَلَا يُشْرِكُ فِي حُكْمِهِ أَحَدًا ﴾ [الكهف: ٢٦]

"Lamana wadaajiyo xukunkiisa cidna" (Al Kahf: 26)

﴿ إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ يَقُصُّ الْحَقَّ وَهُوَ خَيْرُ الْفَاصِلِينَ ﴾ [الأنعام: ٥٧]

"Xukunka Allaah baa iska leh, xaquuna xukumi, waana ku xukunkiisa khayr leeyahay" (Al-Ancaam: 57)

﴿ إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ ﴾ [يوسف: ٦٧]

"Xukunka cidaan Allaah ahayn ma laha, isagaana talo saartay" (Yuusuf: 67)

﴿ ذَلِكُمْ بِأَنَّهُ إِذَا دُعِيَ اللَّهُ وَحْدَهُ كَفَرْتُمْ وَإِنْ يُشْرَكْ بِهِ تُؤْمِنُوا فَالْحُكْمُ لِلَّهِ الْعَلِيِّ الْكَبِيرِ ﴾ [غافر: ١٢]

"Arintaas waxaa ugu wacan in marka loo yeero Allaah keliya aad gaaloowdaan, haddii wax lala wadaajiyana aad rumeysaan, xukunka dhamaantiisna Allaah baa iska leh ee sareeye ee weyne ah" (Gaafir: 12)

﴿ كُلُّ شَيْءٍ هَالِكٌ إِلَّا وَجْهَهُ لَهُ الْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴾ [القصص: ٨٨]

"Wax kasta wuu halaagsami Allaah mooyee, xukunkana isagaa iska leh, xagiisaana la idiin celinayaa" (Al-Qasas: 88)

﴿ لَهُ الْحَمْدُ فِي الْأُولَى وَالْآخِرَةِ وَلَهُ الْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴾ [القصص: ٧٠]

"Mahad baa u sugnaatay (Allaah) adduun iyo aakhiraba, xukunkana isagaa iska leh, xagiisaana loo noqonayaa" (Al-Qasas: 70)

﴿ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴾ [المائدة: ٥٠]

"Ma xukunka jaahiliyadda yey doonayaan, yaa uga fiican Allaah xukunkiisa qoomka wax yaqiinsan" (Al-Maa'idda: 50)

﴿ أَلَا لَهُ الْحُكْمُ وَهُوَ أَسْرَعُ الْحَاسِبِينَ ﴾ [الأنعام: ٦٢]

"Isagaana leh xukunka dedejiyana xisaabta" (Al-Ancaam: 62)

﴿ وَاللَّهُ يَحْكُمُ لَا مُعَقِّبَ لِحُكْمِهِ ﴾ [الرعد: ٤١]

"Allaah wuu xukumin, wax burinayaa ma jiro xukunkiisa" (Ar-Racd: 41)

Aayadahan waxa ay si cad u tilmaamayaan in xukunka uu Allaah kaligiis leeyahay, cid kalena lama wadaagto, ha noqdo malag dhow ama Nabi la soo diray, iskaba daa qof caadi ah ama koox dadka ka mid ah.

Waxaa sidoo kale sunnada saxiixa ah ku soo arooray oo laga wariyay Shurayx Bin Haani', Aabbihii buu ka wariyay, kolkii ay iyagoo wafdi ah Rasuulka Allaah (SCW) u yimaadeen, waxa uu Nabigu maqlay iyaga oo Haani' ugu yeeraya "Abal Xakam", kaddib wuu u yeeray Nabigu (SCW), wuxuu ku yiri: "Allaah ayaa xakam ah, isaga ayaana xukumka iska leh, ee maxaa adiga laguu naanaysay Abal Xakam (Aabbaha xukunka), Haani' sababtii loogu yeeray magaca ayuu ka sheekeeyay, kaddib Nabigu (SCW) waxa uu su'aalay wiilashiisa midka ugu wayn magiciisa, wuxuu ku jawaabay: Shurayx, Waxaa Rasuulku (SCW) uu markaa ku yiri: "waxa aad tahay Abuu Shurayx", naanaystii Abal Xakam ahaydna meeshii buu ku buriyay. Sababtu waxa ay tahay in Allaah uu yahay Xakam, xukunkana isaga uu leeyahay. Ibnul Athiir oo arrintaas ka hadlaya waxa uu yiri: waxa uu Nabigu (SCW) u nacay naanaystaasni waa si aanan sifadaa Allaah loola wadaagin. Waa hubaal in xadiiskani uu arrintaasi aad u caddaynayo.

Ducada furfurashadda salaatul laylka waxaa ku soo aroortay inuu oran jiray Nabigu (SCW):

(وإليك حاكمت)[٦]

Macnuhuna waa xukunka adiga ayaan kuu kor yeelay, cid kale xukun iguma leh.

Waa hubaal in aayadahaan iyo kuwa kaleba ay si shaki la'aan ah meel saarayaan in xukunka sidiisaba Allaah uu leeyahay, Allaah inuu yahay xakam, taasina ay caqiiddada ka mid tahay, waaba aasaaska caqiiddada qofka Muslimka ah.

Haddii hadalkaasi ah Allaah kaligii uun baa xakam ah, gaarna uu u leeyahay xukunka uu qayb ka yahay caqiiddada muslimiinta, ama qaaciddo uu u yahay caqiiddada, taasu waxaa macneheedu yahay in qofka muslimka ahi uusan cid Allaah SWT sokadii ah u qiraynin xukunka.

Wuxuu qoraagu (Muxamad Shakir Shariif) yiri: "halkaa waxaa ka caddaanaya in qofkii sheegta inuu xakam yahay, oo uu xkunka leeyahay, ha ahaado qof, koox, hay'ad, mu'asasad, gole

---

٦ - صحيح مسلم. ج١. ص٥٣١.

shacab, gole wakiillo, ama barlamaa iwm oo magacyadaas qaata, cidii sheegata xukunka waxay sheegatay inay Allaah xukunka la wadaagto. Taasina qof garanaya xaqiiqada Islaamka kama qarsoonto inay tahay gaalnimo daran oo Rabbiga adduunka lagu diiday.

Waxaa kaloo uu yiri: "waxaan halkaa ka fahmaynaa in qofkii u qira sheegadkaa axad aan Allaah ahayn wuxuu Allaah u qiray shariik, Allaahna intaa aad buu uga sarreeyaa. Waxaan qarsoomaynin in in taasi tahay gaalnimda weyn Allaah baan ka magan galnee.

Kii sheegtaa iyo kan u qiraa labaduba kufri daran bay ku dhaceen, kufrigii diinta ka saarayay.

## Macanaha ereyga "Xukun"

Qoraagu wuxuu ka hadlayaa macnaha ereyga "Xukun" hordhac ahaan si qaddiyadda loo bayaamiyo, waxa uu yiri:

"haddii aannu u noqonno macnaha ereyga "xukun" waxaan arkaynnaa inay macnayaal dhowr ah leedahay, labo ka mid ah ayaa ku xiran mawduuceennaan;

Macnaha koowaad: xukmidda iyo kala-goynta arrimo gaar ah iyadoo la cuskanayo sharci hore u jiray, kaalinta qaalliga halkan waxaa weeye raadinta nusuus shareecadaa ku jirta oo xaaladda markaa taagan ku aaddan, kaddibna wixii shareecadu tustay uu ku xakumo, sidii Allaah uu yiri:

﴿ وَإِذَا حَكَمْتُمْ بَيْنَ النَّاسِ أَنْ تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ ﴾ [النساء: ٥٨]

"Haddii aad kala xukuntaan dadka inaad caddaalad ku xukuntaan" (al-nisaa: 58)

iyo aayaddii kale:

﴿ وَإِنْ حَكَمْتَ فَاحْكُمْ بَيْنَهُمْ بِالْقِسْطِ ﴾ [المائدة: ٤٢]

"Haddii aad wax xukmiso ku xukmi dhexdooda caddaalad" (Al-Maa'ida:42)

Ula jeedka "xukumka" nusuustan iyo wixii la mid ah waa xukminta iyo kala-goynta garta loo fadhiyo iyadoo la cuskanayo shareecada Allaah uu soo dajiyay.

Noocan ka mid ah xukunka ma aha mid gaar u ah Allaah SWT, qofka muslimka ahina looma diiddana ku shaqayntiisa. Dabeecadda noocan xukunka ahi wuxuu ku xiranyahay dhacdooyin gaar ah oo xaddidan, qof walba oo muslim ah oo oofsada shuruudda qaallinimo ee la yaqaan, waa uu samayn karaa xukunka noocan ah."

Qaalligu xukun jeebkiisa kama samaysto, ee waxa uu ula laabtaa shareecada Allaah SWT.

Kaddib waxa uu yiri: "macnaha labaad: xukumid iyo kala-goyn dhacdooyinka iyada oo aan la cuskanin sharci hore, ama la cuskado sharci uu qaalligu ama xaakinku uu jeebkiisa ka dajiyay ama cid kale ay u dajisay.

Noocan xukunka ah ayaa ah "sharci dejin" uu xaakinku jeebkiisa ka abuurto ugu horrayntiiba, isaga oon cid kale ku raacaynin ama cid kale aysan u yeerinaynin.

Macnahan dambe ayaa ah midka mawduuceenna khuseeya.

"Ficilka xaakinku uu sameeyay xukunkani waa inuu jeebkiisa ka dagsaday sharci, iyo inuu caddeeyay wixii xukun ah ee ka dhalan lahaa hadallada, tasarrufka iyo falalka"

Dhab ahaan qaalliga amase xaakinka waxaa dhici karaysa inuu dhacdo gaar ah "mucayan ah" xukun uu isagu sameeyay ku rido. Waxa uu yiri qoraagu: " waxaa macnahaas ereyga "xukun" tilmaamaya qowlka Allaah

﴿ ذَلِكُمْ حُكْمُ اللَّهِ يَحْكُمُ بَيْنَكُمْ ﴾ [الممتحنة: ١٠]

"Kiinnaasi waa xukunka Allaah uu dhexdiinna ku xukumayo" (al-Mumtaxinah: 10)

Iyo aayadda kale:

﴿ وَعِنْدَهُمُ التَّوْرَاةُ فِيهَا حُكْمُ اللَّهِ ﴾ [المائدة: ٤٣]

"agtooda waxaa ahaaday Towraad oo uu xukunka Allaah dhex ahaaday" (al-Maa'ida: 43)

﴿ أَلَا لَهُ الْحُكْمُ ﴾ [الأنعام: ٦٢]

"xukunka isaga uun baa leh" (Al-Ancam: 62)

Ula jeedka "xukun" ee nusuustan iyo wixii la mid ah waa sharci hor leh oo la hindiso si dhacdooyinka loo xakumo, ha ahaadeen kuwa guud ama kuwo gaar ahaaneedba".

Dhab ahaan macnahan labaad waxaa gaar u leh Allaah SWT. Xaqiiqada diinta Islaamka waxa ay qeexaysaa in noocan xukunka ahi uu Rabbul caalamiin gaar u leeyahay, cid addoomadiisa ah oo la wadaagtaana aysan jirin.

Waxa uu yiri qoraagu: "halkan waxaa inooga caddaatay in (wixii Allaah uu soo dajiyay oo lagu xakumo" looga dan leeyahay arrimahan soo socda:

1. Rumayn la rumeeyo sharciga Allaah xaggiisa ka soo dagay, la aqbalo, la raaco, dadka loogu yeero iyo in wax burinaaya aan la samaysanin.

2. Xukumidda iyo kala-goynta garta iyada oo la cuskanayo sharciga Allaah ee ku yaalla kitaabka iyo sunnada.

Wuxuu yiri: "waxaan filayaa inay aad u caddaatay in dadka doonaya (wixii Allaah uu soo dajiyay in la isku xakumo) aysan doonaynin xuduudda sharciga ah oo la fuliyo keliya iyo xeerka qoyska oo la dhaqan galiyo, ee waa gebi ahaamba in la dhaqan galiyo axkaamta sharciga ah ee nusuustu tilmaantay, iyadana wax lagu xukumo, duruufta iyo axwaasha dadkana loo diyaariyo si ay awood ugu yeeshaan inay ku dhaqmaan oo ku taagnaadaan sharciga Allaah SWT. Nidaam meel ka jira tusaale ahaan la oran mayo waa mid Islaamka ku taagan oo ku xukumayo wixii Allaah uu soo dajiyay haddii uusan fursad u siinaynin dadka shaqaalaha ah inay salaadda waqtigeeda ku tukadaan. La oran mayo nidaamku wuxuu ku xukumayaa wixii Allaah uu soo dajiyay isagoo dadka ka xirayo irridaha xalaasha ee cunno, cabitaan iyo guurba ah, oo uu isla markaana u ballaqayo irridaha fisqiga iyo fasaadka iyo anshax xumida. Sidoo kalena la oran mayo nidaam baa xukunka Allaah wax ku xukumaya isaga oo dagaalkii ugu darnaa kula jira ducaadda Allaah dadka ugu yeeraysa, booskana u bannaynaya caqiiddooyinka qalloocan iyo bidcooyinka. La oran mayo nidaam wixii Allaah soo dajiyay buu wax ku xakumayo, walaw dastuurkiisa ay ku xusantahay in mabaadii'da shareecada islaamka iyo fiqiga ay yihiin meesha ugu wayn oo wax kasoo xigtay, iyadoo ay maxkamadihiisu ay furanyihiin dadkana lagu kala xukminayo wax ka hor jeeda` xukunka kitaabka iyo sunnada"

Tani waxa ay ka mid tahay arrimaha caddaynaya in waaqaca uu sheegashada xukminayo, sideedana kuma filla qofka inuu sheegto inuu sharciga Allaah ama shareecadiisa uu rumaysanyahay, ama sheegto inuusan shareecada meel aan ahayn waxba ka qaadanaynin, isaga oo waaqiciisu burinayo arrinkaa, kaasi la oran mayo waa nidaam islaami ah ama mid wixii Allaah soo dajiyay ku xukumaya, waa siday u badan yihiin dowladaha maanta jira. Iska hadal iyo sheegasho weeye waxa ay ku celcelinayaan madaxda ama culumada maanta, waaqac ahaanna waxa ay xulufo la yihiin gaalada, arlada ayay intii awooddooda ah fasahaadinayaan, diinka Allaah meel walba ayay kula dirirayaan.

Intaa kaddib waxa uu ka hadlayaa sifooyinka qofka aanan ku xakumaynin wixii Allaah soo dajiyay. Maxay yihiin sifooyinka qofka ka taga xukunka Allaah wixii uu soo dajiyay? Dhowr sifooyin oo Qur'aanka laga dheehday buu sheegayaa.

Waxaa ka mid ah sifooyinka kuwa ku xukmiya waxaan Allaah soo dejinin:

1. **Gaalnimo**: "Ciddii aan ku xukminin wuxuu Allaah soo dejiyay waa gaalo"

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

2. **Dulmi**: "cidii aan wax ku xukumin wixii uu Allaah soo dejiyay waa daalimiin"

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ [المائدة: ٤٥]

3. **Fisqi**: "ciidii wax ku xukunta waxaan Allaah soo dejinin waa faasiqiin"

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴾ [المائدة: ٤٧]

4. **Iimaan la'aan**

﴿ وَكَيْفَ يُحَكِّمُونَكَ وَعِنْدَهُمُ التَّوْرَاةُ فِيهَا حُكْمُ اللَّهِ ثُمَّ يَتَوَلَّوْنَ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ ﴾ [المائدة:٤٣]

"Siidee bay kaaga xaakim yeelanayan, ayagoo towraad haysta oo xukunka Allaah dhexyaallo, kaddibna ka jeesta? kuwaasi mu'miniin ma aha" (Al-Maa'ida: 43)

﴿ وَيَقُولُونَ آمَنَّا بِاللَّهِ وَبِالرَّسُولِ وَأَطَعْنَا ثُمَّ يَتَوَلَّى فَرِيقٌ مِنْهُمْ مِنْ بَعْدِ ذَلِكَ وَمَا أُولَئِكَ بِالْمُؤْمِنِينَ ﴾ [النور: ٤٧]

"Waxay oranayaan (munaafiqiinta) waxaan rumaynay Allaah iyo Rasuulka, waana addeecnay, kaddibna waxaa jeedsada kooxo ka mid ah, kuwaas ma aha mu'miniin" (Al-Nuur: 47)

﴿ وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَنْ يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ وَمَنْ يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا مُبِينًا ﴾ [الأحزاب: ٣٦]

"Uma ahaanin mu'minka iyo gabadha mu'minadda ah haddii Allaah iyo Rasuullkiisu wax xukmiyaan doorasho, qofki ku caasiya Allaah iyo Rasuulkiisa wuxuu lumay lumitaan cad" (Al-Axzaab: 36)

﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء: ٦٥]

"Maya! Rabbigaa baan ku dhaartaye rumeyn maayaan ilaa ay kaaga soo xukun doontaan wixii dhexdooda ah, kaddibna ay naftoodu wax dhibsi ah ka helin waxaad ku xukunto oo ay isdhiibid run ah isdhiibaan" (Al-Nisaa: 65)

5. **Daaquud u xukuntamid**:

﴿ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ وَيُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَنْ يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴾ [النساء: ٦٠]

"Kuwii miyaadan arkeyn sheeganaya inay rumeeyeen wixii lagugu soo dajiyey iyo wixii lagu soo dajiyey kuwii adiga kaa horreeyey doonayana inay u xukun tagaan daaquudka iyadoo la faray inay ku kufriyaan isaga shaydaankuna uu doonayo inuu lumiyo lumid fog" (Al-Nisaa: 60)

Waxaan shaki ku jirin in qofkii ka jeesta xukunka Allaah uu u jeesanaajo xukunka daaquutka.

6. **Hawa raacid**

﴿ يَا دَاوُودُ إِنَّا جَعَلْنَاكَ خَلِيفَةً فِي الْأَرْضِ فَاحْكُمْ بَيْنَ النَّاسِ بِالْحَقِّ وَلَا تَتَّبِعِ الْهَوَى فَيُضِلَّكَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ إِنَّ الَّذِينَ يَضِلُّونَ عَنْ سَبِيلِ اللَّهِ لَهُمْ عَذَابٌ شَدِيدٌ بِمَا نَسُوا يَوْمَ الْحِسَابِ ﴾ [ص: ٢٦]

"Daa'uudow waxaan kaa yeelnay wakiilkii dhulka ee ku xukmi dadka dhexdooda xaqa oo hawo ha raacin, hawadaas oo kaa lumisa waddada Allaah. Kuwa ka luma waddada Allaah waxay leeyihiin cadaab daran halmaanka ay halmaameen maalinta xisaabta darted" (Saad: 26)

﴿ فَاحْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ ﴾ [المائدة: ٤٨]

"ku xukun dhexdooda wuxuu Allaah soo dejiyay oo ha raacin hawadooda" (Al-Maa'ida: 48)

7. **Doonid xukunka Jaahiliyo**:

﴿ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴾ [المائدة: ٥٠]

"ma waxay doonayaa xukunka jaahiliyadda? Yaa ka xukun wanaagsan Allaah qoomka yaqiinsan agtooda" (Al-Maa'ida: 50)

8. **Munaafaqnimo:**

﴿ وَإِذَا قِيلَ لَهُمْ تَعَالَوْا إِلَى مَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَإِلَى الرَّسُولِ رَأَيْتَ الْمُنَافِقِينَ يَصُدُّونَ عَنْكَ صُدُودًا ﴾ [النساء: ٦١]

"haddii lagu yiraahdo u kaalaya wuxuu Allaah soo dejiyay iyo Rasuulka xaggiisa waxaad arkaysaa munaafiqiintii oo kaa jeesnaya jeesad" (al-nisaa: 61).

9. Ku sifaysnaanta cudurrada qalbiga, shakiga, iyo ku kalsoonaan la'aanta caddaaladda axkaamta sharciga ah.

﴿ وَإِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ إِذَا فَرِيقٌ مِنْهُمْ مُعْرِضُونَ ۞ وَإِنْ يَكُنْ لَهُمُ الْحَقُّ يَأْتُوا إِلَيْهِ مُذْعِنِينَ ۞ أَفِي قُلُوبِهِمْ مَرَضٌ أَمِ ارْتَابُوا أَمْ يَخَافُونَ أَنْ يَحِيفَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ وَرَسُولُهُ بَلْ أُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ [النور: ٤٨-٥٠]

"haddii loogu yeero Allaah iyo Rasuulkiisa xaggiisa si uu u xukumo dhexdooda waaba koox iyaga ka mid ah kuwii jeesta, haddii uu xaqu iyaga u sugnaado ayagoo adeecsan bay u imaanayaan, ma qalbigooda buka, mise way shikiyeen, mise waxay ka baqayaan in Allaah ka eexdo iyo Rasuulkiisu, balse kuwaasi waa daalimiin" (Al-Nuur: 48-50)

10. **Shirki**

﴿ أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ ﴾ [الشورى: ٢١]

"Ma waxay leeyihiin shuruko (Allaah lala wadaajiyo) oo u jideeya diin iyo xukun aanu Allaah u idmin" (Ash-Shuuraa: 21)

**11.** ku sifoobid **gaalo raacnimo**

﴿ وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ اتَّبِعُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ قَالُوا بَلْ نَتَّبِعُ مَا أَلْفَيْنَا عَلَيْهِ آبَاءَنَا أَوَلَوْ كَانَ آبَاؤُهُمْ لَا يَعْقِلُونَ شَيْئًا وَلَا يَهْتَدُونَ ﴾ [البقرة: ١٧٠]

"haddii lagu yiraahdo raaca waxa Allaah soo dejiyay, waxay yiraahdaan waxaan raacaynaa wixii aan ka soo gaarnay aabbayaalkeen, oo (ma iskaraacayaan) haddii aabbayaalkood yihiin kuwo aan Shayna garan oo aan hanuunaynin". (Al-Baqara: 170)

Intaasu dhammaan waa sifooyinka qofka aanan doonaynin inuu u xukuntamo Allaah iyo Rasuulkiisa.

Qoraagu halkan waxa uu ku soo guurinayaa hadallo qaar ka mid ah culumada ee ay ku soo arooriyeen gaalaysiinta qofkii xukumka Allaah iyo Rasuulkiisa ka taga oo u bayra qawaaniinta wadciga ah oo la dagsaday. Waxa uu yiri:

"Ibnu taymiya AUN waxa uu yiri: shaki kuma jiro in qofkii aanan rumaynin waajibnimada (wixii Allaah uu Rasuulkiisa ku soo dajiyay in la isku xakumo) uu yahay Gaal. Qofkii bannaysta inuu dadka ku kala xukumo wixii uu isagu caddaalad u arko isaga oo aanan raacaynin wixii Allaah uu soo dajiyay waa Gaal. Sideedana ma jirto ummad ummadaha ka mid ah illaa waxa ay faraysaa in caddaalad wax lagu xukumo, caddaaladdana waxa ay u arkaanna sida ay odayaashoodu u arkayaan caddaalad, badi dadka islaamka sheegta waxa ay wax ku xukumaan caadooyin iyo dhaqan Allaah aanu soo dajinin, sida xeerarka reer miyiga iyo amarrada dadka ay adeecaan, waxa ayna u arkayaan inay sidaas tahay sida habboon in wax lagu xukumo iyada oo kitaabka iyo sunnada la iska dhaafayo, taasina waa Gaalnimo. Dad badan baa soo islaamay, hase ahaatee, waxa ay wali ku xukumayaan caadooyinkooda iyo dadka ay adeecaan taladooda, dadkaasi haddii ay ogaadaan inaysan bannaanayn in wax aanu Allaah soo dajinin wax lagu xukumo kaddibna ay yeeli waayayaan, balse ay bannaystaan inay wax khilaafsan ku xukumaan, waa Gaalo. (Ku xukmidda wixii Allaah uu soo dajiyay) waxa ay waajib ku tahay Nabiga (SCW) iyo cid kasta oo raacda, qofkii aan sidaas yeelinna waa Gaal".[7]

Xalaalaysiga iyo bannaysashadu halkan waxaa loola jeeda ku dhaqmidda, iyo ka bayridda xukunka Allaah iyadoo la yaqaanno lana fulin karo oo xukun kale loo bayro. Qofka bani'aadanka ahi arrin kuma dhaqmo oo qaanuun kama dhigto isaga oo aanan xalaashanin, taasi waa ay ka duwantahay macasiyo hal mar ah. Hase ahaatee, mar haddii uu yiraahdo waa kan waxa aan wax ku xukumayo ama ina kala xukminaya waa xalaashi, haku dhawaaqo ereyga ama yaanu ku dhawaaqine.

Ibnu Kathiir marka uu fasirayo qowlka Allaah SWT:

﴿ أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ ﴾ [المائدة: ٥٠]

"Ma xukunka jaahiliyada ayey doonayaan, yaa uga fiican Allaah xukunkiisa qoomka wax yaqiinsan" (Al-Maa'ida: 50)

---

٧- منهاج السنة النبوية ٢٢/٣.

Waxa uu leeyahay: "waxa uu Allaah SWT cambaaraynayaa kuwa ka baxay xukumkiisa toosan, ee khayr ku idilyahay, xumaantoo idilna reebaya, oo u bayray wixii ka sokeeyay ee aragtiyo, hawo iyo magacyo raggu ay dajiyeen iyaga oo aanan cuskanaynin shareecada Allaah, sidii ay jaahiliyada ugu xukumi jireen baadidii ay hawadooda iyo taladooda ay ku keeneen, iyo sida ay Tataarkuba ugu xukumaan siyaasadaha boqortooyo ee ay ka [8]qaateen boqorkooda Jinkiz-khan, ee loo yaqaanno Yaasiq ama Yaasaa; waa buug lagu aruuriyay axkaam laga soo qaatay shareecado kala duwan sida yahuudda, nasaarada, islaamka iyo kuwa kale, waxaa kale oo ku jira axkaam uu aragtidiisa iyo hawadiisa ku keenay, kolkaas bay caruurtiisii ka dhigteen sharci ay ku dhaqmaan oo laga hor mariyo kitaabka Allaah iyo sunnada Nabiga (SCW) ku xukmintooda. Qofkii sidaa sameeya oo iyaga ka mid ah, waa Gaal waajib ay tahay in lala dagaallamo ilaa uu u soo noqonayo xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa, oo yar iyo waymba wax kale lagu xukumin".

"Sheekh Cabdiraxmaan Bin Xasan Aala Sheekh baa wuxuu yiri isaga oo sharxaya aayaddii:

﴿ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ ﴾

[النساء: ٦٠]

"Ka waran kuwa sheegan in ay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo wax lagu dejiyey kuwa kaa horeeyey, oo u xukun tagaya daaquudka, iyagoo la faray in ay ku kufriyaan" (Al-Nisaa: 60)

Waxa uu yiri: qofkii u ololeeya xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa waxaan ahayn, waxa uu ka tagay oo ka kaaftoomay wixii Rasuulku (SCW) uu la yimid, wuxuu Allaah u yeelay cid la wadaagtay adeecitaanka, wuxuu khilaafay wixii Rasuulku (SCW) uu keenay ee Allaah uu ku amray kolkii uu ku yiri:

﴿ وَأَنِ احْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ وَاحْذَرْهُمْ أَنْ يَفْتِنُوكَ عَنْ بَعْضِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ إِلَيْكَ ﴾ [المائدة: ٤٩]

"Ku kala xukun dhexdooda waxa Allaah uu soo dejiyey, hana raacin hawadooda, kana digtoonoow in ay kaa fidneeyaan waxa Allaah kuugu soo dejiyey qaarkiisa" (Al-Maa'ida: 49)

qofkii khilaafa wixii Allaah iyo Rasuulkiisu (SCW) ay fareen ee dadka dhexdooda ku xukuma wax aanu Allaah soo dajinin, amase doona arrintaas isaga oo raacaya hawadiisa iyo rabitaankiisa, waxa uu ka xuubsiibtay islaamka iyo iimaanka, xataa haddii uu sheegto inuu muumin yahay, Allaah SWT wuu cambaareeyay qofkii doona arrintaas, wuu ku beeniyay iimaanka ay sheegteen, waxaa sidaa laga dheehday ereyga "ku andacoonaya" kaasoo anfinaya inay rumeeyeen."

Waxa uu yiri Sheekh Muxammad Bin Ibraahiim Bin Cabdilladiif Aala Sheekh: "gaalnimada cad waxaa ka mid ah, qaanuunka hoogay in la dejiyo booska wixii ruuxul amiin (waa jibriile) uu ku soo dajiyay qalbiga Nabi Muxammad SCW, si dadka uu ugu digo isago adeegsanaya Afka carabiga oo cad, si bani'aadanka loogu kala xukmiyo oo kuwii is qabsada loogu kala saaro. Waxa uu Allaah SWT iimaanka ka anfiyay kuwa doonaya inay u xukuntamaan wax aanu Rasuulku (SCW) la imaanin ee munaafiqiinta ah. Allaah waxa uu yiri:

٨- تفسير ابن كثير ٦٧/٣.

﴿ أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ وَيُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَنْ يُضِلَّهُمْ ضَلَالًا بَعِيدًا ﴾ [النساء: ٦٠]

"Ka waran kuwa sheeganaya in ay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey iyo waxa lagu dejiyey kuwii kaa horeeyey, oo u xukuntagaya daaquudka iyagoo la faray inay ku kufriyaan, wuxuuna dooni shaydaanku in uu baadiyeeyo baadi fog" (Al-Nisa': 60).

waxa kale oo uu yiri:

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

"Ciddaan ku xukumin wixii uu Allaah soo dejiyey, kuwaasu waa gaalo" (Al-Ma'ida: 44)

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ [المائدة: ٤٥]

"Ciddii aan ku xukumin wixii uu Allaah soo dejiyey kuwaasi waa daalimiin" (Al-Ma'ida: 45)

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴾ [المائدة: ٤٧]

"Ciddaan ku xukumin wixii uu Allaah soo dejiyey, kuwaasu waa faasiqiin" (Al-Ma'ida: 47)

Sheekhu wuxuu yiri: bal eeg sida Allaah SWT uu ugu tilmaamay kuwa wax aan uu isagu soo dejinin ku xakuma inay yihiin Gaalo, daalimiin iyo faasiqiin, waxaanan marnaba suurta gal ahayn in Allaah SWT uu ku magacaabo Gaal qofka ku xukumaya wax aanu isagu soo dajinin misna uu gaal noqon waayo, balse waa gaal caddaystay, ha ahaato gaalnimo camal ah ama mid ictiqaad ah."

Waxa uu sheekhu bayaamiyay **noocyada gaalnimada ictiqaadka**:

"Midka koowaad: in qofka wax aanu Allaah soo dejinin ku xukumayaa uu dafiro xaqnimada ama mudnaanta xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa, macnahaas isaga ah waxaa laga wariyay Ibn Cabbaas, waxaa doortay Ibnu Jariir, waa in la dafiro xukunka sharciga ah ee Allaah uu soo dajiyay, middaasna wax khilaaf ah kama jiro culumada dhexdooda. Asallada la isku wada raacsanyahay waxaa ka mid ah in qofkii diida asal ka mid ah asallada diinta, ama farac la isku raacsan yahay, ama inkira xaraf ka mid ah wixii uu Nabigu (SCW) la yimid oo qadci ah, inuu yahay Gaal, gaalnimo diinta dibadda uga saaraysa…

Midda labaad: inaanu qofka ku xukumaya wax aanu Allaah soo dejinin dafirin mudnaanta xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa, hase ahaatee, uu aamino in xukunka Rasuulka sokadiis uu jiro xukun ka wanaagsan, ka dhammaystiran, kana koobi og waxa ay dadku u baahdaan in lagu kala xakumo kolkii la isku dhoco; gebi ahaan ka wanaagsan ama kolka la eego dhacdooyinka soo cusboonaanaya ee ka dhalanaya horumarka sabanka iyo xilliyada isa sii beddelaya. Waxaa hubaal ah inay arrintaasi tahay gaalnimo, sababtoo ah axkaamta makhluuqa ee ah qashinqubka maskaxda iyo fadarada fikradaha ayaa laga doortay oo laga sare mariyay xukumka Allaah.

Saddexaad: inuusan aaminin inuu xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa ka mudanyahay, balse u ictiqaado inuu la mid yahay, kanina waxa uu la mid yahay labadii nooc ee aynu soo dhaafnay gaalnimo diinta lagaga baxayo weeye, sababtoo ah wuxuu simay khaaliq iyo makhluuq, wuxuuna diiday oo buriyay aayaddii ahayd:

﴿ ليس كمثله شيء﴾. [الشورى : ١١]

"Wax la mid ah Allaah majiro" (Ash-shuura: 11)

Afraad: inaanu aaminin inay isku mid yihiin xukunkuu wato iyo xukunka Allaah, iskaba daa inuu ka sare mariyee, balse wuxuu ictiqaaday inay bannaan tahay in lagu xukumo wax khilaafsan xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa. Isaguna waa la mid kuwii hore, wixii ku dhacay ayaa ku dhacaya, sababtoo ah wuxuu bannaystay wax nusuus cadcad oo saxiix ah go'aamiyeen inay xaaraan tahay.

Shanaad: waa midka ugu daran, ugu ballaaran, uguna badan diidmada sharciga, ka santaagidda axkaamtiisa, khilaafka Allaah iyo Rasuulkiisa iyo barbaryaaca maxaakimta sharciga ah. Howlaha qaybtan waxaa ka mid ah: diyaar garayn, gurmad siin, u qoondayn, ka dhaadhicin, kala shaandhayn, qaabayn, wajiyo uu yeelid, go'aamin, ku khasbid, tixraacid iyo lifaaq u samayn. Sida ay maxaakimta sharciga ahi u leeyihiin tixraac u laabanaya kitaabka Allaah iyo sunnada Rasuulkiisa, maxaakimtanina waxaa tix raac u ah qaanuun laga soo dhoobdhoobay shareecooyin kala duwan iyo qawaanin fara badan, iyo qaanuunka Faransiiska, Maraykanka iyo Ingiriiska iyo kuwa kale, iyo madaahibta bidcoolayda qaar ee u nasab sheegta shareecada, iyo kuwa kale. Maxkamadahan haatan waxa ay ka jiraan dalalka islaamka badankood, iyagoo diyaar ah oo dhamaystiran, irriduhuna u furanyihiin, dadkuna koox koox ay ugu qulqulayaan, qaalliyaduna wax xukunka kitaabka iyo sunnada khilaafsan oo qawaaniintaas ah bay ku xukumayaan, dadkii bayna ku khasbayaan oo ku sandullaynayaan. Gaalnimada ka wayn maxay tahay, iyo burinta ka wayn ee shahaadada in Muxammad uu Rasuulka Allaah yahay ee la buriyaa maxay tahay?

Nooca lexaad: waa waxa ay wax ku xukumayaan badi madaxda beelaha iyo qabaa'ilka baaddiyaha iyo kuwa la midka ah ee sheekooyinka aabbayaasha iyo awoowayaasha ee caadooyinka iyo dhaqanka u ah, waa ay kala dhaxlaan arrintaas, way isku xukumaan, waxay ku dadaalaan inay markii la is qabsado ku kala baxaan, iyaga oo axkaamta jaahiliyadda dooranaya, kana sii jeedsanaya xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa, laaxawla walaa quwata illaa billaah.

Lexdan arrimood dhammaantood waa gaalnimo ictiqaad ah, oo qofku diinta kaga baxaayo, amaba uusan asal ahaamba ku soo galaynin.

Waxa uu yiri Sheekh Muxammad Amiin Al-Shanqiidi AUN: qowlka Allaah

﴿ وَلَا يُشْرِكُ فِي حُكْمِهِ أَحَدًا ﴾ [الكهف: ٢٦]

"Allaah xukunkiisa qofna lama wadaajiyo" (Al-kahf: 26)

waxaa sidaa u akhriyay toddobadii qiro Ibnu Caamir mooyee "ولا يشرك " macnuhuna waa Allaah SWT xukunkiisa cid kale lama wadaago, balse xukunkiisa kaligii ayaa leh, cid kale oo xukun lehna ma jirto, xalaal waa wixii Allaah xalaal ka dhigay, xaaraanna waa wixii uu xarrimay, diintuna waa wixii uu dajiyay, xukunna waa wixii isagu uu gooyay. Ibnu Caamir isagu wuxuu akhriyay "ولا تُشْرِك " waa reebid, Nabiyow Allaah hau shariig yeelin xukunkiisa cid kale, balse xukunka kaligii gaar uga dhig oo ka sifee xukun in lala wadaago."

Waxaa laga fahmayaa aayaddan:

﴿ وَلَا يُشْرِكُ فِي حُكْمِهِ أَحَدًا ﴾ [الكهف: ٢٦]

in dadka raacaya axkaamta sharci dejiyayaashu ay dajiyeen inay Mushrikiin gaalo ah yihiin. Fahamkaa isaga ahna waxaa lagu bayaamiyay aayado kale, Allaah waxa uu ka yiri qofkii shaydaanka sharcigiisa ku raaca xalaalaynta maydka iyada oo loogu yeerayo "wixii Allaah uu bireeyay":

﴿ وَلَا تَأْكُلُوا مِمَّا لَمْ يُذْكَرِ اسْمُ اللَّهِ عَلَيْهِ وَإِنَّهُ لَفِسْقٌ وَإِنَّ الشَّيَاطِينَ لَيُوحُونَ إِلَى أَوْلِيَائِهِمْ لِيُجَادِلُوكُمْ وَإِنْ أَطَعْتُمُوهُمْ إِنَّكُمْ لَمُشْرِكُونَ ﴾ [الأنعام: ١٢١]

"Ha cunina waxa aan lagu dul xusin magaca Allaah, kaasi waa faasiqnimo, shaydaamaduna waxay u waxyoonayaan saaxiibbadood in ay idinla la murmaan, haddii aad adeecdaan mushrikiin baa tihiin" (Al-Ancaam: 121)

Waxa uu ku caddeeyay inay adeecitaankaas mushrikiin ku noqdeen, shirkigaas adeecitaanka iyo raacitaanka sharci khilaafsan kii Allaah ayaa lagu magacaabay "shaydaanka oo la caabudo" meel kale oo Qur'aanka ka mid ah:

﴿ أَلَمْ أَعْهَدْ إِلَيْكُمْ يَا بَنِي آدَمَ أَنْ لَا تَعْبُدُوا الشَّيْطَانَ إِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُبِينٌ ۝ وَأَنِ اعْبُدُونِي هَذَا صِرَاطٌ مُسْتَقِيمٌ ﴾ [يس: ٦٠-٦١]

"Miyaanan idin kula ballamin beni'aadamoow ineydaan caabudin shaydaan, illeen cadow muuqda ayuu idiin yahaye, oo aniga i caabuda taasina waa waddada toosan" (Yaasiin: 60-61).

Meel kale waxa uu Nabigu (SCW) u bayaamiyay arrinkan saxaabiga Cadiy Bin Xaatim Allaah haka raalli noqdee, kolkii uu aayaddan su'aal ka waydiiyay

﴿ اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ ﴾ [التوبة: ٣١]

"Waxay ka yeesheen culimadoodi iyo suufiyaalkoodi Rabbiyaal Allaah sokadiisa ah" (Towba: 31)

waxa uu u caddeeyay in ay u xalaaleeyeen wixii Allaah xarrimay, wixii uu xalaal ka dhigayna ay ka xarrimeen, iyaguna ay ku raaceen, sidaas ayayna Rabbiyaal kaga dhigteen oo ay ku caabudeen.

Daliillada kuwa ugu sii cadcad baa waxaa ka mid ah halka uu Allaah SWT ku sheegayo suuratul Nisaa' in dadka doonaya inay u xukun tagaan sharcigiisa wax aan ahayn uu la yaabayo sheegashada ay iimaanka sheeganayaan, sababtuna waa iyadoo sheegashadaas iimaanka iyaga oo doonaya inay daaquud u xukun tagaan inay tahay mid been ah oo aad loola cajabo"

Waxa uu yiri: "nusuustaas samada ka timid ee aynu sheegnay waxaa si wayn u soo baxaya in dadkii raaca qawaaniinta la dejiyay ee shaydaanku ku jideeyay carrabka awliyadiisa iyada oo la khilaafayo sharcigii Allaah SWT uu carrabka rusushiisa ku jideeyay, dadkaas waxaa un gaalnimadooda iyo shirkooda uu shaki ka galayaa qof Allaah uu sidooda oo kale basiirada ka madoobeeyay, kana indha tiray ifka waxyiga"

"waxa uu leeyahay Sheekh Muxammad Xaamid Alfaqi: ciddii hadallada faranjiga ka dhigata qawaaniin loogu xukun tago dhiigagga, furuujta iyo xoolaha, kana hormariya wixii uu ogaaday oo u caddaaday inay ka mid yihiin kitaabka Allaah iyo sunnada Rasuulkiisa, qofkaasu shaki

la'aan waa Gaal murtad ah haddii uu kusii adkaysto una noqon waayo xukunka Allaah, magac uu la boxo ama camal uu samaystana anfici mayso, salaad iyo soon iyo xaj toona."

Sheekh Axmed Muxammad Shaakir AUN isagu waxa uu leeyahay: "arrinka qawaaniinta la degsaday waxa uu u cadyahay sida qorraxda oo kale, waa gaalnimo cad oon geed loogu soo gabban, ka fiirsasho iyo cudurdaarna ma leh qof islaamka u nasab sheegtay cidduu dooni ha noqdee inuu ku dhaqmo, qiro ama u madax raariciyo, ee qof walbow is jir, qof kastaana isagaa is xisaabinaya. Culumaduna xaqa haku dhawaaqeen iyaga oon cidna uga haybaysanaynin, hana gaarsiiyeen wixii la faray inay gaarsiiyaan, si kaadsiimo iyo gaabis la'aan ah"

Qoraagu waxa uu soo xiganayaa hadal uu leeyahay Cabdil Caziiz Bin Baaz AUN: "wajiga afraad ee tusinaya inay baadil tahay ololaha qowmiyadda carbeed waa iyada oo ololeheedu iyo isku bahaysigeedu uu bulshada u horseedayo shaki la’aan in la diido xukunka Qur’aanka, sababtoo ah dadka qowmiyadda ku jira ee aanan muslimka ahayn raalli kama noqon doonaan Qur’aanka xukunkiisa, taasi waxa ay ku kallifaysaa madaxda qowmiyadda inay iyagu dagsadaan axkaam jeebkooda ah oo khilaafsan xukunka Qur’aanka si bulshada qowmiyaddu ay noqdaan kuwa u siman axkaamtaas, arrintaasina waxaa caddeeyay rag badan sida aan horey u soo sheegnay. Taasina waa fasaadkii waynaa, waa gaalnimo cad, waana riddo qaawan, Allaah waxa uu yiri:

﴿ فَلا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء: ٦٥]

“Maya! Rabbigaa baan ku dhaartaye rumeyn maayaan jeeroo ay kaaga xaakim dhigtaan wixii kala gala dhexdooda kaddibna aysan naftooda ka helin ciriiri wixii aad xukuntay oo ay hoggaansamaan hoggaansan”

Sidoo kale Allaah wuxuu yiri:

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

“Ciddii aan ku xukumin wixii Allaah uu soo dajiyey kuwaas iyaga unbaa gaalo ah”

Dowlad walba – hadalka Sheekh Bin Baaz ayaa watee – oo sharciga Allaah aanan wax ku xukumin, una hoggaansamin xukunkiisa, waa dowlad jaahiliya, gaal ah, daalimad ah, faasiqad ah weeye, naska aayadda ayuuna ku cadyahay, waxaana waajib ku ah dadka muslimiinta ah inay nacaan oo Allaah daraadii ula colloobaan, waxaa ka reebban inay jeclaadaan oo garab siiyaan, ilaa ay ka rumaynayso Allaah kaligii, oo sharcigiisa ay wax ku xukumayso"

Wuxuu yiri: "xumaanta waxaa ugu xun, munkaraadkana ugu daran: shareecadda Allaah waxaan ahayn oo loo xukun tago sida qawaaniinta wadciga ah (la dejiyay) iyo nidaamyada bani’aadamku samaysteen, caadooyinka awoowayaal iyo dadkii tagay, axkaamta kuhaanta iyo saaxiriinta iyo kuwa faaliya, ee dad badan ay manta ku dheceen, raallina ay ka noqdeen, kuna beddesheen booskii shareecada Allaah ee Nabi Muxammad (SCW) lala soo diray. Waxaa hubaal ah oo shaki uusan ku jirin in taasi ay tahay munaafaqnimo wayn, astaamaha gaalnimada iyo dulmiga iyo fisqiga kuwa ugu waawayn, waa axkaamtii jaahiliyadda ee Qur’aanku uu burburiyay, Rasuulkuna uu ka digay. Kaddibna waxa uu sheekhu ka hadlay daliillo qaar, ilaa uu yiri: tani waa digniin culus oo Allaah SWT addoomada oo idil uga digayo inay ka jeestaan kitaabkiisa iyo sunnada Rasuulkiisa (SCW) oo ay wax kale isku xukumaan, waa xukun cad oo Allaah SWT uu saarayo qof kasta oo shareecadiisa waxaan ahayn wax ku xukuma inuu yahay gaal, daalim, faasiq, ku akhlaaq ah munaafiqiinta iyo dadka jaahiliyada".

Waxa uu yiri Sheekh Cabdalla Bin Qacuud Allaah ha xifdiyee:

"Haddii axkaam sharci ah oo ka mid ah axkaamta Islaamka, axkaamtaasoo ay waajib tahay in xukunkeedu diinta Islaamka aad looga dhex yaqaan oo aanay bannaanayn in laga jaahil noqdo, kaddibna booskeeda la dhigo qawaaniin dad sameeyeen sharcigana khilaafsan oo lagu xukumo dadka laguna khasbo inay u xukun tagaan, ficilka noocaas ah waa Allaah oo lala wadaagay xukunka"

Intaasi waa qaar ka mid ah erayo ama weero ay ka yiraahdeen Culimada qaar qaddiyadda sharci dejinta; sharciyaynta xukun aan Allaah iyo Rasuulkiisu xukumin.

Sheekh Muxammed Qudub arrinkan wuxuu ku leeyahay: fiiro gaar ah

Wuxuu leeyahay "Haddii hadalkeenna aan ka dhigno marka aan dadka u yeerayno: qofkii sharci dejiya Allaah sokadiisa waa Gaal muslimiintu isku raaceen gaalnimadiisa, waxaa suura gal ah taasu inay fahamka dadka u dhowdahay, lamana khaldi karo ama fursad heli mayaan kuwa dadka khaldaya, culumo ha ahaadeen ama dad kale, u suuroobi mayso inay ereyga "xukun" u adeegsadaan wareerinta dadka, sababtoo ah kolka aan dadka ugu yeerno (ha la isku xukumo wixii Allaah uu soo dajiyay) waxaa dhici karta inay shubuhaad galaan, oo dadka lagu baadiyeeyo inuu jiro wax la yiraahdo "gaalnimo aan diinta looga bixin", ama in arrintaasu taabanayso oo keli ah qofkii aanan ku xukumin wixii Allaah soo dejiyay dhammaan dhacdooyinka, dowladuhuna dustuurkooda waxay ku qorteen in Islaamku uu yahay diinta dowladda, shareecaduna ay tahay qaanuunka meesha laga keenay. Hase ahaatee, kolka aannu niraahno qofkii sharci dejiyaa waa gaal la isku raacsanyahay, waxaa suura gal ah in kuwa dadka khaldaya fursad ay wax ku khaldaan waayaan.

Taasi waa ra'yi uu qabo Ustaad Muxammad Qudub oo aanan anigu aad ugu waafaqsanayn, sababtoo ah kuwa qalbiga cudurka ka qaba waayi mahayaan xujooyin kale ay dadka ku wareeriyaan, arrintaas ka sokow kolka aan annagu ka hadlaynno qaddiyadda ah xukunka Allaah ayaa iska leh, waxaan caddaynaynaa xukunka ku dhacaya dadka dejinaya xukunka Allaah wax aanan ahayn, ama masalo ka mid ah masaa'il u jidaynaya sharciga Allaah mid aanan ahayn, ama shareecada Allaah ku beddelanaya tii daaquudka. Sidaas iyadoo ay jirto, bay misana dadka wareerinayaan oo khaldayaan.

Qadiyadda dejinta sharci Allaah aanu soo dajinin; waa isku mid haddii gebi ahaamba shareecada Allaah laga guuro, oo sharci cusub iyo qawaaniin hor leh la jideeyo; ama hal dhacdo in loo jideeyo sharci cusub oo xukunka Allaah lagu beddelo iyadoo inta kale shareecada Allaah lagu dhaqmayo, waa isku mid, culumaduna waa isku raacsanyihiin, kuwii hore iyo kuwan dambeba, in ay gaalo yihiin. Waxa aannu kitaabkan la fududeeyay ku caddayn doonnaa in culumadu isku raacsan yihiin in la gaalaysiiyo qofkii xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa ka taga oo u xukun taga qaanuunka dadku dejiyeen.

Waxa uu yiri: "waxa aynu soo sheegnay oo culumadii hore iyo kuwii dambeba aanu ka soo guurinnay ma aha mid dadka yiri fiqigooda ka tarjumaysa, ama matalaysa tiro hadallo ah oo laga yiri masaladan, ama ijtihaad qayb ka mid ah culumadu ay gaareen, ee waa arrin ka tarjumaysa diinta Islaamka wax laga ogaaday, oo muslimiinta oo idilna ay isku raaceen.

Waa kan al-xaafid Ibnu Kathiir AUN oo inoo sheegaya ijmaaca culumada, waxa uu yiri:

"qofkii ka taga sharciga sugan ama la sugay ee Allaah uu ku soo dejiyay Muxammed SCW-khaatamu al-anbiyaa- oo u xukun taga shareecado kale oo nasakhan waa uu gaaloobay. Sidee

buu noqon qofkii Yaasiq u xukun tagay oo ka hor mariya sharciga Allaah? qofkii sidaa yeela waa uu gaaloobay, siday isku raaceen muslimiinta oo idil".

Ibnu kathiir waxa uu hadalkaa ku caddeeyay in Yaasiq oo ah qawaaniin la dejiyay loo xukun tago oo laga hormariyo shareecada Islaamka ay tahay gaalnimo muslimiinta oo idil ay isku raaceen.

Waxaa sidoo kale ijmaacaas sheegay Sheekhul Islaam Ibnu Taymiya, waxa uu yiri: "waxaa si daruuri ah diinta muslimiinta looga yaqaan oo gabi ahaan la waafaqsanyahay in qofkii xalaaleeya ama banneeya in diinta Islaamka iyo shareecada Muxammad SCW wax aan ahayn la raaci karo waa Gaal. Ereygaas Shaykhul Islaam (qofkii xalaaleya raacitaanka shareeca kale) waxa uu la mid yahay ereygii Xaafid Ibnu Kathiir ee ahaa (qofkii ka taga sharciga lagu soo dejiyay Muxammed SCW oo sharciyo kale u xukun taga). Waxa uu caddeeyay Sheekhul Islaam in qofkii falkaa la yimaada ay gaalnimadiisu tahay arrin diinta Islaamka iyo ijmaaca muslimiinta looga yaqaanno si daruuri ah (jaahil laga noqon karin). Bal waxa uu Sheekhul Islaam bayaamiyay in hadalkaasu la mid yahay in la banneeyo in la raaci karo diinta Islaamka diin aanan ahayn.

Waxaa kaloo uu mawduucan ka yiri: bani'aadanku kolka uu xalaaleeyo arrin la isku raacay inay xaaraan tahay, ama uu xarrimo arrin la isku raacay inay xalaal tahay, ama uu beddelo sharci la isku raacay, waxa uu noqonayaa Gaal murtad ah sida fuqahadu isku waafaqeen, arrintan oo kale ayay ku soo dagtay – sida labada qawl mid ka mid ahi qabo.

Waxa laga soo weriyay Sh Cabdi Caziiz Bin Baaz erayadiisii ahaa: "qof kasta oo bannaysta wax Allaah uu xarrimay oo diinta daruuri looga yaqaan inuu xaraam yahay sida sinada, khamrada, ribada iyo ku xukmidda shareecada Allaah waxaan ahayn, qofkaasi waa Gaal sida muslimiintu isku raaceen".

"Waxa uu yiri Sheekh Cumar Al-Ashqar kaddib markii uu soo guuriyay hadalkii Sheekh Muxammad Bin Ibraahiim AUN: faahfaahintan waxaa inooga caddaanaya in laba qayb oo dadka ka mid ahi ay gaalnimo la hubo ay ku dheceeen:

**Qeybta koowaad**: kuwa sharciyeeyay waxaan Allaah soo dajinin, kuwaasina waa kuwa sameeyay qawaaniin khilaafsan sharciga Allaah, addoomadana way ku khasbeen, ijmaaca ku yimid gaalnimadooda shaki kuma jiro, waana shariigyada Allaah SWT ka hadalayay kolkii uu lahaa:

﴿ أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ ﴾ [الشورى: ٢١]

"Mise waxay leeyihiin gaaladu shurako Allaah oo u jideeyey diin aan Allaah idmin" (Ash-Shuuraa: 21).

waana isla iyaga kuwa laga yiri:

﴿ وَكَذَلِكَ زَيَّنَ لِكَثِيرٍ مِنَ الْمُشْرِكِينَ قَتْلَ أَوْلَادِهِمْ شُرَكَاؤُهُمْ ﴾ [الأنعام: ١٣٧]

"Sidaa oo kale waxaa u qurxiyey in badan oo gaalada ka mid ah dilka caruurtooda shurakadooda" (Al-Ancaam: 37)

Macnuhu waa waxa ay u qurxiyeen wixii sharciyo ee ay dajiyeen iyo wixii qawaaniin ay jideeyeen, waxa ka mid ah culumada yahuudda iyo raahibiinta nasaarada ee ay Yahuudda iyo Nasaaradu ka dhigteen Rabbiyaal Allaah sokadiisa:

﴿ اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ ﴾ [التوبة: ٣١]

"Waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii rabbiyaal Allaah ka sokoow" (Towba: 31)

Axbaartaas iyo ruhbaantaasi ee dajiyay sharci kii Allaah aanan ahayn waa gaalo shaki aanu ku jirin gaalnimadooda, waxa ay beddeleen diintii Allaah iyo sharcigiisa.

**Qaybta labaad**: kuwa adeecay dadka beddelaya sharciga Allaah, iyaga oo og inay khilaafeen diinta anbiyada."

Waxaa cad inuu jiro ijmaac in qofkii sharci Allaah aanu soo dajinin dejiya, ama xaaraam xalaal ka dhiga, ama xalaal xaaraan ka dhiga, inuu gaal yahay muslimiinta oo idilna ay isku raaceen.

## Xeerarka casrigan ee khilaafsan Sharciga Allaah

Ka hor inta aanan u gudbin shubuhaadka ay kaakicinayaan kuwa xaqa diiddan ee cadowga u ah, waxa aan soo bandhigaynaa tusaalooyin qoraagu soo jeediyay oo ku saabsan qaar ka mid ah qawaaniinta xilligan lagu khilaafay sharciga Allaah, umana baahna daliil caddaynaysa khilaafka ula kaca ah ee sharciga Allaah SWT...

Waxa uu yiri: "marka aannu eegno dhinaca xalaasha la xarrimay, qawaaniintani wax kasta oo ay reebayaan, erey ama fal ama dhaqan, oo ku kiciddiisana ciqaab ay ka dhalanayso, sidaana ku noqonaya fal dambiyeed iyo arrin xun oo qofka lagu qabsanayo, qaallina lagu horgaynayo si abaalkiisa loo marsiiyo, taasi waxa macneheedu yahay in qaanuunkani xaaraan iyo dambi uu ka dhigayo arrinkan. Haddii marka arrinkaasi qaanuunkan la dejiyay uu xarrimayo ahaa mid ay bannaysay shareecada islaamka, taasi waxa ay noqonaysaa xaaraantinimayn wax Allaah iyo Rasuulkiisu ay banneeyeen.

Tusaale ahaan waxaanu soo qaadanaynaa guursashadda hal dumar ah ka badan, shareecadu waa ay bannaysay ilaa afar xaas guursigooda si cad oo shaki ku jirin, haddii marka nas qaanuun ahi yimaado oo uu reebo arrintaas si cad, ama guurka haween labaad ka dhaliyo ciqaab jirka ama lacageed ama wax kale, si in qofkii lagu khasbo xaaskii hore inuu furo, taasi waxa ay noqonaysaa reebid iyo xarrimid wax Allaah iyo Rasuulkiisu ay banneeyeen, waana beddelid xukunkii Allaah iyo Rasuulkiisa". Tusaalooyinku waa ay ku badanyihiin waxyaabaha xalaasha ah oo qawaaniintanu ay xarrimeen.

Haddii la eego dhanka xalaalaynta waxyaabaha xaaraanta ah, waxay leedahay dhowr qaab. Waxaa ka mid ah dambiga Sinada. Sinadu waa arrin ay xaaraan maqdac ah ay ka dhigtay shareecada, oo sinnaba aanan u bannaanayn. Haddii marka aynu eegno qawaaniinta sinada reebiddeeda shuruud u samaynaysa, sida in la isku khasbo ee aysan labada dhinac raalli ka wada ahayn ama in gabadhu aysan da' xaddidan gaarin, qaanuunkaasi waxa uu noqonayaa xalaalayn sinada haddii raalli la isaga yahay ama gabadhu ay da'dii loogu tala galay gaartay. Sidaa darteed waxa qawaaniinta qaar ku qoran: "ciqaab kama dhalanayso dambiga gogol dhaafka haddii gabadhu ay qaan gaar tahay, oggolaanteeduna ay wax ku dheceen". Meel kale waxaa ku qoran: "xaaska uu ninkeedu fal sino ah ku sameeyo gurigeeda, waxa ay gar u leedahay inay ninkay rabto ka sinaysato, wax loo raacanayana ma jiraan hadday sidaa yeesho". Sidaa ayaa ku dhigan qaanuunka wadciga ah. "taasi macneheedu waa maxay? Miyaanay ahayn inaysan sinadu wax ciqaab ah la kulmaynin? Sow macneheedu ma aha in qaanuunku aanu u arkin – haddii shuruuddan la helo – fal dambiyeed mutaysanaya cambaarayn iyo ciqaab? Taasi miyaanay ahayn beddelid xukunkii Allaah iyo Rasuulkiisa? Miyaanay ahayn xalaalayn wax Allaah iyo Rasuulkiisu ay xaaraan ka dhigeen?

"Qaababka waxaa kale oo ka mid ah oggolaanshaha iyo ka aamusidda xaaraanta. Haddii qawaaniintu ay arrin nolosha dadka iyo dhaqamadooda ka mid ah ay ka indha laabato, oo farid iyo reebid midna aysan ka oran, samayntiisana wax ciqaab ah ama maamuus aysan ku xirin, taasi waxa ay caddayn u tahay in qaanuunku aanu arrinkan dhib u arkin, samayntiisa iyo dhaafiddiisana baas aysan lahayn. Sababtu waxa weeye qaanuunku – sida aanu soo sheegnay – wuxuu ku shuqul leeyahay xukun u dejinta ereyada, falalka iyo dhaqamada dadka, in wax laga dhaliyo arrimahaas, laguna khasbo dadka ha raalli ahaadeen ama halagu dirqiyee. Haddii marka qaanuunku aanu arrin dadka noloshooda ka dhacda wax xukun ah ka dhalinin, ee uu ka aamuso iskana daayo, waxa ay ku tusinaysaa inuusan qaanuunku u arkin arrintaas wax keensanayo in laga hadlo, sidaana uu iskaga daayay, dadkana waxba uusan kaga khasbin dhankiisa.

Taaasi macneheedu waa maxay? Waxa macneheedu yahay waa la ogolyahay waana mubaax. Haddi marka arrintaasu ay tahay mid shareecadu xaaraantimaysay, macneheedu qaanuunku xaaraanta ayuu banneeyay.

Haddii aannu ka soo qaadno in qof dadka ka mid ah arrintaas uu ku koco, qof kale uu markaa inta istaago maxkamadda u gudbiyo arrinkiisa, haddaba maxkamaddu wax caynkee ah bay ku kala xukumaysaa? Qaalligu kama helayo qaanuunka wadciga ah ee lagu dhaqmayo wax qofkan lagula xisaabtami karo, wuxuuna ku xukumayaa in dacwaddii lagu soo oogay aysan meel mari karin, sababtoo ah ereygii, falkii ama dhaqankii uu la yimid qaanuunku ma reebin xaaraanna kama dhigin, wax ciqaab ahna kama dhalinin, sidaa awgeedna wax dhib ah kuma jiro wixii uu sameeyay (qaanuunka kama hor imaanin).

Tusaale usoo qaado ribada; nusuusta shareecadu si cad oo go'an bay u xarrintay, Allaah SWT ayaa kitaabkiisa ku xarrimay, sunnada Rasuulka (SCW) ayaa xarrintay, muslimiinta oo idilna way isku raaceen xaaraannimadeeda. Hase ahaatee, qawaaniinta wadciga ah ka heli maysid haba yaraatee wax tilmaan ah reebid ama ka digis ama ciqaab qofkii sameeya ku dhacaysa, balse waxaaban arkaynaa oggolaansho iyo ka aamusid ka badan, waxaaba la nidaaminayaa qaabka ribada ee dadka iyo hay'adaha u dhexeeya ku hirgali lahayd, waana la isku boorrinayaa"

Haddaba, shardi ma aha inay jirto sharciyayn, haddiiba laga aamuso samaynta wax Allaah iyo Rasuulkiisu xaaraan ka dhigeen, aamuskaasi waa sharciyeynta wax ka soo hor jeedda sharciga Allaah, waana xalaalayn wax Allaah SWT uu xarrimay.

Qawaaniinta wadciga ah oo lagu beddelo sharciga Allaah soo dajiyay, iyadoo xarrimaysa xalaasha la isku raacay xalaalnimadeeda, xalaalna ka dhigaysa xaaraanta la isku raacay xaaraannimadeeda, amase ka aamusaysa falal iyo dhaqamo Allaah iyo Rasuulkiisu ay xarrimeen, intaaba waa gaalnimo muslimiintu isku wada raaceen.

## Mugdiga la galiyey Gaalnimada qofkii ka taga Xukunka Allaah

Intaa kaddib waxa aannu u imanaynnaa qaar ka mid ah shubuhaadka iyo is-daba marinta ay soo arooriyaan kuwa cadowga ku ah xaqan ee sheeganaya islaamka; shubuhaadkan badankood waxa ay ka yimaadaan dad islaam sheeganaya, ha ahaadeen dadweynaha caadiga ah ama dadka ku howlan xarakaadka islaamka, ama culimada dowladda u shaqeeya. Waxaa ka mid ah shubuhaadka:

**Shubhadda koowaad**: waa xadiiskii Rasuulka (SCW) ee ahaa: (qofkii yiraahda Laa ilaaha Illallaah waxa uu galayaa jannada). Waxa ay suuraysanayaan in hadalkaa kaligii, oo lagu

dhawaaqo ereyadaas iyo xarfahaas ay qofka siinayso xukunka Islaannimada. Warkaas waa waxba kama jiraan:

1- Xadiiskan laguma sheegin in Rasuulka la rumeeyo (SCW), taasi waxa macneheedu yahay haddii xadiiska sida uu u muuqanayo aan u qaadanno in qofkii yiraahda "Laa ilaaha Illallaah" ee aanan oranin Muxammadun Rasuulullaah uu noqonayo qof muslim ah, taasina waxa ay ka horimaanaysaa wax diinta si daruuri ah looga yaqaanno.

2- Qowlku (dhihidda) haddii ay xadiiska Nabiga (SCW) iyo luqadda carabiga ay ku soo aroorto waxa macneheedu yahay in la qiro waxa ka dhalanaya qiraalkaas. Haddaba qofka yiraahda "Laa ilaaha Illallaah" waxa uu la mid yahay qof ka markhaati kacay "Laa ilaaha Illallaah". Haddii arrinku uu qowl iyo dhihid carrabka ah ku ekaan lahaa ciyaar bay iska noqon lahayd, oo maba loo baahdeen in wax lays faray lala yimaado wax la iska reebayna laga fogaado. Maxay noqonayaan axaadiista gaalaysiinaysa qofka salaadda ka taga? "qofkii salaadda ka tagaa waa uu gaaloobay" amase kii ahaa "arrinka annaga iyo iyaga noo dhexeeya waa salaadda, qofkii ka tagaa waa uu gaaloobay". Mar haddii falku aanu soo galaynin gaalaysiinta ee in afka laga yiraahdo "Laa ilaaha Illallaah" ay ku egtahay sheekadu, waxa ay noqonaysaa dheeldheel inuu Nabigu (SCW) yiraahdo – waa uu ka nasahan yahay arrinkaas – qofkii salaadda ka tagaa waa gaal, salaadduna waa fal ee ma aha qowl.

3- Waxa ay muslimiintu isku waafaqsan yihiin in qofkii bannaysta arrin daruuri looga yaqaanno diinta islaamka inuusan bannaanayn, waa uu gaaloobay, bannaysigaasi ha ahaado fal la sameeyo ah ama fal la iska daayo.

Haddaba, shubhaddan ma soconayso, waxa ayba ka hor imaanaysaa manhajka iyo qaacidada usuuliga ah (fiqhiga) ee aynu ku sheegnay horraanta hadalkeenna, ee ahayd in qofka muslimka ahi ama qof walba oo doonaya inuu barto xukun ka mid ah axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisa, waxaa laga rabaa inuu soo aruuriyo wixii aayado iyo axaadiis ah ee ku soo arooray arrintaas, kaddibna uu eego sida ay asaxaabadii iyo quruuntii fiicnayd u dabbaqeen iyo wixii ay ka yiraahdeen, kaddib ayuu xukunkeeda la soo baxayaa.

4- Waxaa jira axaadiis fara badan oo qiraya in shahaadada "Laa ilaaha Illallaah Muxammadan Rasuulullaah" ay tahay inay la socoto in lagu gaaloobo wax kasta oo Allaah sokadii la caabudo.

5- waxaa jira axaadiis kale oo qiraya wax dheeri ah iyo waxyaalo wax xaddidaya, oo caddaynaya in ereyga "Laa ilaaha Illallaah" kaligii aanu dadka siinaynin sifada Islaannimada – sidii aannu horay u soo sheegnay – ilaa shuruudeheeda laga xaqiijinayo; sida cilmiga, run ka sheegidda, yaqiinta, daacadnimada, aqbalaadda, jacaylka, iyo bari ka noqoshadda wixii khilaafsan kalimaddaas.

Tani waa shubhadii koowaad, waana dhacdayoo wax kama jiraan aan qiima lahayn bay noqotay.

**Shubhadda labaad**: waa ereygii Ibnu Cabbaas laga soo xigtay ee ahaa "Gaalnimo kasokaysa gaalnimada runta ah"(gaalnimo aan diinta looga bixin, si faahfaahsan buuna uga hadlay qoraagu.

Waxa uu yiri: "aqwaasha ku soo aroortay fasirka aayadda ee ay mufassiriintu ka wariyaan Ibnu Cabbaas iyo rag kale, waana arrin sax ah inuu Ibnu Cabbaas iyo rag kaleba laga soo guuriyay. Hase ahaatee, su'aashu waxa ay tahay oo dadka arrintan ka hadlayaa ay jawaab u helaan ay tahay: ereygaan yaa laga yiri? Ama loola jeeday?

Ereygan miyaa laga yiri qof kasta oo ku xukuma waxa aanu Allaah soo dajinin sabab la'aan iyo shuruud la'aan?

Ma waxaa laga yiri madaxda aanan aqbalin sharciga Allaah dhammaantiis ama qayb ka mid ah?

Ma waxaa laga yiri qof beddelay sharciga Allaah dhammaantiis ama qayb ka mid ah?

Ma waxaa laga yiri qof sharciga Allaah ka doortay sharci kale?

Ma waxaa laga yiri qof sharciga Allaah gabigiisa ama qayb ka mid ah gadaal isaga tuuray, lana yimid qaanuun wadci ah oo sharciga Allaah uu ka hormarinayo, uuna siinayo maamuus iyo maqaam ka sarreeya sharcigii Allaah uu soo dajiyay

Ma waxaa laga yiri qofkii ka dhigay in haddii la is qabto ay tahay in loo xukun tago wixii dadku ay caqligooda iyo hawadooda ay ku dajiyeen, ee sharciga Allaah aanan u tiirin.

Ma waxaa jiray xilligii Ibnu Cabbaas Allaah haka raalli noqdee iyo culumadii kaleba qof ka mid ah madaxda ama dadka u dhow dhow oo wax caynkaas ah sameeyay, si markaa loogu qaato in iyagaa laga hadlayay.

Hal jawaab ayaa taal waxayna noqonaysaa in aysan sidaa dhicin weligeed. Waxaa taariikh ahaan sugan inaysan dhicin laga soo billaabo xilligii saxaabada Allaah raalli haka wada noqdee ilaa ay ka yimaadeen nimankii la oran jiray Tataarka oo ay dhulkii islaamka qabsadeen, marna ma dhicin in nin xaakim ah uu jideeyo sharci ama qaanuun burinaya sharciga Allaah oo uu markaa faafiyo inuu yahay sharci hirgalay oo dadka lagu kala xukminayo. Waxaa arrin caynkan oo kale ah ugu horreeyay Tataarku markii ay dhulkii islaamka qabsadeen oo ay shaaciyeen in buuggoodii Yaasaq uu yahay sharci hirgalay oo la raacayo dadkana lagu kala xukminayo.

Waxaa inoo caddaatay wixii aannu ka soo guurinnay Xaafid Ibnu Kathiir ee horey aanu u soo marnay in arrintaasi ay tahay Gaalnimo la isku raacay.

Haddaba, maxaa xakamaynaya oraahdooda "gaalnimo kasokaysa gaalnimada"?

Waxa uu yiri: waxaa waajib ah in la xuso laba asal oo muhiim ah ka hor inta aanan la galin qaddiyaddan;

**Asalka koowaad**: qofkii aqbali waaya xukun ka mid ah axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisa, ama wax ka yimid Allaah iyo Rasuulkiisa, isaga oo og inay ka mid yihiin diinta Allaah, waa uu gaaloobay, sababtoo ah xaqiiqada Islaamku waxa ay tahay in si buuxda la iskugu dhiibo Allaah kaligii, oo la aqbalo wax kasta oo Allaah iyo Rasuulkiisa ka yimid. Qofkii haddaba is dhiibi waaya, oo diida inuu u hoggaansamo xataa hal xukun oo ka mid ah axkaamtiisa waa uu kibray, qofkii isu dhiiba oo u hoggaansama Allaah cid aan ahayn waxa uu la yimid shirki. Labada arrimba waa riddo iyo diinta islaamka oo laga boxo. Qofku ma noqonayo muslim jeer uu si buuxda ugu hoggaansamo Allaah isaga oo aanan cidna la wadaajinaynin.

**Asalka labaad**: qofkii aqbala waxa Allaah iyo Rasuulkiisa ka yimid ama ay xakumeen, intaa kaddibna macsiyo la yimaada oo xaaraan ku dhaca, isaga oo aanan xalaashanin, oo qirsan dambigiisa iyo falxumadiisa, waa muslim, ma aha gaal, waxa uu ku jiraa mashii'ada Allaah, hadduu doono waa uu cadaabi hadduu doonana waa uu u dambi dhaafi, ugu dambayna waxa uu galayaa janno Allaah idankii.

Asalka koowaad waxaa uu oranaayo qof kasta oo muslim ah oo Allaaha waaxidka ah ee qahaarka ah u qiray Ilaahnimadiisa, oo Nabi Muxammadna u qiray Nabinimadiisa, qofka aanan sidaa oranin maba aha muslim. Asalka labaad waa qowlka Ahlu Sunna Waljamaaca ee Saxaabada iyo taabiciinta iyo dadkii raacay ee aanan dambiga guud ahaan wax ku gaalaysiinnin, dadka macaasidu ka dhacdo ahna naar ku waarinin, waana tay uga duwan yihiin khawaarijta iyo muctazilada iyo wixii soo raaca.

Haddii ay labadaa asal noo caddaadeen, sheekadu waxa ay noqonaysaa macsiyooyin iyo fal dambiyeedyo marmarka qaar ay ku kici jireen dadka caammada ah, marmarka qaarna dadka madaxda ah iyo amiirrada. Khawaarijtu waxaa manhaj u ahayd in qofkii Kabaa'ir la yimaada inuu gaal yahay, haddii ay arkaan qof xukunkiisa ku tacaddiyay ama dulmi xakumiyay, waxa ay ku xakumi jireen gaalnimo iyaga ka duulaya fahamkooda aayaddan:

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

Mana aysan kala soocin kuwa soo galaya asalka koowaad iyo kuwa galaya asalka labaad, waxayna dhammaan wada dejiyeen hal meel.

Kaddib markii sidaa loo caddeeyay oo loo bayaamiyay macnaha ereyga "gaalnimo kasokaysa gaalnimada" waxaa baadiyayn ula kac ah iyo jaahilnimo qaawan noqonaysa in lagu doodo hadalladaas oo loo daliishado inaanan la gaalaysiinin madaxda iyo qaalliyaasha dagsaday qawaanin burinaysa axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisa, oo ka dhigay sharci hirgalay iyo xeer guud oo dadka lagu kala saaro, sida hadda ka jirta inta badan dhulalka muslimiinta, iyaga oo axkaamtii sharciga Allaah uu ku soo dajiyay Nabi Muxammad (SCW) ka doortay kuna beddeshay qawaaniin wadci ah oo ay ka soo xigteen gaalada Allaah la dirirka ah ee Yahuud, Nasaaro iyo kuwa asnaamta caabuda, waxayna ka dhigeen iyada in wax lagu xukumo loona xukun tago.

Sidaa awgeed waxa uu leeyahay Sheekh Axmed Muxammad Shaakir isaga oo ka hadlaya ereyga "gaalnimo kasokaysa gaalnimada": hadalladaas laga soo xigtay Ibnu Cabbaas iyo qayrkiisa waa waxaa ay ku cayaarayaan kuwa dadka baadiyaynaya ee xilligan aynu joogno ee cilmina sheeganaya iyo kuwo kaloo ku dhiirran diinta, waxa ay ka dhigayaan cudurdaar lagu bannaynayo qawaaniinta wadciga ah ee lagu salladay dhulalka muslimiinta.

Waxa sidoo kale hadalladan ka hadlay walaalkii Al-Callaama Al-Ustaad Maxmuud Muxammad Shaakir, waxa uuna raddiyay kuwa doonaya inay qiil ugu helaan madaxda sharciga ka tagtay

Waxa uu caddaynayaa qoraagu sifada saxiixa ah ee sharciga ah ee uu leeyahay qofka falkaa sameeya, waxa uu yiri: falkaasi macnihiisu waa Allaah iyo xukunkiisa oo laga jeesto, la naco diintiisa, axkaamta gaaladana laga doorto xukunka Allaah, waa gaalnimo aanu qof ahlul qibla ah shaki ka qabin, haba la isku khilaafsanaado gaalaysiinta qofka hadalkaa oranaaya oo u ololaynaaya.

Waxa uu yiri intaa kaddib: markaynu halkaa marayno waxaa waajib ah inaan adkaynno dhowr arrimood oo ay ka mid tahay:

**1-** Ereyga "gaalnimo kasokaysa gaalnimada" macneheedu ma aha yarayn iyo fududayn dambigaasi wayn. Sidaa darteed baa Sheekh Muxammad Bin Ibraahiim Aalashaykh AUN waxa uu ka yiri: arrintan haddii aysan diinta ka saarin, haddana waa macsiyo aad u wayn oo ka wayn kabaa'irta sida sinada, khamrada oo la cabo, tuuganimada, been lagu dhaarto, iwm,

macsiyo Allaah kitaabkiisa uu gaalnimo ku magacaabay ayaa ka wayn macsiyo aanu ku magacaabin.

**2-** Dadkan u tiiriyay Ibnu Cabbaas iyo culumada kale inaysan gaalaysiinaynin madaxda qawaaniinta wadciga ah ku beddelatay axkaamta sharciga ah kana hormariyay, ee waajibka ka dhigay in wax lagu xukumo loona xukun tago, dadka sidaa yiri iyagoo xiganaaya ama cuskanaaya qowlka (gaalnimo kasokaysa gaalnimada) been abuurasho weyn ayay ku been abuurteen ibnu Cabbas iyo culimadaas. Mana jiro qof soo guurin kara hal xaraf oo Ibnu Cabbaas iyo qayrkiisaba ay leeyihiin oo caddaynaya inaysan madaxdaa la xusay gaalo ahayn, sidee bay ku dhici kartaa arrintaasi iyada oo gaalaysiintoodu ay tahay mid la isku waafaqay oo ijmaac ku yimid sida aanu soo sheegnay?

**3-** Ereyga "gaalnimo kasokaysa gaalnimada" waxaa si xad dhaaf u adeegsaday laba koox oo dadka ka mid ah, oo aad u kala fog.

**Kooxda koowaad**: waa kuwa dadka baadiyaynaya ee cilmiga sheegta, diinta Allaahna ku dhiirran, u dagdagaya raalli galinta kuwa suldaanka leh, aad ugu dadaalaya raaxadooda iyo shahwaadkooda, una hanqaltaagaya dhaldhalaalka nolosha adduunyo... Waxa ay sidaa u oranayaan si ay suldaanka agtiisa uga helaan martabo iyo boos sare, maal adduunyo, mansab iyo madaxtinnimo.

﴿ وَيَشْتَرُونَ بِهِ ثَمَنًا قَلِيلًا ﴾ [البقرة: ١٧٤]

**Kooxda labaad**: waa dad cilmiga sheeganaya iyo ardaynimo; waxa ay eegeen ereyga Ibnu Cabbaas iyo culumada kale, mana aysan eegin umana kuur galin fiqiga ereygaas duruuftii lagu yiri iyo waaqaca sidii loo qabadsiin lahaa. Waxa ay u qaateen in gaalaysiin la'aanta qofkii qawaaniin ka hor imaanaysa Axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisa ka dhiga sharci hirgalay iyo xeer la raaco, inay tahay fatwo salafi ah, oo xukunka la saarayo madaxda wax walba beddelay uu yahay Gaalaysiin la'aan, loona arkayo inay yihiin muslimiin iyada oo laga duulayo ereyga "gaalnimo kasokaysa gaalnimada". Sidaa awgeed bayna ereygii ku celceliyeen, oo sanadkiisa iyo sidii loo wariyay soo aruuriyeen, dadkii dhexdoodana ku faafiyeen inuu isagu yahay mad-habka salafka ee ay habboontahay in la raaco. Qaar ka mid ah baaba intaa ka sii daray, oo erey kasta oo khilaafsan ra'yigoodaas bidco ka dhigay ay tahay in la iska daayo lagana towbad keeno.

Dadkaas qaflada ku sugan ee waaqaca an la noolayn, iskana ridaya fatwooyin iyo axkaam sidii inay noolyihiin qarnigii koowaad iyo labaad ee hijriga, ee aysan noolayn qarniga afariyo tobnaad iyo shaniyo tobnaad, kuwa caynkaas ah waxaan u soo aroorinaynaa hadal sugan oo uu leeyahay imaam ka mid ah imaamyada mad-habta salafkeenna suuban ee xilligiisa joogay, kaasuna waa Xaafid Ibnu Qayim aljowsiya. Waxaa suurtowda inuu nagu kaalmeeyo inaan masaladan xaqa ku fahamno, sheekhu waxa uu bayaaminayaa noocyada fahamka ee keenaya xaqa in wax lagu xakumo: "uma suura galayso muftiga iyo xaakinkaba inay fatwoodaan ama xukun ay gaaraan ilaa laba arrin laga helo.

**Kan koowaad**: waaqaca fahamkiisa iyo fiqigiisa, iyo kala soo bixidda dhabnimada wixii dhacay iyada oo la adeegsanayo astaamo iyo caddaymo, si cilmi loogu yeesho.

**Kan labaad**: in la fahmo waxa waaqacan waajibka u ah, in la fahmo xukunka Allaah kitaabkiisa iyo Rasuulkiisu ka qabaan waaqacaan, intaa kaddibna lagu dabbaqo.

Kaddib waxa uu yiri isaga oo Ibnul Qayim soo xiganaya: "arrinkaau waxa uu ku dhisan yahay laba asal: midkood waa aqoonta waaqaca sida uu yahay iyo dadka waaqacooda; midka labaadna waa aqoonta xukunka Allaah ee waaqacan oo kale, kaddibna wuxuu faahfaahin u galay labada asal", halkanse faahfaahintaas kuma gali karno.

Mowduuca "gaalnimo kasokaysa gaalnimada" sidaas ayuu u cadyahay, garashada waaqaca, iyo fahamkiisa, iyo axkaamta oo la dul dejiyo waaqacaas kaddib markaan ogaanno halka xukunkaasi ku xiran yahay waa arrin aad u muhiim ah ka hor inta aanu qofku bixinin fatwo ay dhici karto in hore loogu fatwooday waaqac ka duwan kan hadda loo fatwoonayo.

Waxa uu yiri: " maaha aragti sax ah in loo qaato fatwada salafkii baa yiri oo kaliya kaddibna lagu dabbaqo waaqacaan aynu joogno, ilaa la ogaado halka ay ku xirantahay, xaalka iyo waaqaca laga yiriba. Haddii qofka muftiga ahi ama ka hadlaya axkaamta sharciga ah ee salafka laga soo xigtay uu adeegsado iyadoo ku xakamaysan shuruudaheeda, fatwadaasi fatwadu salafi ayay noqonaysaa. Haddiise laga jaahil noqdo, ama laga bayro jidkeeda, oo hadalkoodii xakame iyo qayd la'aan la adeegsado fatwadu noqon mayso mid salafi ah, xataa haddii ereygu ama hadalkaasi uu dhab ahaan uga yimid salafka".

Waxa aannu ka leennahay shubhaddan: inta ugu daran is dabamarintaan taagan waa iyadoo aan waaqaca la fahmin amaba laga magax taago waaqaca.

Inta badan dadka xaqan la colka ah waxa ay mujtamaca maanta jira siinayaan sifada Islaamka, taasoo ah is-daba marina ama marin habaabin, sababtoo ah isku dayi mayaan inay ogaadaan waaqacan kaddibna ay miisaanka saxda ah ee islaamka saaraan, iyo wixii Allaah iyo Rasuulkiisu u xaddideen dabeecadda bulshada muslimka ah iyo astaamaha muslimiinta. Waxaa hubaal ah in mujtamaca muslimka ah shareecada Allaah uu hoos harsado una keliyeelo Allaah Ilaahnimada iyo suldaanka, diidana sharci wax walaboo Allaah uusan soo dejinin, mujtamaca muslinka inuu saa yeelo kasokow waa in dhammaan xubnahiisa iyo kooxahiisa uu ka kooban yahay ay ku toosnaadaan amarka Allaah una hoggaansamaan qiyamka Allaah amray iyo Rasuullkiisu.

Suuragal noqon mayso in qiyamka iyo caadooyinka iyo dhaqanka bulshadu ay is beddelaan, oo ay noqdaan kuwa hareer marsan kitaabka iyo sunnada, caadooyinkaasuna dadka dhexdooda ay ka yihiin kuwa la isku raacsanyahay bal loo arko horumar iyo ilbaxnimo; suurogal noqon mayso iyagoo afkaartaa, dhaqannadaa, kitaab Allaah kasoo horjeeda wata inay mulimiin sii ahaadaa.

Waxaa hubaal ah in qofka sidaa u arkaya uu iska fogeeyay dhammaan halbeegyada iyo axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisu gooyeen, waxa uuna cuskaday dadkan taariikhdoodi hore sida ay ahaayeen. Waxa ay eegayaan waa in dadkanu ay yihiin ubadkii ka haray qolo bari muslimiin ahaan jirtay, arrintaas ayayna ka dhigeen xakamka kali ah ee loo cuskanayo Islaamnimadooda, iyo qaar ka mid ah muuqaallo haraadi ah oo had iyo goor laga helayo mujtamac kasta oo mar uun dabbaqi jiray islaamka. Mujtamac kasta oo diin lahaa waxaa ka sii muuqanaya haraadi fudfudud oo aanan saamayn ku lahayn gunta bulshada iyo xukunkeeda, hase ahaatee waa muuqaallo xiriir taag daran u samaynaya ama ku xiraaya tagtadoodii iyo taariikhdoodii.

Shaki kuma jiro in dhibka uu ka yimid aqoon la'aanta waaqaca, misna fataawa hore iyo axkaam salafku ay ka qoreen dhacdooyin iyo arrimo gaar ah oo mujtamac muslim ah ka dhacay, oo dhinac walba kaga duwan bulshada maanta ay fataawadaas hore dul saarayaan. Taasi waa hubaal inay jaahilnimo ama is-daba marin haysata dadka ay tahay, oo ka haysata xukun in la

saaro waaqaca u qalma, ama si usuul ahaan haddii loo dhigo "waa inay midoobaan halka xukunka uu dhacayo iyo cilladdiisaba si la isugu qiyaaso, waxaa lagama maarmaan ah si qiyaastu sax u noqoto in ay wadaagaan cilladda xukunka, si uu xukunku dhacdo uga gudbo oo mid kale loo saaro.

Tani waa is-daba marin ka imanaysa kuwa aqoonta leh, iyo jaahilnimo ka imanaysa kuwa aanan wax aqoonin, hase ahaatee, labadooduba cudurdaar ku heli mayaan, sababtoo ah irridku waa u furan yahay qofkii xaqa doonaya inuu garto. Waxaanu shaki ku jirin in dhibka ugu wayn ee haysta xilligan dadka xaqa wata uu yahay inay waajahayaan dad sheeganaya islaam, oo sheegashadaasna u cuskanaya sida ay bari ahaan jireen, iyo raadad haraadi ah oo noloshooda ka muuqda, oo ay kala hareen faracii muslimiintii hore ee nabiyada raacay; Masaajid inay jiraan iyo dugsiyo Qur'aanka lagu xifdiyo, iyo noocyo kala duwan oo cibaadaysi ah. Kuwaasi oo dhaan muslimiin ka dhigi maayaan, xataa haddii cibadooyinkaa haraadiga ah ay sida ugu fiican u gutaan, maxaa yeelay waxaa ka maqan asaasyo badan, waxayna sameysteen sharciyo badan oo jeebkooda ah.  Allaah SWT waxa uu Rasuulkiisa (SCW) faray inuu ku yiraahdo Ahlu kitaabka Yuhuud iyo Nasaaroinaanay waxba ku sugnayn, iyada oo ay noloshooda ka jirto haraadigii diintii Nabi Muuse iyo Nabi Ciise oo ay u xukun tagayeen, mowlacyo iyo meelo ay ku cibaadaystaanna way lahaayeen. Hayeeshee, waxaa Nabiga (SCW) la amray inuu ku yiraahdo:

﴿ قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَسْتُمْ عَلَى شَيْءٍ حَتَّى تُقِيمُوا التَّوْرَاةَ وَالْإِنْجِيلَ ﴾ [المائدة: ٦٨]

"Waxaad dhahdaa Ahlu Kitaabkoow waxba ma tihidiin inta aad ka oogtaan Toowraad iyo Injiil" (Al-Maa'ida: 68)

ilaa aad ka oogtaan towraad oo idil iyo injiil oo idil. Towraad iyo Injiil waxa ay ugu yeerayaan inay rumeeyaan risaalada u dambaysa ee Nabi Muxammad, oo ay dhammaan islaamka dib ugu noqdaan. Waa sidii iyada oo loogu yeerayo inay ku dhagganaadaan wixii Rasuulka Allaah (SCW) uga keenay Allaah agtiisa, wixii ay sameynaayeen ee cibaado iwm, waxba lagama soo qaadin, balse hal bacaad lagu lisay baa laga dhigay, waxaa lagu yiri: (Waxba ma tihidiin inta aad ka oogtaan Toowraad iyo Injiil).

Sidaas oo kale ubadkii ka haray Muslimiintii hore ee xilligan jooga, haraadigaasu noloshooda ayuu ka muuqdaa muuqasho mayd ah oo aan ruux lahayn. Waxaad arkaysaa marmarka qaar iyaga oo u qasdaya inay sameeyaan muuqaalladaas, dacaayadna u sameeyaan si ay dadka aanan garan xaalkooda ugu sii dagmaan waaqaca caynkaas ah. Waxa aanu arkayno ee ah dadaalka lagu dadaalayo xajka iyo cumrada, dadka sida loogu fududaynayo xajka iyo cumrada, idaacadaha iyo telefishinnada Qur'aanka kariimka ah laga sii daynayo, jiritaanka golaha sare ee arrimaha Islaamka, xarumaha cilmi baaridda Islaamka, jaamacadda As-har, xarumaha iyo hay'adaha diiniga ah ee faraha ka batay, dhammaan arrimahaas waxaa looga dan leeyahay inuu sii jiro been abuurka iyo dhagarta, si kuwa ku dagani muuqaallada haraadiga u sii dagnaadaan, iyo si aanay u dhagaysan dadka xaqa wata markii ay ku yiraahdaan bulshadaan wax walba waa ay ka tagtay, dad yahow idinkuna waxba kuma sugnidin(diin mahaysaan), waxa ay oranayaan: sidee baanan waxba ugu sugnayn? Waxan iyo waxaas iyo keer baannu haysannaa. Waxaa hubaal ah in tani ay ka mid tahay caqabadaha ugu waawayn ee dadka ka hor taagan xaqa inay fahmaan, waana waxa ay cadowga Islaamka uga faa'idaystaan cabsi galinta iyo been u sheegidda dadka.

Jaahiliyyadu dhab ahaan wax walba way ka faa'idaysanaysaa, wax walba ayay u adeegsanaysaa inay dadka diinta uga celiso, ha ahaato samaynta islaam iyo muuqaallo been

abuur ah, waxay soo reebanayaan muuqaallo islaam ah oo ay shacabka ku maaweeliyaan, kaddibna dadka ku cabsiiyaan dambiga "gaalaysiinta muslimiinta", ama qofkii Islaamka dadka ugu yeera oo xagjirnimo iyo argagixisanimo lagu eedeeyo, iyo eedeymo kale.

Arrimahaasoo idil waxa ay dadka u horseedayaan inay cabsadaan oo ka fogaadaan dariiqan adayga badan (run ka sheegidda waaqaca), oo ay u gudbaan dariiq ka sii adag (waxaan jirin isku maaweelinta) oo shaki la'aan Jahannama geeya.

Waa hubaal in u caddaan la'aanta waaqacaan ahlu cilmi kuwa sheeganaya iyo caammadaba ay khatar weyn tahay. Annaga Allaah SWT ayaa naga caafiyay, oo nagu hanuuniyay inaan garanno waaqaca jira waxa uu yahay, awoodna noo siiyay inaan baadidiisa iyo dhalanteedkiisa daaha ka rogno.

**Shubhadda saddexaad**: si xun u fahamka erayada mufasiriintu ku fasireen in aayadaha:

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

"Ciddaan ku xukumin wixii uu Allaah uu soo dejiyey, kuwaas uunbaa gaala ah"
(Maido: 44)

in aayadahaan Ahlul kitaab kusoo degeen, kolkaasay dadka u maldahayaan oo leeyihiin waxay kusoo degtay ahlul kitaabka oo kaliya. Sidaa awgeedna waa xukun iyaga uun ku gaar ah, dadka kalana waxba Kama khuseeyaan.

Si hadalkaa aannu u raddinno waxaan leenahay: waxaa usuulka ka mid ah in "ahmiyaddu ay tahay ereyga guudnimadiisa ee ma aha sababta gaar ahaaneed", dadkuna waxa ay si khaldan u fahmeen khilaafka culumada qaar ee xukunka sabab gaar ah loogu xiro oo ah sababtii uu ku yimid, kolkaasay xukunka ku xirayaan kooxdii ama qofkii ay aayaddu ku soo dagtay, arrintuna sidaa ma aha.

Aayaddu dhab ahaan waxa ay ku soo dagtay ahlukitaabka, nin yahuudi ah ayaa ka sinaystay naag yahuudiyad ah, Rasuulkii Allaah (SCW) ayay xukun ugu yimaadeen, waxa ay qariyeen xukunka rajmiga ah (dhagax ku dilka) ee ku qoran towraad, waxa ayna xukunka towraadka jeebkooda kaga beddesheen wajiga oo la madoobeeyo iyo qofka saaniga ah oo dameer si gadaal gadaal ah loogu fariisiyo. Sidaas ayay ku heshiiyeen, sababtuna waa – sida uu sheegay mid culumadooda ka mid ah ee Nabiga rumeeyay – iyagu markoodii hore qofkii maskiin ah oo sino ku dhaca xadkay ku oogi jireen oo la rajmin jiray, qofkii shariif ah ee ku dhaca sinana xad aan laga oogin ee si fudud loo ganaaxi jiray, markay dadkii masaakiinta ahaa ka doodeen arrinkaas, waxaa la isku waafaqay si loo suuliyo kala duwanaantaas in la mideeyo ciqaabta labada dabaqadood, oo qof walba lagu ganaaxo waji madoobayn iyo si geddisan dameer loo saaro, sidaasay ku buriyeen xukunkii shareecada mid kalena way ku beddesheen sidaasayna iska soo dhaxleen ab ka ab, kaddibna xukunkaas ayaa noqday xukunka lagu kala baxaayay halkay xukunka Allaah ka qaadan lahaayeen. Sidaa daraadeed ayay u soo dagtay aayaddan (Ciddaan ku xukumin wixii uu Allaah soo dejiyey, kuwaas uunbaa gaalo ah) (Al Maa'idda: 44)

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

Waxa uu qoraagu leeyahay (Muxammad Shaakir AlShariif): "dhacdadan inay tahay sababu nusuulka (sababta aayaddu u soo dagtay) macneheedu ma aha inay aayaddu ku egtahay ahlulkitaabka. Waxaa arrintaas noo caddaynaya Ibnu Taymiya, oo yiri: (waxaa meeshan soo gali kara oraahda mufasiriintu oranaysa aayaddan waxay ku soo dagtay arrinka caynkaa ah, si

gaar ah haddii waxa la xusay uu yahay qof, sida asbaabu nusuulka lagu sheego tafaasiirta, tusaale ahaan aayadda Dihaarka (xaaska oo lagu yiraahdo hooyaday baad iga tahay) waxa ay ku soo dagtay xaaska saxaabiga Thaabit Ibnu Qays, sidoo kale aayadda:

﴿ وَأَنِ احْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ ﴾ [البقرة: ٤٩]

"Ku kala xukun dhexdooda wuxuu soo dejiyey Allaah" (Al Maa'idda: 49)

waxa ay ku soo dagtay Banii Qurayda iyo Banii Nadiir (qabiillo yahuud ah) … iyo kuwo badan oo la mid ah kuna soo dagay gaaladii Quraysh ee Mako, qolyo ahlu kitaab ah oo Yuhuud iyo Nasaaroah, kuwa yiri sababtaa ayay kusoo degtay uma ayan jeedin in xukunka aayadda uu gaar ku yahay dadkaa ay ku soo dagtay oo keliya, qof Muslim ah iyo qof kastoo caqli leh sidaa oran maayo. Dadku haba isku qabteen ereygaan guud ee ku soo arooray sabab uun, ma ku gaar u noqon sababtaas mise maya? Haddaba qof culumadii muslimiinta ka mid ah waligii ma oran in erayga caamka ah ama si guud ahaaneed kitaabka iyo sunnada ugu jira waxa ay gaar u yihiin qof go'an, ee waxa la oranayay waxa ay gaar ku tahay qofkaas wixii la nooc ah ama shaabaha, aayaddii yeelata ama lahaata sabab mucayan ah ee ay ku soo degatay amar ha noqoto ama reebid waxay saamaynaysaa ciddii ay kusoo degatay iyo cid kastoo ay isku nooc ama mansilo yihiin.

Waxa uu yiri: "nusuusta guud waxaa ka mid ah kuwa ku yimid ama ku soo arooray sabab, waxaa kaloo ka mid ah kuwa guud oo sabab gaar ah aanan lahayn. Noocan dambe la iskuma khilaafsan inay arrimo guud yihiin".

"haddaba nooca nusuustaa ee ku soo arooray sabab, waxaa jira laba qowl oo culumada usuulku ay ka sheegaan:

Kan koowaad: in murtida iyo waxa lagala baxaayo ay tahay ereyga si guud ahaan u soo arooray ee aysan ahayn sababta gaar ahaanta wax ugu yimaadeen.

Kan labaad: in cibradu ay tahay sababta gaar ahaanta ee aysan ahayn ereyga guud ahaanta u soo arooray.

Qowlka koowaad haddii aayaddan lagu eego, waxaa muuqanaysa inay aayaddu taabanayso xaakin kasta oo ku xukuma wax aanu Allaah soo dajinin, sababtoo ah ereyga "من= qofkii" ee aayadda ku jira waa erey guud, sidaa awgeedna aayaddu waxa ay taabanaysaa ahlukitaabka, isla markaana cid kasta oo ereygu guud ahaan u qabto ayay taabanaysaa.

Qowlka labaadse, waxa uu Ibnu Taymiya caddaynayaa inaanan loo dan lahayn ereyga guud in lagu koobo sababtii uu ku soo dagay, ee hadalka dulucdiisu waa in macnaha guud ee ereyga sabab ku soo arooray aanan laga indha laabanaynin sababtii" (waa in sababtaa la helo si xukunkaa guud u qabto). "ee waxa macnahaasi guud uu ku koobnaanayaa nooca sababta, ereyga guud ee naska waxa uu qabanayaa sababtaas iyo wixii la halmaala" (haddii dhacdo ay la mid noqoto sababtii ay wax ku soo dageen xukunkii baa lagu qaadayaa).

"Sidaa awgeed, in la yiraahdo aayaddan waxa ay ku soo dagtay ahlukitaab macneheeda ma aha in iyaga kaliya ay taabanayso, waxase macneheedu yahay in aayaddu ay ku soo dagtay falka ay faleen ahlukitaabka, haddaba, waxa ay taabanaysaa iyaga iyo ciddii la mid ah. Sidaa awgeed, qofkii shaabaha ahlukitaabka oo qaanuun samaysta oo sharciga Allaah ka hormariya oo ka dhiga mid loo xukuntamo ka sokow shareecada Allaah, waxaa qabanaya aayadahan gaalnimada ku xukumaya ahlukitaabka. Sidaa waxaa oranaaya Xaafid Ibnu Xajar kolka

aayadahan uu fasirayo: "waxaa aayadahan ka muuqanaya haba ku soo dageen ahlukitaabe, laakin guud ahaan qayrkoodana way taabanayaan". Intaa kaddib waxa uu Xaafidku soo guurinayaa hadallo culumadii hore oo hadalkiisa taageeraya, waxa uu yiri: "Ismaaciil Alqaadi ayaa ku qoray kitaabkiisa Axkaamul Qur'aan kaddib marka uu khilaafkan ka sheekeeyay: aayadaha waxaa ka muuqanaya in qofkii sameeya wixii ay sameeyeen ama hindisa xukun khilaafsan kii Allaah oo diin lagu dhaqmayo ka dhiga waxaa qabanaya gooddigii qabta ahlukitaabka, xaakin ha ahaado qofkaas ama wax kale."

Waxa uu yiri: "qofkii akhriya dastuurrada iyo qawaaniinta xukuumado badan oo ka taliya dalalka muslimiinta, kuwaasoo garsoorka iyo xukunka, dhaqamada iyo xallinta khilaafaadkuba ay dustuurka taabacsan yihiin, waxa uu qofku si fudud u arkayaa in sharciyo la jideeyay iyo cuquubaad ka hor imaanaya xukunka Allaah, bal waxa uu ku arkayaa wax intaa ka daran. Waxa uu arkayaa falal ay shareecadu xaaraan ka dhigtay oo ciqaab u samaysay, halkan dastuurradan iyo qawaaniintanna aysan dambi ka dhigaynin falalkaas, iska daa inay ciqaab u qoondeeyaane.

Haddaba iska hor imaan mayaan labada erey ee (waxa ay ku soo dagatay Ahlukitaab) iyo (gaalnimo kasokaysa gaalnimada). Waxa ay dadka qaar moodi karaan in labadaan oraah ay iska hor imaanayaan, dhabtu waxa weeye inay is dhamaystirayaan oo aanay iskaa hor imaanayn.

Oraahda (gaalnimo kasokaysa gaalnimada) waxa ay caddaynaysaa sifada xaakinka ee xukunkiisa aanu ka saaraynin xerada islaamka.

Halka oraahda (waxa ay ku soo dagtay ahlukitaabka) ay caddaynayso sifada xaakinka uu xukunkiisu ka saarayo xerada islaamka. Haddaba labada oraahood waa kuwa is dhamaystiraya.

## Goormuusan gaaloobayn qofkii ka taga Xukunka Allaah?

Qoraagu waxa uu yiri: " waxaa jira shuruud xaakin khilaafay xukunka Allaah aanan loogu xukumaynin gaalnimo:

**Shardiga koowaad**: "inuu ahaado mid ku dhaggan oo aqbalsan kor iyo hoos xukun iyo sharci kasta oo Allaah SWT ka yimaada ama Rasuulkiisa (SCW) siduu dooni iyo dhinucuu dooni ha ahaadee, haddii uu hal xukun aqbali waayo isaga oo og in xukunkaasi Allaah iyo Rasuulkiisu keeneen waxa uu noqonayaa Gaal murtad ah. Culumaduna shardigaan hadallo badan bay ka yiraahdeen, waxaannu ka dooranaynnaa hadalkii Ibnu Taymiya: "in wixii Allaah uu soo dajiyay lagu xakumo waxa ay waajib ku tahay Nabiga (SCW) iyo cid kasta oo raacda, qofkii xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa ka tagana waa Gaal", "qofkiise xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa ku dhaggan kor iyo hoos, laakin dambi ku dhaca oo hawadiisa raaca, kaasi waxa uu noqonayaa kuwa la midka ah ee cusaadda". Kaasi waa shardiga koowaad, waana shardi aanan laga helaynin xaakin ka mid ah kuwa maanta wax xukuma.

**Shardiga labaad**: "waa inuu qirsan yahay oo ictiraafsan yahay in ka tagista xukunka Allaah ee dhacdadan gaarka ahi uu ku dambaabayo, xukunkiisuna mid khaldan uu yahay ee xukunka Allaah uu sax yahay". Shardiganna sidoo kale la heli maayo. "Hadallada culumada ee shardigan waa badanyihiin, waxa aannu ka dooranaynnaa hadalkii ina soo maray ee Abii Mujliz ee uu ku caddaynayay sababta aanu gaalnimo wayn ugu xukumin madaxdii xilligiisa, waxa uu yiri: "haddii ay xukun ka tagaan, waxa ay ogyihiin inay dambi galeen". Waxaan kaloon ka dooranaynnaa hadalkii Sheekh Muxammad Bin Ibraahiim AUN ee ahaa: "qaybta labaad ee

labada nooc ee xaakinka wax aanu Allaah soo dajinin ku xukuma aanu gaalna ku noqonaynin waxa uu ku yimid tafsiirka Ibnu Cabbaas ee aayadda:

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

waxa uu yiri: " gaalnimo kasokaysa gaalnimada" "ma ahan gaalnimada aad moodaysaan", waxa ay tahay shahwadiisa iyo hawadiisa ayaa ku bixinaya inuu qaddiyaddan ku xakumo wax aanu Allaah soo dajinin, isaga oo aaminsan in xukunka Allaah iyo Rasuulkiisu ay yihiin Xaqa, isla markaana qirsan inuu khaldamay oo hanuunkii uu ka bayray. Haddii xaakinku yiraahdo ama falalkiisa laga arko, ama dastuurkiisa iyo qaanuunkiisa, ama warfaafinta afkiisa iyo nidaamkiisa ku haddasha, ama siyaabo kale oo fekerkiisa iyo ra'yigiisa laga arko in xukunkiisa uu ka fiicanyahay xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa, ama uu la mid yahay, ama xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa xilligii tagay uu habboonaa kiisuna uu xilligan ku habboon yahay, ama xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa uu yahay midka fiican kuna habboon xilli kasta iyo meel kasta laakin waajib uusan ku ahayn oo wixii isagu maslaxad iyo caddaalad u arko uu ku xukumi karo, haddii intaas ama qayb ka mid ah uu yiraahdo waxa uu noqonayaa Gaal murtad ah".

Tanina waxa ay ka muuqanaysaa dhammaan xaakimiinta xilligan jooga.

**Shardiga saddexaad**: in xukunka khilaafsani uu yahay mid dhacdooyin gaar ah khuseeya oo uu arrimaha guud aanu ahayn. Shardigan saddexaad mugdi baa galay oo kuma aysan baraarugin dad badan oo xilligan jooga oo ka hadlay mawduucan, sidaa awgeed ma aysan xusin, buugtooda iyo hadalladoodana kuma aysan tilmaamin. Ee waa maxay dhacdooyinka gaarka ah? Maxayse yihiin arrimaha guud?

Qoraagu waxa uu tilmaamayaa in sababta salafku aysan u sheegin shardigan ay tahay iyadoo waaqocoodu ahaa in axkaamta iyo fatwooyinku dhammaan ee ka soo baxa culumada iyo madaxda ay taabanaysay dhacdooyinka shakhsiga ah oo keliya, ee aanay marnaba ahayn axkaam guud oo caam ah.

"dhacdooyinka shakhsiga ah waa qaddiyado xaddidan oo baaxad iyo faafitaan lahayn, kolkii xukun lagu ridana wuxuu noqonayaa mid dhacdadaa khuseeya iyo duruufta ku hareeraysan, ee noqon maayo mid guud ahaan lagu xukumo oo la raaco".

Waxaa la mid ah in qaalli uu ku xukumo qof sinaystay ama wax xaday inaanan la rajminin(dhagax lagu dilin) ama gacanta laga goynin iyada oo ay hawo iyo shahwo u gaynayso, xukunkaasi waxa uu noqonayaa mid qofkaas iyo dhacdadaas gaar u ah, ee ma noqonayo qaanuun qaalligu uu uga qiyaas qaadanayo dhacdo kale, sababtoo waxaa loo keeni karaa qof kale oo isla falkii sameeyay, laakin ma uu doonayo inuu u eexdo ama xadka ka dhaafo, waxa uu ku xukumayaa in la rajmiyo ama gacanta laga gooyo, waxa uuna leeyahay: waa xukunka Allaah. Sababtoo ah dhacdadaa iyada ah waxa uu lahaa hawo ama shahwo ama eexasho, waa dhacdooyin shakhsi ah.

"Haddiise aynnu eegno arrimaha guud ahaaneed waa arrimo xilli, meel iyo qof aanan gaar ah u khusaynin, ee xukunku waxa uu saamaynayaa dhammaan dadka, dhacdooyinka, iyo falalka soo hoos galaya arrimahan guud, xukunka kulliyaadka waa sharci dajin oo kale"

(Sababta uu sharci dajin u yahay waa sidii in la yiraahdo: qofkii sinaysta isaga oo horay guur u soo maray waa la xirayaa ama waa la jeedalayaa) …

Waxa uu yiri: "xukunkani gaar kuma aha dhacdo go'an oo duruufteeda iska leh, haddaba markaasi oo kale waxa uu ka dhigan yahay xukun guud iyo sharci lagu dhaqmo. Haddii qofku

arrimahan ku xukumo wax khilaafsan sharciga toosan waxa uu noqonayaa mid Allaah la dagaashan, isla markaana sheeganaya magac ka mid ah magacyada Allaaha wayn".

Waa kaa farqiga u dhexeeya dhacdooyinka shakhsiga ah iyo arrimaha guud ee caamka ah.

Saddexdan shardi ayaa laga rabaa xaakinka si gaalnimo wayn aanan loogu xukumin:

Kow: inuu aqbalsanyahay kuna dhagganyahay dhammaan sharciga Allaah iyo Rasuulkiisa dhinac walba iyo qayb kasta.

Labo: inuu qirsan yahay oo ictiraafsan yahay in xukunkiisa dhacdadaa iyada ah uu yahay mid khaldan oo ciqaab mudan.

Seddex: in xukunku uu yahay mid dhacdo shakhsi ah ee aanu ahayn xukun guud oo caam ah.

Shuruudahani dhab ahaan waa kuwa aad u adag oo haba yaraatee waaqaca maanta aanan joogin, hal ka mid ah madaxda casrigaanna laga heli mayo.

Tusaale ayuu keenayaa, waxa uu yiri: "waxa aan idiin tusaalaynayaa farqiga u dhexeeya xukunka dhacdooyinka shakhsiga ah iyo xukunka guud ahaaneed. Kaba soo qaab xaakin ama qaalli tuug loo keenay, waxa uu ku xukumay in wax xadiddu ay xaaraan tahay, waxa uu ku xukumay in gacanta la gooyo. waxa loo keenay tuug kale, haddaba isaga oo eegaya qaraabannimo, saaxiibnimo, dheef uu rajaynayo ama dhib uu iska fogaynayo ama sabab kale ayuu ku xukumay inaan gacan la goynin, ee la garaaco ama la xiro, waxa uu u raadiyay cudurdaar iyo xujooyin si ciqaabta gacan goynta uu uga fakiyo. Marka halkan waxaa jira seddex xukun:

Xukunka koowaad: in wax xadiddu ay xaaraan tahay, waa xukun guud oo taabanaya xatooyo kasta.

Xukunka labaad: in ciqaabta tuugga ay tahay goyn, waa xukun guud oo taabanaya qof kasta oo laga helo tuugannimo.

Xukunka seddexaad: waa xukunkii garaacidda ama xabsiga ee qofkii gaarka ah uu ku xukumay isaga oo eegaya duruuftii iyo arrimihii qofka wax xaday la xiriirtay, waa xukun gaar u ah dhacdadaas ku eg, mana aha xukun guud oo dhacdo walba lagu xukumo, ee xukunkiisa guud masaladan waa gacan goyn, ee waxa khilaafka keenay dhacdadan waa arrimo gaar u ah qofkan. Mar haddii qaalligu uu xakumayo xaaraannimada wax xadidda, ciqaabteeduna gacan goyn uu xugminayo, dhacdada la hor keenayo haddii duruuf aysan jirin uu gacanta goynayo, ha yeeshee duruufo gaar ah uu mararka qaar xukunka Allaah wax khilaafsan xukminayo, waxaa hubaal ah qaalligaasu inaanu gaal noqonaynin.

Haddii qaalliga ama xaakinku ay xukumaan in wax xadiddu aysan xaaraan ahayn, wax ciqaab ahna aysan lahayn, waxaa jiraya laba xukun:

Koowaad: xukunka ah in tuugannimadu xaaraan ayan ahayn. Waa xukun guud.

Labaad: xukunka in ciqaab ayan lahayn wax xadiddu, waa xukun guud iyana. Xukunka guudna mar haddii uu khilaafsanyahay xukunka Allaah waa xukun dad oo lagu beddeshay kii Allaah, iyo rabitaan xukunka jaahiliyada iyo daaqudka, kolkaana anfici mayso inuu yiraahdo: waan qirsanahay in xukunkaygu uu khaldanyahay, ama xukunka Allaah ayaa saxsan anigana waan ka xumahay. Anfici mayso qiraalka iyo ictiraafka caynkaas ah, sababtoo ah wuxuu sharci ka dhigtay wax burinaya oo khilaafsan xukunka Allihii cirka iyo dhulka, sidaana waxa uu ku noqonayaa Gaal, wuxuu doonayo ha yiraahdo, wuxuu doonayana ha sheegto.

Waxa uu yiri: "waxaa lagama maarmaan ah haddaba – xukunka islaamka – in shareecada guud ee baahsan ee wax walba taabanaysa ay noqoto midda Allaah iyo Rasuulkiisa ka timid, intaa kaddibna waa suurta gal in xaalado shakhsi ah oo mukhilaafo ah dhacaan iyagoo shuruudihi aan soo xusnay ku socda.

Haddiise xukunka guud iyo sharciga guud iyo asalka loo noqonayo uu yahay mid khilaafsan wixii Allaah iyo Rasuulkiisa ka yimid, ha yaraato ama ha badnaatee, waxa ay noqonaysaa rabitaan xukunka jaahiliyada, iyo xukunka dadka oo lagu beddesho kii Allaaha wayn, waxa kale uu noqonayaa ka bixataan xerada diinta.

Xaqiiqada qof caqli leh oo wax fahmaya aanu ka doodaynin, waa in waxa ka dhacaya madaxda muslimiinta ee khilaafsan sharciga Allaah uu yahay nooca dambe, iyaga oo samaystay axkaam iyo sharciyo burinaya oo khilaafaya wixii Allaah iyo Rasuulkiisa ka yimid, kana dhigay sharciga guud iyo asalka loo noqdo la iskuna xukumo.

Naguma yara caddaymo iyo bayaamin arrintan, waxaa yaalla dastuurradooda iyo qawaaniintooda ay gacmohooda ku qorteen, una laabtaan isku xukumaan, waxaana buux dhaafay wax burinaya axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisa, dhammaan dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, qaanuunka, akhlaaqda iyo dhaqanka, iwm"

Waxa uu yiri: "gabagabada hadalka waxaanu sheegaynaa in seddexda shardi ee aynu sheegnay oo caddaynay haddii dhammaan laga helo xaakin ku xukumay wax Allaah uusan soo dajinin, lagu xukumi maayo riddo iyo diinta inuu ka baxay, falkiisuna waxa uu ka mid yahay kabaa'irta dambiyada.

Haddiise hal shardi oo shuruudahaa kamid ah la waayo, sidii in qaalliga ama xaakinku uu dhacdo shakhsi ah ku xukumo wax xukunka Allaah iyo Rasuulkiisa khilaafsan, dambigiisa uusan qirsanayn; ama wuxuu ku xukumay qaddiyado guud sharci khilaafsan kii Allaah iyo Rasuulkiisa, kaddibna khaladkiisa iyo dambigiisa uu qirto, dhammaan xaaladahan waxa uu xaakinku noqonayaa gaal murtad ah oo diinta ka riddoobay"

Waxa uu yiri: "waxay dadka qaar u malayn karaan in xaakin lagu xukumi karo gaalnimo oo qura marka uu ka wada tago shareecada ku xukunkeeda, haddiise qaar ka mid ah wixii Allaah uu soo dajiyay uu ku xukumo waxa ay tusinaysaa iimaankiisa, fahamkaasi waa mid khaldan. Qur’aanka ayaa fahamkaas ereyo cad cad ku raddiyay markii uu yiri SWT:

﴿ أَفَتُؤْمِنُونَ بِبَعْضِ الْكِتَابِ وَتَكْفُرُونَ بِبَعْضٍ فَمَا جَزَاءُ مَنْ يَفْعَلُ ذَلِكَ مِنْكُمْ إِلَّا خِزْيٌ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيَوْمَ الْقِيَامَةِ يُرَدُّونَ إِلَى أَشَدِّ الْعَذَابِ وَمَا اللَّهُ بِغَافِلٍ عَمَّا تَعْمَلُونَ ﴾ [البقرة: ٨٥]

“Miyaad rumeynaysaan kitaabka qaarkiis kana gaaloobaysaan qaar, ruuxii saas fala oo idinka mid ah abaalkiisu ma aha dulli adduun iyo maalinta qiyaamo oo loo celin cadaab daran mooyee, Allaahna ma mooga waxaad falaysaan” (Al-Baqara: 85)

iyo sidoo kale markii uu yiri SWT:

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يَكْفُرُونَ بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيُرِيدُونَ أَنْ يُفَرِّقُوا بَيْنَ اللَّهِ وَرُسُلِهِ وَيَقُولُونَ نُؤْمِنُ بِبَعْضٍ وَنَكْفُرُ بِبَعْضٍ وَيُرِيدُونَ أَنْ يَتَّخِذُوا بَيْنَ ذَلِكَ سَبِيلًا ۝ أُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ حَقًّا وَأَعْتَدْنَا لِلْكَافِرِينَ عَذَابًا مُهِينًا ﴾ [النساء: ١٥٠-١٥١]

“Kuwa ku kufriya Allaah iyo Rasuulkiisa oo doonaya in ay kala bixiyaan Allaah iyo Rasushiisa oo oran waxaan rumeyney qaar, waxaanna diidnay qaar, oo doonaya in ay ka yeeshaan arrintaa

dhexdeeda waddo. Kuwaasi iyaga uun baa gaalo dhab ah, waxaana u diyaarinay cadaab wax duleeya" (Al-Nisa': 150-151)

Haddaba shardi ma aha in iska daynta ama beddeliddu ay ku dhacdo dhammaan axkaamta sharci si qofkaasi u mutaysto magaca gaalnimo, ee mar haddii la iska daayo ama la beddelo hal xukun oo ka mid ah axkaamta Allaah iyo Rasuulkiisu sharci ka dhigeen ama lagu beddesho axkaam kale, waa Gaalnimo, Allaah ha inaga koriyee."

## Dadka iyo ka tagista xukunka Allaah

Haatanna, waa maxay mawqifka dadku ka taaganyihiin kuwa wax aanu Allaah soo dajinin wax ku xukumaya? Xukunkooduna muxuu noqonayaa?

Waxa uu yiri: "kolkii madaxda iyo hoggaamiyayaashu gaaloobaan, diintana ay ka riddoobaan, axkaamna ay dagsadaan, samaystaanna nidaamyo ay ku burinayaan sharciga sugan ee Allaah, waxa ay ka doonayaan oo ka dalbanayaan shacabkooda iyo dadka raacsan inay sidaas ku raacaan oo wixii ay la yimaadeen ka aqbalaan, markay halkaa marayso dadku seddex kooxood bay u kala baxayaan:

**Kooxda koowaad**: waa kuwa diida wax walba oo khilaafsan sharciga Allaah, oo diida inay raacaan kuwa wax beddelaya, wayna ku sabraayaan wixii dhib ah oo naftooda, ehelkooda iyo maalkooda ka soo gaara arrintaas.

**Kooxda labaad**: waa kuwa diidmo kaliya aan ku ekaane, hadalka camal ku dara, oo u ololeeya una jihaada, naftana u hura si xaqa iyo dadkiisu u guulaystaan, oo sharciga Allaah arlada uga hirgalo.

**Kooxda saddexaad**: waa kuwa dadka ugu liita, waxa ay aqbaleen waxa ay la yimaadeen kuwa wax beddelay, wayna ku raaceen oo ku garab istaageen, wixii kuwaasu ay banneeyeen way bannaysteen, wixii ay xaaraan ka dhigeenna way ka fogaadeen, kuwaani waa mushrikiin Allaah ugu shariig yeelay adeecitaanka, hoggaansanaanta iyo sharci dajinta, haddii ay doonaan ha soomaan, ha tukadaan ama ha yiraahdaan muslimiin baan nahay, waa shirkiga wayn arrintaasi. Waxayna nusuusta shareecadu bayaamisay in sharciga ka hor imaanaya kii Allaah oo la aqbalaa ay tahay shirki wayn. Waxa uu Allaah SWT yiri:

﴿ وَإِنَّ الشَّيَاطِينَ لَيُوحُونَ إِلَى أَوْلِيَائِهِمْ لِيُجَادِلُوكُمْ وَإِنْ أَطَعْتُمُوهُمْ إِنَّكُمْ لَمُشْرِكُونَ ﴾ [الأنعام: ١٢١]

"Shaydaanaduna waxay u waxyoodaan saaxiibadood si ay idin la murmaan, haddaad adeecdaan waxaad tihiin mushrikiin" (Al-Ancaam: 121)

Waxa kale uu yiri SWT:

﴿ اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِنْ دُونِ اللَّهِ ﴾ [التوبة: ٣١]

"Waxay ka yeesheen culimadooda iyo suufiyadooda rabiyaal Allaah ka sokoow" (Towba: 31)

Tafsiirkeeda waxaa xadiiskii Cadiy Bin Xaatim lagu sheegay inay ku raaceen sharciga khilaafsan kii Allaah, sidaana shirki loogu xukumay.

**Kooxda afraad**: kooxda xoogaa mugdi ah baa nooga muuqda

Waxa uu yiri: "waxaa ka mid ah kuwa ictiqaad sax ah ka qaba shareecada Allaah iyo Rasuulkiisa, xalaashu waxa ay u arkaan wixii sharcigu u arkay, xaaraantuna sidoo kale, laakin

waxa ay adeeceen kuwa wax beddelay macsi ahaan sida qofka muslimka ahi macsiyada ugu dhoco isaga oo u aaminsan macsi inay tahay. Kuwani waxa ay la mid yihiin dadka dambiyada gala, laakin waxaa looga baqayaa inay haddii xilligu ku dheeraado inay ka guuraan xerada islaamka oo xerada gaalada ay u guuraan, Allaah ha inaga koriyee".

Waxa aad arkaysaa in qoraagu hadalkiisa is burinayo, kooxda seddexaad isaga oo adeecitaanka ku sheegay, buu haatan adeecitaanka ka dhigay wax camalka ka duwan. Taasi macneheedu waxa weeye inay raalli ka noqdeen manhajkan.

Hayeeshee inay mar marka qaar macsi ku dhacaan waa arrin kale, sababtoo ah waxaa lagama maarmaan ah in la helo laba shardi:

**Koowaad**: qalbiga oo laga inkiro; taasina macneheedu waa inaanan la raacin, qofkii qalbiga wax ka inkira waa uu khilaafaa marka uu kaligii yahay, gaar ahaan haddii cid ku khasbaysa aysan jirin.

**Labaad**: hiillada; waa in qofka hiilladiisa iyo gargaarkiisu ay leeyihiin dadka muslimiinta ah oo keliya.

Waxa uu yiri: "halkan waxaa ka cad in ka hadalka "wax aanu Allaah soo dajinin oo wax lagu xukumo" uu taabanayo laba nooc oo dadka ka mid ah:

1- Nooca madaxda iyo kuwa dajinaya sharciga Allaah wax aanan ahayn

2- Nooca aqbalaya ama dadka ku raacaya xukunkaas beddelan ee ka hor imaanaya shareecada; taasi macneheedu waxa ay tahay in dadka caammada ay waajib ku tahay inay diidaan xeerarka la dajiyo ee ka hor imaanaya sharciga Allaah, waa inay inkiraan, aanay aqbalin, una madax raaricinin, qof walba awooddiisa iyo karaankiisa, sababtuna waa iyadoo aqbalaadda axkaamta caynkaas, ka raalli ahaansheheeda, raacitaankeeda iyo inkiraad la'aanteeda looga baxayo diinta islaamka, Allaah hanaga koriyee."

Hadalkan dambe waxa uu ka hor imaanayaa wixii uu ka yiri kooxda afraad, laakin waa hadal sax ah, sababtoo ah aqbalaad iyo inkiraad la'aan iyo muslimiinta oo aanan lala jirin loona hiillin waa raacitaan, xukunkaas ayaana lagu qaadayaa.

## Buunbuunita Xukunka aanu Allaah soo dajinin

Waxan halkan soo gaarnay dhammaadka mawduucyada qoraagu uu baaritaanka ku sameeyay, waa in xukaamta beddelay iyo taageerayaashoodu ay leeyihiin qaabab badan oo ay dacaayad ugu sameeyaan xukunkooda Allaah aanu soo dajinin, waxa uu qoraagu qabaa in taasi ay sabab u tahay jaahilnimada dadka iyo toosnaan la'aantooda, iyo is-daba marinta ay ku dhacayaan culumada daacadda aanan ahayn, taasoo madaxda gaalada ah ugu kaalmaynaysa wixii fatwo ay doonayaan si xukunkoodu u sii jiro.

Wuxuu yiri: waxaan awoodnaa inaan xakame sax ah samayno oo lagu raddin karo shubho kasta iyo wax walba oo laga yiri ama shaydaanku uu u qurxin karo mustaqbalka dadka isaga raacsan. Xakamahaasi waxa uu yahay; waxaa ku sugnaaday daliillo cadcad waajibnimada in lagu xukumo wixii Allaah uu kitaabkiisa ku soo dajiyay iyo sunnada Rasuulkiisa (SCW), meel walba iyo xilli walba, cid walba iyo arrin walba, ha yaraato ama ha waynaato, iyo in caddaymahaas sharciga ah ee saxda ah ay is taageerayaan oo marna ayan is burinaynin. Haddaba ma jiri karto hal qaacido sharci ah oo sax ah ama daliil sharci ah oo sax ah oo tusinaya inaysan waajib ahayn wixii Allaah soo dajiyay in wax lagu xukumo, oo bannaynaya ku

xukumidda wax aanu Allaah soo dajinin in wax lagu xukumo. Xakamahani ayaa ku filan raddinta shubho kasta ee uu keeno qof baadiyaysan oo shakisan ama qof munaafiq ah oo carrab caalim ah leh."

Wuxuu yiri: "Arrimo fara badan iyo sababo dhowr ah ayaa ka qayb qaatay inay arrintaani ku dhex faafto muslimiinta:

**Tan koowaad**: jaahilnimada dadka badankii haraysay, oo diintooda aysan ka aqoon wax yar mooyee, intaa yarna saafi ma aha ee waxaa ku qasan khuraafaad, ku-tiri-ku-teen, hadallo baadil ah iyo axaadiis la been abuurtay.

**Tan labaad**: adduunyo is raacin, ku kadsoomiddeeda, aruurinteeda laga shaqeeyo, waqtigoo dhanna la siiyo.

**Tan seddexaad**: jiritaanka haraadiga fekerka Irjaaga ee camalka iyo iimaanka kala saaraya.

**Tan afraad**: waxaa jira wadaad xumeyaal cilmigooda u adeejiyay u khidmaynta kuwa sharciga beddelaya si ay u helaan lacag ama mansib la siiyo.

**Tan shanaad**: culumada iyo ducaadda qaar oo ka seexday waajibkoodii sharciga ahaa ee arrintan khuseysay.

**Tan lixaad**: culumada iyo ducaadda qaar oo ku mashquulsan ka hadlidda arrimo aanan keenaynin wax dhibaato ah ama culays ama jihaad.

**Tan toddobaad**: dagaalka fekerka iyo maskax dhaqidda lagu haayo muslimiinta, iyo soo ifbixidda madaahibta calmaaniyada, dimoqraadiyada, qowmiyadda, hantiwadaagga iyo wixii la mid ah.

**Tan siddeedaad**: u gacan gelinta xukunka iyo talada muslimiinta kooxo murtaddiin iyo munaafiqiin isugu jira.

**Tan sagaalaad**: madaxda iyo salaadiinta oo dagaal kula jira ciddii arrimahan ka haddasha, oo eedeymo iyo dhaleecayn ku dhajinaya, wax walba oo xunna ku sifaynaysa si dadka ay uga didiyaan, kaddibna xabsiyada la dhigo oo la ciqaado, ugu dambaynna laga soo laalaadiyo tiirarka daldalaadda".

## Maxaa nala gudboon si loo hirgaliyo Xukunka Allaah

Ugu dambayn waxa uu is waydiinayaa: "maxaa waajib inagu ah inaan samaynno hadalkaan oo dhan kaddib?

Wuxuu yiri: "ugu horrayn: waxa ugu muhiimsan ee inaan samayno ay waajib tahay waa inaan suulinno jaahilnimada caqligeena iyo qalbigeena dabooshay, annaga oo cilmiga baranayna akhris iyo dhagaysi iyo su'aal waydiin dadka cilmiga leh. Haddii ay ducaadda iyo culumada waajib ku tahay dadka inay wax baraan oo ay wax fahansiiyaan, annaga naguma habboona inaan iska fariisanno oo sugno inta ay nooga imanayaan oo ay wax nabarayaan, waajibaadka ducaadda iyo culimada saaran waa kaas. Iyagaana ka mas’uul ah arrintaas. Annagase waajibkeennu waa inaan ku dadaalno cilmiga saxda ah raadintiisa, barashadiisa, waqti ku bixintiisa iyo dhaqaale ku bixintiisa.

Kolka laga hadlayo cilmi barashada iyo bariddaba, waxaa habboon inaan cilmiga u doonanno culumada ku dhaqanta cilmigay barteen oo ay dhab ka tahay howshu, kana muuqanayo wanaagga iyo dadaalka ay ugu jiraan in kalimadda Allaah kor noqoto, iyo u bareeridda

qaadidda mas'uuliyaddaas, adaygeeda iyo dhibkeeda u adkaysanaya. Ma aha inaan aadno kuwa fadhiidka ah ee ka haray u gargaaridda xaqa iyo sheegiddiisaba, ee raacay kuwa sharciga beddelay, ama kuwa aan fahamsaneen qaddiyaddan, oo aan aqoon iyo danayn midnaba u haynin, ma aha kuwaasi inaan arrimahan ka baranno ama wax ka waydiinno. Sidee baa cilmi sax ah looga helayaa dariiqa ragga caynkaas ah ee garbahooda ku qaaday fatwooyinka tiirka u ah xukunka daaquutka

Waxaa nagu habboon inaan si dhab ah u kala saarno culumada cilmigooda ku camal fala ee naftooda u huraya kalimadda Allaah kor yeeliddeeda iyo culumada lagu hungoobay, ee baadi wax baadiyaynaysa ah, ama isku koobay hal baab ama dhowr baab oo ka mid ah fiqiga, dhinacna aanan u dhaafaynin.

Tan labaad: waxaa waajib nagu ah inaan si sax ah oo go'an u xaddidno cidda hiillada (Walaa') iyo gacalba aan siinayno, waa inay ahaadaan Allaah iyo Rasuulkiisa iyo mu'miniinta, kuwa raalliga ka ah shareecadiisa ee ku shaqaynaaya una adeegaaya iyada. Waan inaan bari' ka noqonnaa kuwa Allaah iyo Rasuulkiisa iyo mu'miniinta la diriraya, ee shareecada Allaah ka jeestay iyo wax ku xukunkeeda. Hiillada iyo ka bari'ahaanshadu ma ahan marnaba inay ku dhisnaato aasaas jaahili ah, sida qowmiyad ama wadaniyad ama cunsuriyad, ama heer bulshadeed, jinsiyad, luqad, midab ama wax la mid ah oo ay jaahiliyadu ku dhisto hiillada iyo ka bari'noqoshada.

Haddii si sax ah loo xaddido waxaa waajib nagu noqonaysa inaan taageerno oo garab siinno dacwada xaqa ah ee haysa dhaxalkii Nabiyada, matalaysana manhajka Ahlu Sunna waljamaaca, una ololaynaysa sharciga Allaah in wax lagu xukumo, sidii lagu xaqiijin lahaana u shaqaynaysa. Waa in la is garab taagaa dadka dacwada wada, taageero iyo gargaar la siiyaa, kaalmo iyo dardaaran la siiyaa, loo duceeyaa, qofkii ka mid ah xaqa uu u taagan yahay lagu dhibana in la difaaco isaga iyo ehelkiisaba, sababtoo ah waa mujaahid Allaah dartii u jihaadaya, qofka mujaahidka ahna in reerkiisa wanaag looga khaliif noqdo waxa ay ka mid tahay acmaasha Allaah loogu dhawaado kuwa ugu wanaagsan.

Tan seddexaad: in laga shaqeeyo in "shareecada Allaah" ay noqoto midda talinaysa, taana loo maro dariiq walba oo sharci ah; sida dadka in la tuso oo laga wacyi galiyo qaddiyaddan iyo waxa ka dhalanaya, madaxdana si xooggan looga dalbo u noqoshada sharciga Allaah iyo dhaqan galintiisa, taageeradana lagala noqdo ciddi ajiibi wayda, lana qaawiyo oo daaha laga rogo nidaamkooda, lana caddeeyo inay sharcinimada nadaamkoodu dhacday, sidaana uu baadil ku noqday, iyo in la caddeeyo wax walba oo ka dhalanaya ee axkaam iyo dhaqamo ah.

Tan afraad: waxaa muslimiinta waajib ku ah inay ka tagaan oo ka fogaadaan in loo xukun tago nidaamyadan dadku dagsadeen ee Allaah iyo Rasuulkiisa la dagaashan, sharciga Allaahna burinaaya, oo wixii arrin la soo gudboonaada oo xukmin u baahda in loo tago qof cilmigiisa iyo diintiisa lagu kalsoonyahay, oo laga dalbado inuu sharciga Allaah ku xukmiyo qaddiyadda taagan, haddii uu kala saaro oo xukun ridana waa inay ajiibaan oo fuliyaan dadku.

Tan shanaad: in ruuxda jihaadka lagu baahiyo muslimiinta naftooda, laguna boorriyo bixin iyo naf hurid, diinta inay sharaf ku dareemaanna la shaaciyo, lana caddeeyo inaysan jiraynin sharaf, raynrayn, guul ama madaxnimo iyada oo sharciga Allaah xukunka la siinin, oo hadalka Allaah iyo Rasuulkiisa laga hormariyo dadka hadalkooda, lana caddeeyo in wax walba oo ummaddu ay soo martay ama maanta ay marayso ee daciifnimo, dulli, liidasho iyo cadowga Allaah iyo Rasuulkiisa oo aanan ka haybaysanayn, ilaa kuwa lo'da iyo sanamka caabudayay iyo Yahuud iwm ay iska dullaysteen, waxaas oo idil waxaa keenay shareecada Allaah oo laga

jeestay, xukunkii Allaah soo dajiyay oo la iska daayay, waxyigii kariimka ahaa Nabi Muxammad lagu soo dajiyay oo lagu beddeshay shaydaan iyo taageerayaashiisa waxa ay qurxiyeen iyo axkaamta gaalada iyo qaababka kuwa waxba aanan aqoonin.

Tan lixaad: waxaa culumada iyo ducaadda looga baahan yahay inay iska daayaan u yeelidda dadka waxay rabaan, ee ah in laga hadlo arrimaha furuucda ah ama nadariga ah intii loo baahnaa ka badan, oo dadka loola gudbo marxalad xoogga la saarayo qaddiyado muhiim ah oo waaqac taabanaya, dadkuna u baahanyihiin, hayeeshee ayan ogayn arrintaas, arrimahaas oo jaahil laga noqdo ama la khaldana waxaa ka dhalanaya islaamku inuu mugdi ka galo dadka. Waa in qaddiyadahaas loo baahan yahay xoogga la saaraa iyada oo aan laga tagaynin mabda'a dacwada ee ah mid is dhamaystiraya oo aan la kala goyn karin, ama qayb ka mid ah islaamka aan loo dayacaynin qayb kale daraadeed.

Tan toddobaad: waxaa ka mid ah arrimaha ku habboon inaan ku dadaalno; inaan caddaynno dhicitaanka maamullada gaalada ah ee murtaddiinta ah ee nacay sharciga Allaah iyo xukunka kitaabkiisa iyo sunnada Rasuulkiisa, kuna beddeshay waxay iyagu dagsadeen ee ah nidaamyo kasoo horjeeda sharciga Allaah; maamulladaasi jiritaankoodu sharci maaha oo way dhaceen. Arrintaas in dadka lagu dhex baahiyo oo la baro, oo saxnimadeeda loo caddeeyo ayaa habboon.

Tan siddeedaad: waxa sidoo kale ay tahay inaan xoogga saarno oo tixgelin siinno; in qof walba oo naga mid ahi uu mudnaan siiyo qalbigiisa, kuna dadaalo sidii iimaan uu ku kororsan lahaa, arrimaha dadkana aysan naga mashquulin arrimaha nafteenna. Qof walba oo naga mid ah waa inuu orod badan u gala inuu naftiisa hagaajiyo, wixii ka dhimman ee taqwo iyo cibaado iyo akhlaaq ahna dhammaystiro, si qofka naga mid ahi u noqdo qof hadal iyo camalba is waafaqsan, oo awood u leh inuu socodka dariiqa xaqa sii wado isaga oo aan shaki iyo labalabayn lahayn.

Cabsida Allaah SWT xilligan cadowgu dibad iyo gudo, kor iyo hoosba ay isugu kaaya tageen, jeesasho run ahna loo jeesto, Allaah oo kaliya loo faqiir ahaado, loo qushuucoo la isu dulleeyo madaxana loo raariciyo, laga shaqeeyo u gargaaridda diintiisa, naf iyo maalna loo huro dariiqiisa, kuwaas oo dhan waxay ka mid yihiin arrimaha noogu kaalmaynaya Allaah idankii inaan xaqiijinno waxa aan u hanqal taagayno ee khayr iyo hanuun ah, waxaanna ku helaynaa guusha Allaah SWT na siinayo".

Sidaas waxaa inoogu dhammaaday soo bandhigiddii kitaabkii koobnaa ee fududaa, ee caddaynayay shubuhaadka iyo hadallada lidka ku ah xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah", ee ah qaaciddada mujtamaca muslimka ahi ku taagan yahay, markaynu ka hadlaynay dhalashada mujtamaca muslimka ah iyo astaamahiisa.

Waxaanu ka hadallay macnaha ereyga Jaahiliyo, iyo sifaalaheeda.

Waxaanu sidoo kale ka hadallay qaddiyadda "Laa ilaaha Illallaah", iyo macnaha u kali yeelidda Allaah Ilaahnimada, xukunka iyo suldaanka.

Waxaan sidoo kale ka hadallay qaar ka mid ah shubhooyinka cadowga xaqu ay dariiqa noo hor dhigayaan.

Waxaan dhammaan soo cuskannay oon weheshannay hadallo culumo badan oo salaf iyo khalafba leh iyo kuwa casrigaan joogaba, si markaa qaddiyaddu dareenkeenna ay aad ugu sii caddaato, si amarka Allaah aan ugu toosnaanno, mujtamac Islaam oogiddiisana aan u qaadanno tallaaba kasta oo ay keensanayso, waxay doonto hanagu kallifto oo naf iyo maalba ah.

Waxaan sii wadi doonnaa – haddii Allaah idmo – hadalkii ku saabsanaa dhalashada mujtamaca muslimka ah, annaga oo ifsanaynna arrimihii aynu soo sheegnay oo haatan noqdeen kuwa aad u cad cad.

Waxaanu soo sheegnay qaddiyaddani inaanay u baahnayn daliil badan, inta aan niri ka yar baa ku filan dhabnimada iyo saxnimada qadiyaddan in la caddeeyo, iyo sidoo kale jaahiliyada iyo dadka naga soo horjeeda in lagu waajaho, ma aha inaan baqanno ama gilgilanno haddii ay caddaymo badan na waydiistaan, waxaan is dultaagaynaa daliilka aan is leennahay waa ku filan yahay, kolkaa baan waxaan leennahay: rumeeya ama ha rumaynina, waa howl idiin taalla.

Waxaa lagama maarman ah inuu noo cadyahay manhajka wax daliishiga, dabeecadda manhajka Qur'aanka ee uu qaddiayadda ku soo bandhigayo, qaabk anbiyadu wax u sheegeen iyo habka dood wadaagga na dhexmari kara annaga iyo kuwa xaqaan nagu colaadinaya waqti kasta iyo meel kasta insha'a Allaah

## Arrimo Muhiim ah oo khuseeya dhalashada Bulshada Muslimka ah

Weli waxaanu ka hadlaynaa dhalashada mujtamaca muslimka ah, cinwaan keenuna weli wuxuu nooga baahan yahay inaan u dejinno qaacidooyin badan intaynaan hore u sii galin cutubkaan; maxaa yeelay waxaa lagama maarmaan ah in dhalashadaasi lagu dhiso aragti iyo manhaj cad, aanna kala hubsanno qaacidooyinka uu ku dul dhismaayo

Waxaan kasoo hadalnay ahmiyadda dhalashadaasi iyo mudnaanteeda, waxaan ka soo hadalnay jaahiliyadda iyadoo ah mu'asaso ama dhismo ay lagamamaarmaan tahay inay ka hortagaan kuwa dhaqdhaqaaqa Islaamka u kacay. Waxaan niri: mujtamaca jaahiligu kuma dhisna qaab nadariya, falsafad, yididdilo iyo halkudhegyo oo kaliya

Waa mu'asaso dhamaystiran lehna nidaamkeeda, awooddeeda, falsafaddeeda iyo qiyamteeda. Sidaa darteed waa in Islaamku ku waajahaa jaahiliyadda awood u dhiganta bal ka adkaan karta, awood meel walba kaga gacan sarreysa; hanoqoto tiirarkeeda aragtida nadariga, manhajkeeda howlqabad nooc walba. Ama qiyamteeda iyo halbeegyadeeda, amaba dhaqdhaqaaqeeda iyo nidaamkeeda.

Waxaan kasoo hadalnay jaahiliyadda; qeexiddeeda, aragtiyada aan ka qabno…inkasta oo aannaan ku dheeraanin, oo aannaan si weyn u kala dhigdhigin, waayo arrimahaasu way nala socon doonaan intaan fasalka ku dhex jirno, oo ugu dambayna gaari doonno xaqiiqada jaahiliyadda, noocyadeeda iyo waxay ka kooban tahay

Sida aan hore uga soo hadalnay shahaadada Laa Ilaaha illallaah, maadaama ay tahay qaaciddada uu ku dul dhismayo mujtamaca muslimka ah, ayna habboon tahay inuu mujtamaca aadanaha oo idil ku istaago; maxaa yeelay Allaah dadka oo dhan wuxuu u abuuray cibaadadiisa oo kaliya iyo in la sugo inuu isaga uun dhulka ka ilaah yahay marka la waajahayo jaahiliadda ku xadgudubtay xaqa Allaah CWJ.

Waxaan niri shahaadada Laa ilaaha illallaah la heli mayo sharci ahaanna uma jirayso illaa inay yeellato suuraddaas dhammaystiran mooye oo jiritaan dhab ah u yeelaysa kalana qeexaysa in kan oranayaa Muslim yahay ama uusan ahayn.

Haatan waxaa ina hor yaalla dhowr arrimood oo aad muhiim u ah, xiriir wayn oo daruuri ahna la leh dhalashadda mujtamaca muslimka ah iyo astaamehiisa.

## Af-ka-nuslim iyo ku milanka jaahiliyadda

Kaddib markii uu ustaad Sayid degdeg ku soo dulmaray xaqiiqada wuxuu yiri:

**(Hayeeshee, islaamku – sidaan soo sheegnay – kuma suura galaynin inuu iska ahaado (fikrad) qayaxan, oo ciddii doonaysa ay iska aaminto, gaar ahaanteedana ugu cibaadaysato, kaddibna ay iska ahaadaan xubno ka tirsan Mujtamacas isku xiran ee leh xubnihiisa ku dhaqdhaqaaqaya aragtida jaahiliyadda. Sababta oo ah, joogitaankooda qaabkaas ah – siday doonayaan ha u bateene – ma aha mid keenaya "jiritaan dhab ah" oo islaamku uu jiro).** Wuxuu ustaad Sayid adeegsanayaa tibaaxda ah" muslimka nadariga ah" run ahaantii waa tibaax cusub oo leh biya dhaceeda iyo ujeedkeeda.

**(Sababta oo ah xubnaha (fikradda islaamka xambaarsan) ee ka midka ah hab-dhiska xubneed ee mujtamaca jaahiliga ah waxa khasab ku ahaanaya inay buuxiyaan baahiyaha mujtamacaas. Waxa ay u dhaqaaqayaan – ha rabeen ama ha diideen, ha ogaadeen ama yaanay ogaan – inay daboolaan baahiyaha asaasiga ah ee nolosha mujtamacan ee daruuriga u ah jiritaankiisa, wayna u dirirayaan oo ka difaacayaan wixii handadaya jiritaankiisa, maxaa yeelay noolahu howlihiisa wuxuu ku fushadaa dhammaan xubnihiisa ha oggolaadeen ama ha diideen. Taasu waxay ka dhigantahay in dadka (aragtida islaamka xambaarsan) ay sii xoojinayaan (dhab ahaan) mujtamaca jaahiliga ah, ee ay (aragti ahaan) u shaqaynayaan inay suuliyaan, waxayna sii ahaanayaan unugyo firfircoon oo jiritaankiisa ku kaaba wax walba oo uu uga baahanyahay inuu sii waaro. Waxay ku kaabayaan khibraddooda, waaya aragnimadooda, farsamadooda iyo firfircoonaantooda, si uu nolol iyo xoog uga qaado, halkii laga rabay inay dhaqdhaqaaqoodu ku jihaysnaado dhidibbo u siibidda mujtamaca jaahiliga ah iyo taagidda mujatamaca islaamiga ah).**

Waa hubaal in qaddiyaddani ka mid tahay qaddiyadaha ay keensanayso shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" qaabkeeda saxda ah, islaamku waligii ma noqon ictiqaad lala jidboodo oo keli ah, ama qanaacad caqliga ah, ama xataa dareemo qalbiga ah. Islaamku qaabkaas kuma jiri karo, oo qalbiga iyo caqliga uu iskaga ekaado, amase dareen iyo caadifad mararka qaar kacaysa marar kale iska damaysa.

Hayeeshee islaamku waa dhaqdhaqaaq muuqda oo bulshada beni'aadanka ku quudinayaa dhammaan waxa uu baahanyahay mujtamac xubnihiisa leh kana mid ah howlaha nolosha.

Sidaa awgeed, qofka muslimka ah ictiqaadkaas saxda ah aaminsan markii la helo, oo naftiisu ay la falgasho dareenka, jacaylka iyo u hiillinta diintan, ma suura galayso mana awoodi karo – haddii run uu sheegayo – inuu ahaado xubin ama unug u shaqaynaya dhinac liddi ku ah wixii uu rabay, aaminsanaa, isla markaana uu jeclaa.

Qofku kolka uu rumeeyo xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah", kolka uu maqaamka Allaah barto, kolka uu ogaado masaafada u dhexeysa isaga iyo maqaamkaasi, kolka uu ogaado kaalinta go'an ee arlada uu ku leeyahay, kolka uu ogaado qiimihiisa dhabta ah, kolka uu ogaado ujeeddada iyo hadafka loo abuuray, …

Misana kolka naftiisu ay la falgasho dareenka weyneynta, maamuuska, jacaylka, hilowga iyo tala saarashadda Allaah SWT, iyo dhammaan arrimaha ka imanaya yaqiinta nafta, qalbiga iyo caqliga ee ku dhex duugan xaqiiqada "Laa ilaaha Illallaah", sinnaba u suurta galimayso in qofku intaa kaddib – haddii run uu sheegayo – uu noolaado isaga oo dhaqankiisu aanu u jihaysneyn burburinta mujtamaca u heellan xaqiiqadan baabi'inteeda, dadkana diinta ka hor taagan, beni'aadankana nolosha dhabta ah u diiddan, kolkii ay diinta Allaah ka fogeeyeen. Waa hubaal

in qofkaasu noqonayo Muslim nadari ah (aragtida ama fikrad ahaan muslim ka ah) sida uu ku tilmaamay Ustaad Sayid. Islaamku sideedaba saas ma aha, mana aqbalyo waligii wax caynkaas ah, sababta oo ah islaamku waa inuu wax beddelaa, waa inuu beni'aadan hor leh abuuraa. Waa inuu ka raraa boholaha iyo qashin qubka uu ku noolyahay kolka uu jaahiliga yahay, una raraa beerta qabow iyo mujtamaca ay noloshiisu sarreyso ee ku dhisan Shahaadada "Laa ilaaha Illallaah".

Islaamku suurogal ma aha inuu qofna aqbalo ilaa uu hiilkiisa iyo gacalkiisa soo wareejiyo dadaalkiisa iyo dhaqadhaqaaqiisana u wareego oogida mujtamac Muslim ah, oo ku dhisan "Laa ilaaha Illallaah". Qofka sidaa aanan yeelin ma aha muslim dhab ah, waa muslim fikri ah, waa qof la doonayo inuu islaam noqdo, mase aha islaam dhab ah, dib waa ka noqon karaa muslim dhab ah marka uu dhaqaaqo, is beddelo, waxa ku hareeraysanna uu beddelo. Intaa ka horse Maya! sababta oo ah waxa uu wali yahay xubin ka shaqaynaya dhismaha mujtamaca jaahiliga ah, wuxuuna ku korinayaa jiritaankiisa uu ku dhex jiro, kartidiisa, wax qabadkiisa, awooddiisa, xoolihiisa, dhaqaalihiisa iyo noloshiisa oo idil.

Hase ahaatee, qofka muslimka ahi kolkii uu is beddel billaabo, hiilladiisu inay is beddesho bilowdo, dhaqdhaqaaqiisuna kasoo horjeesto mashruuca jaahiliyadda, kolka uu gudintiisa u qaato siibidda dhidibbada mujtamaca jaahiliga ah, si uu u burburiyo isaga oo wada dhaqdhaqaaq sugan oo ku dhisan manhaj islaami ah oo sax ah. Kolkaas uun baa la oranayaa wuu ka soo gudbay islaamkii fekerka ahaa, wuxuuna u gudbay inuu noqdo Muslim dhab ah oo xaqiijinaya addoonnimadiisa uu Allaah addoon u yahay, walaayadiisana dhabtii Allaah uu leeyahay.

Qaddiyaddan badanaa dadku ma fahmayaan, waxa ay rumaysan yihiin – waa sidii loo tusaye – in qofkii afka ka yiraahda "Laa ilaaha Illallaah" jannada uu galayo, waxa ay taas ka garteen in ereyo afka laga oranaayo uun ay tahay, ereyadaas haddii ay afka ka dhahaanna ay jaahiliyo iyo gaalnimo ka soo guurayaan, islaannimo iyo iimaan ay soo galayaan. Taasi dhab ma aha, sababta oo ah afka wax laga yiraahdo qofka ma beddelaan, ee hadalka – sida aan horay u soo sheegnay – waa qirid, qiriddaasina waxa ay leedahay wax ka dhalanaaya, arrimahaas bayna tahay in qofku uu ka dhabeeyo.

Jiilkii koowaad ee saxaabadu sidaa kama aysan fahmin xadiiskan, culumadii salafkana sidoo kale kama aysan fahmin waligood in xadiiskani uu tilmaamayo hadal oo keli ah, ee waxa ay ka garteen in aaminaad iyo yaqiinsi "Laa ilaaha Illallaah" ah uu jiro, kaasoo keensanaya in la dhaqaaqo, la is beddelo, waxna la beddelo.

Islaamku ma aqoonsana islaamnimada kuwa fekerka uun muslimiin ka ah, waa dad awoodi waayay inuu dhammaystirmo korriinshaha iimaankoodu oo waxay ku ekaadeen inay caqli ahaan ku qanceen islaamka dareenkooduna la kacay, hayeeshee wax tallaabo ah hore uma ayan qaadin, halka mujtamaca jaahiligu uu u xambaaranayo halka uu la doonaayo. Run ahaantii waxay Islaamka u tareen ma jiro, bal ficilkoodu waa mid dadka ka jeedinaya Islaamka mar haddii hadalkooda iyo waaqacoodu is dhaafsan yahay, kuna dhaqmayaan wax ka duwan waxay sheegteen inay rumaysn yihiin.

Qaddiyaddan muhiimka ah waxa ay ku xiran tahay, amase ka farcamaya, ama la xiriira dhowr qaddiyad oo iyagana muhiim ah. Waxa ayna u baahan yihiin hadal dheer iyo qoraallo u gaar ah.

## Xaqiiqada mujtamacaadka maanta

Qadiyadaha ku xiran qiridda "Laa ilaaha Illallaah" oo ah tiirka uu mujtamaca islaamka ah ku taagan yahay; qaddiydahaas waxaa nooga haray laba qadiyadood oo ahmiyad badan leh oo kala ah: xukunka ay leeyihiin mujtamacyada maanta jira iyo wax cudurdaar ah ma u leeyihin xaalddooda mise uma laha?

**Qadiyadda koowaad:** xukunka mujtamacyada haatan jira iyo noocyadooda kala duwan

Waxaa jira mujtamacyo calanka gaalnimada taagaya, dadka ku hoos noolna ay gaalnimadooda sheeganayaan, waxaa is waafaqsan calanka iyo xaalka mujtamacaas, waxa ay rumaysanyihiin oo ictiraafsanyihiin calankooda. Wax khilaaf ah kama taagna xukminta mujtamacaan. Mujtamaca calankiisu waafaqsanyahay waaqaca dadkiisa waxa uu qaadanayaa calankaas sifadiisa. Haddii marka calanka taagan, aragtida, falsafadda, iyo halku dhegyadu ay yihiin jaahiliyo, aayadaha Allaah oo lagu gaaloobo, jidka Allaah oo dadka laga celiyo, diinta islaamka diin aan ahayn oo la aamino, dadka calankaas ku hoos nool waa ay ku raacsanyihiin arrinkaa, wax kalena ma sheeganayaan, mujamacaas haddaba waa uu cad yahay sawirkiisu oo laba qof isku khilaafi mayso. Calankaasi waa calan gaalnimo, ha ahaado shuuciyad, hantigoosi, kuwa dhagax caabuda, kuwa Allaah inkiraya jiritaankiisa, ama waxay doonaan ha noqdeen. Dadka ku hoos noolna waa ay aaminsayihiin calankaas, xeerkiisa ayay ku dhaqmaan, way u dhiidhiyaan, dagaal bayna u galaan. Mujtamacyadaasi waa caddahay inay gaalo yihiin, sawirkaas cadna cid muran ka keeni karta ma jirto.

Haddii calanka taagani uu yahay kii Islaamka, shareecada Islaamkuna ay tahay midda mujtamaca u talisa, dadka ku hoos noolna ay aaminsayihiin shareecada, darteed u shaqaynayaan, dagaalna u galayaan, mujtamacaanna sidoo kale cid isku khilaafi mayso inuu yahay mujtamac muslim ah oo taladiisa Allaah u dhiibtay, oo dhab ahaan ku taagan "Laa ilaaha Illallaah", ictiqaad ahaan, camal ahaan, hiillo iyo gacal ahaan, iyo iimaan ahaamba.

Hayeeshee, wareer wuxuu imanayaa kolkii calanka taagan uu ka duwanyahay waaqaca dadka. Calanku tusaale ahaan waa calan gaalo, calmaani ama hantiwadaag ama hantigoosi ah, hayeeshee dadka ku hoos nool waxa ay sheeganayaan inay muslimiin yihiin, islaamka ay doonayaan, aabbayaashood ay muslimiin ahaayeen. Arrintaan oo kale waligeed taariikhda sidan oo kale uma dhicin, in calanka taagan iyo maamulkuba ay caddaynayaan inay calmaani yihiin, islaamkana ay diidayaan shareeco ahaan, waaqac iyo dhaqan ahaan, akhlaaq iyo qiyam ahaan intaba, misana dadka ku hoos nool islaam ay sheeganayaan, qaabkan waligeed taariikhda horay looma arag. Arrinta laga sheego oo waagii Tataarka dhacday sidan ma ahayn, qaab ka duwan buu ahaa, dhulkii muslimiintu dagganaayeen baa madax kale xoog ku qabsatay, hayeeshee dadkii deegaanka ahaa waa necbaayeen, way la diriri jireen, hiillo kalama dhexeyn, diintooda ayayna ku adkaysteen kor iyo hoosba. Arrintaas ayaana ku kalliftay Tataarku in yar kaddib inay Islaamka qaataan, isagana wax ku xukumaan. Waxa dhacday inay goor dambe isku dayeen inay Yaasaq muslimiinta ku xukumaan, waxay doonaan inay sameeyaan bay damceen, hayeeshee muslimiintu ma aysan ku raacin, axkaamtii gaaladana kama aysan soo muuqanin bulshada, raalli lagama noqonin, la isuma dhiibin, waxaa had iyo goor jiray masaafo weyn oo aad u cad oo una dhexeeysa madaxda iyo bulshada.

Waxaa dhici kara inay jireen – waana dabci beni’aadanku leeyahay – dad ama kooxo Tataarku ay duufsadeen, oo adduunyo ka doortay aakhiro, hayeeshee kuwaasi waxa ay ahaayeen dhif iyo naadir aanan muuqanin. Umaddii islaamka iyo Daartii Islaamka guud ahaantooda uma madax raaricin, raallina waligeed kama noqon xukunkaas gaalnimada ah.

Waaqaca haatan jira sidaas ma aha. Waxaa suura gal ah in cadowga islaamku ay wixii tagay darsi ka qaateen, oo ay markaa isku dayeen ka hor inta aysan calanka Islaamka iyo ku dhaqanka shareecada meesha ka saarin, inay jirka umadda suus iyo aboor galiyaan, si saldhigyada bulshada muslimka ahi u noqdaan kuwa bolol ah oo aysan la istaagi karin, awoodna u siinaynin inay calanka weyn ee islaamka qaaddo. Kolkii uu calankii dhacay, bulshadii oo idil baa dhacday, dhammaanna waxay u kala daateen si dhakhso badan oo aanan lagu fasiri karin inay kolkii horeba waxba haysanin mooyee. Waana arrinta uu Nabigu (SCW) ku tilmaamay xumbo inuu umadda ku iman doono xilli ay noqonayso xumbo ka hor inta aysan dhicin.

قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: «يُوشِكُ الْأُمَمُ أَنْ تَدَاعَى عَلَيْكُمْ كَمَا تَدَاعَى الْأَكَلَةُ إِلَى قَصْعَتِهَا»، فَقَالَ قَائِلٌ: وَمِنْ قِلَّةٍ نَحْنُ يَوْمَئِذٍ؟ قَالَ: «بَلْ أَنْتُمْ يَوْمَئِذٍ كَثِيرٌ، وَلَكِنَّكُمْ غُثَاءٌ كَغُثَاءِ السَّيْلِ، وَلَيَنْزَعَنَّ اللَّهُ مِنْ صُدُورِ عَدُوِّكُمُ الْمَهَابَةَ مِنْكُمْ، وَلَيَقْذِفَنَّ اللَّهُ فِي قُلُوبِكُمُ الْوَهْنَ»، فَقَالَ قَائِلٌ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، وَمَا الْوَهْنُ؟ قَالَ: «حُبُّ الدُّنْيَا، وَكَرَاهِيَةُ الْمَوْتِ»[٩]

(Wuxuu Rasuulki AllaahSCW yiri" waxaa la arkaa inay ummaduhu isugukiin yeertaan sida kuwa wax cunayaa ay xeerada isugu yeertaan, mid baa yiiri: ma tiro yarideenna maalintaas darteed baa? Wuxuu SCW ku yiri: maya waad badan tihiin hayeeshee waxaad tihiin sida xumbada daadka oo kale wuxuuna Allaah ka siibi doonaa quluubta cadowgiina inay idinka haybaystaan, quluubtiinnana ku tuurayaa jilicsanaan. Mid baa yiri Rasuulkii Allaahow waa maxay jilicsanaantu? Wuuxuu yiri waa jaceylka adduun iyo geeri kahashada).

Haddaba way dhacday kolkii xumbo ay noqotay, dhicidda kaddibse xumbo ma sii ahaanayso, waxa ay noqdeen wax kale oo umadda muslimka ah iyo xaqiiqada islaamka wax xiriir ah la lahayn. Xumbadii waxaa qaaday daadkii, sababta oo ah xumbo isma taagi karto, boosna ma ceshan karto.

Qaabka mujtamacyada maanta jooga u noolyihiin waa sida soo socota: calan ay caddahay calmaaninimadiisa, gaalnimadiisa, dagaalka Allaah iyo Rasuulkiisa uu kula jiro, jeesjeeska diinta Allaah, har iyo habeen ka shaqaynaya iftiinka Allaah damintiisa, burburinta khayr walboo soo bixi raba amaba soo bixid bailaabay; markaasaad arkaysaa dadwaynaha calankaas ku hoos nool oo sheeganaya inay muslimiin yihiin. Cadowga islaamkuna sidoodaas inay malahaas ay ismoodaan muslimiin ayuu u daayay, mar haddii masaajid ay jiraan, soon iyo salaad iyo addin uu jiro, iwm, waxaad wali tihiin muslimiin. Gaaladu sidaa uma yeelin inay Islaamka jiritaan u rabaan, ee waxay yaqiinsadeen inaysan baabi'in karin diintaan muuqaal iyo gunba, marka way iska ogolaadeen inuu shakli ahaan u jiro ee uusan nuxur iyo jiritaan dhab ah yeelanin, dadka waxaa loo daayay inay ku dagmaan dushaa sare ama muuqaalka Islaamka noloshooduna ahaato midaan Islaamka lagu dhaqin.

In calan calmaani ah taagan yahay dadka ku hoos noolna Islaam sheeganayaan, waa waxa ugu adag ee ducaadda maanta ka haysta Islaamka baaqiisa iyo bayaanintiisa, dadkana ku adkaynaya inay Islaamka fahmaan. Maxaa yeelay waxay isu haystaan inay muslimiin yihiin, Islaamkana ay ku noolyihiin, oo ay leeyihiin "Laa ilaaha Illallaah", way soomayaan, way xajinayaan, ciidaha Islaamka ayay u dabbaal dagayaan, Mako ayay aadayaan, magacyadooda waa magacyo Islaam, masaajiddu waa furanyihiin, aadaanku shanta waqti waa la maqlaa, Qur'aankiina waa la akhrinayaa, …

---

[٩]- سنن أبي داود ج٤. ص١١١

Waxaa hubaal ah in Xaladdaan jirta ay mugdi keennayso oo caqabad ku noqonayso dadka, oo aan la dhihi Karin waxba ma tihiin, macnaha wax diin ah ma haysataan. Markaan dadka Maraykanka annagoo xaqa ugu yeerayna ku dhahno waxba kama haysaan xaqan aan wadanno, waxay oranayaan waa run waxba kama hayno, oo diinta Nabi Muxamad (SCW) waxba kama hayno oo muslimiin ma ihin, agtiinnana gaalo ayaan ka nahay… gaalaa tihiinna diidi maayaan

Hayeeshee, mujtamacyadii Islaamka ahaan jiray, ee duullaanka fikradeed lagu minjaxaabiyay dabadeedna xaqa iyo diinta xaqa ah laga fogeeyay, waa kuwan mugdiga ku jiro oo caqabad ku noqonaya ducaadda. Kolka dadka mujtamacyadaan ka midka ah loogu yeero Islaamka, waxaa soo baxaya qaylodhaan oranaysa: dadku waa muslimiin mar haddii ay "Laa ilaaha Illallaah" oranayaan, ama dadku waa jaahiliin wixii soo gaaray uun bay yaqaanaan, inta ay yaqaanaan oo ay ku camal faleen bay muslimiin ku noqonayaan. Taasina (jaahilnimdaas) ma aha arrin sax ah, sababta oo ah dadku waxa ay yaqaanaan in aad uga badan inta ay ku camal falaan, dacwooyin badan iyo rag mujaddidiin ah baa marar badan soo maray taariikhda islaamka, ilaa haatan la joogo waxaa jira dad xaqiiqada islaamka u sheegaya. Hayeeshee, waxaanu arkaynaa inay waxa diinta kasoo horjeeda iyaga oo xammaasadaysan u fak fakanayaan oo ay rabaan. Waxaa dhab ah inay Islaamka yaqaanaan. Idaacadaha Qur'aanka iyo kanaallada diiniga ah ayaa xaqiiqooyinka islaamka had iyo goor ka hadla, oo caqiiddada laga billaabo ilaa halka u dambaysa si cad u sheegaya, haddaba sheegashada jaahil baan nahay waa waxba kama jiraan.

## Cudurdaar ma noqon Jaahilnimadu?

Mowduuca aan markaan dul istaagayno waa: **Xujadu maku oogan tahay mujtamacyadan mise maya? Ka jaahil noqoshada asalka diinta iyo arrimaha ay lagama maarmaan tahay in qof walbaa diinta ka ogaado ma ka dhex jirtaa mujtamacaadkan mise waa maya?**

Waa mawduuc muhiim ah, wuxuu ka mid yahay arrimaha dadka mugdiga ka galay, bal xarakaadka islaamka, culimada Islaamka, aqoon yahanno fara badan oo islaamka ka hadla ayaa oranaaya dadka xujo wali laguma oogin, culumaduna waxa ay leeyihiin: dadka gaalo noqon mayaan jeeray xujadu ku ooganto, waa qaddiyad muhiim ah; goorma ayay xujadu oogmaysaa?

Waa arrin ay habboon tahay inaan qaadaa dhigno oo garteeda siinno. Salafka qaar ka mid ah ayaa oran jiray: "Allaah waxa uu jecelyahay qofka aragti xaqa u dusaysa leh kolkii shubho timaaddo, iyo midka caqliga dhammaystiran leh kolka shahwo ay timaaddo". Waxaa hubaal ah inaan u baahannahay aragti awood badan, sababta oo ah shubuhaadku waa badan yihiin, cadowga islaamka ayaa meel u fadhiya, kuwa islaamka jecelna waxa ay ku dhacayaan gafaf aad u waaweyn, maxaa yeelay caqligooda ma adeegsanayaan. Waxaan horay u soo sheegnay in Islaamku uu la hadlayo basiirada (aragtida xeel dheer), ee caqli kaligii, qalbiga kaligii, ama dareenka kaligii la hadli mayo, beni'aadanka oo idil buu la hadlayaa.

Basiirada (aragtida xeel dheer) ee Islaamku waxa ay u taagantahay wax kasta oo wacyiga beni'aadanka ah, iyo dhammaan hababka lagu helo wacyi iyo waxa beni'aadanku wax ku gartaba. Qofku wuxuu wax ku gartaa caqliga, dareenkiisa, caadifadiisa, iyo fidradiisa. Basiiradu waa midda islaamku uu la hadalahayo. Sidaa awgeed, Allaah SWT waxa uu jecelyahay dadku inay yeesheen aragti fiiqan oo xeel dheer kolka ay shubho timaaddo, iyo caqli buuxa oo dhammaystiran kolka ay shahwo timaaddo. Sababta oo ah shahwadu caqliga ayay daroogaynaysaa, waa lagama maarmaan markaa si shahwaadka la isu hortaago in la helo caqli buuxa oo bisil oo garanaya khatarta shahwada, xukunkeeda, xuduuddeeda iyo sidoo kale waxa ka dhalan kara, si caqligu u xakameeyo shahwada. Sidoo kale kolka shubhooyin yimaadaan waxa uu u baahanyahay aragti xeel dheer oo u ifisa, kolkii ay daruuraha madow iyo hugunka

shubuhaadka qofka ka luminayan miisaankiisa, oo uu ku waayayo awooddiisa wax arag soo rogmadaan. Sidaa awgeed aad baan u jeclaystay hadalkaan salafka nin ka mid ah laga soo xigtay: "Allaah waxa uu jecelyahay qofka aragtida xaqa u dusaysa leh kolkii shubho timaaddo, iyo midka caqliga dhammaystiran leh kolka shahwo timaaddo".

Waxaanu halkan isku dayaynnaa inaan caddayno qadiyadda xujada iyo oogitaankeeda.

Waxaa asalku yahay in xujadu ay ku ooganto rususha iyo kutubta Allaah uu soo dajiyay. Waxaa hubaal ah in Rasuul walba kolka Allaah uu soo diro waxa uu naf ahaantiisa xujada ku oogi jiray qoonkiisa isaga oo xujadiisa adeegsanaya iyo wixii Allaah uu u soo dhiibay. Rususha Allaah waxaa loo soo diri jiray qoomamkooda ay ka dhasheen, kaddib baa shaydaan dadka xaqa ka duufsan jiray, kolkaa bay u baahan jireen Rasuul kale, sidaas bayna ku socotay, ilaa laga soo saaray khaatamkii Nabiyada ee Nabi Muxammad (SCW), waxana uu la yimid xujadii anfici lahayd beni'aadanka ilaa aakhiru sabaanka.

Haddii dadkii noolaa ka hor inta aan Nabi Muxammad la soo saarin ay ku jireen mugdiga jaahilnimada, waxa ay noqdeen soo saarkiisii kaddib kuwa aan mugdi ku jirin. Nabiga (SCW) ka hor ma jirin kitaab sax ah, towreed iyo injiil labadaba waa la beddelay, suxuftii Nabi Ibraahin iyo raadadkii Nabiyada waa ay dhumeen, waxaa kaliya soo haray haraadi Ahlukitaab ah oo xaqiiqada yaqaana, hayeeshee awood u yeelan inay dadka kala hor yimaadaan, ama xataa ay ugu yeeraan.

Hayeeshee, Rasuulka (SCW) kolkii uu yimid kaddib, ee Allaah SWT uu ku misaalay Siraaj (Nal):

﴿ إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ شَاهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ۞ وَدَاعِيًا إِلَى اللَّهِ بِإِذْنِهِ وَسِرَاجًا مُنِيرًا ﴾ [الأحزاب: ٤٥-٤٦]

"Nabiyoow waxaan ku diray adigoo marag ah oo bishaaraynaya oo digaya, oo dadka Allaah ugu yeeraya idinkiisa darteed oo siraaj ifaya ah" (Al Axzaab: 45-46)

waa xiddigga ifka badan ee wax walba ifinaya, sidaa darteed baa qorraxda Siraaj loogu magac daray, halka dayaxa loo bixiyay Nuur, sababta oo ah isaga ifka kama soo boxo, ee waa jir mugdi ah oo ifka qorraxda uun soo celinaya, laakin qorraxdu waa xiddig holcaya oo ifkiisa arlada huwinaya, Rasuulka SCW waxaa lagu misaalay Siraaj.

Imaatinka Nabi Muxmad kaddib mugdi ma harin, xujadiina beni'aadanka waa ay ku oogantay. Sida qorraxdu ay dadka ugu soo baxdo, oo dhammaan ay u arkaan, oo aanu jiri Karin qof inkiraya jiritaanka ama ifka ama kulka qorraxda, sidoo kalena sax ma aha lagana aqbali mayo qof inuu inkiro xujada inay ku dul oogantay iyaga oo ay yaallaan kitaabka Allaah iyo sunnada Rasuulkiisa (SCW). Sababta oo ah Qur'aanku waa Siraajka dadka u ifinaya dariiqooda ilaa qiyaamo laga gaaro, sunnada Rasuulkana (SCW) waa Siraaj kale oo dadka nolosha u ifinaya. Sidaa awgeedna, qof cudur daar u leh ma jiro inuu yiraahdo xujo iguma oogmin.

Waxa aan doonayno inaan sheegno waxa weeye inuu jiro Farqi u dhexeeya xujadu inay ooganto iyo in la fahmo xujada. Xujadu mar haddii ay jirto waa oogantahay, kumana xirna dadku inay fahmayaan iyo in kale. Xujadu waa taagantahay laga soo billaabo Nabi Muxammad SCW kolkii Qur'aanka lagu soo dajiyay, Allaah SWT ayaana ballan qaaday fadligiisa iyo deeqsinimadiisa inuu beni'aadanka u xifdiyo iftiinka ay ku hiranayaan ilaa qiyaamo

﴿ إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ ﴾ [الحجر: ٩]

"Annagaa soo dejinnay dikriga (Qur'aanka) annagaana dhawrayna" (Al-xijri: 9)

qof walba oo kitaabku uu soo gaaro, iyo qof walba oo risaalada Nabi Muxammad SWC ogaada wax cudur daar ah ma leh, xujadu waa ay ku oogantay mar haddii ay jiraan Qur'aanka iyo sunnada Rasuulka.

Xujada fahankeeda haddaanu ka hadalno, waxaanu soo qaadanaynnaa hadallo goos goos ah ku soo arooray risaalo qiimo badan oo uu qoray Sh. Isxaaq Bin Cabdiraxmaan (dhashii dambe ee Sheekh Muxammad Cabdiwahaab weeye) oo mageceedu yahay: (xukunka gaalaysiinta qof shakhsi ah, iyo farqiga u dhexeeya xujada oo ooganta iyo xujada fahankeeda).

Waxa uu ku billaabayaa ninka risaalada qoray:

"qadiyadda takfiirka iyo baadi ku sheegidda iyo bidco ku sheegiddu waa qadiyad xididdo ku leh taariikhda kooxaha islaamka, waa astaan muuqata iyo calaamad lagu yaqaannay khawaarijta iyo wixii sidooda ahaa, kaddibna waxa ay isu beddeshay arrin la isku caayo, oo dad badan ay awrka ku kacsadaan oo kuna dhagaan, dadka tawxiidka iyo raacitaanka sunnada xaqiijinayay wax uga sheegaan, si ay u gaaraan in xayndaabka islaamka la waasiciyo, xataa haddii lala yimaado wax cad oo lagu gaaloobayo"

Haddaba qadiyadda takfiirku waa qadiyad qadiim ah, waxaa jiray xilli taariikhda umadda islaamka ka mid ah oo ay bateen kooxaha baadiyaysan, oo dadku ay isu mala xumeeyeen ictiqaadka wixii khuseeya, oo ay si sahal ah isugu tuuri jireen tuhunka gaalnimada, ilaa ay gaartay in dadka qaar ay shahaado qoran ka soo qaataan culumada, taasoo caddaynaysa inuu muslim yahay, si uu meel fiican u dhigto, haddii qof uu gaalaysiiyo waxa uu la soo baxayaa shahaadadii si uu u caddeeyo islaannimadiisa. Waxaa dhacay wareer dhanka aqoonta iyo caqiiddada ee nolosha muslimiinta, waxa ay noqotay gaalaysiinta tuhmad lagu dhici karo si sahlan, oo ay dadku is waydaarsadaan had iyo goor, taasina waxaa ka dhalatay in dadku ay ka baqaan in lagu tuhmo inay wax gaalaysiinayaan.

Sida muuqata waxaa dhacday fowdo ballaaran, dadkii baa gar iyo gardarraba la gaalaysiiyay, qofku wuxuu noqday inuu ka baqo in gaalnimo lagu tuuro isaga oo islaannimadiisa og, sababta oo ah kooxo badan oo dadkii kala shakisiiyay baa jiray xilligaas. Waxaa dabcan bilaabmay olole looga soo horjeedo gaalaysiintan fowdada ah, waxaa timid xasaasiyad in qof haba yaraatee la gaalaysiiyo. Sidaas bay qaddiyaddii ku macna beeshay, dadku kuma aysan hakan halkii wasadka ahaa ee dhexe, in qofkii gaalnimo mutaysta la gaalaysiiyo, qofkii Allaah uu ka badbaadiyayna laga dhaafo. Wuxuu noqday soo qaadidda arrinka takfiirka amase ka hadalkiisu arrin xasaasi ah, oo ay ka faa'idaysteen cadowga islaamka iyo kuwa ku talaxtagayba, si dadka ay uga bajiyaan in cidna la gaalaysiiyo, xataa haddii Nabiga (SCW) la caayo, Qur'aanka la caayo, ama Allaah la caayo, waxay oranayaan: ma awoodno inaan gaalaysiinno, waan ka istaagaynnaa, Allaah ayaan u daynaynaa arrinkiisa. Waxa ay noqotay qaddiyadda takfiirka ama in xukun lagu tuuro qof ama koox ama mujtamac arrin xasaasiyad xun leh, ujeeddadeedii koowaad waxa ay ahayd in la habeeyo arrinka si fowdo aanu u noqon, laakin waa laga faa'idaystay intaa kaddib, ilaa uu noqday – sida Ustaad Sayid Dilaalka ugu sheegayba – tuhmad ama dambi la suro luqunta qofkii ku dhiirrada in wax la gaalaysiiyo, bulshada ama kooxaha ama qof shakhsi ah intaba.

Waa hubaal in qadiyaddani ka hor imaanayso dadka maanta ku howlan dacwada xaqa iyo towxiidka saxda ah, kuna xukminaaya xukunka Allaah ku xukumaayo mujtamacyadaan, dowladahaan, manaahjta iyo dadka oo dhan. Waxa uu arrinkaanu noqday mid si baqdin leh loo eego oo aanan loo dhowaan karin, sidii inaysan bannaanayn in sinnaba cid loo gaalaysiiyo.

Murshidkii hore ee Ikhwaan Muslimiinka masar Ustaad Xaamid Abunnasri ayaa qoraal qoray, wuxuuna ku yiri: "annaga cidna ma gaalaysiin karno sideedaba". Qaar ka mid ah ikhwaankana ee xabsiga ku jiray waxa ay oran jireen: aniga ma gaalaysiin karno Yahuud iyo Nasaaro.

Arrinku haddaba waxa uu noqday hadal ficilo iyo wax iska dhicin loo yiraahdo marka laga hadlaayo Islaamka iyo qaddiyadda towxiidka iyo wax kasta oo soo raaca sida walaayada iyo is gacalaysiga iyo wax walboo ka dhalanaya oo xukun ah dadka, nidaamyadooda, iyo xaaladahooda qof ahaan iyo mujtamac ahaanba. Waxay qaddiyaddaani noqotay miday ka faa'iidaystaan cadowga Islaamka kana dhigtaan tuhmad laysku eedeeyo layskuna qabsado.

Waxa uu yiri Ustaad Sayid: "cadowga xarakaadka islaamka waa ay yaqaanaan goldaloolkaan ay xarakaatku leeyihiin, sidaa awgeed way dulfariisteen, way sii ballaariyeen, mugdi iyo wareer bay galiyeen, ilaa ay ku dhawaaqidda kalimadda (kala baxa ah) ay noqoto tuhmad lug iyo luqunba laysu qabanayo, tuhmadda gaalaysiinta muslimiinta". …Ilaa uu ka yiraahdo (waana hadal go'an oo cad): "waa inay ka gudbaan ducaaddu caqabadaan, oo ay naftooda arrinta u caddaato, si awooddoodu dhammaan jidka Allaah ugu dhaqaaqdo, iyada oo shubho celinaynin, mugdi hortaagnayn, wareerna haysanin. Awoodohoodu ma dhaqaaqayaan ilaa ay si yaqiin ah u aaminaan inay iyagu yihiin "Muslimiinta", dadka is hortaagaya oo jidka Allaah u diiddan dadkana ka hortaagan dariiqa Allaah inay yihiin "Mujrimiinta (gaalada)". Sidoo kale, dulqaad uma yeelan karaan dhibaatooyinka dariiqa, ilaa ay yaqiinsadaan inay tahay qadiyadda (laysku haystaa) iimaan iyo gaalnimo, iyo in iyaga iyo qoonkoodu laba dariiq kala haystaan, iyaguna ay diin haystaan, qoonkooduna diin kale ay haystaan:

﴿ وَكَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ وَلِتَسْتَبِينَ سَبِيلُ الْمُجْرِمِينَ ﴾ [الأنعام: ٥٥]

"Sidaas oo kale ayaan u kala dhigdhignaa aayadaha si ay u caddaato waaddada dambiilayaasha" (Al-Ancaam: 55)

Waxa uu yiri: "waa lagama maarmaan inay kala xaddidmaan calammada iyo boorarka, la suuliyaa hagoogta beeneed ee laysku qarinaayo, arrimuhuna kala caddaadaan, si qofkii dhimanaya wax cad ugu dhinto, qofkii noolaanayana wax cad ugu noolaado"

Waa taas howsha rususha: inay xaq cad la yimaadaan oo kala saaraya mugdiga iyo iftiinka, gaalnimada iyo iimaanka, jaahiliyada iyo islaamka, baadida iyo hanuunka, haddii sidaa ayan yeelin Nabiyadu ma noqonayaan kuwa howshoodii gutay.

Nabiyadu dhammaantood way yimaadeen wayna guulaysteen, waxa ay sidaa ku gaareen fadliga Allaah SWT ugu horrayn, iyo daacadnimadoodii iyo ku adkaysigoodii inay dhigaan manaaradaha lagu hanuuno, iyo inay qoomamkooda u kala xaddidaan halka lagu kala baxayo. Waa sidii uu Nabigu (SCW) ugu yiri qoonkiisa:

﴿ قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ۞ لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ ۞ وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ۞ وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَا عَبَدْتُمْ ۞ وَلَا أَنْتُمْ عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ۞ لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ﴾ [الكافرون]

iyo sidii loo farayba inuu yiraahdo:

﴿ قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ لَسْتُمْ عَلَىٰ شَيْءٍ حَتَّىٰ تُقِيمُوا التَّوْرَاةَ وَالْإِنْجِيلَ ﴾ [المائدة: ٦٨]

Sixidda ictiqaadka dadka, xukminteeda, iyo garasha xumida keentay waxyaabaha ay caabudayaan, waxa ay udub dhexaad u ahayd howsha Nabiyada, ee u yimid inay beni'aadanka

ka badbaadiyaan baadida, kana saaraan mugdiyada oo ifka u saaraan, rususha Allaah waxa ay u yimaadeen inay dadka ku yiraahdaan: waxaad ku sugantihiin baadil, waxaannu idiinkugu yeeraynnaa hanuun, waxaa lagu amray inay dadka u sheegaan dhabnimada xaalkooda, inay gaalo yihiin, wax ay ku suganyihiinna aanan la arag.

Hayeeshee, wax walba waxa ay leeyihiin xakamayaal si fowdo aanay u dhicin, sida maanta jirta ee xarakaad iyo kooxo islaami ah ay ku talax tageen tuuridda xukunka gaalnimada, xataa iyaga dhexdooda is gaalaynaya, khilaaf farac ah oo fudud dartii, ama fikrado iska hor yimid dartood. Taasina ma bannaana. Waxa lagama maarmaan ah inay arrintu xakame leedahay, si aanay u dhicin fowdo u suuro gelin karta cadowga islaamka inay dadka ka cabsiiyaan u dhowaanshaha qadiyaddan (gaalaysiinta). Xakamayaashaasi waxa ay awood u siinayaan dadka xaqa u taagan inay dadka xaqa gaarsiiyaan isaga oo sax ah oo ku talax tagid iyo ka gaabin midna lahayn.

Waxaan hore u soo sheegnay in xujadu oogantay haddii ay joogtaba, in lafahmana shardi ma aha sidoo kale waxa la qeexayo waa umuuraha qarsoomaya ee ma aha usuusha Islaamka. Qofkii ku istaaga musxafka la dhihi mayo waa waajib inaan usheegno in taa lagu gaaloobayo, waayo waa camal sidiisa kufri u ah, kii sameeyana la weydiin mayo loona sheegi mayo, maxaa yeelay waa arrin asal ah, qofkii inkira sunnada rasuulka SCW iyaduna waa asal sida tii hore loo sheegi mayo loona caddayn mayo bal waxaa laga dalbanayaa inuu towbad keenaa, towbad weydiintuna waa iyadoon waxna loo caddayn ama la barin.

Hayeeshee arrimaha dadka ka qarsoomi kara sida bidcooyinka oo kale ama oraahyada farciga ah, haddii dadka qaar ku dhacaan waa in loo sheegaa khatarteeda iyo in lagu gaaloobayo si ay uga soo noqdaan, laakin umuuraha asuuliga ahee uu Qur'aanka iyo sunnuhu sheegay, ciddii inkirtaa ama ku xadgudtaa waxay noqonayaan gaalo isla markiiba, taasi waa **qaddiyadda koowaad**

Qaddiyadda labaad, haddii xataa khilaaf ka dhex jiro culumada xaaladaha gaarka ah, ma loogu cudur daarayaa qofkii ku dhaca mise maya sida ahlu fatrada oo kale. Labada aragti waxay wada qirayaan inaysan muslimiin ahayn kuwaasi, wuxuuse khilaafku ka jiraa aakhiro ma loo cuudurdaarayaa mise looma cuudurdaarayo waa abaal marinta aakhiro, laakin addunyada xukunkoodu waa ijmaac inay gaalo yihiin.

Qadiyaddani aad bay muhiim u tahay, sababta oo ah xataa haddii kuwaasi aakhiro loo cudurdaarayo, waaqacooda adduunyada waa inaysan Muslim ahayn, Allaah wax uu ka ogaa darteed wuu u cudurdaari karaa. Waxaana ku soo arooray xadiis in dadka caynkan lagu imtixaani doono banka qiyaamo, haddii marka dhab ahaan aanan wax la soo gaarsiinin waa la imtixaanayaa. Waxaa soo arooray in qofka dhagoolka ah ama doqonka ah ama dhintay xilliga fatrada Allaah ay la doodayaan oo ay leeyihiin: Rabbiyow maanan ogaan, Allaah awoodohoodii buu u soo celinayaa, kaddibna wuu imtixaanayaa. Sidaas baa xadiiska[10] ku soo aroortay.

Qadiyaddani labaad waa muhiim, sababta oo ah dadku way iska hadlayaan iyaga oo jaahil ka ah in xujadu ay oogan tahay marba haddii ay jirto, taasina ay tahay arrin la isku waafaqay, khilaafkuna uu ka taaganyahay haddii xujadu aysan gaarin, xataa haddii aysan gaarinna ma noqonayaan muslimiin.

Waxa uu leeyahay qoraaga risaalada: "masaladeennan, waa Allaah kaligii oo la caabudo shariig la'aan, wixii ka soo harayna bari laga noqdo, iyo in qofkii Allaah qayrkii la caabudo uu la yimid

١٠- أخرجه أحمد من حديث الأسود بن سريع -رضي الله عنه-، قال علي بن المديني: إسناده صحيح

Shirkigii waynaa ee ka saarayay diinta, waa asalka asallada, waa waxa rususha lala soo diray, kutubta loo soo dajiyay, dadkuna xujadu ugu oogantay Rasuulka iyo kitaabka awgood. Sidaas ayaana ka arkaysaa jawaabaha imaamyada diinta ee asalkan kolkii la gaalaysiinayo qof Allaah u shariig yeelay, waa la towbad waydiinayaa, haddii uu towbad keeni waayana waa la dilayaa. Ma sheegayaan in wax "ogaysiin" la samaynayo masaa'ilka asalka ah, ee "ogaysiintu" waxaa la sheegaa masaa'ilka qarsoon ee dadka qaar ka dahsoomi kara, sida masaa'il ay ka doodeen kooxaha bidcada qaarkood sida Qadariyada iyo Murji'ada, ama masalo sideeda isaga qarsoon sida Sarfiga iyo Cadfiga (waa laba nooc oo sixir ah)

Ogaysiinta halkan (caddayn iyo xujada sharxideeda) ma aha arrimaha asalka, ee qofkii ku dhaca waa la towbad waydiinayaa, wax la ogaysiinayaa ma jiraan, gaalaysiintiisuna kuma xirna ogaysiintiisa, sababta oo ah arrinku waa usuul, ogeysiinna looma baahna.

Waxa uu tusaale u soo qaadanayaa kuwa qubuurta caabuda, waxa uu yiri: "sidee ogaysiin loogu samaynayaa maba aha muslimiine? Islaannimo shaqo kuma ay laha, shirki gadaashiis camal wax ma taraa? Allaah waxa uu yiri:

﴿ وَلَا يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ حَتَّى يَلِجَ الْجَمَلُ فِي سَمِّ الْخِيَاطِ ﴾ [الأعراف: ٤٠]

"Mana galaan janno inta uu ka galo rati irbid dulkeeda" (Al-Acraaf: 40)

﴿ وَمَنْ يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَكَأَنَّمَا خَرَّ مِنَ السَّمَاءِ فَتَخْطَفُهُ الطَّيْرُ أَوْ تَهْوِي بِهِ الرِّيحُ فِي مَكَانٍ سَحِيقٍ ﴾ [الحج: ٣١]

"Ruuxii u shariik yeela Allaah wuxuu la mid yahay mid ka soo dhacay samada oo ay kaladafayaan shimbiruhu oo ay ku tuuri dabaysho meel dheer" (Al-Xaj: 31)

﴿ إِنَّ اللَّهَ لَا يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ ﴾ [النساء: ٤٨]

"Allaah ma dhaafo in lala wadaajiyo" (Al-Nisa': 48)

﴿ وَمَنْ يَكْفُرْ بِالْإِيمَانِ فَقَدْ حَبِطَ عَمَلُهُ ﴾ [المائدة: ٥]

"Ciddii ka gaaloowda iimaanka, wuu buray camalkiisa" (Al-Maa'idda: 5)

iyo aayado kale oo badan. Ictiqaadkan waxaa ka dhalanaya arrin foolxun, oo ah in la yiraahdo Rasuulka iyo Qur'aankuba wax xujo ah kuma oogin umaddan, Allaah ayaan ka magan galaynaa fahankaas xun, waxaa la isku raacay dadka ahlufatrada ah ee risaalada iyo Qur'aanku aysan soo gaarin ee jaahiliyada ku dhintay in waa muslimiin la oranaynin, loo dambi dhaaf waydiinaynin, ee culumadu waxa ay isku khilaafeen in aakhiro la cadaabayo iyo in kale" ...

Waxaa laga wariyay sheikh Muxammad Cabdiwahaab hadal uu yiri: "qofkii islaamka ka riddooba Nabiga (SCW) kaddib, sida kuwii riddoobay xilligii Abuu Bakar Allaah haka raalli noqdee, saxaabadu waxa ay ku xukumeen riddo markii ay sakada diideen, raggi yiri Cali waa Ilaah, raggii masjidka Kuufa ee Musaylima raaciddisa ka qoomamayn jiray, iyo reer Banii Cubayd Alqaddaax, dhammaan waxaa lagu xukumay riddo shakhsi ahaantooda". Kolkii ay astaamaha gaalnimo ka dhacaan dad gaar ah, waxaa lagu xukumayaa gaalnimo, iyada oo wax labalabayn ah la galin.

Wuxuu yiri: "Imaam Ibnu Taymiya waxa uu caddeeyay in qofka mucayanka ah aan la gaalaysiinaynin ilaa ay xujadu ku ooganto, hayeeshee haddii xujadu ku ooganto waa la gaalaysiinayaa. Waxaa la ogsoon yahay in oogideeda macneheedu ahayn inay hadalka Allaah

iyo Rasuulkiisa sida Abuu Bakar oo kale u fahmaan, ee mar hadduu gaaray hadalka Allaah iyo Rasuulkiisa, wixii loogu cudurdaarayayna uu ka marraado, waxa uu noqonayaa gaal, sida gaalada dhammaantood xujadu ugu oogantay la kulanka Qur'aanka ama araggiisa iyo maqalkiisa oo kaliya, iyada oo Allaah SWT uu yiri:

﴿ إِنَّا جَعَلْنَا عَلَى قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَنْ يَفْقَهُوهُ ﴾ [الكهف: ٥٧]

"Waxaan yeelnay quluubtooda dabool in aysan fahmin Qur'aanka darted" (Al Kahf: 57)

﴿ إِنَّ شَرَّ الدَّوَابِّ عِنْدَ اللَّهِ الصُّمُّ الْبُكْمُ الَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ ﴾ [الأنفال: ٢٢]

"inta Dhul socota waxaa ugu shar badan Allaah agtiisa, kuwa aan maqlin, hadlin, caqlina lahayn" (Al Anfaal: 22)

Waxaa hadalka Ibnu Taymiya iyo culumada ee arrinkan ka haddashay inaan cidna la gaalaysiinaynin ilaa ay xujadu ku ooganto, macnaha ay gaarto oo la ogaysiiyo, ee ma aha inuu fahmo, haddii arrinku sidaa yahay cidna ma gaalowdeen. Waxa meel kale uu ku yiri: "haddii kale xujadu waxay noqon lahayd inaan Nasaaro iyo Yahuud la gaalaysiinin, sababta oo ah ma fahmayaan". Ogaysiinta iyo caddayntu – sidaan soo sheegnay – waxay gashaa macnayaalka qarsoon ee qofka baadiyaysan ka qarsoomi kara, kaasi la gaalaysiin maayo sababta oo ah xujadii lagu gaalaysiin lahaa kuma oogmin. Waxa uu yiri: "hayeeshee, arrimaha muuqda ee Mushrikiin, Yuhuud iyo Nasaaroay ogyihiin in Nabi Muxammad (SCW) lala soo diray wixii diidana uu gaaloobayay; sida inuu amray Allaah kaligii oo la caabudo shariig la'aan iyo inuu reebay cid kale in la caabudo, arrimahaani waa astaamaha ugu asaasisan ama ugu muuqalka badan Islaamka, sidaasaan cidna loogu cudur daaraynin ka tagistooda". Waxa kale uu yiri: "waxaa ka sii daran taasi in culimadaasi ka mid yihiin kuwo riddada wax ka qoray sida Raazi uu wax uga qoray xiddiga caabudidda,taasina waa riddo islaamka laga noqday waana la isku raacsanyahay", waa erayadii Ibnu Taymiya.

Wuxuu halkan ku yiri: "bal si fiican ugu fiirso hadalkiisa – waa Ibnu Taymiyee – ee ah Raazi inuu islaamka ka riddoobay, Raazina waa nin ka mid ah ragga ugu waawayn mad-habta Shaaficiyada, taasi waxa ay ka hor imaanaysaa diidmada qof mucayan ah xukun la saaro". Haddii gaalnimo ay ku caddaato qof mucayan ah wax diidaya ma jiraan in la gaalaysiiyo.

Waxa uu yiri: "ulajeedku waa in xujadu ku oogantay Rasuulka iyo Qur'aanka, qofkii Rasuulka maqla oo Qur'aanku uu gaaro xujadu waa ku oogantay, taasi waxa ay ka muuqataa hadalka Sheekhul Islaam kolka uu yiri (waxaa la ogyahay in xujada oogitaankeedu aanu ahayn inuu hadalka Allaah iyo Rasuulkiisa uu u fahmo sida Abuu Bakar oo kale, bal haddii uu gaaro wax loogu cudurdaarana uu ka marraado waa Gaal, sida gaalada oo dhammi xujadu ugu oogantay oo kale Qur'aanka soo degitaankiisa oo kaliya, saas oy tahayna wuxuu Allaah uu yiri:

﴿ إِنَّا جَعَلْنَا عَلَى قُلُوبِهِمْ أَكِنَّةً أَنْ يَفْقَهُوهُ وَفِي آذَانِهِمْ وَقْرًا ﴾ [الكهف: ٥٧]

"Waxaan yeelay dabool quluubtooda in ayan fahmin Qur'aanka, dhegahoodana culays" (Al-Kahf: 57)

Wuxuu ku celinayaa mar kale: "usuusha diinta ee Allaah uu ku caddeeyay kitaabkiisa Allaah waxaa xujo u ah Qur'aanka, qofkii uu gaaro Qur'aanku waa ay gaadhay xujadii, hayeeshee, wareerku halka uu ka yimid waxa ay tahay inaysan kala saarin xujada oogmiddeeda iyo

fahmiddeeda, badi gaalada iyo munaafiqiinta ma aysan fahmin xujada Allaah, wayna ku oogantay, sida Allaah uu yiri:

﴿ أَمْ تَحْسَبُ أَنَّ أَكْثَرَهُمْ يَسْمَعُونَ أَوْ يَعْقِلُونَ إِنْ هُمْ إِلَّا كَالْأَنْعَامِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ سَبِيلًا ﴾ [الفرقان: ٤٤]

"Mise waxaad u maleeyn in badankood wax maqlaan ama wax garanayaan may aha xoolo oo kale mooyee, balse iyago waa kuwo ka baadinimo badan xagga waddada" (Al-Furqaan: 44).

Xujadu oogmiddeeda iyo gaariddeedu waa arrin, fahmideeduna waa arrin kale.

Sheekh Sulaymaan Bin Cabdullaahi AUN waxa uu ku sheegay kitaabkiisa (Taysiirul Caziizil Xamiid Fii Sharxi Kitaabu towxiid): "qofkii ku dhawaaqa ereyga towxiidka, ee tukada, saka bixiya, hayeeshee hadalkiisa iyo ficilkiisa ku khilaafa arrimahaas, ee dadka saalixiinta ah barya, gargaar weydiista, waxna u gowraca, waxa uu la mid yahay Yahuud iyo Nasaaro, waxa ay ku dhawaaqeen ereyga towxiidka waana ay khilaafeen, qofkii yiraahda mushrikiinta ayaa wax la ogaysiinayaana waxaa ka dhalanaysa in Yuhuud iyo Nasaaro ogaysiin loo sameeyo, oo aan la gaalaysiin in wax la ogaysiiyo mooyee, waana arrin iska muuqata middaasi".

Waxa uu yiri: Ibnul Qayim AUN waxa uu sugay ama gooyay inay gaalo yihiin dadka odayaashooda kaga dayda masaa'ilka lagu gaaloobayo iyagoo awood u leh xaqa inay raadiyaan oo bartaan, misna ay ka jeesteen xaqiina aysan raadinin. Qofkiise ay u suuroobi waydo barashada wixii rusussha ku soo dagay waxa uu la mid yahay Ahlulfatra (dadka nool xilliyada Nabiyada u dhexeeya) ee dacwada Nabiyada aysan soo gaarin, labada noocna loo xukumi maayo islaam inay yihiin, mana soo galayaan muslimiinta, sidaa waxaa qaba xataa kuwa aan dadka qaarkood gaalaysiinin

Waxa uu yiri: "waxaa shubhada inta ka dhiman kaa faydaya hadalka Ibnul Qayim AUN baabka (Dabaqaatul Mukallafiin) ee kitaabkiisa (Dariiqul Hijratayn) ku yiri; kolkii uu sheegay madaxda gaalada ee dariiqa Allaah is hor taagay, iyo in cadaabkoodu laba laab uu yahay; waxa uu yiri: "Dabaqada todobo iyo tobnaad: Dabaqada (muqallidiinta = kuwa iskaga dayanaya) iyo gaalada jaahiliintooda, kuwa raacsan iyo dameerradooda iyaga taabacsan, ee oranaaya aabayaasheen ayaan wax ku aragnay wixii baana kaga dayanaynaa, isla markaana nabad galinaya muslimiinta, dagaalna kula jirin, sida dumarka dagaalyahannada, u adeegayaashooda iyo dabadhilifkooda, kuwaasoo aan isu taagin howsha kuwan kale isu taageen ee daminta nuurka Allaah iyo duminta diintiisa iyo daminta ereygiisa, waxa ay la mid yihiin xoolaha oo kale. Dabaqaddan waxa ay umaddu isku raacday in ay gaalo yihiin, haba ahaadeen kuwa ku dayanaya madaxdooda, kuwa Ahlubidcada ahse oran maayaan waa Ahlunaar, waxayba la mid yihiin dadka dacwadu aysan gaarin(waa siday la tahay), waa mad-hab aanu oran qof ka mid ah imaamyada muslimiinta, saxaabada iyo taabiciinta iyo dadkii ka dambeeyay midna".

Hadalkiisii buu sii wataa Ibnul Qayim, waxa uu yiri: "Islaamku waa towxiidka Allaah iyo kaligii in la caabudo shariig la'aan, Rasuulkiisa la rumeeyo, wixii uu la yimid lagu raaco, addoonka intaa aanan laga helin ma aha muslim, walaw uusan ahayn gaal canaadaya, waase gaal jaahil ah, Dabaqadan waxa ugu fiican ay noqon karaan waa gaalo jaahiliin ah oo canaad uusan ku jirin, canaad la'aantooduna ka saari mayso gaalnimada, gaal waa qofkii dafira towxiidka Allaah SWT, Rasuulkiisana beeniya, ha ahaato canaad, ama jaahilnimo iyo ku dayasho dadka canaadaya, qofkani haddii xataa uusan canaadin waxa uu raacsanyahay kuwa canaadaya, Allaah ayaana meelo badan ku sheegay in la cadaabayo kuwa dadkoodii hore ku dayday ee gaalada ah, waxoo idilna inay naarta iskugu tagayaan, oo ay halkaa ku doodayaan..", kaddibna waxa uu soo daliiliyay aayado iyo axaadiis.

Waxa uu qoraagu intaa kaddib ka hadlay qaddiyadda xaaraantinimada u hiillinta iyo daacad u noqoshada cadowga Allaah, waxa uu yiri:

في حديث ثوبان -رضي الله عنه- عن رسول الله ﷺ قال (لا تقوم الساعة حتى يلحق قبائل من أمتي المشركين وحتى تعبد فئام من أمتي الأوثان)".

"waxaa ku soo arooray xadiiska Thowbaan Allaah haka raalli noqdee inuu Rasuulku (SCW) yiri: (Saacaddu dhici mayso jeeray qabaa'il umaddayda ka mid ah gaalada raacaan, iyo jeeroo qaybo ka mid ah umaddayda ay asnaamta caabudaan)".

Waana hubaal in arrintaasi ay ka jirto waaqaca muslimiinta.

"Waxa uu yiri Abul Wafaa Ibnu Caqiil: haddii aad rabtid inaad ogaatid islaamku halka uu ka joogo dadka xilligan jooga ha eegin ciriiriga ka taagan irridaha masaajidda, ha eegin sida ay Labbayka ula qaylinayaan waqtiga xajka, ee waxaad eegtaa sida ay cadowga shareecada ula jiraan oo ugu hiillinayaan".

Qaddiyadda hiillada iyo daacad u noqoshada waa qadiyad cad oo mawqifka xaddidaysa, salaad iyo xaj iyo arrimo kaleba qiimo ma laha mar haddii qofku cadowga Allaah uu hiillo iyo daacad u yahay ama aanu cadow la ahayn. Xadiiska Thowbaan Allaah haka raalli noqdee waxa uu yiri: Rasuulka Allaah (SCW) waxa uu yiri:

و عن ثوبان -رضي الله عنه- قال: قال رسول الله ﷺ (يوشك أن تداعى عليكم الأمم كما تداعى الأكلة إلى قصعتها)، قال قائل: ومن قلة نحن يومئذ؟ قال (بل أنتم يومئذ كثير، ولكنكم غثاء كغثاء السيل، لينـزعن الله عن صدور عدوكم المهابة منكم، وليقذفن في قلوبكم الوهن)، قال قائل: يا رسول الله وما الوهن؟ قال (حب الدنيا وكراهة الموت).

(waxaa la filayaa in ummaduhu isugu kiin yeertaan sida dadka wax isla cunaya xeerada isugu yeertaan", waxaa la waydiiyay: ma tira yaraan baa na haysata maalintaas Rasuulkii Allow? Waxa uu yiri: "bal waad badantihiin maalintaas, ha yeeshee waxaad tihiin xumbo sida xumbada daadka oo kale... Allaahna waxa uu laabta cadowgiinna ka siibi doonaa haybaddiinna, quluubtiinna waxa uu ku tuuri doonaa Wahan", saxaabi baa yiri: Rasuulka Allow waa maxay Wahan? waxa uu yiri: "Adduunyo jacayl iyo dhimasho nacayb).

Waxa uu xusay xadiiskii Xudayfa Allaah haka raalli noqdee:"ha iska ilaaliyo midkiin inuu Yahuud ama Nasaaro noqdo isaga oo aan dareemaynin", kolkaasuu akhriyay aayaddii suuratul Maa'ido:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا الْيَهُودَ وَالنَّصَارَى أَوْلِيَاءَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ مِنْكُمْ فَإِنَّهُ مِنْهُمْ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴾ [المائدة: ٥١]

“Kuwa xaqa rumeeyiyoow ha ka yeelanina Yuhuud iyo Nasaara waliyaal, qaarkood qaarka kale ayey waliyaal u yihiin, ciddii waliyaal ka yeelata oo idinka mid ah, wuxuu ka mid yahay iyaga, Allaah ma hanuuniyo qoomka daalimiinta” (Al-Maa’idda: 51)

Cumar Bin Khaddaab Allaah haka raalli noqdee ayaa Abuu Muusal Ashcari ku canaantay inuu nin Nasaara ah ka dhigtay kaatib wax u qora, waxa uu ku yiri: go’e maxaa idinka dhexeeya adiga iyo isaga! maxaad uga dhigan wayday qof muslim ah oo toosan? Waxa uu akhriyay isla aayaddaas. Waxaa lagu haystay adeegsigiisa, maxay kula tahay qofkii u hiillo iyo daacad u

noqdaa ama karaameeya. Waxa uu yiri: "Allaah waxa uu ka anfiyay iimaanka ciddii gaalada jeclaata, waxa uu yiri:

﴿ لَا تَجِدُ قَوْمًا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ يُوَادُّونَ مَنْ حَادَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ ﴾ [المجادلة: ٢٢]

"Ma helaysid dad rumeeyey Allaah iyo maalintii aakhiro oo haddana jecel ruux Allaah iyo Rasuulkiisa khilaafaya" (Al Mujaadala: 22)

waxaa la ogsoon yahay qofkii qof jeclaada inuu raalli ka noqonayo, haddii raalli uu ka noqdana diintiisa ayuu raalli ka noqonayaa, sidaasuu uga mid noqonayaa ahalka diintiisa isaga oon ogayn, dadka badankoodna way ka digtoon yihiin macsiyada iyo waxa keena, kamase digtoona shirkiga iyo sababihisa". Taasina waa dhab, dad badan aad bay u dhibaysaa inuu sino ama ribo ku dhoco, laakin in badan buu shirki ku dhacayaa isaga oon ogayn.

Waxa uu yiri: "kolkii Allaah uu reebay in cadowgiisa gaalada iyo mushrikiinta loo hiil iyo daacad noqdo, oo uu banneeyay qofkii la khasbo inuu Tuqyo sameeyo, waxa uu yiri:

﴿ وَيُحَذِّرُكُمُ اللَّهُ نَفْسَهُ ﴾ [آل عمران: ٢٨]

"Allaah wuxuu idinkaga degayaa naftiisa" (Aal-Cimraan: 28)

Taasina waxa ay ka mid tahay waciidka iyo gooddiga midka ugu daran qofkii ka fekera kitaabka Allaah ee amarkiisa weeleeya".

Waxa uu yiri sidoo kale inay jiraan dad aanay u muuqan inay tahay in cadowga Allaah laga haajiro ama kuwa mushrikiinta ka weli yeesha, waxa uu yiri: "ugu horrayn in laga haajiro waa sharci daliil baana ku cad, salafka badankoodna way tilmaameen, ka haajiridduna waa darajaad, waxayna kala leedahay xaalado iyo faahfaahin laga samaynayo qalbiga, carrabka iyo addimada. Allaah SWT waxa uu ka yiri Ibraahiim CS,

﴿ وَأَعْتَزِلُكُمْ وَمَا تَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ وَأَدْعُو رَبِّي ﴾ [مريم: ٤٨]

"Waana idinka fogaan idinka iyo waxaad caabudaysaan oo Rabbi ka soo haray, Waxaana baryi Rabigay" (Maryama: 48)

waxa uu SWT ka yiri Asxaabul Kahfi:

﴿ وَإِذِ اعْتَزَلْتُمُوهُمْ وَمَا يَعْبُدُونَ إِلَّا اللَّهَ ﴾ [الكهف: ١٦]

"Markaad ka fogaateen gaalada iyo wixii ay caabudayeen oo Allaah ka soo haray" (Al Kahf: 16)

Nabiguna (SCW) waxa uu ka haajiray seddexdii nin ee ka hartay dagaalkii Tabuuka, sheekadoodu waa caan.

Waxa uu ka yiri aayadda suuratul mumtaxina ku jirta ee kusaabsan Nabi Ibaahim iyo dadkii la jiray; "Allaah waxa uu yiri:

﴿ قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنْكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّى تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَحْدَهُ ﴾ [الممتحنة: ٤]

"Waxaan idiinku sugnaaday ku dayasho wanaagsan Nabi Ibraahim iyo kuwii la jiray markii ay ku yiraahdeen qoomkoodii beri' baan ka nahay idinka iyo waxa aad caabudaysaan Allaah

sokadiisa, waan idinku kufrinnay waxaana muuqday dhexdeenna cadaaweysi iyo caro weligeen ilaa aad ka rumeysaan Allaah kaligiis" (Mumtaxina: 4)

Bal eeg sida bayaanka ah ee loo caddeeyay, waxa uu yiri: ﴿ وَبَدَا بَيْنَنَا ﴾ macneheeduwaa" waxaamuuqday", taasi waa muujinta iyo kor u qaadidda diinta, waxaa lagama maarmaan ah in la muujiyo cadow in loo yahay, si cadna loo gaalaysiiyo, si ficil ahna looga tago oo laga fogaado. Cadowtinimadu macneheeda waa inaad dhinac joogto cadowguna dhinaca liddiga ah uu joogo. Asalka ka bari' noqoshaduna waa in qalbiga, carrabka iyo jirka laga gooyo(goyn dhammaystiran). Qalbiga muuminka ah marna kama marnaan karto cadowtinimada gaalka, ee waxa la isku hayaa waa muujinta cadaawadaas iyo in kale, waxaa loo qarin karaa sabab sharci ah markay jiraan sida khasbidda, qofku isaga oo qalbigiisu ku xasilanyahay cadownimada, waxaa kaloo qarin kara cadownimada qof macduur ah oo tabardarro u gaysay oo Qur'aanku cudurdaar siiyay, waxaa loo qarin karaa sabab adduunyo ah, middan dambe ayayna u badanyihiin dadkii dambe, waaba haddii aysan muujinin waafaqsanaan. Sheegashada dadka Allaah uu indha tiray ee oranaaya in diinta la muujiyo ay tahay dadka cibaadaysanaya ama diinta baranaya oo aan loo diidin (macnaha haddii salaadda aad tukaan karto , cilmiga diiniga ahna baran karto waad muujisay diintii weeye), waa sheegasho baadil ah, caqli ahaan iyo sharci ahaamba warkaas socon maayo; dadka ku nool dhulalka Nasaarada, Majuusta iyo Hindida haku farxeen xukunkaas baadilka ah, sababta oo ah salaadda iyo aadaanka iyo diin barashadaba waa ka jiraan dhulalkooda, taasina waa burin la burinayo hijrada iyo jihaadka, waana dadka oo laga celinaayo dariiqa hanuunka.".

Waa hubaal in hadalkani uu kala caddaynayo farqiga u dhexeeya oogmidda xujada iyo fahmidda xujada, iyo in xaraj ama dhib laga dareemo gaalaysiinta haddii xakamaheeda la adeegsado, xarajkaasuna kama mid aha sharciga iyo diintaba, xataa dadka jaahilnimo dadka ugu cudurdaaraya oo ka soo qaadaya inay Ahlufatro yihiin, ma siinayaan sifada islaamka. Haddaba, waaqaca aanu ku noolnahay marka uu ugu fiicanyahay – haddii aan suuraysanno inaanay xujadu gaarin sida ay ku andocoonayaan mufakiriinta casrigaan – haddii laga soo qaado Ahlufatro badankoodu waxba kama haystaan diinta, ee waxaa hadda iyo kow loogu yeerayaa shareecada iyo diinta Allaah si hadda ay u soo galaan. Waxbana u tari maayo asalkii dhaxaltooyo ee aabbayaashooda muslimiinta ahaa ka dhaxleen, ama inay bari ahaan jireen muslimiin. Waxaa dhab ah inaysan waxba ahayn qofkii Allaah u naxariisto mooyee, islaamna ma yaqaanaan, xaqiiqadiisana ma aysan garan.

Ustaad Muxammad Towfiiq Barakaad isagoo ka hadlayo qadiyadda Jahliga, marka uu ka jawaabayay dhaleecooyinka loo soo jeediyay Sayid Qudub ee qadiyadda Takfiirka, oo uu si fiican uga difaacay waxa uu leeyahay:

Waxa uu yiri: "waxaa halkan taal hal shubho oo ku aaddan xaakinka Allaah wax aanu soo dajin wax ku xukumaya iyo dadka xukunkiisaas raalliga uga ah, waana Jahliga: Dad badan baa oranaaya wax saxa baad ka sheegteen gaalaysiinta qofkii sharciga Allaah aanan u xukun tagaynin, laakin dadku jaahil bay ka yihiin waajibnimada shareecada Allaah in loo xukun tago, waxay jaahil ka yihiin in qayrkeeda oo raalli lagu noqdo gaalnimo ay tahay, arrintaasna caddayn la'aan kama uusan tagin Sayid Qudub.

Waxa uu yiri Ustaad Sayid: "mar kale waxaan ku celinayaa in xukunka oo Allaah lagu qabsado, qofkaas ku qabsaday diinta Allaah ayay ka saaraysaa, waa xukun diinta si daruuri ah looga yaqaan, sababta oo ah waxa ay ka saaraysaa addoonnimadii Allaah kaligii loo ahaa. Taasina waa shirki diinta Allaah ka saaraya qofkii ku dhaca, iyo sidoo kale dadkii u qira qofka Allaah

xukunka ku qabsaday sheegashadiisa, ee adeeca oo u hoggaansama, qalbigana aan ka inkirin bililiqada suldaanka Allaah iyo waxyaabaha u gaarka ah, labadoodana waa isku mid miisaanka Allaah SWT. Waxa uu goynayaa Yuusuf Calayhisalaam in "xukunka oo Allaah loo gaar yeelo iyada oo la xaqiijinayo cibaadada kaligii uu xaqa u leeyahay" ay kaligeed tahay diinta qayimka ah"waana taas diinta toosan} Suuratu Tawbah 36

﴿ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ ﴾ [التوبة: ٣٦]

Waa hadal laga faa'idaysanayo soo gaabin, diin qayim ah ma jirto aan ahayn diintan ee xaqiijinaysa gaar u lahaanshaha Allaah ee xukunka, iyada oo la xaqiijinayo gaar u lahaanshihiisa cibaadada,

Qoraagu hadalkiisii buu sii watay, waxa uu yiri:

"Sayid Qudub AUN xukunkiisa waxa uu ku dhisay

a. Ereyga "Cibaado" ee islaamka kuma koobna cibaadooyinka oo lala yimaado, ee waxa uu koobayaa dhaqan wanaagga, xeerarka iyo dhammaan arrimaha nolosha, sifada "addoonnimada" kuma xaqiiqoobayso illaa qofkii Allaah u gudbiyo cibaadooyinkiisa, isla markaana dhammaan manhajka noloshiisa kala kulma Allaah oo kali ah.

b. Iyo in sifada Ilaahnimo ee Allaah si buuxda aanay u rumoobayn inuu xaakim noqdo mooyaane, Allaah oo kaligii xukunka la siiyo waa qayb ka mid ah Ilaahnimada oo kaligii la siiyo, towxiidka khaaliska ahna sidaas buu keensanayaa.

Labadaan arrimood qof muslim ah ma inkirayo, haddii laga jaahil noqdana waa arrin diinta in laga yaqoon daruuri ay tahay oo jaahil laga noqday, taasina cudur daar noqon mayso, sababta oo ah arrimahaas qofna loogu cudurdaari mayo jaahil ka noqoshadooda, qofkii liddigooda ku dhaca isaga oo jaahil ka ah waxa uu la mid yahay qof isaga oo og ku dhacay, taasina waa arrin ku sugan usuusha iyo caqiiddada islaamka.

Maadaama bayaaminta gaalnimada dadka noocan ah ay qayb ka tahay caqiiddada, iyo aqoonta macnaha "cibaado" iyo "xaakimiyo" ee islaamka, waxa uu Sayid Qudub ku adkaystay inay waajib tahay in la caddeeyo, ka sokow baahida camaliga ah ee ay u qabto xarakada islaamka. Xaqiiqadan sheegiddeedu waxa uu daaha ka qaadayaa maamullo badan oo maanta jira iyo dadka garabka siinaya, waana arrin daruuri u ah dhaqaaqidda xarakada islaamka, sababta oo ah dariiqa gaalada inuu caddaado waa ujeeddo Qur'aani ah

﴿ وَكَذَلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ وَلِتَسْتَبِينَ سَبِيلُ الْمُجْرِمِينَ ﴾ [الأنعام: ٥٥]

"Sidaas oo kale ayaan u kala dhigdhignaa aayadaha iyo inay caddato waddada mujrimiimta" (Al-Ancaam: 55)

Hinqashada koowaad ee shaqo ku iman mayso inuu qofku yaqaan inuu xaq ku taaganyahay, ee waxay ka imanaysaa inuu yaqaanno sidoo kale in cadowgiisu ku suganyahay baadil iyo gaalnimo, arrintan oo la caddeeyana dad badan oo qafla iskaga jira bay miyirkooda u soo celinaysaa kolkay arkaan haadaanta dheer ee ay ku dheceen kolkay diinta Allaah ka bexeen iyaga oo moodaya inay hanuunsanyihiin. Cadowga islaamkuna waa ay ku baraarugeen labadaas fikradood, waxa ay had iyo goor ku dadaalaan inay boorar islaannimo huwiyaan nidaamyada ka soo hor jeeda diinta Allaah, xataa waxa ay billaabeen inay xarakadii Kamaal

Ataatork – cadowga islaamka – ugu yeeraan kacaan cusboonaysiin oo islaam ah, kaddib markii ay ku han waynaayeen inay xarakadaas xun ay noqoto midda islaamka ka tirtirta turkiga".

Hadalkiisii buu sii watay waxa uu yiri: "waxa sii adkaynaya hadalka Sayid Qudub AUN in kutubta laga qoray caqiiddada ay qorayaan mas'aladan; waxaa ka mid ah wixii uu ku qoray Dr Saciid Ramadaan Albuudhi kitaabkiisa "Kubral Yaqiiniyaatil kowniya": "haddaba, xaakimiyada waxaa iska leh Allaah kaligii, isaga ayaa sharciga u dajiya addoomadiisa dhammaan dhinacyada noloshooda adduun iyo aakhiro, isaga kaliya ayaa ah meesha loola noqonayo dhibaato kasta, iyo nidaam iyo dastuur kasta oo noloshooda habaynaya, qofkii diida arrinkaas waxa uu ku kufriyay Allaah iyo Rasuulkiisa, xataa haddii uu afkiisa ka sheegto Allaah iyo Rasuulkiisa inuu rumeeyay, salaad iyo soon iyo xajna uu la yimaado, sidaas waxaa caddeeyay daliilka caqliga iyo midka kitaabka iyo sunnada laga keenayba, waxaana sidaa ijmaac ku gaaray muslimiinta oo dhan", waxaa dhamaaday hadalkii Dr Albuudhi.

Sidaa darteed waxa uu Sayid Qudub yiri:

"waajibka koowaad ee ducaadda diinta Allaah u yaalla waxa weeye inay soo dajiyaan boorarka been abuurka ah ee nidaamyada jaahiliga ah isku qarinayaan, kuwaasoo ilaalinaya nidaamyadan u taagan inay xididdada u siibaan diinta arlada dhammaanteed. Halka ay ka billaabayso xaraka kasta ee islaami ah waa inay noqoto qaawinta jaahiliyada iyo qaadidda magaca beenta ah ay huwantahay, iyo dhabnimadeeda in loo muujiyo, shirkiga iyo gaalnimada, oo lagu sifeeyo dadka sifada ku habboon waaqacooda.

Waxa uu yiri AUN: "waxa ugu daran ee xarakaadka "islaamiga" ah haysta waa caddaan la'aanta dariiqa muslimiinta wanaagsan, iyo dariiqa mushrikiinta dambiilayaasha ah, iyo isku dhex darmidda boorarka iyo canaawiinta, isku qasmidda magacyada iyo astaamaha, iyo wareerka ay la xaddidmi la'yihiin halka ay waddadu ku kalabayrto.

"cadowga xarakaadka islaamka waa ay yaqaaniin iintan, way dul fariistaan, ballaarin iyo macna tirid iyo maldihid darteed, ilaa ku dhawaaqidda kalimadda "kala bixataanka" ay noqoto tuhmad qoorta la isla soo qabanayo "tuhmada takfiirinta muslimiinta", waxa uu noqonayaa islaannimada iyo gaalnimada xukmintoodana masalo loola noqonayo wixii dadku curfi ka dhigteen ee loola noqon mayo hadalkii Allaah iyo Rasuulkiisa (SCW)". Waa dhamaadeen wixii aan ka soo guurinnay kitaabkii Muxammad Towfiiq Barakaad.

Qadiyadda oogidda xujada waa mid muhiim ah, usuusha oo laga jaahil noqdana dood kama taagna, xataa qofkii u cudur daara Ahlufatra ama dadka diinta Allaah aanay waxba ka gaarin, haku cusboonaadeen islaamka ama xujaduba yaanay gaarine, kuwaas xataa la oran maayo muslimiin jeerooy ka markhaati kacaan xaqa sida uu yahay.

## Shuruudda Laa Ilaaha Illallaahu

Sida aanu horay u soo sheegnay, shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" waxay u baahantahay toddobo shardi, waan xoojinaynaa mar labaad:

Waxaa lagama maarmaan ah shahaadada "Laa ilaaha Illallaah" inay wadato toddobo shardi oo qofku aanay anfacayn inay wada kulmaan mooyaane:

Kow: cilmi in loo leeyahay, kaasoo liddi ku ah jahliga

Labo: yaqiin in laga gaaro, kaasoo liddi ku ah shaki

Saddex: in la aqbalo, taasoo liddi ku ah in la diido

Afar: in loo hogaansamo, kaasoo liddi ku ah hogaansanaan la'aan

Shan: Ikhlaas, taasoo liddi ku ah shirki

Lix: run in laga sheego, taasoo liddi ku ah beenta

Toddobo: in la jeclaado, taasoo liddi ku ah nacaybka

Waxaa laga soo xigtay sharaxa kitaabka Towxiidka, ee uu qoray Cabdiraxmaan Bin Muxammad Bin Al-Qaasim

Shuruuddaas waa in la helo si loo helo islaamnimo

Waxaan horay u soo sheegnay in shahaado (markhaati kicid) macneheedu inuu yahay in si yaqiin leh iyo aqoon dhab ah wax loo sheego.

Waxaa ku yimid kitaabka "Ibdaalu Altanjiid Bi ikhtisaari Sharxi Towxiid" ee uu qoray Alcallaama Xamad Bin Cali Bin Catiiq, markii uu ka hadlayay xadiiska Citbaan Allaah haka raalli noqdee, ee Nabigu (SCW) uu yiri:

حديث عتبان قال رسول الله ﷺ (فإن الله حرم على النار من قال لا إله إلا الله يبتغي بذلك وجه الله)

"Allaah wuu ka xarrimay naarta qofkii yiraahda "Laa ilaaha Illallaah" isaga oo ku doonaya wajiga Allaah":

"waxa uu yiri AlXasan: macnaha axaadiistan waxa uu ku socdaa qofkii ereygan yiraahda, oo xaqiisa iyo waajibaadkiisa guta. Waxaa kaloo la yiri waa qofkii yiraahda kolka uu towbad keenayo oo sidaa ku dhinta, waana sida Bukhaari uu yiri. Culumada u dhabba gala qaybtood baa yiri: dad baa u adeegsan kara xadiisyada xujo takaaliifta lagu tuurayo, axkaamta meesha looga saarayo acmaashana lagu burburinayo, iyaga oo aaminsan in shahaado iyo shirki la'aan ay ku filanyihiin, waxaa dhici karta inay taasi ku dhagto Murji'o (qolo iimaanka iyo camalka kala saarta), ictiqaadkaasina waxa uu keensanayaa laabidda gogosha shareecada iyo burinta xuduudda, waxa uu keensanayaa in la isku boorriyo daacada in lala yimaado, la iskaga digo macsida iyo dambiyada uusan wax macno ah lahayn, bal wuxuu keensanayaa in laga boxo diinta oo idil, lagana xuubsiibto shareecada iyo sunnada, in hayjad la galo oo laga baxo jidkii toosnaa.

Ereygiisa (qofkii ka markhaati kaca) waa hubaal in shahaadadu aanay shahaado noqonayn haddii aqoon, yaqiin iyo run ay ka marnaato, haddiise jahli iyo shaki ay jiraan wax ka soo qaad ma leh anficina mayso, qofka shahaadada oranaaya oo xaaladdiisu sidaas tahay waa beenlow sababtoo ah jaahil buu ka yahay macnaha waxa uu qirayo. Ereygan wayni waxa uu xambaarsanyahay anfin iyo sugid, waxaa Ilaahnimo laga anfiyay wax walba oo Allaah ka soo haray (Laa ilaaha), waxaana kaligii Ilaahnimada loo sugay Allaah (Illallaahu). Allaah SWT waxa uu yiri:

﴿ شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ لَا إِلَهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴾ [آل عمران: ١٨]

"Allaah wuxuu qiray in aan ilaah kale jirin Allaah mooyee, Maali'katu iyo kuwa cilmiga u saaxiibka ahna way qireen iyagoo caddaalad ku taagan, Ilaah ma jiro asaga mooyee kii adkaade xikmad bandane ah" (Aal-Cimraan: 18)

Imisa ayaa macneheeda iyagoo jaahil ka ah baadiyoobay, waana sida loo badanyahay, waana ay rogeen macnihii dhabta ahaa, Ilaahnimadii la anfinayay bay u sugeen ciddii laga anfinayay

ee makhluuqa ahayd ee qabuurta ku jirtay, siyaarooyinka, dawaaqiidda, geedaha, dhagaxda, jinka, IWM, sidaas bay diin ka dhigteen,waa u ekeysiiyeen oo qurxiyeen, towxiidkii bidco ayay ka dhigeen, ciddii ugu yeertayna way ku inkireen, waxa kaliyoo ay ka garteen waa intii gaaladii Quraysheed ay ka garteen".

Waxa uu yiri gaalada xilligan joogta ma aysan fahmin kumana aysan camal falin, halka gaaladii Quraysh ay fahmeen, hase ahaatee ay diideen iyaga oo aqoon u leh.

Su'aashu waxa ay tahay: kolka calanku uu calmaani (diin laawe) uu yahay, dadka ku hoos noolna ay Islaam sheeganayaan, xukunku muxuu noqonayaa?

Bulshada oo idil waxaa lagu xukumayaa inay yihiin mujtamac gaalo mushrikiin ah, sababta oo ah waxa ay harsanayaan shareecada Daaquudka. Dadkase waxaa qof walba xaddidaaya mawqifkiisa diidmo ama raacitaan. Waa lagama maarmaan in la inkiro daaqudka, waana lagama maarnaan in loo hiilliyo dadka muslimiinta ah. Sidaas buu qofku uga badbaadayaa gaalnimada suran luqunta qof kasta oo bulshadaas ka mid ah oo daaquudka aanan ku gaaloobin.

Qofka doonaya inuu gaalnimada naftiisa ka badbaadiyo, waa inuu inkiraa baadilka, waa inuu dadka xaqa wataa u hiilliyaa. Kolka bulshada oo idil aan shirki ku xukumaynno, halka dadka shakhsigoodana aan ka hakanayno jeeroo xaalkoodu caddaado, waxa ay taasi la soconaysaa usuusha sharciga ah, dadka guud ahaan xukun guud baa la siin karaa, hayeeshee qof walba oo shakhsi ah waxaa dhiman in booskiisa goonni loo xaddido oo marka sidaa xukunka lagu saaro. Waxaa daliil aan ku degno noogu filan wixii Rasuulka Allaah (SCW) la kulmay, waxa ay Mako ahayd Daar Gaalo iyada oo Nabigu (SCW) iyo saxaabaduba ay ku noolyihiin. Waxaa kale oo daliil laga helayaa xadiiskii ku yimid ciidankii Maka iyo Madiina dhexdooda dhulka lala goynayay, ee Caa'isho ay su'aashay: dhulka miyaa lala goynayaa Rasuulka Allow, iyada oo ay la socdaan kuwii adeeganaya iyo dad aan ka mid ahayn iyaga? Waxa uu yiri: "Haa, kaddib baa niyadooda lagu soo saarayaa"[11]. Xukunka guud macnihiisa ma aha in qof walba shakhsigiisa ugu dhacayo xukunku, ee waxa uu noqonayaa xukunka guud kolka la eego calanka taagan iyo shareecada islaamka oo meesha ka maqan. Haddii Allaah SWT oo awoodo inuu dadka wanaagsan si uun uga badbaadiyo dhul-la-goynta, hayeeshee waxa ay la wadaageen masiirkii dadkii halaagsamay, taasi macneheedu waxaa weeye xukunka guud dadkoo idil buu taaban karaa, sidaa awgeed waxa suuratul Anfaal Allaah SWT ku leeyahay:

﴿ وَاتَّقُوا فِتْنَةً لَا تُصِيبَنَّ الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْكُمْ خَاصَّةً ﴾ [الأنفال: ٢٥]

“Ka dhowrsada fitno aan ku dhacaynin kuwa dulmiga falay ee idinka mid ah kaliya”
(Al-Anfaal: 25)

Dadkii oo idil bay ku dhacaysaa, xataa haddii ay jiraan dad wanaagsan, way wada taabanaysaa, kaddib baa Allaah dadka uu ku soo saarayaa niyaddoodii.

Waxaa jira hadal uu yiri Imaam Ibnu Taymiyay AUN:

"waxaa bannaan, bal waajib ah la dagaallanka Tataarkan, xataa haddii Ashahaadataynka ay ku dhawaaqaan oo ay islaamka sheegtaan, waxaa waajib ka dhigaya dagaalkooda sunnada Rasuulka (SCW) iyo isku raacidda imaamyada muslimiinta, taasina waxaa lagu dhisay laba

١١- البخاري من حديث عائشة رضي الله عنها.

asal: midkood waa aqoonta xaalkooda, midka kalena waa aqoonta xukunka Allaah ee iyaga iyo wixii la hal maala.

Midka koowaad: qof walba oo qoladaas la dhaqmay wuu garanayaa xaalkooda, dadkii runta sheegayayna way soo wada wariyeen. Annaguna waxaan ka hadlaynnaa dhowr arrimood kaddib marka aanu caddaynno asalka kale ee aqoontiisu ay gaarka u tahay Ahlul cilmiga, waxaan leenahay: qolo kasta oo shareecada islaamka muuqata ee isa soo tartay ka baxda, sidii inay salaadda ka tagaan, sakada diidaan, ama la jahraan bidcooyin burinaya islaamka ee caqiiddo ama cibaado ah, ama Daaquud u xukun tagaan, IWM, waxaa muslimiinta waajib ku ah inay la diriraan sida ay isku raaceen imaamyada muslimiinta, xataa haddii Ashahaadataynka ay ku dhawaaqaan, waxaa waajib ah in lala dagaallamo sida ay Abuu Bakar iyo saxaabadii ula dirireen dadkii riddoobay iyo khawaarijtiiba, ilaa diinka dhammaantiis Allaah uu yeesho.

Asalka kale ee labaad: waa aqoonta xaalkooda, taasina waa macruuf."

Haddaba cibradu waa laba arrimood: aqoonta xukunka Allaah, iyo aqoonta xaalkooda iyaga.

Marar badan marka aan la doodayno mufakiriinta casrigaan waxay ku leeyihiin: xaggee baad ka keentay inaad xukunto dadka iyaga oo oranaaya "Laailaaha Illallaah”.

Jawaabtu waxa ay tahay: aniga waaqaca noloshooda ayaan wax ku xukumayaa, waqacooda oo aan aqaanno, bal waxaan aqaannaa sida aan ahaa ka hor inta aanan xaqan baran, sidee baan ahaa ka hor inta aanan Islaamka baran? Qof kasta oo innaga mid ah ka hor inta aanu baran islaamka wuu is ogyahay inuusan Muslim ahayn macnaha dhabta ah ee islaamka, dadka waaqacoodana wuxuu ka ogyahay inaysan waxba haysanin.

Xaalka aqoontiisa waxa uu ka mid yahay astaamaha iyo calaamadaha asaasiga ah ee la cuskado kolka dad la xukumayo. Lama oranayo dadka qalbigooda miyaad jeexdeen? Annaga qalbiga ma jeexno, ee waxa muuqda ee shaacsan ayaa ah Aayadaha Allaah oo lagu gaaloobay, lagu jeesjeesay, lagu ciyaaray, sharciga Allaah oo waxba lagu xukumin, dadka dalbanaya shareecada Allaah oo la dilayo, loona aqoonsaday inay yihiin dad bulshada ka baxsan oo dambiilayaal ah dhiiggooduna uu bannaan yahay, intaa iyo ka badan oo muuqata ayaa naga dhigtay inaan ku qalbi dagganaanno inaanay waxba ku sugnayn dadkan.

Waxa uu yiri Ibnu Taymiya: "Asalka labaad, ee ah aqoonta xaalkooda, waxa uu yiri: waxa ay u dagaallamayaan boqortooyada Jinkiz Khan, qofkii daacadooda soo galaya iyo daacada shareecada Jinkiz Khan ee gaalnimada ah waxa ay ka dhiganayaan wali haddii xataa uu gaal yahay, qofkii ka baxana waxa ay ka dhiganayaan cadow xataa haddii uu ka midyahay dadka ugu khayrka badan muslimiinta".

Tataarka iyo Jinkiz Khan iyo caruurtiisu waa caynkaas xaalkoodu; dadka ku raaca siyaasadohooda gaalnimo, axkaamtooda, shareecadooda daaquudka ah waa waligooda, ciddii ka baxdana waa cadowgooda, xataa muslimiinta ugu khayrka badan hadduu yahay.

Waxa uu yiri: "uma dagaallamayaan islaamka, Ahludimmo jizyo ma saarayaan, balse Jinkiz Khan waxa uu ka dhib badanyahay Fircoon iyo Haamaan, arladii buu ku kibray, dadkii buu qaybo ka kala dhigay, dad iyo duunyaba wuu baabi'iyay, dadkii buu diinta Nabiyada ka celiyay, wixii isaga uu hindisay ee jaahiliyo iyo siyaasad gaalnimo buu u celiyay. Haddii aan sheego wixii aan ka arkay iyo wixii aan ka maqlay ku fillaan mayso halkan", hadalka waxaa wata Ibnu Taymiya. "waxaa diinta Islaamka laga yaqaan in qofkii banneeya in la raaci karo shareeco Islaam aanan ahayn uu yahay Gaal, qofkii iyaga u carara oo madaxda ciidanka ah

waxa uu ku xukun noqonayaa iyaga, waxaa ku jira riddo la’eg inta uu ka tagay ee shareecada Islaamka, waxaa nagu waajib ah inaan la dagaallanno, xataa haddii uu ku jiro qof ku khasban u joojin maynno, sababta oo ah Allaah ayaa dhulka la goynaya ciidan idil oo kacbada ku soo duulay isaga oo og inay ku jiraan dad la soo khasbay, kaddibna waxaa lala soo saarayaa niyaddooda. Qofkii ku andacooda in Tataarkan loola dagaallamayo Buqaad ahaan (dad muslimiin ah oo qooqay oo la edbinayo) khalad aad u fool xun buu ku dhacay, Tataarkani wax shubho ah kama taagna, arlada ayay fasahaad la ordayaan, iyaga oo bannaanka ka ah shareecada diin kasta.

Haddiiba aannu ka soo qaadno inay ta'wiil (qiyaas khaldan) sameeyeen, ta'wiil cuntamaya ma noqonayo, waxaa waji ka mudan ta'wiilkii khawaarijta iyo kuwii sakada diiday. Haddii la soo qabto gaal dagaallamaya oo uu ku dhawaaqo Ashahaadataynka waxaa waajib ah in la daayo, sidaas waxaa ka duwan kuwa shareecada ka baxay; sida murtaddiinta uu la dagaallamay Abuu Bakar Allaah haka raali noqdee, ama khawaarijta uu la dagaallamay Cali Allaah haka raalli noqdee, ama Tataarka, iyo wixii la mid ah oo ku dhawaaqay Ashahaadataynka misna shareecada islaamka aan qaadanin.

Hayeeshee ninka dagaallamaya oo gaalka ah haddii uu ku dhawaaqo waa la daynayaa, haddii uu tukan waayo waala towbad waydiinayaa, haddii uu tukan waayana imaamka ayaa dilaya, cid kale oo raciyada ah oo dili karta ma jirto, waxa un dilaya waa waliyul amriga sida Maalik, Shaafici, iyo Axmed ay qabaan, Abuu Xaniifa waxa uu qabaa in lagu ciqaabayo wax dil ka fudud.

Haddiise ay jirto qolo salaadda diidday iyo wax la mid ah, kuwaasi waxaa loola dirirayaa sidii Murtaddiinta iyo Khawaarijta, qofkii laga soo qabtana waa la dilayaa, waa in la kala saaraa qofkii la soo qabto iyo la dagaallanka qolada ee dagaalka doonaysa".

Waxa uu yiri Muxammad Towfiiq Barakaad markii uu ka hadlahayay qaddiyadda bulshada jaahiliyadeeda, iyo inay tani tahay Daar Gaalo: "fuqahadu waxa ay isku waafaqeen in Daarta Islaamka ay tahay midda wax ku xukunta shareecada Allaah, Daarta gaalnimana ay tahay midda shareecada Allaah aan wax ku xukumin. Waxa ay yiraahdeen dhulalka beri ahaan jiray Islaam, kaddibna ka baxay islaamka, waxa ay noqonayaan Daar Gaalo ama Daar Riddo, axkaamta daarta riddada ayaan ka adag axkaamta daarta gaalo”.

Sidaa awgeed, waa uu la yaabayaa dadka oranaaya dadkan muslimiin ayay ahaayeen wayse riddoobeen, ee ma aha gaalo asal ah.

Waxa uu yiri: "dadkaasi ma yaqaanaan inay xukunkii ay uga sii dareen oo mid ka adag ay galiyeen, sababta oo ah dadka riddooba iyo daarta riddada midna loo cudur daari mayo, dagaalna laga joojin mayo ilaa ay islaamka uga soo laabtaan".

Qaddiyaddu haddaba waa ay caddahay in xukunka guud ee bulshada la saarayo uu yahay mid sharci ah, oo siirada laga dugsanayo, iyo hadalkii Allaah SWT:

﴿ وَاتَّقُوا فِتْنَةً لَا تُصِيبَنَّ الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْكُمْ خَاصَّةً ﴾ [الأنفال: ٢٥]

"Ka dhowrsada fidno aan ku dhacaynin kuwa dulmiga falay oo idinka mid ah si gaar ah”
(Al Anfaal: 25)

Sida arrinkan aan u sii caddaynno waxa aannu soo guurinaynaa wixii hadallo ku soo arooray macnaha ereyga "Laa ilaaha Illallaah":

Waxa ku soo arooray (Tafsiirul Jaamic Li Axkaamil Qur'aan) ee Qurdubi, markii uu fasirahayay aayaddii:

﴿ فَوَرَبِّكَ لَنَسْأَلَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ ۞ عَمَّا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴾ [الحجر: ٩٢-٩٣]

"Allaah baan ku dhaartay waan warsanaynaa dhamaantood waxay falayeen" (Al-Xijr: 92)

hadalka Allaah ee (waxa aannu waydiinaynnaa dadka la sheegay wixii adduunyada ay ku faleen. Bukhaari waxa uu yiri: tiro Ahlul Cilmi ah baa yiri Allaah baan ku dhaartay waan warsanaynaa dhamaantood waxay falayeen) macnihii waxaannu ka waydiinaynnaa "Laa ilaaha Illallaah". Qurdubi waxa uu yiri: tani waxaa la wariyay iyadoo marfuuc ah; Tirmidi baa yiri: Anas Bin Maalik baa Rasuulka (SCW) ka wariyay aayaddan Allaah baan ku dhaartay waan warsanaynaa dhamaantood waxay falayeen) inuu ka yiri: "waa qowlka Laa ilaaha Illallaah". Waxa uu yiri Abuu Cabdullaahi: macnuhu waxa weeye runtii uu ka sheegay Laa ilaaha Illallaah iyo sidii uu u oofiyay, waxa uu yiri: Allaah baan ku dhaartay waan warsanaynaa dhamaantood waxay falayeen) ee ma oran (wixii ay oranayeen), iyada oo ay bannaan tahay in qowl loo adeegsado iyada oo laga wado carrabka camal uu qabanayo weeye, ayaa misana macnuhu uu yahay sida dadka luqada ku xeel dheer ay yaqaanaan in qowlkuna qowl uu yahay, camalkuna camal uu yahay, sida uu yiri Alxasan Albasri: Iimaanku ma aha sheegasho, diintuna ma aha rajo, ee waa wax qalbiga dagay, camalkuna rumeeyay. Sidaa awgeed buu yiri Rasuulku (SCW): "qofkii yiraahda Laa ilaaha Illallaah isaga oo daacad ka ah waxa uu galayaa Jannada", waxaa la waydiiyay: Rasuulka Allow, maxay tahay daacadnimadeedu? waxa uu yiri: "inay ka celiso wixii Allaah uu xarrimay", waxaa wariyay Zayd Bin Arqam. Waxaa kale oo laga wariyay inuu yiri: Rasuulka Allaah SCW ayaa yiri: "Allaah waxa uu ii ballan qaaday in qof umaddayda ka mid ah aanu iila imanin Laa ilaaha Illallaah isaga oon waxba ku labin illaa in jannada la galiyo", waxa la yiri: Rasuulka Allow, waa maxay waxa lagu labayo oo lagu qasayo Laa ilaahaIllallaah? waxa uu yiri: "adduunyo lagu dadaalo, la aruuriyo, la isu diido, hadalka Nabiyada ayey ku hadlayaan, camalkii kuwa qooqayna wey sameynayaan". Waxa kale uu Anas Bin Maalik wariyay: Rasuulka Allaah (SCW) ayaa yiri: "Laa ilaaha Illallaah waxa ay addoomada ka celisaa carada Allaah, waa haddii aysan adduunyadooda ka dooran diintooda, haddii duunyadooda ay ka doortaan diintooda, kaddibna ay yiraahdaan Laa ilaaha Illallaah waa lagu soo celinayaa, Allena waxa uu leeyahay: been baad sheegteen". Sanadyaalkeedu waxa ay ku jiraan Nawaadirul Usuulka.

Waxaa Xudayfa Allaah haka raalli noqdee sanad saxiix ah looga wariyay aayadda

﴿ مَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ [المائدة: ٤٤]

"Ciddii aan ku xukmin wixii Allaah soo dejiyey, kuwaasi waa gaalo" (Al-Maai'dda: 44)

Nin baa Xudayfa hortiisa ku yiri: waxa ay ku soo dagtay reer Banii Israa'iil, waxa uu Xudayfa ku yiri: walaalnimo fiicanaa Banii israa'iil, haddii idinku wax kastoo wanaag aad leedihiin iyaguna wax kasta oo xun, Wallaahi Maya sidaa ma aha, dariiqii iyo saanta ay qaadeen baad qaadi doontaan.

Ibnu Cabbaasna sidoo kale ayaa laga wariyay. Waxaan iri: aayaddan haba ku soo dagto Yahuud e, gaar uma ahan iyaga, waxa ahmiyadda lihi waa macnaha guud ee ereyga ee ma aha gaar ahaanta sababta, ereyga "من" waxa ay faa'idaynaysaa shardi, waa wax guud. Aayaddani waxa ay taabanaysaa cid walba oo wixii Allaah soo dajiyay aanan wax ku xukumin, ee kitaabka iyo

sunnada. (kitaabka "Fatxul Bayaan Fii Maqaasidil Qur'aan" ee amiirkii caalimka ahaa ee Sadiiq Xasan Khaan).

Waxaa Thowbaan laga wariyay: Rasuulka Allaah (SCW) ayaa yiri:

(لا تقوم الساعة حتى تلحق قبائل من أمتي بالمشركين، وحتى يعبدوا الأوثان، وإنه سيكون في أمتي ثلاثون كذابون كلهم يزعم أنه نبي، وأنا خاتم النبيين لا نبي بعدي)[١٢]...

"Saacaddu dhici mayso ilaa qabaa'il umaddayda ka mid ah ay mushrikiinta raacaan, asnaamtana caabudaan, waxaana umaddayda jiri doona soddon beenlow oo mid walba uu sheeganayo inuu Nabi yahay, anigana waxaan ahay kii Nabiyada lagu khatimay, Nabina igama dambeeyo".

Qadiyadda Laa ilaaha Illallaah iyo inuu jiri karo wax diidaya xaqiijinteeda haddii la sii bayaamiyo, Ibnu Taymiya waxa uu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay markii uu ka hadlayay gaalnimada kuwa sakada diiday: "saxaabadu ma ayan waydiin kuwii sakada diiday: ma qirsantahay waajibnimadeeda, misa waad inkirsantahay? Saxaabada waxaa lagama baran, balse Abuu Bakar baa Cumar ku yiri: Wallaahi haddii dabar ay Nabiga siin jireen ii diidaan waan kula dirirayaa, waxa uu dagaalka ku bannaystay diidmada oo kali ah, ee ma aha inkiridda waajibnimada. Waxa uu yiri Imaam Isxaaq Ibnu Raahawayh oo ka mid ah imaamyadii caanka ahaa: muslimiintu waxa ay ku ijmaaceen in qofkii Allaah ama Rasuulkiisa caaya ama diida wax ka mid ah wixii Allaah uu soo dajiyay, inuu sidaas gaal ku yahay, xataa haddii uu qiro wax walba ee Allaah uu soo dajiyay".

Waxaa haddaba ka cad hadalkeenna ku saabsan qadiyadda "Laa ilaaha Illallaah" iyo sida bulshada aan ula dhaqmayno iyo sida aan xukminayno, iyo sidoo kale shakhsi ahaanta dadka haddii ay hoos taagan yihiin calan ayna qirsan yihiin, calankaas ayay ku xukun noqonayaan, haddii ay is khilaafsan yihiin calanka iyo sheegashada dadkana, waxaa la eegayaa xaalka dadka shakhsi ahaan, qof walbana wixii xaalkiisu noqdaa lagu xukminayaa, hase ahaatee guud ahaan waxa ay ku xukun noqonayaan calanka taagan iyo shareecada xukumaysa.

## Qawaaciddii la soo sheegay iyo Waaqaca Maanta

Taasina kolka aan ku dabbaqno waaqaca maanta taagan waxa ay noqonaysaa arrin dhinac walba ka cad:

Ugu horrayn: xujadu inay oogantay, waxay ku oogantay Qur'aanka iyo sunnada Nabiga (SCW), iyada oo laga indha laabanayo inay fahmeen xujada, sababtoo ah jaahilnimo la isuguma cudurdaaro arrimaha usuusha ah.

Midda labaad: marka loogu fiicnaado oo la eego hadalka qolada ugu cudurdaaraysa dadka inaanu xaq soo gaarin, ama arrintu u caddaanin, xataa qoladaas uguma cudur daarayaan jaahilnimo. Cudurdaarku wuxuu anfici karaa aakhiro, adduunyadase waxaa la isku raacay in Ahlufatro iyo wixii la mid ah muslimiin loogu yeeraynin, loona ducaynaynin, laguna tukanaynin haddii ay dhintaan.

Kolka shakhsi ama koox la xukumayo waxaanu sheegnay in qof walba booska uu joogo lagu xukumayo, waa sida Qur'aanka iyo sunnada ay noo faa'ideeyeen arrinkan, iyo in bulshada

[١٢]وهذا حديث صحيح رواه الترمذي في سننه

guudna ay calanka sifadiisa qaadanayso, dadka shakhsi ahaantoodana dhaqankooda ayaa xaddidaya halka ay islaamka ka joogaan.

Taasi waxa ay mar labaad noo celinaysaa wixii aan hadalka ku bilownay ee ahaa in Islaamku tirsanin muslimiinta fekerka ah, iyo inay lagama maarmaan ay tahay in qofka rumaysan xaqan uu isu beddelo mid burburinaya oo suulinaya jaahiliyada.

## Gabababo: sidee mujtamac muslim ah mar labaad arlada looga hirgalin karaa?

Wuxuu yiri ustaad Sayid:

**"Haddaba, waxaa lama huraan noqotay in saldhigga feker ee islaamka (kaasoo ah caqiiddada) uu ugu horraymba ka dhex muuqdo isu-tag xubno ka kooban oo dhaqdhaqaaq samaynaya. Lama huraan bay ahayd inuu hana qaado isutag caynkaas ah oo ka duwan midka jaahiliga ah, ka go'an kana madax bannaan isutagga bulsheed ee jaahiliga ah ee islaamku beegsanayo inuu suuliyo, xarunta isutagga cusubna ay noqoto hoggaanka cusub ee ah Rasuulka Allaah SCW, kaddibna hoggaan walba oo islaami ah, oo beegsanaya inuu dadka u celiyo ilaahnimada Allaah, Rabbinimadiisa, xukunkiisa, suldaankiisa, iyo shareecadiisa, iyo in qof walba ee qira shahaadataynka inuu hiilladiisa iyo la-jirkiisa ka gooyo isutagga jaahiliga ah – ee uu ka yimid – iyo hoggaankii isutaggaas – qaabkuu dooni ha noqdo, hoggaan diimeed ama siyaasadeed ama mujtamac ama dhaqaale sidii Quraysh oo kale –, intaa kaddibna hiilladiisa ku soo koobo isutagga cusub ee islaamka ah iyo hoggaankiia muslimka ah**

**Waxay ahayd lagama maarmaan in arrintaas la helo isla marka uu qofka muslimka ahi islaamka soo galo, ee uu ku dhawaaqo shahaadataynka, sababta oo ah jiritaanka bulshada muslimka ah sidaa uun buu ku suura galayaa. Ku suura gali maayo in fikradi ay dagto quluubta dadka intay doonayaan hala tiro ekaadeene, kuwaasoo aanan ahayn isu-tag xubnihiisu is dhamaystirayaan oo is caawinayaan, kaasoo leh jiritaan madax bannaan, si wada jir ahna xubnihiisu uga qayb qaadanayaan gogol-dhigga, ballaarinta iyo sii adkaynta jiritaankiisa, iyo arrimaha liddiga ku ah oo laga difaacayo, iyaga oo isla markaa ka hoos shaqaynaya hoggaan ka madax bannaan hoggaanka bulshada jaahiliga ah, hoggaankaas oo habaynaya dhaqdhaqaaqooda, una jihaynaya sidii ay ugu gogol dhigi lahaayeen una ballaarin lahaayeen jiritaankooda islaamiga ah, iyo sidii ay uga hortagi lahaayeen, isagana caabbin lahaayeen, una suulin lahaayeen jiritaanka kale ee jaahiliga ah.**

**Sidaas buu islaamku ahaa, aragti feker oo dhamaystiran, kuna taagan isla markaa isu-tag dhaqaaqaya oo xubno ka kooban, kana madax bannaan bulshada jaahiliga ah, kana soo horjeeda. Islaamku waligii lama arag isagoo ah fikrad qayaxan oo ka maran jiritaan dhab ah. Sidaas la sheegay un buuna islaamku mar labaad ku iman karaa, marna ma dhici karto in islaamku ka dhex hana qaado mujtamac jaahili ah, meel walba iyo xilli walba, iyada oon la haynin fiqiga saxda ah ee daruuriga u ah hanaqaadidda dhaqdhaqaaqa xubnaha ka kooban ee islaamka.**

Sidaana waxaa ku caddaaday in jiritaanka jamaacada muslimka ahi ay tahay mid iimaan ahaan daruuri u ah, ee ma ahan nidaam ahaan kaliya. Iimaanka ayay daruuri u tahay, islaamna jiri mayo la'aanteed, islaamna lama oogi karo, diintanna lama xaqiijin karo iyada oo aanan la helin isutag xubineed oo Islaam ah, kaasuna waa in la helaa mar haddii ay jiraan seddex qof oo ka markhaati kacaya "Laa ilaaha Illallaah", oo caqiiddada xaqa ah aaminsan, hiilladooduna ay gaar

u tahay Allaah iyo Rasuulkiisa iyo hoggaanka isutaggan, dareenkooda iyo qiyamkooda iyo hal beeggoodana ay kala soo go'aan bulshada jaahiliga ah; aragti, hoggaan, maamul, qiyam iyo dhaqan ahaan intaba. Waxaa aad u cad in Islaamku uu gebi ahaamba diidayo qadiyadda muslimiinta fikriga, ee aaminsan oo fahamsan islaamka, isla markaana wax dhaqaaq ah aanan ku samaynaynin, iskana sii ahaanaya xubno ka dhex shaqaynaya bulshada jaahiliga ah, oo awooddooda iyo dhaqaaqooda ku xoojinaya, kana shaqaynaynin burburintiisa iyo suulintiisa sida Islaamku uu ka rabo.

Waa sidan bulshada muslimka ah ee aynu ka hadlaynno koboceeda, ee aynu hadalkan dheer ka soo hadalnay, waxaana daruuri ahayd inaan dhidibbada u aasno oon faahfaahinno si ay noogu caddaato ahamiyadda in la helo bulshadan, iyo in bulshadani aysan haatan waaqaca ka jirin, iyo in sheegashada dadku islaamka sheeganayaan, ama ku dhawaaqiddooda "Laa ilaaha Illallaah", ama jiritaanka muuqaallo ama dhaqamo islaami ah, dhammaan waxaasi waa inaysan naga ilduufin dhabnimada waaqaca iyo inaanu ahayn waaqac islaam, iyo inay tahay dadka haddaan u yeeraynno inaan hadda iyo kow Islaamka ugu yeerno, una caddaynno inaysan waxba ku sugnayn. Mawduucan waxaan uga hadli doonnaa cutubyo soo socda. Waxaan ka hadli doonnaa manhajka dhismaha, manhajka dacwada, manhajka gaarsiinta, manhajka tarbiyada, manhajka kala baxa, iyo manhajka la dhaqmidda jaahiliyada. Dhammaan waa faracyada manhajka Islaamiga ah ee cutubyo kale aan uga hadli doonno. Waxaan kaloon ka hadli doonnaa dabeecadda manhajkan, qadiyadda marxaliyada (diintu inay heerar soo martay), qadiyadda horutabin (sida ay wax u kala horreeyaan), iyo qadiyadda habaynta iyo qeexidda tallaabooyinka manhajka islaamiga ah.

Waxaanse ku soo khatimaynnaa cutubkan qadiyaddan ay tahay in la dhamaystiro, si loo dhamaystiro astaamaha bulshada muslimka ah ee aan doonayno samaynteeda.

Ustaad Sayid wuxuu yiri: “**Intaa ka dib; islaamku waxa uu umadda muslimka ah ku dhisayaa saldhiggaas, isaga oo u maraya manhajkaas, jiritaankeedana waxa uu aasaas uga dhigayaa isutaggaas nool ee dhaqdhaqaaqaya, gunta isku xiraysa isutaggaasna waxa uu ka dhigayaa caqiiddada. Islaamku waxa uu beegsanayaa soo muujinta, xoojinta, iyo dhidibbo u aasidda insaanka insaaninimadiisa, iyo in laga sare mariyo dhinacyada kale ee qofka bani’aadamka. Marnaba islaamku kama leexanaynin manhajkiisaas dhammaan farriimihiisa, fekerkiisa, shareecooyinkiisa iyo axkaamtiisa”.**

Ka sokow inay dhallashada mujtamac muslima ah tahay iimaan ahaan mid daruuri ah, iyo mid ajiibaysa ujeeddada jiritaanka bani'aadamka, iyo muraadka Allaah SWT ee ah in la oogo mujtamac muslim ah oo Allaah kaligii caabuda, qirana Ilaahnimadiisa arlada, la dagaallama, daaquudka ku xadgudbaya Ilaahnimada Allaah, burburiyana tiirarka daquutka si diinta oo idil Allaah kaligii u yeesho. Ka sokow intaas oo idil, waxa uu sidoo kale yahay mid beegsanaya soo saaridda "bani'aadannimada dadka". Sababta oo ah bani'aadannimada bani'aadanka dhab ahaan ka suura gali mayso mujtamac muslim ah mooyee.

Dadkuse haddii ay jaahiliyo ku jiraan, waxa ugu horreeya oo ay waayayaan waa bani'aadannimadooda, waxa ay noqonayaan xoolo oo kale, bal waa ka daran yihiin.

Xaqiiqadanna iyada oo ah arrin si dabiici ah uga dhalanaysa mujtamac muslim ah haddii ay ku dhisanto aasaas aragti sax ah, waxa ay isla mar ahaantaa siinaysaa bulshada muslimka ah astaan gaar ah; oo ah xaqiijinta bani'aadannimada dadka sida ku habboon booskiisa oo ah sayidka wax walba oo arlada saaran, si bani'aadamku gaar ula ahaado dhamaan astaamaha Allaah uu gaarka u siiyay oo uu ku sharfay. Jaahiliyaddu waxa ay doonaysaa inay

bani'aadamka ka soo dajiso maqaamkaas oo heerka xayawaanka ay keento, bal waa ka sii baadiyaysan yihiin. Sababtuna waa hagardaamo jaahiliyaddu ay waddo, waxay ogsoon tahay haddii dadku ay u dhaadhacaan heerka xayawaanka ama ka hoos aanay awood u yeelanaynin inay noqdaan addoon Allaah.

Maadaama ay bani’aadamka ka celinayso cibaadada Allaah, waxa ay ku dadaalaysaa inay booska xayawaanka u soo daadajiso, dhab ahaan meel ka hoosaysa ayay gaarsiinaysaa, sababta oo ah xayawaanku waxa uu gudanayaa kaalintiisii loo abuuray iyo sidii Allaah ugu tala galay, waxa uu daacad u yahay kaalintiisa gudashadeeda, kamana bayrayo wixii Allaah uu la doonay.

Bani'aadamkuse mar haddii uu heerka xayawaanka iyo ka hoose u sii daadago, waxa uu ka baxayaa howshiisii iyo kaalintiisii, waxa uu sidoo kale ka baxayaa addoonnimadiisii dhanka Allaah SWT, waxa uu isu geddinayaa mid Allaah la dirirsan, naftiisana hoojinaya, waxa uu noqonayaa sida Qur’aanku tilmaamay qof naftiisa liiday

﴿ وَمَن يَرْغَبُ عَن مِّلَّةِ إِبْرَاهِيمَ إِلاَّ مَن سَفِهَ نَفْسَهُ وَلَقَدِ اصْطَفَيْنَاهُ فِي الدُّنْيَا وَإِنَّهُ فِي الآخِرَةِ لَمِنَ الصَّالِحِينَ ﴾ [البقرة: ١٣٠]

“Yaa naca diinta Nabi Ibraahim ruux naftiisa liiday maahee, waana dooranay Nabi Ibraahim adduunyada aakhirana wuxuu ka mid noqonayaa kuwa suusuuban” (Al-Baqara: 130).

Macnuhu waa wuu xaqiray oo dulleeyay naftiisa.

Cadowga islaamka waxa ay doonayaan inay bani’aadamka heerka xayawaanka gaarsiiyaan, sidaa awgeed waxa ay ku sii daynayaan shahawaadka iyo, si uu uga guuro bani'aadannimada oo xayndaabka xayawaanka ugu aruuro, si dadka ay arrintaas uga maldahaan waxa ay u galiyeen qaab cilmiyeed, dhab ahaanna waa jaahilnimo cilmi ah sida Ustaad Sayid uu hadalkan ku caddeeyay, waxa uu yiri:

**(Bani’aadamku waxa ay naflayda kale iyo waxyaabaha aan noolaymba la wadaagaan sifooyin, kuwaasoo ay moodayaan dadka (jahli cilmiyeedka aaminsan) mar inuu yahay neef la mid ah xayawaanka intiisa kale, marna inuu yahay walax la mid ah walxaha kale. Hayeeshee, bani’aadamku isaga oo sifooyinkaa la wadaaga naflayda iyo walxahaba, waxa uu goonni u leeyahay “astaamo” gaar ah oo ka dhigaya jiritaan goonni ah. Waxa ay dadka (jahli cilmiyeedka) wata ugu dambayn ku khasbanaadeen inay qiraan, ka dib markii ay xaqiiqooyinka dhabta ahi loodin kari waayeen, way ku khasbanaadeen qiritaankaas iyaga oo daacadnimo iyo saraaxo aysan ka ahayn).**

Ereyga "Jaahilnimada cilmiga ah" waa erey aad u cajab badan oo macna qota dheer xambaarsan, si khaldanna looma fahmi karo, dhinac waxa ay adeegsanayaan cilmiga oo dhar cilmiyeed bay soo xiranayaan, waxa ay kaloo adeegsan karaan sunnooyinka kownka si ay u caddeeyaan waxa ay sheegayaan. Hase ahaatee, waxaa dhab ah inaysan xaqiiqada gaaraynin waligood, waxa ay xaqiijinayaan jahli magaca cilmi looga dhigay. Waxa ay bani’aadamka ka arkeen astaamaha xoolaha qayb ka mid ah – sida uu sheegay Froyd iyo dhammaan culumada maaddiga ah – waxa ay qireen in bani’aadamku ka koobanyahay oo keli ah shahwaad iyo dareen, qolo kale oo dhaqanka daraaseeya waxa ay bani’aadamka ka xayuubiyeen rabitaanka, waxa ay ka dhigeen mid ku dhacaya shahwaadka, falal dambiyeedyada, iyo qallooca isaga oon doonin, wuu iska dhaqaaqayaa wax ku bixiya haddii la helo, waxay ugu yeeraan shardiga liddiga ah, macnuhu waa wuxuu dhaqaaqayaa isagoo ka jawaabayaa arrin un saamaysay, hortiisa ayuu u dhaqaaqayaa iyo halkii arrintaas dhacday ay u jeedisay, isaga oo wax rabitaan ah, wacyi, masuuliyad iyo faham midna lahayn.

Shuuciyadda waxa ay bani'aadamka ka dhigeen maaddo, waxa abuurayna waa maaddada, isaguna waa shay' cunto iyo cabid iyo galmo u nool, intaa ka badan ma jirto. Dhinaca macnawiga ahoo idil jiritaan kuma leh aragtida cilmiga maaddiga ah sida ay ugu yeeraan.

Waa isku mid kuwa bani'aadamka oranaaya inuu xoolo yahay, iyo kuwa maaddo oranaaya; labaduba waxa ay dadwaynaha ku khaldayaan dhinacyada uu bani'aadamku ka shaaboho xayawaanka iyo maaddada, ha ahaadaan falgallada, qaabka lammaanaha, sababtoo ah kownka oo idil baa lagu abuuray laba labadaas, ha ahaado dunida maaddada, dunida dhirta, dunida xoolaha ama bani'aadamka.

Dhabnimadu waxa ay tahay inay xaqiiqada qarinayaan, taasoo ay ku khasbanaadeen inay qirtaan; in bani'aadamku gaar ka yahay dhammaan wixii ka soo haray, sida uu yiri Julian Hakisli, ee hindisay waxa loogu yeero "Daarwiniyada cusub", waxa uu qoraalladiisa ku qirtay in bani'aadamku shakhsi aad uga duwan dunida xayawaanka, iyo inay labadooda u dhaxayso hog aad iyo aad u wayn. Waxa uu yiri bani'aadamku waa makhluuqa keli ah ee garanaya macnaha rabitaanka iyo go'aansiga, waana makhluuqa kaliya ee loollama oo halgama. Inuu loollamayo waxa macneheedu yahay inuu doorasho samaynayo, had iyo goor uu taaganyahay waddo meel ay ku kala baxayso, waxaa kolkaa dhacaya loollan wixii uu doonayay iyo wixii laga doonayay. Juliyan Hakisli waxa uu si cad u qiray in bani'aadamku gaar ka yahay makhluuqaadka intooda kale. Waxa uu xataa yiri waxa cilmiga casriga ah uu ka ogaaday bani'aadamka waxa uu aad ugu dhowyahay wixii diimuhu horay ay u sheegeen. Hase ahaatee oran ma hayo gebi ahaan wixii ay diimuhu sheegeen, sababtoo ah waxa uu ka kibrayaa inuu qiro in wixii diimuhu dheheen ay xaq dhammaystiran ahaayeen.

Dadka jaahilnimada cilmiyaysan wata waxa ay doonayaan inay bani'aadamka ka siibaan waxa cajiibka badan ee uu huwanyahay, oo ah bani'aadamnimada.

Hase ahaatee, islaamku waxa uu u yimid inuu caddeeyo in bani'aadamku yahay mid gaar ah, sifooyinka uu la wadaago xayawaanka ama maaddadana waa sifooyin awood uu u leeyahay inuu kor u qaado, si uu uga dhigo astaamo iyo dareemo iyo shahawaad bani'aadamnimo ah. Waxa uu shahawaadka oo idil ula dhaqmayaa hab bani'aadam, ee ma aha hab xayawaannimo. Intaa kaddibna waxa uu istaagayaa heer aan wax xiriir ah la lahayn xayawaanka, walow ay muuqaalka kore iyo habka shaqada uu ka shaabahayo xayawaanka.

Islaamku waxa uu bani'aadamka la dhaqmayaa si ka fog xiriirrada jaahiliga ah, kuwaasoo ah xiriirrada xayawaanka, xiriirrada jaahiliga ah – sidaan soo sheegnay – waa kuwa xayawaanka; kuwaasoo ah sinji, dhul, nooc, iyo hayb.

Islaamkuse waxa uu bani'aadamka la dhaqmayaa isaga oo idil, sababta oo ah nooca bani'aadamka waa mid kaliya, hal cod buu kula hadlayaa, waxa uu ka doonayaa dalabaad mid ah, dadka kuma kala saarayo caqiiddada mooyaane, wax farqi ah ma jiro oo ka imanaya waqti, meel, sinji, dhul ama luuqad. Islaamku ma ictiraafsana in arrimahan oo idil ay wax saamayn ah ku leeyihiin kala soocidda iyo teed u samaynta dadka.

Manhajka islaamka markii qadiyaddan loo adeegsaday, ee isutagga islaamka lagu oogay caqiiddo oo qura, iyada oon la eegaynin jinsi, dhul, midab, af, amaba dan dhow oo ku dhisan xuduud goboleedyada macnadarrada ah, isla markaana la muujinayo oo la kobcinayo korna loo qaadayo astaamaha "bani'aadamnimo", iyada oon la eegaynin sifooyinka naflayda lala wadaago, waxaa la arkay natiijooyin yaab badan.

Waxaa ka mid ahaa natiijooyinka yaabka leh ee dhab ahaan ka soo baxay manhajkan in bulshada muslimka ahi ay noqotay mujtamac u furan dhammaan jinsiyadaha, qowmiyadaha, midabbada, iyo afafka kala duwan, iyada oo aysan jirin wax kala teedaya sida teedadka xoolaha kala geynaya oo kale.

Waa arrintan waxa ay cadowga islaamku isku dayayaan inay cadaadiyaan oo maldahaan; waxa ay ku magacaabeen ilbaxnimadii islaamku keenay inay ahayd ilbaxnimo carbeed, iyaga oo og in dadkii kaalinta wayn ku lahaa culuumta islaamka iyo ilbaxnimadiisa aanay ahayn carab, ee ay ahaayeen addoomo la xoreeyay, ama cajam aan carab ahayn sinnaba, laakin dhammaan islaamku uu kulmiyay.

Bulshada muslimka ah ee sare waxaa isugu yimid: Carab, Furus, Masaari, reer Shaam, Marooko, Turki, Shiinays, Hindi, Roomaaniyiin, Giriig, Indonesiyaan, Afrikaan iyo dhammaan qowmiyadaha iyo sinjiyadaha kala duwan. Waxaa isu soo uruuray dhammaan astaamohoodii si ay isugu milmaan, isuna kaalmeeyaan, si simanna uga wada shaqeeyaan sidii ay u dhisan lahaayeen bulshada muslimka ah iyo ilbaxnimada islaamka. Ilbaxnimada (xadaaradda) islaamku waligeed ma noqon mid carbeed, ma noqon mid qowmiyad u gaar ah, ee waligeed waxay ahayd mid “caqiiddo”.

Dhammaantood waxay isu yimaadeen iyaga oo siman, jacayl uu isku hayo, hal dhinacna u hanqal taagaya, markaas bay si hagar la’aan u bixiyeen intii karraankooda ahayd, sifooyinkii jinsi walba uu lahaa kuwii ugu xeel dheeraa bay soo muujiyeen, nuxurkii waayo-aragnimadooda shakhsi iyo qowmiyad ahaaneed bay isugu keeneen sidii ay u dhisan lahaayeen bulshadan midka ah ee loo wada siman yahay, la isuguna imanayo xiriirkaas lala leeyahay hal Rabbi oo keli ah, ayna ku muujinayaan bani’aadamnimadooda oo keli ah iyada oon wax teed ah lahayn, waana arrin waligeed aanan ka suura galin isutag kale inta taariikhda la ogyahay.

Waxaannu ogsoonnahay in boqortooyadii Roomaanka ay koobtay sinjiyado kala duwan, laakin iskuma aanay qasin, kuma aysan kulmin qiimo sare sida caqiiddada ama akhlaaq, ee waxa ay ahayd isutag dabaqadeed oo dadku ay kala yihiin dabaqadda madaxda iyo dabaqadda addoomada, ama dabaqadda ashraafta iyo dabaqadda addoomada.

Casrigan aynu joogno sidoo kale waxaa kacay isutagyo sida boqortooyada Ingiriiska, hase ahaatee waxa ay ahayd isutag qowmiyad oo danayste ah, qolyihii ay boqortooyadu isu keentay waxaa looga faa'idaystay inay yihiin addoomo, halkan Ingiriisku uu dhammaan ka wada sarreeyo. Waxaannu ogsoonnahay in ninka Ingiriiska ahi uu yahay gentleman (nin ragannimo leh) kolka uu joogo jaziiradda Ingiriiska, haddiise uu meelaha ay gumaystaan uu tago waxa uu noqonayaa Roomaani qalbi adag oo dhaqan xun. Dhulalkii ay gumaysteen kolkii uu doonayo inuu faraska fuulo waxa u rukuucaya ninka Afrikaanka ah ama Hindiga ama Bakistaaniga si dhabarkiisa uu jaraanjar uga dhigto kolka uu korahayo faraskiisa. Sidaas bay dadka kale ula dhaqmi jireen, waxa ay u haysteen dad dhiig kale iyo darajo kale ah oo iyaga ka duwan. Taasina waa fikradda shacabka la doortay ee Yuhuuddu ay doonayaan inay dunida ku shaaciyaan inay iyagu yihiin shacabka Allaah ee la doortay sida ay sheeganayaan.

Boqortooyadii Roomaanka waxa ay isku aqoonsatay inay tahay shacabka gaarka ah, sidoo kale ayay samaysay boqortooyadii Ingiriiska, maantana Maraykanku waxa ay dunida inteeda kale u haystaan dad u adeegaya Ameerikaanka, meel walba wixii ay doonayaan bay ka sameeyaan.

Mujtamacyadan dhamaantood waxa ay ugu horrayn ku dhisan yihiin soo muujinta sifooyinka xayawaanka oo kali ah, kobcintooda, horumarintooda, iyo meel marintooda; maadaama

dalabaadka asaasiga ah ee bani'aadamku ay yihiin cunno iyo degaan iyo galmo; waana isla dalabaadka xayawaanka ugu horreeya, waxaa sidaa ka siman shuuciyadda, hantigoosiga, Roomaankii hore, boqortooyada Ingiriiska, Faransiiska iyo Maraykanka, dhamaantood bani'aadamka waxa ay u dajinayaan heer hoose oo aad u foolxun.

Hase ahaatee, islaamku waxa uu goonni la noqday manhajkiisa rabbaaniga ee muujinta astaamaha u gaarka ah bani'aadamka.

Isutag bani'aadam inta taariikhdii hore la ogyahay waxaa ugu caansanaa boqortooyadii Roomanka tusaale ahaan. Waxa ay isu keentay jinsiyado, afaf, midabbo, iyo dadyow aad u kala geddisan, hayeeshee, isutaggaasi kuma taagnayn xiriir bani'aadamnimo, xiriir sare oo caqiiddo oo kale ahna ma jirin, wuxuu ahaa isutag dabaqadeed, oo ku dhisan dabaqadda ashraafta iyo dabaqadda addoomada meel walba oo boqortooyada laga joogo, wuxuuna ahaa isutag midab takoor iyo hayb sooc ku dhisan, oo ah madaxnimada jinsiga Roomaaniga ah guud ahaan, iyo addoonnimada dhammaan jinsiyadaha kale. Sidaa awgeed uma soo dhowaan heerka sare ee isutagga islaamku marayay, mana keenin mirihii uu dhaliyay isutagga islaamku.

Sidoo kale waxaa taariikhda dhow la arkay isu-tagyo kale, sida isu-tagga boqortooyada Ingiriiska. Hayeeshee, wuxuu la mid ahaa bulshadii Roomanka ee ay dhaxleen, isutag qowmiyad iyo danaysi ku dhisan buu ahaa, oo ku taagan korraynta jinsiyadda qowmiyadda Ingiriiska, iyo gumaysiga dhammaan dhulalkii ay haysatay boqortooyadu.

Waxaa la mid ah dhammaan boqortooyooyinka Yurub; sida boqortooyada Isbaanishka iyo Burtuqaal, iyo sidoo kale Faransiiska, dhammaan heerkaas hoose ee fooshaxun bay mareen. Shuuciyadda ayaa isku dayday inay taagto isutag nooc kale ah, kaasoo ka gudbaya teedadka sinjiga, qowmiyadda, dhulka, afka iyo midabka, hayeeshee ma aysan la iman bani'aadamnimo, ee waxay ku taageen asaas dabaqadeed. Wuxuu noqday mid liddi ku ah isutaggii Roomaaniyiintii hore, kaasi waxaa gacanta sare lahaa dabaqada ashraafta, kanina dabaqada shaqaalaha iyo darbijiifka, dareenka hareeyayna wuxuu ahaa ciil loo qabo dhamman dabaqadaha kale. Isutaggaas yar ee qurunka ahna kamaba suura gasheen inuu soo saaro waxa ugu liita ee bani'aadam laga fisho mooyee, ugu horrayn waxa uu ku taagan yahay soo muujinta sifooyinka xayawaanka oo keli ah, iyo xoojinteeda, iyada oo laga dhigayo baahida asaasiga ee dadku inay tahay "cunno, hoy, iyo galmo" – kuwaasoo ah baahiyaha asaasiga ah ee xayawaanka –, taariikhda bani'aadamkana laga soo qaaday inuu yahay taariikhda cunno raadinta!!

Islaamku waxaa uu la gaar noqday manhajkiisa rabbaani ah ee soo muujinaya astaamaha bani'aadamka u gaarka ah, isla markaana kobcinaya korna ugu qaadaya si uu ugu dhiso bulshada dadka. Walina gaar buu layahay manhajkaas, dadka uga leexanaya manhaj kale, kaasoo ku taagan saldhig kale, sida qowm, sinjiyad, dhul ama dabaqad … iyo waxyaabo kale ee liita, waa dad cadow ku ah bani'aadamka. Waxa ay u diiddan yihiin bani'aadamka inuu uunkan dhexdiisa goonni la ahaado astaamihiisa saree e Allaah uu ku abuuray, mujtamacyada bani'aadamkana uma rabaan inay si siman ka faa'idaystaan awoodaha, kartida, iyo waaya aragnimada mujtamacyada kale.

﴿ قُلْ هَلْ نُنَبِّئُكُمْ بِالْأَخْسَرِينَ أَعْمَالًا ۞ الَّذِينَ ضَلَّ سَعْيُهُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَهُمْ يَحْسَبُونَ أَنَّهُمْ يُحْسِنُونَ صُنْعًا ۞ أُولَئِكَ الَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِ رَبِّهِمْ وَلِقَائِهِ فَحَبِطَتْ أَعْمَالُهُمْ فَلَا نُقِيمُ لَهُمْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَزْنًا ۞ ذَلِكَ جَزَاؤُهُمْ جَهَنَّمُ بِمَا كَفَرُوا وَاتَّخَذُوا آيَاتِي وَرُسُلِي هُزُوًا ﴾

[الكهف: ١٠٣-١٠٦]

"Waxaad dhahdaa ma idiinka waramaa kuwa ugu khasaaro badan camalkooda* waa kuwa uu ku dhumay camalkoodu nolosha adduun iyagoo isu malaynaya inay wanaajinayaan camalka *kuwaasu waa kuwa ku gaaloobay aayaadka Rabbigooda iyo la kulankiisa, wuu buray camalkoodu umana joojinayno maalinta qiyaame miisaan *kaasina waa abaalkoodii jahannamo gaalnimmadooda darteeda waxayna ka yeesheen aayaadkayga iyo Rasusheyda jeesjees"
(Al-Kahfi: 106-103).